ISLEEG ISA Seeggan

ISMAACIIL C UBAX

Copyright © 2015 Ismaaciil C Ubax

All rights reserved.

ISBN: 978-91-88133-40-3

Qaabaynta jaldiga:



Buuggan waxa ku kaydsan lix sheeko oo kala madax bannaan.

MAHADNAQ

Macbuudkaa mahad leh.

1 CALI-WADAAD

Horto aan iskiin baro, anna aad i barataan. Magacaygu waa Cali, Cali hooyaa ii bixisay, aaabana wuu ku raacay. Maanta waa duq labaduba, anna daanka timaan ku leh yahay. Timo aad u dhaadheer. Sunihii rasuulkaan (nnkha) ku adkaystay waayadan. Dadku magaca aan qabo, mid kalay ku kaabaan. *Cali-wadaad* ayaa la iigu yeedhaa. Salaadda waan ka adagahay, axaadiista waan aqaannaa, khamiiskana ma saaro. Dadku way i yaqaannaan, xaafadda aan ku noolahay. Marka aanan tujinayn ama aanan jamaca hor taagnayn, carruurta ayaan quraan baraa. Galabtii, iskuul Quraanka lagu dhigo ayaan macallin ka ahay. Hablahaan baraa Quraan. Aniga ayaa masuul ka ah. Saddex sanno ayaan hor joogay, aan u ahaa macallin.

Da'du soddonkay wax dhaaftay, doobnimana weli ma sii dayn. Asxaabtay dhammaantood, carruuray la dheelaan. Anna gabadhii dhali lahayd, toosh baan ku raadshaa. Weli waanan soo qaban. Ma aqaan hablaha iyo hadalkooda toona. In kastoon macallin ahay, hablo badanna Quraanka baro, haddana aayadaha quraanka ah ma dhaafsiisna sheekadu. Dhammaantood habluhuna waa wada gashaantimo. Balse damacu sidiisaba anigaba igu ma jiro. Arday weeye qaali ah, sidaasaan ku dhowraa.

Salaasa weeye maanta, casar ayaa wakhtigu yahay. Maalin weeye caadi ah. Caadi maaha laakiin. Wax weyn baa is beddeli raba. Noloshayda rogi kara. Sanqadh weeye kabo dumar, dhulka xoog u duraya, dhawaaq dheerna bixinaya. Inkastooy mamnuuc tahay in ay habluhu kabo noocaas ah xidhaan, haddana inantaasi maanta way soo xidhatay. Waan xasuustaa si waadax ah, sabbixisma ayaan gabadh ka dhegaysanayay. Mar keliya waxa dhegahayga soo gaadhay shanqadh odhanaysa "dhag, dhag, dhag, dhag". Way soo dhowaanaysay marba marka ka dambeysa.

Dhegahaygii ayaa door biday dhawaaqa kabaha. Shaydaankaan iska naaray. Gabadhii Quraanka ka baxaysay ayaan aamusiiyay. Sanqadhii oo haatan soo dhowaatay ayaan dhegaystay. Ardaydii oo dhan ayaa dhanka albaabka eegtay. Qofkaa khaladka weyn maanta galay wa ayo toloow? ayay kolley is lahaayeen. Haddii maalintaa aan ogaan lahaa sanqadhaasi inta ay noloshayda ka beddeli doonto iyo sida ay u geddiyi doonto, albaabka ayaan xidhan lahaa. Si aanay gabadhaasi u soo gelin. Balse maan ogeyn. Aniga oo cadhaysan ayaan dhanka albaabka u jeedsaday. Waa ardayad cusub. Weligay hore u ma arkin. Albaabkay istaagtay. Fasax ayay iga sugaysay kolley.

Indho gadoodsan ayaan kor ugu eegay. Indho dabacsan ayay hoos u dhigtay. Wax yar ayay aamusnayd. In ka badan ayaan eegayey. Wadaad dhammaystiran in aanan ahayn, maalintaasaan ogaaday. Wejigeedaan ka bogtay, anigoo hadal dhowri. Muddaan sii yara eegay. Indhahaan ku illoobay. Baadad aad u dhaadheer oo indhaheeda dul yaalla, ayay marna kor u qaaddaa, haddana hoos u dhigtaa. Iyadoo uga jeedda, “sheekh dee iga jeedso”. Markaan fahmi waayey farriintaa ay dirayso, ayay hadal keentay. Cod aad u xabiib ah, aadna aan u dheerayn oo dhegta uun ku filan, ayay salaanta islaamka si cajiiba ugu heestay. Alla mar kale i salaan, ayaan hoos u idhi. Cunahaan sifeeyay. Cod aad u madow ayaan isticmaalay, markaasaan u jawaabay. Ardayda oo dhan, midna ma hadlaayo. Anigaa hadal la iga sugayaa. Anna waxa aan arkay ayaan sharraxaaddiisa maskaxdayda ka sugayaa. Balse way kari weyday, way suurayn garan weyday quruxdan hor taagan. Inantii oo haatan khajilsan, ayaa xijaabkii ay xidhnayd ku dabooshay wejigeeda dhinaciisa midig hoostana eegtay. Dhankeedaan u dhaqaaqay. Marka aan marayo meel munaasib ku ah, ayaan khasab isku taagay. Muraadka ayaa degdeg aan u su’aalay. Jawaabo habboon ayay i siisay. Su’aalo kale ayaan haddana

keenay. Haddana way ka jawaabtay. Kuwo kale oo aan khusaynin ayaan kusii tuuray. Jawaabbo aanan nuxurkooda danaynayn ayay ii celisay. Sidii ayaan ku waday, anigoo codkeeda oo keliya dantaydu tahay. Mar dambaan is maqlay anigoo ku dhahaaya, “ma adaa carruurtiina u weyn?”

In aan soo dhoweeyaan damcay. Maxaan ku idhaa? *Adeer*, mise *walaal*? Adeer haddaan idhaa, inantii waan fogeeyay. Walaal haddaan odhan lahaa, afkaan iigu hagaagayn. Kursi ayaan u tilmaamay safka hore yaallay. Muuqeedaan rabaa in aanay ishu ku hawshoon. Hawshaydii ayaan sii watay. Inantii kale ee sabbixisma maraysay, ayaan kusoo laabtay. Waa mid aan sabbixisma dhaafin. Quraankay akhriyaysay waan maqlayay, maan se dhegaysan. Degdeg ayaan isku dhaafshay. Waxba maan sugine, yartaan meesha dhigtaan, soo kac aan ku idhi. Si hufan waata u boodday. Saddex tallaabbo ayay xaggayga u soo qaadday. Kabeheedaa dhulka saddex jeer ka dhawaajay. Sidii geenyo faras, nin lahaa carbiyay, u diyaar ah jihaad, dhulka qoobka ku aastay, anigay i hor joogtaa. Sidii addoon la gumaysto, ka adeega boqortooyo, maryo duuga wata, boqorkiisii hor jooga, baqdin la hoganaaya, anigaa hor fadhiya. Kor ayaan is idhi eeg markii aan la hadlaayay. Indhahaa iga diiday. Wejigeeday hayn waayeen. Dhan kale ayay u ordeen, sidii ilmo la bursaday. Wax ka yaabiyay arkeen. Hadallo aan dirqi ku soo saaray, ayaan kolba in tuuraa. Si deggan ayaa la iigu jawaabaa. Si aan u ogaado inta ay taqaanno Quraanka, imtixaan kooban ayaan ka qaaday. Suurado dhowr ah ayay akhriday. Adduunka waxa aan ugu jecelahay sheekh la yidhaa Bukhatir marka uu quraanka akhriyayo. Maanta beddelkiisii ayaan helay. Kaalinta labaad ayuu hoos ugu dhacay. Aayadda afaraad ee suuradda *Wadduur* ayay badhtanka kaga jirtay, anna indhaha oo ii xidhan ayaan nimco dhex jiifay goortii eedaankii casar wadaad kale oo aan waxba ogayni uu ku dhuftay.

Xiisaha i hayaa badanaa. Carruurnimada xubnahayga dhex mushaaxaysaa xaggay ka timid? Ma inantaa wadatay? Ma anaa dib u saqiiray? Calooshaydan gariiraysa, iyaduna maxay rabtaa? Magaceedii horto muxuu ahaa? Sowtii laba jeer ii sheegtay. Adkaayee oo wacnaayee magucu. Imikaan weydiin doonaaye, sug.

Halkaa anigoo maraaya, ayaan ku war helay dadka midigta u wada jeedsaday. Casar ayaa laga baxay. Ilaahow iga aqbal. Daaradda iskuulka oo aannu ku tukanaynay, ayaan jamacii ka dhex booday. Fasalkaygii oo aan cidi joogin, ayaan is dhex taagay. Kuraasida iyo miisaska midabka bunniga ahi ku dhabooqan yahay, muuqaalkooda ishu ay ka ordayso marka ay aragto sida ay u kala waaweyn yihiin, gidaarrada madhan ee cawlaanka kugu soo eegaya, dhammaan intaas oo is biirsatay ayaa maanta bilic gaar ah yeeshay. Qurux aanay lahaan jirin ayaan arkayaa. Maanta wixii aan eegaaba, way nuurayaan. Dadku way wada faraxsan yihiin. Tolow ma indhahaygaa wanaagga wata. Wixii ay arkaanna wanaajinaya?

Sanqadh ayaa ii baxday. “Dhag, dhag, dhag”. Wallaahi waa iyadii. Calooshaan ka naxay. Wax baa hoos ii go’ay. Si kasta oo aan u rabay in aan gaar u helo, haddana waan baqayaa. Toban jir dembi ku jira sidiisa oo kale, ayay naftaydu noqotay. Markii ay soo dhowaatay, ayaan is mashquuliyay. Dhowr kitaab oo miiska saarnaa ayaan furayaa oo aan haddana isku laabayaa. Way soo gashay. Sidii qof aanan filayn ayaan u eegay. Way dhaqaaq-joogsatay.

- Soo soco waa caadiye, ardaydii kalena way imanayaan imikee. Waa qaar hawl badanoo way iska soo habsaamaane. Adigu waad fiican tahay. Soo gal oo fadhiiso kursigaaga.

Hadal naxdin iga keentay uun iga dheh. Weligaa wax aad ka baqayso, haddana ma u yeedhatay? Kursigeedii ayay fadhiisatay. Waanu isku muuqannaa. Is ma eegayno, balse hoosta waan kala socdaa xarakaatkeeda. In ay nin iyo naag qol ku keliyoobaan, waa xaaraan. Waa wax aan dhallinyarta ka waanin jiray. Maanta ma doonayo in la i xasuusiyo wixii xaaraan ah ee dareenkan aan ku jiro waxyeellaynaya. Show dhallinyartu sidanay dareemaan. Belo idinku dhacday dheh!

Waa in aan wax ka ogaadaa nolosheeda, magaceedii adkaana ha iigu celiso.

- Horto magacaaga Ilaahay waa igu adkeeyay.

Si hoose ayay u qososhay, markaasay raacisay:

- Dadkoo dhan ayaa sidaa yidhaa. Waa Mushtaaq.
- Haa, Mushtaaq. Allaahumma salli calaa Muxammad. Waan gartay. Quraanka inteed ka dhigatay horto?
- Macallin waxaan dhigtay illaa jiska shanaad.

Waxa yari cod macaanaa, ma subag bay cabtay!

- Haye? Iskuulkeed dhigan jirtay?
- Daarul Axsaan.
- Haa, waan gartay. Een, maxaad uga timid markaa iskuulkii hore?
- Macallin habaryartay oo Jigjiga deggan ayaan u tegay. Markaa sannad ayaan iyada la soo joogoo, imikaan soo noqday. Markaan imika soo noqdayna iskuulkan ayuun baan xiiseeyay.

Fariid faraxalan! Bagaad aniga ii timid.

- Haye, markaa sannad dhan ayaad magaalada ka maqnayd?
- Haa, macallin.

Macallinkan ay i daba waddo may iga deyso.

- Sax! Laakiin reerku halkan ayuu deggan yahay sow ma aha?
- Haa, macallin.
- Aabbo iyo hooyaba?
- May, macallin, aabbo Dubai ayuu ka shaqeeyaa, laakiin hooyo iyo waxa jooga ciyaalkii uun.

Waa fursad qaali ah. Si aan iyada ugu dhowaado waa in aan islaanta is barannaa. Waa inaan iyada iska dhaadhiciyaa. Nin weyn oo masuul ah waa inaan iska dhigaa oo inanteeda ilaalinaya. Dee runtaa fiicane waan ilaalin doonaa weliba. Markaa islaanta haddaanu is baranno, billee carruurta yaryarna ay igu tidhaa Quraanka u dhig, oo aan gurigaba tagaa! Arrinkaa waa inaan qorshihiisa galaa.

- Waxaan ku weydiiyay, een, hooyo u yeedh berri.
- Hee macallin, maxaa dhacay?
- Dee waxba ma dhicine, waa in aan la kulmaa waalidkaaga maadaama oo aad cusub tahay. Qof kasta sidaas ayaan ku idhaa. Waa wax caadi ah.
- Haye, macallin. Berri ayaan soo kaxayn doonaa.

Maalintu dheeraydaa. Inantu qurux badnaydaa. Dareenku macaan badnaa. Maxaa i helay? Acuudu billaahi mina shaydaan! Miyaa la'i dardaray? Waxa yari maxay ahayd? Horto da'deedu imisa ayay ahayd? Waar kolley waxba igamay yarayn. Adigu illaa

toban sanno way iga yarayd. Toban ma wax badan baa? Mayee maaha. Aabahayba hooyaday waxaan la garanayn ayuu ka weynaa.

Hurdo ayaan isku diyaariyay. Furaashkaygii dhinaca go'naa ayaan dushiisa jiifsaday. Caawa heshiis ayaanu nahay. Dhawaaqa yuuska kaneecada shanqadhii kabaha ayaa ii dheer. Madaxaygii ayaa noqday dhulkii ay Mushtaaq u xoog sheeganaysay. Anna raalli ayaan ka ahay. "Dhag dhag dhag". Socod macaanaa. Acuudu billaah, inanta ha faallayn waa dembiye. Codkii dhagahaygu ku raaxaysanayeen markay quraanka akhriyaysay. Tolow cajalad ma ku duubtaa berri? Codadku kala macaan. Codku waxa uu ka turjumaa meesha uu ka soo baxayo. Waxa uu wax ka sheegaa qofka uu ka imanayo. Marka aad maqasho ayaad dareemi kartaa inuu qofkaasi yahay qof balwad leh iyo in kale, qof naxariis badan iyo in kale, qof xaaraan cun ah iyo in kale. Iyada codkeedu edaab ayuu lahaa. Iyada codkeedu dhegahaaga marka uu gelayo raalli ayaad ka noqonaysay. Iyada codkeedu jidh la dhaqaaleeyey ayuu kasoo baxay. Acuudu billaah. Waar sowniga inantii ku fogaaday. Ilaahayoow noo dembi dhaaf. Haddana waan is rogay. Barkimadii ayaan ku dhegay. Inaan is illowsiiyo ayaan damcay. Inaan seexdo ayaan doonay. Haddana way i hor joogtaa. Way i hor taagan tahay. Jooggeedii wacnaa ayaa ii sawiran. Asluubteedii qanjaha joogtay ayaan daallacanayaa. Acuudu billaah. Waa inaan seexdo. Been idiin sheegi maayo, shan jeer oo kale ayaan haddana shaydaanka naaray. Dabadeed aan gam'ay.

Ilaahii nabad igu soo kiciyayoow adigaa mahad leh. Indhahayga ayaa mid waliba xabbad liin dhanaan ah le'eg tahay. Debnahayga ayaa daaha ka qaadaya gaws-dambeedkayga. Cagahayga ayaa durba dhulka haysta. Wax caajis ah la maan soo kicin. Naqaska qolka ku xidhan farxad ayaa ka carfaysa. Hawlahaygii subaxnimo ayaan soo qabsaday. Markii aan qadeeyay ayaan u jarmaaday dhankii iskuulka. Aan idhaahdee dhankii

Mushtaaq iga xigtay. Iftiinka cadceedda ee dhakada ka garaacaya magaalada waxa ka dhalaal badan khamiiska cad ee aan xidhanahay. Khamiiskii iyo cimaamaddii aan jimcaha xidhan lahaa ayaan maanta xidhay. Ninba maalin ayay jimcihiisa tahay. Aniga maantaa jimce ii ah. Ciidda ayaan ka ilaalinayaa in ay iga boodheeyaan kabaha aan saddexda jeer baalasheeyay saaka. Wadnahayga oo hab-dhiciisu ka dheeraynayo tallaabadayda ayaan soo galay iskuulkii. Maamulihii oo isha igu dhuftay ayaa igu soo tuuray:

- Oo Sheekh Cali maanta waad soo dheeraysee!

“Wax walba yaynaan isula imanin” ayaan hoos u idhi.

“Macallin! Macallin!” ayaan ku war helay. Ma cod la garan waayaa? Waa codkaan xalay ka seexan kari waayey. Weji furan oo ka turjumaya waxa qalbigayga ku jira oo aanay ardaydu iiga baran ayaan ku qaabilay iyada.

- Macallin hooyaa ila socota.

Candhuuf weyn ayaan liqay. Hadalkii aan odhan lahaa ayaan soo dhoweeyay. Waan soo dhaqaaqay. Isha ayaan ku baadhay. Waan helay. Bartaas ayay iga soo eegaysaa. Dhankeeda ayaan u dhaqaaqay. Waa Mushtaaq oo yara weyn. Lama kala garto. Quruxdaba show hooyadeed ayay ka keentay. Acuudu billaah. Salaan iyo hadallo ixtiraam leh kadib xafiiska ayaanu galnay. Imika talo aniga ayay i jirtaa. Waa in aan ku guulaystaa sidii aan Mushtaaq ugu dhowaan lahaa.

Haddii aannu nahay dadka diinta wax laga weydiiyo, haddii aanu nahay dadka wadaaddada loo yaqaanno, Ilaahay waxyaabaha uu noo fududeeyay waxa ka mid ah dumarka. Dumarka heshiis

ayaannu nahay. Qalad ha ii fahmin, laakiin dumarku marka ay arkaan gadh weyn, khamiis cad, hadalkana ku bilowdo “innal xamdu lillaah”, wixii aad tidhaahdo way maqlayaan. Mushtaaq hooyadeed si fiican ayaan ula hadlay, waannu is barannay, xaaladda Mushtaaq si kooban ayay iiga sheekaysay. Wax aanan hore u ogeyn maan maqlin. Nin weyn si uu hadalka u dhigo ma garan waayo. Anna si aan fikirkii aan watay iyada uga helo maan garan waayin. Way ogolaatay. In aan carruurteeda quraanka u dhigo ayay iga codsatay. Iyada ayaa fikirka ku dhawaaqday, dabcan kubadda anaa soo sallaxay. Intaa markii aan ka helay, markii aan ogaaday inaan fiidka saacad soo mari doono guriga Mushtaaq ayaan kulankii degdeg u gabo-gabeeyay. Farxad ayaan hoosta ka qoslayaa dushana wejigii aamusnaa ayaan muujinayaa. Fasalkii ayaan soo galay. Bartii aan shalay fadhiisiyay ayay fadhidaa. Markii ay i aragtay ayay qoorta sare u taagtay. Indhaha ayaan ardayda kale u qaybiyay. Salka ayaan kursigaygii la doontay. Hablihii oo sheekaynaya ayaan aamusa odhan kari waayey. Naxariis aan la’iiga baran ayaa korkayga sida daruurta u hadhaysay. Ul aan sidan jiray shalayba waan tuuray. Dhirbaaxo aan lasoo ordi jiray durba waan mamnuucay. Caligu Caligaan aqaannayba maaha. Waaxay waxan oo naxariisii. Qalbi-xabxabkani aniga maaha. Inkastoo aanan nin xun ahayn, haddana waan jeclaa inaan hablaha yara dhangadeeyo. Show kabo shanqadhaya ayuun baan u baahnaa. Acuudu billaah.

Maanta farxad ayaan la hoyday. Berri waa maalin cusub. Berri waa maalin aan guriga Mushtaaq tegi doono. Alla farxad weynaa. Durba waan lulooday. Haddana waaban gam’ay. Iyadoo la moodo dhinacaan u seexday inaanan iska rogin ayaan daakiraaddii ku toosay.

Sidii la'iiga bartay maalmihii u dambeysay ayaan soo qaddimay. Fasalkii ayaan dhex fadhiistay. Waxyar kadibna wuu soo buuxsamay. Habluhu muuqa guud way wadaagaan, balse dheemmantaydii way ka dhex hillaacaysaa. Hoos ayaan u idhi "caawa gurigiinaan soo arkayaa, qolka aad seexatana waan soo khaawisayaa". Acuudu billaah. Halkaa markaan marayaan isku qoslay. Inantii quraanka aan ka dhegaysanayay ayaa aamustay. Macallin miyaan khalday? ayaan ku war helay.

Show qosolku bannaanka ayuu usoo baxay. "Mayee iska wado" ayaan ugu jawaabay. "Anna hoostaan jacayl-nacaskayga ka wadanayaaye" ayaan sii raaciyay. Dabcan hoos baan u idhi.

Dhulka oo mugdi hadheeyay iyo cirka oo u hiilin waayey ayaan cagta bidix bannaanka soo dhigay markii aan kasoo baxayay masjidka salaaddii maqrib kadib. Dabcan labbiskaygu ma liito. Muuqaygu waa macquul. Cadar ah nooca la isku masaxo oo aan jeebadda ku sitay ayaan meel walba iska mariyay. Caqligu uu og yahay inaan laba wiil oo yaryar quraan u soo dhigayo. Qalbiguna waxa uu u turjuntay inaan aroosanayo. Qalbi-bajaq dheh. Dhankii tilmaamta la i siiyay ee guriga ayaan u soo dhaqaaqay. Wax yar kadib waan hor imid gurigii. Keligii ayuu meel ku yaallaa. Muuqa guud wuu qurxoon yahay. Inay Mushtaaq ku nooshahay waa la garan karaa. Dhismaha weyn ee hortayda kambadhuudha deyr weyn ayaa dhan kasta ka ooday. Albaabka ganjeelka ah ayaa ah xuddunta guriga. Bartii ayaan ku hagaagay. Saddex jeer ayaan si edaab leh u garaacay. "Dhaw dhaw dhaw". "Wa ayo?" Ayaa cod dirqi lagu soo saaray gudaha la'igaga soo tuuray. Jawaabtii caalamiga ahayd ayaan siiyay. "Waa aniga". Codkayga oo uu qofkii aqoonsan waayey darteed ayaan helay su'aashii kale ee aan sugayay. "Adiguna?"

Intii aanan ka jawaabin ayaan maqlay cod kale oo odhanaya “naa waa sheekhii, waa macallinkaygiiye aamus”. “Uu uu uu naa shalmad i sii” ayuu cod kale yidhi. Saddex dumar ah ayaan u gartay. Laba waa labadii is dhalay. Ta kale se garan maayo. Qaddar yar oo saacado u dhigmayay kadib ayaa albaabkii la’iga furay. Waa gabadhii saddexaad. “Soo soco sheekh” ayaan ka guddoomay. Bisinka oo dabeecad iga noqday ayaan hoos u higgaadshay. Jid baabuurka loogu talo galay ayaa xidhiidhiya albaabka aan kasoo galay iyo goobta baabuurka la dhigo. Jid dhuuban oo dhanka bidix u baxaya ayaa kugu hagaajinaya albaabka yar ee guriga laga galo. Barxadda weyn ee soo hadhay waxa qaybsaday cagaar iyo wadiiqooyin la maro. Intii ay indhaygu kolba meel u boodayeen ayaan soo gaadhay kadinkii guriga. Waa Mushtaaq hooyadeed.

- Soo dhawoow Sheekh!
- Saan dhowahay, waan dhowahay.

Qol ay farta iigu fiiqday ayaan dalam idhi. Laba wiil ayaa sii dhex fadhiya. Laba illaa saddex sanno uun tobanka kor u dhaafay.

- Sheekh waa kuwan nimanka aan kuu sheegayay. Garaac weliba haddaad waxba ka garan weydo waa niman ciyaar badane.
- Mayee khayr insha Allah, ayaan u celiyay aniga oo hoosta ka leh “maan waalanahay markaan dilayo Mushtaaq walaalladeed? Ma nacas baan ahay?”

Hadal kooban kaddib ayaan hawshaydii macallinnimo gudo galay. Haddaba gurigii waan imid. Carruurtiina quraankii waan u dhigayaa. Mushtaaq xaggeen ka helayaa markaa? Sideen laakiin u arki karaa iyada? Arrinkaa isaga ah is ma baan weydiin. Ciyaalkan quraankooda ma xiisaynayo anigu. Marka aan shanqadh maqlaba kor ayaan u boodayay. Qoortaaba i xanuuntay. Xitaa mar ay qof dumar ahi sharaab ii keentay iyada ayaan mooday. Tii codka weyneyd ee albaabka iga furtay ayuun bay igu noqotay. Sidani ma

shaqaynayso. Sidani si maaha. Sidan waa inaan wax ka beddelaa. Dhako kale waa inaan keenaa. Anigu inaan Mushtaaq arko ayaan u imid. Inaan laba duufle hor fadhiyo u maan iman.

Quraankii ayaan u dhammeeyay. Hungo ayaa ii dhammaatay. Intii aanan guriga kasoo bixin ayay Mushtaaq hooyadeed ila hadashay.

- Sheekh bal ka warran nimankii aad wax u dhigaysay?

Aniga oo aan xiisaynayn sheekadaas ayaan u dul maray.

- Alla innamadu waa xariifiin. Insha Allah waan la dedaalayaa aniguna.
- Khayr Alle ha ku siiyo sheekh dee, waad sii socon sow maaha?
- Haa intaanay wakhti dambe noqon ayaan iska bixi.

Intaa aan iyada bannaanka kula hadlayo qoortaydu sidii digaagad xafashtay ayay wax u daymoonaysaa. Laakiin Mushtaaq meelna way iiga muuqan weyday. Waan iska dhaqaaqay. Albaabka markii aan kasii baxayay ayaan istaagay. Fikir aan u baahnaa ayaa igu soo dhacay. Allaylehe imika ayaan helay. Waar ninkaygani cajiibsaniyaa. Gabadhii ayaan u dhawaaqay.

- Ee sheekh!
- Een waxaan ka fikirayay; wakhtigan aan carruurta u imid miyaanay xilli dambe ahayn?
- Dee mooyi sheekh, ma xilli dambaa?
- Haa dee, malaha anigoo maqrib kahor u imaaddaa la qaatay?
- Sheekhow sidii kuu habboon uun samee nimankani meel ma tegayaane.

Intaa markii aan ka helay afkeeda ayaan sida shaydaan la naaray dib u jeedsaday. Mugdi magaalada xoog ku haystay ayaan dhex muquurtay. Waan ku dhex libdhay. Farxad ayaan la hurdo tagay.

Maanta iskuulkii ayaan imid. Xiise badan uma hayo maanta iskuulka. Balse iskuulka kadib ayaan xiise u hayaa. Sidii aan gabadha ka ansixiyay, carruurta waxaan u tagayaa maqrib kahor. Taas oo ka dhigan inaan toos u tago marka aan iskuulka ka rawaxo. Laakiin fikir ayaa ii laaban. Keligay guriga ma tegayo. Wakhtigii aan orodkiisa dhibsan jiray ayaan maanta raagsaday. Maaha inaan Mushtaaq illoobay, balse wax kasii fiican ayaa ka dabdeeya. Wax aan sugaba way gaadhay. Fasalka aniga ayaa ugu dambayn jiray. Maanta gelin horeba waan baxay. Mushtaaq ayaan u yeedhay. Codkii dahabiga ahaa ayay ku tidhi:

- Hee macallin.

Macallinkaagu kala jab! Ma iyadaa ogba waxaan damacsanahay! Waan u bilaabay:

- I sug anaa kusii qaadayee ileyn gurigii ayaan tegayaaye.
- Ma imikaad tegaysaa macallin?

Ilmaha yari su'aalo badanaa.

- Haa dee maqrib kahor ayaannu hooyo ballannay.

- Haye macallin.

Xafiiska maamulaha ayaan soo dhigtay alaab aan haystay. Aniga oo ordaya ayaan bannaanka u soo cararay. Waxa yari billee iska tagtaa? May, iga walle waata halkaa soo taagan. Fariid dheh.

Dhinac waxa aan iska eegayaa ardayda kale oo khalad u fahmi kara inaannu israacno, dhinacna ujeeddadayda ayaan fushanayaa.

Laakiin khalad may fahmeene waa siday xaqiiqadu tahay. Indhaha inta aan isku qabtay ayaan baabuurkii hore ka fuulay. Mushtaaq oo i daba socota ayaa albaabka dambe iska furtay. Si kasta oo aan u jeclaa in ay xagga hore fadhiisato, haddana si fiican ayay samaysay.

Waa aniga iyo iyada oo keliya. Sowtii aan odhan jiray waa dembi in dumarka lagu keliyoobo. Waxaa iska illow. Baddaa ka bax oo inanta u sheekee. Haddaba maxaan ku idhaa. Halkeen ka bilaabaa? Gacmahayga iyo lugahayga ayaa shaqadooda qabsaday, si wadajir ahna baabuurkii u dhaqaajiyay. Waa inaan hadlaa. Waa inaan wax uun idhaahdaa. Naqaskaygii ayaa culusaaday. Alla fulaysaniyaa. Waar bal wax uun iska dheh. Hadal ayaan baadh-baadhay. Hadallo badan ayaan hayaa laakiin mid aan idhaahdo ma garanayo. Mid ayaan iska soo tuuray.

- Guriga miyaad halkan aynu joogno ka garanaysaa?
- Haa macallin, ayay si hoose iigu jawaabtay.

Alla doqonsaniyaa. Ninkayga weyn ee gadhka leh ayaa gabadh yar ka baqaya. Naanaab. Wallaahi in aanan habeen jirin. Nasakh. Bal sug aan ku celiyee. Hadal kale ayaan ku odhanayaa. Horto ta yari miyaanay qoslinba? Weli iyadoo qoslaysa maan arage. Car ma ka qosliyaa? Bal sug aan isku dayee. Wallaahi inaan ka qoslin karo.

- Sowtii la yidhi habluhu tilmaamta kuma fiicna billee aynu lunnaa? Qosol dheer ayaan raaciyay.

Mar dambe ayaan ogaaday inaan keligay qoslayo. Afkaan isku qabtay. Waan la waayey. Dhaartii aan dhaartay istaaqfurullah. Haddana waan calool-adaygay.

- Mise adigu tilmaamta waad ku fiican tahay?

Wax yar kadib ayaa la'ii jawaabay.

- Waxna kuma fiicniye laakiin gurigayga waan heli aqaannaa macallin.
- Dee imika iskuulkii waynu ka nimide macallin ha'i odhan.
- Hee macallin maxaan ku idhaa?
- Horto maanad aqoon magacayga? Alla hoogay inantu magacaygaba ma taqaan.

Halkaa marka aan marayo ayay qosol dheer ku dhufatay. Wallaahi waanigaa ka qosliyay. Waryaa wax nool baan ahay.

Maalintaa wixii ka dambaysay qosolkeeda ayaan bartay. Maalintaa wixii ka dambeysay kaftankeedaan fahmay. Illeyn nacas wax fahmay ayaan ahee halkii ayaan kaga waday. Mushtaaq waanu is sheeko barannay. Reerkiina waan dhex galay. Xaafadda ayaan ka mid noqday. Laba usbuuc ayaannu sidii ahayn. Laba usbuuc ayaan janno ku jiray intii aan la'iga joojin. Laba usbuuc ayaan qoslayay intii nalkii ii shidnaa aanu iga bakhtiyin. Laba usbuuc ayaan qosolka Mushtaaq ku raaxaysanayay intii aan afka la qaban.

Wax kasta oo bilow leh dhammaad ayay leeyihiin. Wax kasta oo duulaana mar uun bay soo degaan. Sidoo kale xaaladdayduna dhammaad ayay yeelatay. Laba usbuuc iyo saddex maalmood ayaa kasoo wareegay maalintii aan fikirka keenay. Fikir aan moodayay inaanu iga daba iman doonin. Balse mid ayaan illoobay. Mid aanay ahayn inaan illoobo ayaa maskaxdayda ka baxday. Qaddarka. Rabitaanka Sarreeyeheenna. Sida-uu-doonaba-yeele qorshihiisa ayaanan xisaabtaba ku darsan.

Maalinta shanaad ee usbuuca ayay ahayd. Farxaddaydii yarayd ayaa sidii daruur keligay dushayda hoganaysay. Baabuurkii ayaan guriga hortiisa joojiyay. Iyada ayaa iga cag fududayd oo guriga iga hor gashay. Waan kasoo daba galay. Hooyadeed oo kaabadda ku

soo fadhida ayay indhahaygu qabteen. Dhankeeda ayaan u soo dhaqaaqay. Salaan iyo qosol kooban kadib ayay bilowday hadal kale.

- Sheekh waxaan doonayay, naa dee orodoo sheekha shaah u keen hooyo. Sheekh waxaan doonayay, dee inantaa nalaga soo doonanayaa kow dheh. Aabbeheedna...
- Yaa inantee?
- Dee Mushtaaqe i dhegaysoo, aabbeheedna Dubai ayuu ka imanayaa jimcaha. Isagana waan u sheegoo waxaan ku idhi sheekh Cali ayaa joogoo wadaad kale oo meheriya uma baahnin.

Sidii qof biyo qabow oo aanu filayn dhakada lagaga shubay ayaan u qallalay. Naqaskaygii ayaan ku haftay. Hadalkii ayay sii wadatay.

- Markaa meherku wuxuu dhici doonaa arbacada dambe. Dee sidaa u ogow sheekh.

Belo kugu dhacday! Sidaa u ogow kuteh. Hadalka ay i tidhi uu koobnaa ujeeddadiisana waan fahmay balse uu ii dhaadhici waayey. Cunaha ayuu ii mari waayey. Maskaxda ayaa diidday. Qalbiguna ma buu dhegaysan. Fikirkayga dib ayaan u dhigtay. Ciyaalkii aan quraanka u dhigayay ayaan xaggooda u kacay. Sida dhagax meel la dhigay ayaan iska fadhiyay. Si kooban ayaan ugu mariyay. Maqribna uu i soo galay. Sidii caadiga ahayd ayaan la tukaday labadii wiil. Aniga oo qiiraysan ayaan xidhay salaaddii. Faatixada kadib ayaan suuradda “Yaasiin” dabada ka galay. Dhadhan gaar ah ayay lahayd. Waan ku nuux-nuuxsaday. Waan ku dheeraaday. Ilmada dhabankayga dul ordaysa ayaa gadhkayga ku dambaynaysa. Hawo kale ayaan galay. Marka aan marayo “salaamun qawlan min Rabbin Raxiim” ayaan xasuustay in ay

carruur ila tukanaysay. Waan u fududeeyay, rakcaddii dambena “innaa cadayn” ayaan uga dhigay. Goortii aan salaadda ka baxay ayaan sacabbada dhabanka mariyay. Waxaan damcay in aan iska baxo. Sidii qof hadal ila sugaygsa ayay u taagnayd Mushtaaq hooyadeed markii aan dhanka albaabka u soo dhaqaaqay. Tolow maxay illowday?

- Sheekh waxaan kaa illoobay, Mushtaaq ma imanayso iskuulka maanta wixii dambeeya. Waad iska garanaysaayoo waa inay u diyaar garowdo arooska. Markaa sidaa u ogow sheekh.

Waan garanayay in aanay wax khayr qaba soo wadin. Marka hore waxay ii sheegtay in inantii aan jeclaa nin kale la siinayo, haddana waxay ka daba keentay in aanan arki doonin. Islaantii aanu isku wanaagsanayn waan sannifay. Cadawgayga koowaad ayay noqotay. Laakiin kolley waa hooyo, shaqadeeda ayuun bay qabsanaysay. Meel kale aniga oo aan u dhaqaaqin ayaan gurigii tegay. Furaash farxad iiga bartay ayaan shan dareen oo isku laaqan la dul tegay. Kolley isaga laftiisu uu yaabbanaa. Dhabarka ayaan dhulka ku qabtay. Gacantayda midig ayaan madaxa iyo barkinta u dhexaysiiyay. Lugta bidix oo fidsan ayaan ta midig soo laabay. Indhahayga ayaa si bilaa dareen ah u eegaya xagga sare ee qolka. Maskaxda ayaa shaqo bilowday. Qalbiga ayaa werwer bilaabay. Maskaxda ayaa muraajico ku samaysay hadalkii ay gabadhu igu tidhi. Eray kasta oo aan soo xasuusto waxa uu ii gubayay sida dhimbiil dab ah. Gabadh aan isa siiyey ayay dadkii lahaa iga qaateen. Adduunka waxa ugu daran marka ay wax kugu dhacaan ee aanad waxba ka qaban karin. Waa dareenka adduunka ugu xun. Mushtaaq waan jecelahay, haddii aan awoodana maantaba ninkeeda rumaad ayaan ahaan lahaa. Laakiin ma dhacayso, mana saamayn karo. Markii aan yaraa dilmada waalidkay ayaa iga oohin

jirtay. Markii aan weynaaday cabsida Ilaahay ayaa iga oohin jirtay. Maantana jacayl ayaa iga oohinaya. Nin weyn oo gadhle oo soddonka sare u dhaafay oo gabadh darteed u ilmaynaya waa wax lagu qoslo balse waa xaqiiqo aniga i haysata. Adduunyo aan dhistay ayaa la'ii sheegay in aanay waxba ka jirin. Qosol iyo farxad aan soo qaatay ayaa laga daba tegay. Qof aan jecelahay ayaa la'igu yidhi qof kale ayaa iska leh. Maxaan anigu ahaa markaa? Ma jacaylkayga ayaa been ahaa? Ma anigaa khiyaali is tusay? Waxa ay ahayd markii u horreysay ee aan qof si caadi ah u jeclaado. Markii u horreysay ee aan qof muuqiisa ku farxo. Markii u horreysay ee aan qof kale codkiisa ku farxi jiray, aan qof kale dareenkiisu uu kayga ahaa. Marka aan wejigeeda cadho ka arko waan nixi jiray. Caloosha ayaa i xanuuni jirtay. Marka aan la hadlayo waxaan dhegaysan jiray sida ay iigu jawaabayso si aan u ogaado waxa ay ii dareemayso. Haddii ay ii qososho aniguna maalintaa oo dhan farxad ayaan ku noolaan jiray. Haddii kalena werwer ayaan fadhiga xammili waayi jiray illaa inta ay ka qoslayso mar labaad. Naftayda badhkeed ayay noqotay. Maya, naftayda inteeda badan ayay noqotay. Imikana waxa la'ii sheegay in aan waxaas oo dhan iska illoobo. Haddaba naftaydan sideen ugu sheegaa? Maxaan ku sasabaa? Maxaan ku qanciyaa? Ma qanci kartaa horto? U malayn maayo. Bal maxaa masaajidkaygii iga soo saaray? Dumar iyo haasaawahooda maxaa ii keenay? Inkasta oo aanan anigu doonan oo ay kabahaasi i soo doonteen. May ahayn wax aan anigu maamulkeeda hayay. Awood iga weyn ayaa i jiidatay. Wax iga xoog badan ayaa i helay. Mar keliya ayaa sammada la'iila baxay. Daruuraha ayaa la'i kor mariyay si mar keliya la'ii sii daayo. Laakiin weli maan garan. Ma aniga ayaa gar daran. Ma jacaylka i helay ayaa daandaansi badan. Ma Mushtaaq ayaa qaldan. Maya, iyadu ma khaldana. Aniguna ma khaldani oo qof wax jeclaaday

ayaan ahay. Jacaylka ayuun baa wakhti khaldan yimid. Aniga ayaa nasiib xun.

Maalintii ballantu ahayd ayaa la joogaa. Sidii la sugayay arbacadu may soo daahin. Aniga haddii la'i weydiiyo waabay soo dheeraysay. Cadceedduna ballanteedii way ka soo baxday oo way iftiimaysaa, inkasta oo daruuro aan badnayn dhabarkooda ay dhuumaalaysi ku ciyaarayso. Waxaan maqli jiray cimrigaaga oo dheeraadaa geel dhalaayana waa ku tusaa. Maanta waxaan ogaaday in cimrigaaga oo dheeraadaa Mushtaaq meherkeedana ku gaadhsiiyo. Islaan markii aan yaraa aan dhegaysan jiray, intii aanan wadaadka noqon, waxay odhan jirtay "geerida horteed maant maan go'o". Anigu waxba ku darsan maayo hadalkaa laakiin usbuucii inna soo dhaafay dhowr jeer ayaan dhintay. Dhowr jeerna waan sigtay. Inkasta oo aanan imikaba waxba la noolayn haddana rafaadkii waan soo dhammaystay. Intiisii badnayd. Walow ay in kale i sugayso. Waa inaan Mushtaaq meheriyo maanta. Alla qadhaadhaa. Waxaan ahay sidii qof dil lagu xukumay oo haddana la yidhi hoo adigu is dil. Noloshu naxariis daranaa. Noloshani ma laga yaabaa inay nooshahay? Oo ay habeen walba la shirto qaar kale oo ay asxaab yihiin oo iyada kasii xun. Dabeedna habeen walba laga sheekaysto dadkii maanta ay soo dhibeen. "Naa dee kii Cali Wadaad dhulkaan la dhacay". Haddii ay sidaa tahay, habeen kasta aniga cid aan ahayn ka ma sheekaystaan. Ilaahay ku dhib dheh.

Ballantu waa 9:30 subaxnimo iyo hudheel magaalada ku yaalla. Bal galabta uun hadday ka dhigi lahaayeen. Maxaa subaxa ku qasbay? Dee ma dad wax jecel baa? Horto nacasanidaa!
Labis aad u qurux badan ayaan xidhay. Gadhka ayaan shan jeer oo isku xigta feedhay intii aanan guriga ka bixin. Mushtaaq aabeheed oo aanu maalin dhoweyd is barannay ayaa laba jeer i soo wacay.

Qaddar yar kadib goobtii ayaan is keenay. Qolkii weynaa ee lagu jiray ayaan soo galay. Dhankayga midig ee qolka waxa fadhiya dad da' kasta leh. Waxa kasoo horjeeda intaa in le'eg. Soo jeedka waxa yaalla shan kursi oo isku xiga. Kursiga dhexe ee ubaxyada badani ku wareegsan yihiin cidi kuma fadhido. Waxa midigta ka xiga kursi uu Mushtaaq aabeheed naqaska ku dhejiyay. Waxa kusii xiga kursi bannaan. Malaha waa kaygii. Dhanka kale ee kursiga arooska ee bannaan waxa fadhiya oday go' shaal ah cunaha iskaga bakhtiiyay oo aan inanka aabihii u gartay. Hore ayaan u soo dhaqaaqay aniga oo salaamaya guud ahaan dadweynaha gaar ahaanna inta iga mudan. Kursigaygii ayaan dabada la haleelay. Illaa saacad badhkeed ayaa ka dhiman wakhtigii ballantu ahayd, dadkuna sidii looga bartay ayuu midba mar soo dhacayaa. Waraaqo aan sitay oo buug ku dhex jiray oo aanan waxba uga baahnayn ayaan isku mashquuliyay. Aniga oo foorara ayaan ku war helay sacab iyo hambalyo igu cidhiidhiday hawadii aan qaadanayay. Kor marka aan eegay ayaan arkay. Waa isagii. Dad ayaa isku dhiib-dhiibaya. Kolba mid ayaa laabta ku qabanaya. Meesha uu taagan yahay oo mugdi ah awgeed ayaa muujinaysa caddaanka ilkaha ay daamamkiisa midba dhinaca joogaa daaha ka qaadeen. Dareen aan fahmi waayey nooca uu yahay ayaa inta uu caloosha ka bilaabmay jidhka oo dhan saaqay. Wallaahi waanigaa dhaartaye in aanan garanayn dareenkaasi nooca uu ahaa. Ma sifayn karo. Laakiin dareen farxadeed muu ahayn, mid murugana muu ahayn. Isku-dhex-karis ayuu ahaa. Qosolkiisa ayaa i dhibayay. Farxadda wejigiisa ka muuqata ayaa i dhibaysay. Shaydaanka ayaan iska naaray. Laakiin shaydaan sheekada muu wadin. Dareenkii uu iga bixi waayey. Dareen xaasidnimo maaha. Waxa uu u badnaa mid cadho. Balse muu wada ahayn. Nin hanti uu lahaa lagu soo doontay ayaan ahaa. Nin naag uu isa siiyay laga qaadanayo ayaan noqday. Weliba qosolna loogu daray. Waxaan

moodayayba in ay dadkan faraxsani aniga igu wiirsanayaan. Nin cadow soo weeraray ayaan ahaa. Haddana cadowga u adeegaya ayaan noqday.

Qayb naftayda ka mid ah ayaa igu leh “meesha iskaga tag waxba ha meherine”, haddana caqli maalmahan aan caadi u shaqaynayn ayaa kolba igu lahaa “ha deg-degin”. Dhankayga ayuu u soo dhaqaaqay. Caloosha ayaa i wareegtay. Qosol ayuu iigu daray. Waan matagi gaadhay. Salaan soo qabowday ayuu ila soo tiigsaday. Aniga oo aan is ogeyn ayaan gacantiisa qaaday. Waa aniga iyo isaga imika. Laba nin oo naag qudha wada doonaya. Labadayada gacmood way is haystaan. Wejigiisa ayaa laba taako ii jira. Indhihiisa iyo indhahayga ayaa is arkay. Indho qoslaya ayaan arkay. Indho faraxsan ayaan arkay. Waan sii eegay. Wax aanan garanayn ayaan ka raadiyey. Waan heli waayay. In aan qalbigiisa arkayo ayaan is moodey. Su’aalo aanu maqlayn ayaan weydiiyay. Afkayguna salaanta ayuu sida canjalad xumaatay uu kusoo cel-celinayay. Gacanta ayuu dabciyay isaga oo sidaa si la mid ah anigana iga sugaya. Waan u bixi waayey. Waan kusii dhegay. “Weli maynaan kala dhammaan” ayaan hoos u leeyahay. Hadal ayaa iigu dhiman. “Maad jeceshahay Mushtaaq? Goormaad jeclaatay? Jacayl noocee ah? Ma kii ciyaalka? Oo imika Mushtaaq ayaad guursanaysaa? Naagta billee nin kale jecel yahay miyaanad is odhan? Cirka ayuun baad nagaga timide? Imika ma xannaanayn doontaa? Wallaahi haddaad qalad ku samayso... Af xun oo dheer lahaydee”. Mar dambe ayaan ogaaday in aan aniga uun maqlayo su’aalahan. Mar dambe ayaan ogaaday in dadku aniga i soo wada eegayaan. Shantaydii farood ayaan kala furay. Gacan qoyan ayaan lasoo laabtay. Muraayad aan xidhnaa ayaan la baxay si aan wejiga ugu masaxo cumaamadda aan xidhanahay. Intii uu kursigiisa fadhiisanayay ayaan kaygii haab-haabtay. Salka ayaan saaray. Xidid kasta oo jidhkayga ku jira ayaa garaac wadnaha la socda

samaynaya. Biyaha qadaadkayga hoos uga dhaadhacaya ayaan dareemaya jidka ay marayaan marka ay la dhaadhacaan dhabarka illaa ay meel hoose surwaalka ugu tagaan.
Sawir cajiib ahaa ayaa i soo hor maray markii aan halkaa marayay. Waxa uu ahaa filim gaalo matalaysay oo aan beri hore daawaday. Aroos ayaa socday. Kiniisad gudaheed. Qaadigii wax meherinayay ayaa intii aanu hawshiisa bilaabin su'aal weydiiyay dadkii kasoo qayb galay xafladda. Waxa uu yidhi "haddii uu jiro qof kasoo horjeeda meherka hebel iyo heblaayo, fadlan imika hadal inta aanu meherku dhicin". Wax isoo xasuusiyay ma garanayo laakiin waxaan is idhi haddii su'aashaa maanta la'i weydiin lahaa toloow maxaan odhan lahaa? Ma anigaa inanta jecel ayaan odhan lahaa?

Fikirka oo halkaa ii maraya ayaan ku war helay gacanta odayga ee garabka iga gujisay. Wakhtigii aan shaqadayda qabsan lahaa ayaa la gaadhay. Dareen kasta oo igu jira ayaan dabool madow saaray. Dhegaha ayaan furaystay. Intii aan aqaannay ayaan akhriyay. Inantii Mushtaaq ayaan iska fogeeyay. Nin kale ayaan gacanta ugu xidhay. Hambalyo ayaa bilaabantay. Kaftan ayaa raacay. Qosol ayaa xigay. Gudahayga murugaa fadhida. Bannaanka ayaan u soo baxay. Dadku waa koox-koox. In wax guursatay iyo in laga guursaday. Anigu waa keligay. Mushtaaq nin waayey ayaan noqday. Weligey noloshayda markii u horreysay ee aan cidlo dareemo ayay ahayd. Wallee in aanan dib wax u jeclaan doonin. Gabdhaha tii doonaysa in ay i jeclaato, masaajidka Cali Mataan ee magaalada Hargeysa ku yaalla iga soo doona. Nabadeey. Ilaahay wax idin jecel ha idin siiyo.

2 RAAXO KOOSAAR

Saddex sanno kahor, goor aan isniin ahayn salaasana aan la gaadhin ayay ogaatay. Telefoonkii ay dhegta ku haysay markii ciidanka nabadgelyadu u sheegay warka ayaa ka siibtay. Dhegaha ayaa awdmay. Indhaha ayaa wax hor yaaceen. Dhulka ayaa cagaheeda ka hoos baxay. Dunida ay ku noolayd haddii ay dhalo ahayd, maalintaas ayay jabtay. Saaxiibkeedii koowaad. Garabkeedii midig. Saygeedii rumaad. Subaxaa markii uu ka sii baxayay haddii ay ogaan lahayd way joojin lahayd. "Aayar soco" ayuu ahaa hadalkii u dambeeyay ee ay ku tidhaahdo markii uu cagta saaray jidka dhuuban ee isku xidha Kampala iyo Mityana. Nolol laguma gaadhin. Laba maalmood kadibna xabaalaha Kololo ayuu boos ku yeeshay.

Wixii maalintaa ka lumay weli way ka maqan yihiin. Wixii maalintaa helay raad ayay ku reebeen. Nabarrada wakhtigu dhayo, iyada keedu kuma jiro. Kelida iyo murugada, mugdiga iyo ciilka sida loola macaamilo ayay aad u baratay. Hadda way nabdoon tahay. Hawl wixii ay qaybsan jireen keligeed ayay ka lulataa. Way ka midho dhalisay. Shaqadii cirka ayay ku shareertay. Waxa ay go'aan ku gaadhay in ay himiladii ninkeeda, riyadii uu lahaa, rajadii uu qabay, qorshihii uu qaddarku kasoo gaadhay, inay iyadu rumayso. Waxay ogaatay in ay tahay habka keliya ee ay xasillooni ku dareemi karto. Raasamaalkii yaallay maanta waa shan-goor-

laab. Afar qaaradood weeyaan inta badeecaddeedu taallaa. Goobta ay ku nooshahay dadku way qaddariyaan. Ragga intii hanti haysay dusheeday ku meeraan. Raggu waxaanay weli garan Raaxo inay lingaxday haantaa. Raaxo waxaanay weli garan inay haantu madhan tahay. Raaxo waxaanay weli garan inay noloshu bilow tahay. Iyadu waxaanay weli garan inuu jiro geesi aan gabban, jacayl magaciisu uu yahay. Cidduu doono uu galo. Dhagax uu dheeman ka dhigi karo. Maarna dahab ka dhigi karo. Sida cudur wax laaya, cidna aanay celin karin.

Raaxo guriga ay magaalada kaga nooshahay waa qasri ay yagleeshay. Toban sanno uun kahor kiro ayay ku noolayd. Iyada iyo ninkeedaa gurigan astaystay. Geeridiisii dabadeed illaa maanta weli way ku nooshahay. Keligeed ayay dhex joogtaa. Qololka gurigu faraheeda oo dhan tiro ahaan way ka badan yihiin. Dadka ka dhex shaqeeyaa iyaguna sidoo kale. Bulshada ay ku nooshahay aad ayaa loo tixgeliyaa. Bulshada ay ku nooshahay aad ayay u kaabtaa. Hadal-haynta magaceeda intaa waa la subcinayaa. Raaxo Koosaar weeyaan. Baabuurta ay raacdo mid ayay aad u jeceshahay. Saddexda soo hadhayna carruurtaa loogu adeegaa.

Qofba meel ayuu jacaylku ka hoos galaa. Qofba qof kale ayuu farta ugu fiiqaa. Iyada meesha uu ka hoos galay agteeda weeyaan, haddana uma dhowa. Fahad ayay jeclaatay. Ixtiraamka guud ayaa aad u soo jiitay. Weligii hadal qallafsan muu odhan. Marka ay u baahato garabkeeduu taagnaa. Muddadii ugu darnayd garabkiisay ku oyday. Nolosheeda maantana isagaa ag jooga. Wixii ay u baahato isagaa diyaar ah. Talo haddii ay noqoto amma adeegyo kaleba isagay weydiisaa. Saaxiib fog weeyaan. Haddii ninkeeda la

weydiin lahaa, Fahad waxa uu noqon lahaa ninka keliya ee uu u ogolaan lahaa inay maanta jeclaato.

Raaxo waxay ogaatay in la haleelay haatan. Wejigeeda ayaa dhalaala markay muuqiisa aragto. Dhegaysiga ayay badisaa marka uu hadlaayo. Hoosta ayay ka eegtaa isaga oo aan u jeedin. Hal dhib ayaa se jira. Haddaba marka laga tago sidii ay dareenkeeda u muujin lahayd, dhib kale ayaa jira. Fahad waa dirawalkeeda khaaska ah.

Dareenka ay isaga u qabto ayaa la kordhayay kolba inta jeer ee ay raacdo baabuurka uu wado. Masaafada iyada iyo Fahad u dhaxaysa ayay damacday in ay soo gaabiso. Fahad waa nin ay shaqadiisu ku kooban tahay guriga bannaankiisa. Guriga ma soo galo. Laakiin Raaxo ayaa is beddel damacsan. Waxay bilowday inay beddesho habka ay u wada dhaqmaan oo ah hab madax iyo mijo kala leh oo ay ka dhigto hab laba qof oo siman.

Dhinac waa qof wax jecel dhinacna waa qof dumar ah oo xishood ayaa ku gadaaman. Labadaa arrimood sidii ay u mataanayn lahayd ayay ka fikirtay. Waxay bilowday in ay guriga u fasaxdo in uu soo galo laakiin Fahad way ku adkaatay. "Waar kaalay shaah cab" ayay dhowr jeer u dhawaaqdaa si uu guriga u soo galo. Inta uu koob kulul is dhaafiyo ayuu degdeg shaqadiisa ugu noqdaa. Tallaabbo kale ayay haddana qaadday. Albaabka baabuurka ayay tidhi aniga ayaa iska furaya maanta wixii ka dambeysa. Fahad oo aan la qabsan isbeddelkan ay Raaxo la timid ayaa in uu aqbalo mooyee hadal kale kasoo celin waayey. Nolol uu la qabsaday ayay damacday inay wax ka bedesho. Muddo ayay sidii ahayd. Muddo ayay rejo qabtay. Markii dambe ayay bilowday

in ay hadal aan shaqo ahayn ka wada hadlaan. Sheekooyin dhex-yaal ah ayay bilowday. Uu la qaadi kari waayey. Ka may daalin.

Qosol aanay iyadu maamulin ayaa kolba ka soo baxaya. Kaftan gaaban ayay bilowday. Hadal kasii gaaban ayuu ugu jawaabaa. Ixtiraam uu reerka u hayo ayuu hadalkiisa ku dabbaqaa. Balse taasi Raaxo way ku filnaan weyday. Raaxo ma rabto sidan. Raaxo si kalay rabtaa. Waa qof wehel u baahan. Saddexdaa sanno ee uu ninkeedu sii mootanaa waxa ay halgan kula jirtay hawl adduun. Waxa ay in badan ka shaqaysay wax aan iyada dareenkeeda shakhsiyadeed saamayn ku yeelanayn. Nin ay maanta heshaa waxa uu u buuxin lahaa kaalin uu ninkeedii banneeyay. Waxa uu u noqon lahaa garab. Garab mar kasta ay cuskato. Garab ay bahalladu kaga baydhaan. Bal haddaba yaa u sheegi isaga? Fahad yaa ku odhan waa lagu jecel yahay. Waa lagu doonayaa. Fahad yaa u sheegi in gabadha uu wadaha u yahay ay isaga oo keliya rabto. Bal yaa ka dhaadhicin Fahad in guriga gudihiisa looga baahan yahay? Sidee loogu sheegaa?

Raaxo maaha qof fudud. Iyadu maaha qof af-dheer. Wallee maaha qof degdegta. Degganaansho ayay intaa kusoo gaadhay. Hubsiimo ayay kaga soo baxday wakhti loo haystay in ay boqortooyadii uu ninkeedu dhisay ay burburi doonto. Salka inay wax kasta u dhigto ayay ku caano-maashay. Dhanka kale Raaxo waa qof madax-adag. Madax-adayga kiisa wanaagsan. Wixii ay u dhaqaaqdo way ka biyo-keentaa. In ay suuqa waddanka Shiinaha gaadhsiiso meceeshaddeeda waxa u sahlay Ilaahay iyo madax-adayg ay dumarka dheer tahay. Maaha in ay Fahad ka heli waayi doonto waxay rabto. Su'aashu waa "goorma". Marka loo eego

waxyaabaha ay kasoo gudubtay, isagu waxa uu noqonayaa wax aan biyo loo kabban doonin.

Nolosheedii kale ayay si habsan u wadataa. In ay isaga soo dhoweysana dhinac ayay ka waddaa. Hawluhu iskagama laaqna. Balse ma degdegto. Waxay bilowday inay safarro shaqo gasho. Kuwo dhaadheer. Safarro sahli kara sheekooyin dhexdooda ka dillaaca.

Maanta qorshaha laba shay ayaa Raaxo ugu jira qabashadooda. Kow, in ay safar ugu baxdo magaalada Masaka oo dhinaca koonfur-bari kaga aaddan Kampala. Safar haddii lagu sheekaysto qaadan doona laba saacadood. Laba, in ay xaalad cusub abuurto.

Sidii lagu yaqaannay ayay u soo labbisatay. Guriga ayay markaas uun kasoo dhammaatay iyada oo ka soo daaddegaysa kaabado dhowr ah oo guriga albaabkiisa weyn iyo barxadda ka horreysa isku xidha. Dhibica sida xaq-dhowrku ka muuqdo ugu dhacaya kaabadaha cadcad ee ay cagaheedu kolba mid ku istaagayaan ayaa shuux ay dheguhu ku qabowsadaan ka dhawaajinaya. Fahad oo kursiga baabuurka iskaga nabaya qabowga Kampala ayaa soo booday markii uu arkay muuqeeda aan marnaba ishu diidayn. Dhoolla-caddayn aad u ballaadhan ayay kaga jawaabtay markii isaga oo garbihiisa roobku ku laba dhacayo uu ku dhawaaqay "walaal iska jir ha ku siibane".

Illeyn waa dabeecad uu bartaye albaabka ayuu ka furay. Illeyn waa ujeeddo kalee way baal martay. Illeyn waa sheeko cusube uu yaabay. Baabuurka ayay daba martay iyada oo abbaaraysa dhinaca kale ee gaadhiga. Kursigii dambe ayay dhaaftay. Kursigii hore ayay

daaqaddiisa haleeshay. Fahad oo baabuurka dhankiisa kale weli taagan ayaa kusoo tuuraya indho aad mooddo in ay arkeen qof diinta ka baxaya. Hoos iyada oo u qoslaysa ayay qumaati u fadhiisatay albaabkana soo xidhatay. Fahad oo daanka hoose dhacay ayaa isna kursigiisa aayar fadhiistay. Hadal ayaa kasoo bixi waayey. Way u miciini weyday. Waxyar bay aamusnayd. Yaabkiisa ayay ku raaxaysanaysay. Fajaciisa ayay ka helaysay. Maaha xaalad ay hore ugu aragtay. Xasilloonni-darro ayay u hagoogtay. Awood gaar ah in ay gacanteeda ku haysato maanta ayay dareentay. Fahad oo aan weli weydiin dhinaca uu u dhaqaaqayo ayaa baabuurkii hinjiyay. Dhankii ganjeelka weyn ee guriga ayuu ku hagaagay isaga oo si dhowrsoon ugu gacan-haadinaya labada ilaallada ah ee labada dhinac ee ganjeelka kala haya. Dhankii magaalada ayuu u dhaqaaqay. Wadiiqooyin aan ballaadhnayn ayuu sii dhex maray. Labada dhinac waxa ka xiga derbiyo waaweyn oo uu dusha kaga wareegsan yahay siligga wax lagu ilaaliyo. Markii uu kasoo dhammaaday waddooyinkii yaryaraa ayuu wadada Bombo kaga soo dhacay saldhigga booliska ee Kawempe agtiisa. Markii uu laba daqiiqo cagta ku hayay jidkaas ayay hadalkii u horreeyay Raaxo soo tuurtay.

- "Northern Bypass" qaado, ayay si qabow ugu soo tuurtay.

Madaxa ayuu aayar ruxay isaga oo amarka fulinaya oo gartay in meel kale loo socdo. Dad roobka dhex lugaynaya ayaa baallahooda maraya. Basaska dadka u adeega ayaa si qaab wacan wadada dhinaceeda u taagan. Jid dheer oo dhowaan soo dhammaan doona ayuu ku taagnaa.

- Bidix u laab kadibna midig, ayay isu raacisay markii ay wadadu soo dhammaanaysay.

Fahad oo gartay jidka ayaa fahmay in Masaka loo socdo. Raaxo ayaa dib u fadhiisatay markii ay isaga ku hubsatay jid aan goorahaa dhammaanayn. Cagaarka dhirta gaagaaban ee dugsanaysa ta dhaadheer ee dhulka kala korreeya ku dul sharraxan ayay indhaheedu sii qooraansadeen. Caleemaha dhirta ayaa sida sacabbo Ilaahay baryaya u kala furan roobkana isu dhigaya. Waa jawi lala wadaago qof aad raalli ka tahay oo keliya. Hadalkii ay doonaysay ayay bilowday.

- Waar heedhe, gabadh baa igu kaa wareerisay.

Jawaab ayay sugtay iyada oo hadalkeeda hakad gelinaysa. Fahad ayaan la soo daahin hadalka.

- Yaa walaalo, waa tuma taasi? Maxayse rabtaa? Ayuu is daba dhigay isaga oo si taxaddir leh u dhooolla-caddaynaya.

Hadalkii ay doonaysay ayay afka ka furtay. Way sii wadatay.

- Dee way igu kaa xiijisoo anna waxaan ku idhi 'naa Fahad malaha diyaar uma aha guur iyo waxaase bal sug aan soo weydiiyee'.

Qosol ayuu ku bilaabay.

- Waa tuma taasi markaa?
- Kuu ma sheegayo dee, maan waalanahay?

Si gaar ah ayuu u qoslay. Way sii wadatay.

- Billee aad diiddaa inanta, billee aad gabadh kale la sheekaysataaba, maxaan ka ogahay?
- Haaye.

- Horto waxaad igu tidhi 'weligay maan guursan' sow maaha?

Isaga oo indhaha ku haya barta ay dhibica iyo laammidu ku kulmaan ayuu saddex xaraf is raaciyay.

- Haa

Iyada oo gacanteeda midig ku mashquulinausa shuulliyada ay gacanta bidix ku xidhan tahay, indhahana ku illowday muraayadda dhinaceeda ah ee ay biyuhu dul yaacayaan ayay si gaaban u soo tuurtay hadal kale.

- Adiga yaa ku diidi kara Fahadoow, kolley adiga ayaan si fiican u raadin.

Fahad ayaa afka iyo indhaha kor u qaaday intii aanu jawaabin kahor.

- Kolley waa calaf uun walaal.
- Waar Fahadoow walaal gabadh maad waayine Ilaahay ka cabso.

Fahad oo aan u baran in sheeko noocan oo kale ahi ay dhex marto ayaa jawaab u celiyay.

- Waa run walaal oo gabadh maan waayin, laakiin dee gabadh kastana la ma guursado. Markaa mid macquul ah ayaan raadinayaa. Markaa bal ii soo raadi adna.

Hadal ay doonaysay ayay ka heshay. 'Adigu ii soo raadi' waxay ahayd odhaah ay sugaysay. Gool ayay dhalisay. Hoos ayay u qososhay. Iyada ayaa is cajabisay. Fahad mid ayaanu ogeyn. Waa hubaal in ay gabadh u soo raadin doonto. In ay raadinta iyadu iska bilaabi doonto, Fahad ma oga. Qofka ugu horreeya ee ay soo waraysan doonto in ay iyada lafteeda tahay, Fahad ma oga. Maskaxdeeda waxa dhex guuraya haddii uu ogaan lahaa, haa uu iska qiiroon lahaa. Balse sida dawada oo kale, waa in si yar loo qulaamiyo. Kolba in afka loogu shubo. Sida bariis hadda dabka laga qaaday, waa in kolba in qabowday afka loogu rido. Haddii kale uu ku saxan.

Raaxo ayaa haddana bilowday in ay ka sheekayso tuulooyinka yaryar ee ay sii dhex mushaaxayaan. Sidii ciyaar la kala nasanayo oo kale ayay taariikh kale u bilowday. Mawjad kale ayay u saartay. Taariikh ay ayeeydeed ka soo gaadhay ayay uga sheekaysay. Taariikh dib ugu noqonaysa 1979-kii markii Tanzania weerarka ku soo qaadday Uganda. In jidkan uu ahaa meelihii uu dagaalka culus ku dhex maray labada dowladood ayay uga sheekaysay. Sida ciiddamadii ajnabiga ahaa ay u waxyeeleeyeen dadkii ku dhaqnaa tuulooyinkan ay dhex marayaan. Sida ay markii dambena u qabsadeen magaalada Masaka ee ay hadda ku socdaan. In markii ay qabsadeenna ay cagta mariyeen. Fahad oo aan weli si faahfaahsan looga sheekayn taariikhdan labada dal dhex martay ayaa sidii ilmo yar oo sheeko carruureed looga sheekaynayo aayar u fadhiyay. Dhaqdhaqaaqa gacmihiisa oo la socday qallooca uu

jidku samaynayo mooyaane meel kale ka muu nuuxsan. Weji aanu hore uga aqoon iyada ayuu maanta bartay. In badan ayuu aqoon u lahaa iyada laakiin maanta qayb kale oo nafteeda ah ayay u furtay. Shakhsiyaddeeda ayaa aad u cajab gelisay. Waa gabadh la yaab leh. Maskax Ilaahay ku mannaystay. Waa qof marka ay agtaada fadhido aad degganaansho dareemayso. Aad xasilayso. Aanad dareemayn in ay kaa lacag badan tahay. Walow ay magaalada jeex iibsan karto. Fahadna nasiib ayuu u yeeshay in maanta la ag fadhiisto. Isna uu dareensan yahay.

Hadal ka dhigan in ciyaartii dib u bilaabantay ayay keentay.

- Anigu haddaanan ku aqoon waxaan is odhan lahaa xaas ayuu leeyahay.

Inta uu qoslay ayuu jawaab iyada qaylisiisay u celiyay.

- Hee waayo walaal, maan gaboobay?
- Maya maya, bisinka. Mayee waxaad u eeg tahay qof reer leh. Yacnii sida yar ee aad u nooshahay. Degganaanshaha kaa muuqda iyo waxaas oo dhan.
- Waad i ammaanaysaaye waxaasi waa iska kaftan.
- Wallee waa iga dhab. Inta badan dadka waa la kala gartaa. Adiga waxa la moodaa in naag khatar ahi ku soo xannaanayso.

Qosol dheer ayuu ku dhuftay.

- Haye.
- Si wanaagsan ayaad u nooshahay.

Fahad ayaa isna markiisa hadal la yimid.

- Walaal adiguba miyaanad is arag?
- Hee sideen ahay?
- Degganaanshaha aad igu sheegayso adiga ayaa boqolka keenay. Weliba qof dumar ah ayaad tahay, haddana noloshaada waxa la moodaa in uu nin geesi ahi kaa dambeeyo.
- Waar iga daa ogaan baad u leedahaye.
- Wallaahi waa runtay walaal. Bal u fiirso. Waa saddex sanno inta aad keligaa ahayd imika, haddana wax kasta dhabarka ayaad u ridatay. Xitaa raggu way kaa baqaan oo kugu ma soo dhacaan.
- Alla waar dee waad ka badnadinaysaa imika.
- Walliyo bille waa iga dhab.
- Hee sidey iiga baqaan?
- Oo walaal ma qof lagu dhacaad tahay.
- Ma dadkaan cunaa bisinkee?
- Waa laga yaabaa inay dadka qaar sidaa u haystaan.
- Walaal way igu dambaabayaane miskiin yar baan iska ahay.
- Haaye kolley qaar badan oo wax ku weydiiyay ayaad eriday.
- Een haa kolley way jiraan, dee walaal dhareerle kasta ma 'haa' baan ku odhan karaa Ilaahay baa i lehe? Qof dee macquul ah ayaa loo baahan yahay. Qof edaab leh. Edaabtaada oo kale.

Gool labaad ayay dhalisay. Baabuurka gudihiisa aamusni qabow ayaa durba hadhaysay. Ma aha in ay hadal iska weyday. Ma

aha in ay wax kale la aamustay. Waa fursad ay isaga siisay. Fursad uu ku fikiro. Fikir uu wax ku fahmo. Fahan isku soo dhoweeya. Dhowaansho guur ku dambeeya. Balse markan isaguna uu dareemay gujada. Wuu dareemay in isaga lala hadlayo. Haddana muu hubin. 'Toloow maxay uga jeeddaa?' In isaga la soo galay uu fahmay, haddana way ka degi weyday. Cunaha ayay u mari weyday. Fikirka uu iyada ka qabo ayaa ah mid isaga fogeynaya. Halka ay maskaxdiisa ka joogto ayaa ah mid isaga hoos u dhigaya. Sawirkeeda iyo kiisa ayaa ah laba aan hal kadar wada geli karin. Magiciisa iyo keeda ayaa ah laba aan hal weedh lagu wada xusi karin. Waa sida uu u haysto. Isagu uu isku qufulay. Maskaxdiisa ayuu sawir kale gashaday. Isaga ayaa is cabudhiyay. Is cadaadiyay. In arrinku intaa ka fudud yahay weli muu garan.

Raaxo way taqaannaa sida hadalka loo jaro. Waxayse kasii taqaannaa sida dib loogu furo.

- Meeshaa buurta hoosteeda ah ma arkaysaa? Ayay si qabow u weydiisay iyada oo farta ku fiiqaysa buurta hortooda sida ballaadhan u fadhida.
- Haa, ayuu cod caafimaad qaba kula soo booday.
- Halkaasaa la iibinayaa.
- Wallaa?
- Oday yar oo gaaban oo Maykal la yidhaa ayaa iska leh.
- Sax.
- Shalay ayuu ii yimidoo, markaasaan ku idhi ”waar iga tag dhulna dooni maayee”.
- Dee walaal waa dhul weyne.
- Haa waa intaa aanay dhirtu ku oollin oo dhan, ”kaalay aad guri ka dhisatide” kuye.

- Ma cidladaasuu ku dejinayaa ninku?
- Sow ma arkaysid cadawnimadiisa. Magaalada ayuu iga soo saarayaa ayaan is idhi.

Halkaa marka ay marinayso ayay haddana aamustay si ay mawduuca u bedesho. Aamusni yar oo ah bilowga hadal cusub.

- Waar maxaad tidhi ”raggu way kaa baqayaan”. Maanta waad iga qoslisay wallaahi.
- Hee maad la yaabtay walaal?
- Dee haa walaal, waxaan is lahaa qof wax la weydiin karo ayaad tahay. Waayo illaa haatan kuwa wax i weydiiyay waa qaar dano kale leh.
- Waan gartay.
- Bal walaal aan is yara dabciyo dee si aan la'iiga yaacine.
- Sow maaha? Mayee walaal sidaadaa iska ahow, kii kugu soo dhici waayaa isagaaba nacasee.
- Ma tidhi? Waa hagaag. Laakiin waa runtaaye dadka qaar ayaa ii haysta in la'i qabo.
- Haa waan ogahay. Way jiraan.
- Malaha waa lagu weydiiyay?
- Haa dee kolley way jiraan. 'Waar nabad geliya' ayaan ku idhaa.
- Waar inaadeer maxaad iiga eryaysaa ragga? Alla cadowsanidaa Fahadoow!
- Dee maaha walaal, kuwani dhareerleyaashii aad sheegaysay ayay ahaayeen. Qaar laguu soo tilmaamo may ahayn.
- Wallaahi inaad qof nool tahay, iga ilaali huuno doqmaha. Fariidnimadu waa intaad ragga dheer tahaye.

Wejigiisa ayaa mar keli ah iftiimay. Afkiisa ayaa buuxiyay in ka badan kala badh wejigiisa. Indhihiisa ayaa dhoolla-caddeeyay. Intaas ayuu la shawakhay. Haddii uu ogaan lahaa waxa soo socda uu suuxi lahaa. Way sii wadatay hadalkeedii.

- Hablo aannu saaxiib nahay baa i dacaayadeeyoo..

- Haye.
- ”Naa maxaad u guursan weyday?” ayay iga la dhammaan waayeen.
- Haaye
- Anna malaha ammaantaada ayaan ku badiyoo.. 'Naa dee ninka guurso haddaad sidan uga heshay haddii kale hadalka naga daa' ayay midi lasoo boodday.

Cod qosol u eeg ayuu ku dhuftay.

- Hadda hadal caadi ah ayuun baan ku lahaa. Sidan aad tahay uun baan uga sheekaynayay ma ogtahay?
- Haaye.
- Mid kalena kute 'naa sida aad mar walba u wada socotaan in aad is qabtaan baa la moodaa'
- ...
- Anna waan ku xanaaqoo waxaan ku idhi 'naa ma anaa nasiibkaaba leh, midda kale miyaanu nin ahayn i guursan kara maxaad sidaa u leedihiin?' Cadho ayay naftu iga baxday.

Way aamustay. Wuu aamusnaa. Dhibica roobka oo aad moodaysay in uu sheekadooda dhegaysanayay ayaa isna joogsaday. Raaxo hadalkeedii way dhammaysay. Intaa wixii ka

dambeeya xishood ayaa xidhaya. Xadka ayay istaagtay. Isaga ayay xilka ku wareejisay. Intii ay odhan lahayd way tidhi. Fahad iyo raganimadii.

Fahad maskaxdiisa iyo qalbigiisa ayaa isku mar shaqo hor leh bilaabay. Xawli boqol jeer ka dheeraynaya ka baabuurka ayay ku dhaqaaqeen. Maskaxdu hadallada ay isu geyso ayuu qalbiguna wadartooda sii labanlaabaa. Kuwa ay maskaxdu isku dhufato ayuu tamartooda sii jibbaaraa. Meesha ay maskaxdu shaki geliso ayuu qalbigu ansixiyaa. Fahad uu shaki baxay. In isaga loo socdo ayuu fahmay. Gabadh uu iska hoosaysiin jiray ayaa isla sintay. Dareen aanu hawaysan lahayn inta noloshiisa ka dhiman ayaa imika suuroobay. Cir aan daruur lahayn ayaa mahiigaan uga da'ay. Jidhka ayaa la dhex yaacay. Miskiinka waa la saaqay. Durba waa la haleelay. Dhaxan ayuu la jarreeyay. Dhidid ayuu la qoyay. Hal mar ayuu kun shay wada noqday. Kun shay ayaa hal mar ku kulmay.

Raaxo ujeedadeedii way gaadhay. Hadal way dhammaysay. Culays ayaa ka degay. Fudayd ayay dareentay. Qalbiga ayaa u xasilay. Indhaha ayaa qabowsaday. Hoos ayay u faraxday.

Burburkii uu ka tegay dagaalkii ay ka sheekaynaysay ayay indheheedu qabteen markii ay gaadheen magaaladii ay u socdeen ee Masaka. Halkii ayay kasii amba-qaadday taariikhdii. Sheekadu waa sheekadii. Safarku waa safarkii. Iyagu waa iyagii. Balse Kampala weji ayay kaga soo bexeen. Masakana mid kale ayay ku galeen. Kampala markii ay kasoo baxayeen, baabuurku dhinac ayuu ka rarnaa. Masaka markay galeen, kafaduhu way is le'ekaayeen.

Iyaga oo aan dareemin, Masaka sowkuwa jooga. Iyaga oo aan filayn ayay durba soo galeen magaaladii. Raaxo dib ayay u fadhidaa, nasasho ayay haatan gashay. Indhahaa u furan balse hadalkii way jartay. Sidii qof aad u qanacsan ayay aayar fadhidaa. Fahad ayaa hawsha wada, isagaa garanaya meesha ay u socdaan. Uma baahna tilmaan. Waddada halbowlaha magaalada ayuu cagta ku hayaa. Dadka iyo baabuurta sida uu uga dhex dusayo ayay Raaxo daawanaysaa. Midabbada indheheeda soo gaadhaya ayaa nooc kasta leh. Laamida ay ku taagan yihiin ayaa aad u madow. Hareeraha labadeeda dhinac ciidda ka soo muuqata ayaa aad u cas. Ciidda waxa ku xiga dhul ballaadhan oo isna aad u cagaar ah. Midabbada ku xardhan direyska carruurta dugsiga hoose dhigta ee ay dhinaciisa marayaan ayaa iyaguna kaalintoda ka qaatay. Masaka waa magaalo yar balse si u weyn. Waa magaalo ganacsi. Dib haddii aad u eegto aasaaskeedii koowaad, ganacsato hindi ah ayaa dhagaxa dhigtay qarnigii labaatanaad bilowgiisii. Waa goob dhaqdaqaaq ka muuqdo. Raaxona way fahamsan tahay. In ay laan ka furato sannadkii inna dhaafay ayay uga maarmi weyday. Xafiisku magaalada badhtankeeda ayuu ku yaallaa. Fahadna isaga ayuu ku hagaagay.

Gudaha ayay ku jirtay. Fahadna baabuurka dhexdiisa ayuu sii fadhiyaa. Intii aanay ka degin ayay ku sii fikirtay in ay isagana sii kaxaysato si uu u arko sida ay wax u socdaan. Illeyn imika waa keediiye. Haddana waa degdege iska dhaaf ayay is tidhi. Wax yar ayay ka maqnayd. Haddana way ka maqnayd. In kale ayay ka maqnayd. In badan ayay ka maqnayd. Meesha way ku habsaantay. Laakiin Fahad ma degdego. Shaqadiisa wuu yaqaan. Balse maskaxdiisa durba wax kale ayaa ku jira. Fursad waxa uu u helay in uu isku-shaandhayn ku sameeyo dhacdooyinkii soo haleelay.

Kursigii uu ku fadhiyay ayuu mid jiif ah ka dhigay isagoo cagtiisa bidix kor u soo laabaya, midda midigna halkeeda ku dhaafaya. Labadiisa gacmood ayuu is dhaafsaday isaga oo laabtiisa ku dul nasinaya. Indhihiisa ayaa xagga sare aragti la'aan daawanaya. Maskaxda ayuu dib u baadhay. Halkii uu fadhiyay markii uu sugayay gurigeeda dhexdeeda ayuu dib ugu laabtay. Halkaas ayuu ka bilaabay fikirkiisii dheeraa. Dhibcihii roobka ee oogada muraayadda kala boobayay ayuu xusuusta ka bilaabay. Sidii uu dhinaceeda u jalleecay markii ay guriga albaabkiisa kasoo baxday, sidii markii uu arkay jooggeeda qurxoon shaydaanka uu u naarray. Sidii isaga oo aan is ogeyn kor uu ugu booday si uu albaabka baabuurka uga furo iyo sidii ay uga diidday. Markii ay agtiisa si kalsooni leh u fadhiisatay, udgoonkii isaga saaqay iyo indhihii ay sida tooshka ugu soo ifinaysay markii ay ka qoslaysay dhoosha teeda bidix. Wejigeedii ayuu mid-mid qayb-ba dhinac ugu qaaday. Indaha kuwo deero aad mooddo ayaa in qumman oo aan kala kala gaabnayn amma aan kala dheerayn isu jira. Baadadka aad mooddo warmo la ganay ayaa la socday dhaqaaqa ay samaynayeen indhaha wiilka bunni-caddayska ahi dhexda uu kaga yaallo. Korkooda sunniyo aad xero mooddo ayaa lagu ooday. Hal mar ayay wada hinqadaan iyaga oo aad mooddo in ay debnaheeda la shaqaynayaan. Marmar ayuu ka midig keligii baxsadaa, korka uu u boodaa.

Xusuusta ayuu ku fogaaday, cid ka qabatana uu waayey. Indhihiisii furnaa markii ay fahmeen in aan loo baahnayn ayaa dabool isa saaray. Naxdintii ay ku beertay ayuu aad ula yaabay. Argaggixii ay ku ridday ayuu aad ula yaabay. Fikirkii laftiisa ayaa naxdin ku dhaliyay.

Jidhkiisa ayaan xubin dhaqaaqda lahayn. Muuqeedii uu ka gudbay. Wax kale oo ka macaan ayuu dib u jalleecay. Waa codkeedii wacnaa. Codkii aan dheerayn haddana aad maqlaysay. Codkii marka uu dhagahaaga soo gaadho aad "iska dhegayso" odhanaysay. Codkii marka ay hadlayso kolba caynad cusub lahaa isaga oo la socda hadalku nooca uu yahay. Marka ay sheeko caadi ah werinayso caynad gaar ah ayuu lahaa. Marka ay su'aal kugu soo ganayso si kaleetuu ahaa. Marka ay xishooto ama ay khajisho quruxdiisaa la yaabaa. Isna kaasuu jeclaa. Canjalad aan dhammaanayn oo maskaxdiisa ku jirta ayaa inta uu doono uu ku soo ceshadaa. Marka ay marayso hadalkii ahaa "adiga yaa ku diidi kara Fahadoow" ayuu joogsi dhigay. Afkiisa oo saacaddii u dambeyseyba aan hadal haynin ayaa aad u qoslay. Wejiga oo dhan ayaa dabadeed ku daydey. Jidhkiisa oo dhan ayay dhaxani ka duushay. Hadalkii ay tidhi ayuu ku soo ceshaday. Cod aanay dhegihiisu maqlayn ayuu aayar dhegaystay. Hadalku heedhe macaanaa! In ay sidaasi tidhi ayuu u qaadanba waayey. Markii ay ku lahayd imikuu ka macaan yahay. Dareen aanu hawaysan, weligii rajaynayn amma aanu filayn in uu suuroobi doono oo sida dhimbiil habaastay, dambas aad ahi ka sarreeyo ayay aad u afuuftay. Dhamacdii is qarinaysay ayaa dhalaal la soo toostay. Dhimbiishaasi hadda gudihiisa ayuu holaceedu ka baxayaa weligiina damayn. Balse hadda wax ayaa u iftiimay isaga. Waxa uu xaqiiqsaday in ay Raaxo maanta hawsheedii iyo in ka badanba gudatay. In ay maanta iyadu intii ay qaban lahayd iyo in ka sii badanba ay qabatay. Dareenkii ay qabtay in ay isaga u soo gudbisay ayuu haatan ogaaday. Mid kale oo uu ogaaday ayaa jirta maanta. In isaga waajib uu fuulay, in isaga looga fadhiyo geeddigan hayaamaya halkii uu sal dhigi lahaa ayuu imika ogaaday. Markii uu halkaa marinaayo ayuu shanqadha ku salalay.

Waa Raaxo oo aad u xiiqsan. Wejigeeda oo beddelan ayay soo fadhiisatay agtiisa. Markii uu arkay, markii ay aragtay, markii ay is arkeen ayay aayar is eegeen dabadeed kala jeesteen iyagoo khajilsan.

Xidhiidhka dhexdooda ayaa si kale noqday. Haddii uu habeen ahaa, maalin ayuu noqday. Haddii uu abaar ahaa, hadda waa barwaaqo. Kursigeedii cusbaa ayay iska macmiillatay. In agtiisa la fadhiisto isna uu la qabsaday. Maalinta aanay la joogin si kale ayaabu dareemaa. Iyada oo imika ka degtay ayuu durba tebaa. Iyaga oo wanaag ku kala dhaqaaqay ayuu werwer meel la fadhiistaa inta ay ka maqan tahay. Mar iyada ayuu ka werweraa; “toloow miyay nabad qabtaa?” “Billee ay wax ku dheceen?” Marna isaga ayaa dib isugu noqda; “Malaha way kuu cadhoonaysaa?” “Malaha baabuurka ayaad si qaldan u kaxaysay?” “Malaha sheekada ayaanad si fiican uga dhegaysan?” Weydiimo aan jawaabbo sahlan lahayn. Marka uu arko wejigeeda furan ayuu werwerkii beenoobaa. Farxad cusub ayuu haddana la bilaabaa. Hadalkeeda ayuu dhegaystaa. Qosolka uu ugu roon yahay. Markii ay ku habboon tahay ayuu intiisa tuurtaa. Dareenkeeda ayuu aad u ilaaliyaa. Wixii dhibaya ayuu ka dhowraa, intii awooddiisa ah. Marka uu u soo dhaco teleefan iyada ka xanaajiya ayuu hoosta iska cunaa. Inkaar intii uu yaqaannay ayuu hoos u tiriyaa. Habaar wixii uu hayay ayuu dabada ka galaa. Qofka ka cadhaysiiya ayuu hoosta ka higgaadiyaa. Ma ogola in Raaxadiisa la qalin-daaro. Qosolkeeda ayuu qalbiga ku rushaystaa, mana ogola in biyaha laga jaro. In ayay sidaa ahaayeen, way isku soo dhowaadeen. Nolosha ayay isla fahmeen. Raaxo waxa ay bilowday tallaabboyin ay isaga ku soo dhoweynayso. Waxa ay si yar ugu bilowday shaqooyin kale. Badweyn aanu fahmayn ayay wehel uga dhigtay. Sidii ilmo socod

barad ah ayay kolba lug u qaadday. Isaga oo weli wade ah ayay kolba xafiis geysaa, kolba sheeko ganacsi u saartaa. Isaga oo aan aad u danaynayn ayuu aayar dhegaystaa. Iyada weeye darteed. Sidii ayay ahaayeen illaa salaasadii dhoweyd. Haa salaasadii. Maalintii Isniinta ku xigtay. Kursigiisa ayuu si deggan ugu fadhiyay markii iyada oo ag fadhida badhtamaha magaalada uu isaga teleefankiisu yeedhay. Markii u horreysay uu iska dhegomariyay. Sheekada ku socota ayaa ka weyn waxa qofkaasi wado, waa sida uu is leeyahaye. Mar labaad ayuu yeedhay. Raaxo ayaa sheekadii hakisay, hakad noqday luuqad kale oo u dhiganta ”teleefanka ka jawaab xabiibi”. Gacantiisa bidix ayaa u guurguuratay jeebaddiisa bidix barta ay surwaalka kaga taallo. ”Haloow” markii uu yidhi ayuu muddo aamusni keenay. Raaxo oo aamusan ayaa isku deyaysa in ay fahamto dhawaaqa qofka dumarka ah ee ka soo yeedhaya teleefanka uu ku cabudhinayo dhegtiisa ballaadhan. Waxba way ka fahmi weyday. In ay isaga jawaabtiisa sugto ayay haatan dooratay. Balse way ku hungowday. In muddo ah. Hadalkiisa oo markiisa horeba koobnaa ayaa imikana joogsi la saaray. Muddo kadib ayuu ”illaa goorma?” si hoose u yidhi. Jawaab markii uu helay ayuu haddana u celiyay ”oo maba dhaqaaqayso?”. Raaxo ayaa indhaheedii dhafoorkiisa ku taagtay. Aamusnaantiisii dheerayd ayuu ”imika ayaan soo baxayaa” ku soo afmeeray. Sidaadii uu u jaray khadkii, intii aanay su’aalin, ayuu kala hor tegay ”Hooyaa lagu soo qayliyay”. ”Alla bisinka, walaal siday tahay?”. Isaga oo aan indhaha ka qaadin jidka ayuu aayar u celiyay ”ma dhaqaaqayso oo bilaa miyir”. Markii ay intaasi afkiisa ka soo baxday waxa wehelinaysay ilmo dheer oo sidii dad tartamaya hoos u yaacday labadiisa dhaban. Raaxo ayaa hadalku ku noqday, afkeeda ayaa hadli diiday. Wejigiisa oo noocan ah weligeed may arkin. Muddo ayay ”walaalkay bal aamus”

iyo ”keen ilmada kaa tiree” waxoogaa subcinaysay. Qorshe uu hore ka qaatay ayay u soo bandhigtay. ”Aniga suuqa i dhig, adigu gaadhigan qaado, inta aad doonto maqnow anna waan soo ducayn”. Raaxo suuqa ayay ku hadhay Fahadna jidka Tororo taga ayuu cagta saaray. Laba shandadood oo aan aad u weynayn ayaa gacanta bidix u sudhan marka ay tallaabada hoosta ka xadayso. Diyaaraddu waxa ay kacaysaa saacad kadib. Raaxona waa diyaar. Fahad waxa uu sii maqnaa laba maalmood. Iyaduna laba usbuuc oo safar ah ayay Shiinaha ugu xadhko xidhatay. Xidhiidho cusub ayay soo unkaysaa. Shiinaha ayay dhul-ballaadhsi ka bilaabaysaa. 18 saacadoo iyo 35 daqiiqo kadib ayay Shangahaay cago-dhigatay. Magaceeda oo sare loo hayo ayay la kulantay iyada oo ay weheliyaan xamaanteedii. Durba waa lala booday. Shandaddii cuslayd waa laga qaaday. Laba dirawal oo sii sugayay ayaa u hagay dhankii baabuurka. Madal heer sare ah ayaa lagu sooray. Galab ayay ahayd, hurdo ayay ku qaabbishay illaa subaxii kale. Markii waagu baryey ayay shaqadii sugaysay dhankeeda u kacday. Maanta waxa ay la kulmaysaa xubin aad u muhiim ah. Mustafe Baaruud. Amma Gacan, sida dadka intooda badan ugu yeedhaan. Mustafe Gacan waxbarasho ahaan ayuu u yimid Shiinaha muddo laga joogo sagaal sanno. Sannadkii labaad ayuu ka tegay dugsigii. Fursad kale ayaa u hillaacday. Suuq dad u baahan ayuu arkay. Dillaal ayuu noqday. Intii hore saalaxwaate ayuu ahaa. Markii uu wax helay ayuu shaqo kaamil ah ka dhigtay. Kaabadaha ganacsiga ayuu kolba mid ku tallaabsaday. Maanta, toddoba sanno kadib, heer sare ayuu ka gaadhay. Suuqa Shiinaha oo dhan isaga ayaa looga dambeeyaa. Iyadu aqoon u ma laha isaga. Balse isagu uu yaqaannaa iyada. Muddo lix bilood ah ayuu daba socday. Farriimo badan ayuu u soo diray, siyaabbo kala duwan ayuu ku soo gaadhsiiyay in uu rabo in ay wada-shaqayn sameeyaan. Intii hore

cago-jiid ayay ahayd, balse doorkan ayay ku dhaqaaqday. Fursadda u bannaan weynideeda ayay hadda garatay. Isna uu ku farxay. Weligeed may arag. Weligii muu arag. Warbixin se isku ma seeggana. Gabadh aad u shaqo badan in ay tahay, ganacsigana ku dheeraysa uu ka dheragsan yahay. Ninka suuqa Shiinaha gacan bir ah ku haya in uu isaga yahay iyaduna way og tahay. Maanta isaga ayay arki doontaa. Sida sharciga u ah ganacsiga, maalinta aad qof noocan oo kale ah aad la kulmayso, sawir uu la yaabbo ayaa la siiyaa. Waa sharci ka mid ah sharciyada ganacsiga. Raaxona way taqaannaa. Hoteelka ay seexatay xalay hortiisa waxa u taagan baabuur kala jiidan. Madowgiisa gudcur la moodo. Indhihiisana xiddigo la moodo. Labbiska ay xidhan tahay ayaa ah caddaan iyo madow keli ah. Masarka madaxa ugu xidhan ayaa aad u weyn oo aad mooddaa in ay saddex qof ka soo shaqeeyeen. Sharci kale oo dhigaya in aanad qofka goobtiisa ku booqan ayay sidiisa u raacday. Goobta ballanta oo ah makhaayadda Wagas ayay ku hagaagtay. Albaabka ayay ka soo gashay, indhaha ayay dul marisay iyada oo tallaabada dhimaysa. Isheeda ayaa qabatay. Miiska dambe ee dhanka bidix ayuu keligii fadhiyaa. Markii uu arkay ayuu fadhigii ka kacay. Markii ay aragtay ayay hakatay. Haddana way hinqatay. Joog aad u wanaagsan ayuu dad fadhiya la dhex taagan yahay. Koodhka suudhka, surwaalka ka hooseeya, tayga qoorta ugu xidhan iyo kabihiisa ayaa madowga wadaaga. Timaha oo madowga ka qayb qaadan lahaa ayaa haatan aan joogin. Laba sannoba way sii maqnaayeen. Markii uu wejigeeda arkay ayuu afka kala jiiday. Way ku soo dhowaatay. Gacmihiisa ayaa kolba meel u booday. Raaxo oo socota ayaa kuu iman ayaanu is lahayn. Hortiisa ayay istaagtay. Indhaha ayuu kala jiiday.

Mustafe Baaruud qorshihiisu mid maaha. Waa laba. Mid waa la wada og yahay. Midna keligii ayaa og. Midka ganacsi, magaca guudna ku daahan waa la wada garanayaa. Waa waxyaabaha ay maanta ka wada hadli doonaan.Midka kale waa mid shakhsi ah. Qalbigiisa mooyaane aanay xubnihiisa kale la ogeyn. Sidii uu u hirgelin lahaa, laba usbuuc ayaa hor yaalla. Isaga iyo ragannimadii. In uu rumayn doono, hadafkiisa gaadhi doono, isaga shaki ka ma saarna. Xaalado horeba uu ka soo gudbay. Dhowrkii sanno ee uu ganacsiga Shiinaha ku jiray ayaa waayo-aragnimo ugu filan. Saddex sanno kahor, intii aanu suuqa oo dhan la wareegin, waxa uu ahaa ganacsade dhexe. Sidaas ayuu ku qanacsanaa. Balse maalin ayuu fikirkiisu is beddelay. Maalin ayuu hammigiisu koray. Raaxo ayaana u sabab ahayd. Ninkii berigaa looga dambeeyay suuqan uu maanta haysto, Faysal Gaab, iyo niman kale oo ay Faysal saaxiib ahaayeen, oo tartan ku jira ayuu arkay. Waxa ay ahayd markii uu Raaxo ninkeedu shilka ku dhintay. Isaga oo aan aqoon Raaxo qofka ay tahay ayuu iyaga ka maqlay. Waxa uu ogaaday in ay tahay gabadh maal iyo mansabba ku leh Uganda. In ninkeedu bilo kahor geeriyooday. Nimankanina ay u tartamayaan sidii ay iyada u heli lahaayeen. Mustafe waxa uu bilaabay raadraac. Qofka ay gabadhani tahay ayuu damcay in uu soo ogaado. Baadhitaankii uu maalintaa bilaabay, illaa maanta uu ku jiraa. Kolba inta uu ka ogaado ayuu sii xiiseeyaa. Gabadh aan dumarka la mid ahayn in ay tahay markiiba uu fahmay. Mustafe ragga ka ma liito, isagana damaca ayaa shaqeeyay. Go'aan ayuu qaatay. Raaxo waa in aan is baraa. Balse ganacsade yar ayuu ahaa, arrintaasina isaga Raaxo way ka fogaynaysay. Isna uu ogaa. Tallaabadii xigtay ayuu ku dhaqaaqay. Si ay Raaxo u aragto, waa in uu is tusaa. Si uu isu tuso waa in uu meel uu ka muuqdo istaagaa. Taas ayaa ku dhalisay in uu la wareego suuqa Shiinaha. Faysal

Gaabna booska ka qaado. Saddex sanno ayay ku qaadatay. Balse maanta uu rumeeyay. Intii ka dhinnayd riyadiisa, maanta way buuxsantay. Raaxo way aragtay, magiciisa way haysaa, hortiisaanay fadhidaa. Haddii uu maqli jiray in Raaxo ay sanka taagto, maanta labadaba in ay taagto ayuu arkay. Intii uu ka maqlay shakhsiyaddeeda, in kasii badan ayay wadataa. Mustafe oo aan baqan, geesinimona ku caan baxay, maanta hadalka uu is dhex dhigayaa. Gabadh ayaa xasilloonidii ka qaadday.

- Soo dhawoow walaalo. Halkan fadhiiso. Halkaad doontid fadhiiso.
- Mustafe waa adiga!
- Mustafe waa aniga, adigu Raaxo inaad tahay waan garanayaa laakiin.
- Iska hubso! Qosol naxdin daba fadhido ayaa ”fudh” ka soo yidhi.
- Wallaahi imtixaan, safar dheer ayaad soo gashay. Ilaahay ma ku nabad keenay?
- Sow anigan ku hor fadhiya, waan nabad imid haa, ayay u celisay iyada oo shandadda yar ee ay sidato miiska dhinac ka saaraysa kursigana gacanta kale ku hagaajinaysa.

Waa la fadhiistay. Hadal aan dhammaad lahayn, waa la bilaabay. Qosol aan dhab ahayn, waa lagu daray. Haddii ay ciyaar kubbadeed ahaan lahayd, iyadu Brazil ayay ahaan lahayd. Isaguna dabcan Sucuudiga. Dabeecaddii ganacsiga ayay la soo baxday. Markiiba waxa ay ogaatay in uu socod-barad yahay. Sida ay doonto ayay ka yeeshay, way isku laba rogtay. Mar uu wejigiisa dhidid ka masaxayay, iyadu funaanad ay sidatay ayay labada gacmood gelisay. Mustafe uu isla yaabay. Toloow ma aniga ayaa

wax kale ku soo talo galay, mise iyada ayaa nooc kale ah. ”Malaha aniga ayaa daawasho u imid meesha”. In laga xariifsan yahay, qirashadeeda ma ogola. Balse in ay tahay gabadh aan loo geli karin, xaqiiqdeeda ma diiddana. Kulankii uu dhammaaday, balse heshiisku ma dhammaan. Mustafe oo aanay isaga laftiisa maskaxi ku yarayn ayaa qorshe dhigay. Markii uu imanayay waraaqaha uu ka kala yimid. Ogaan. Kulan kale ayuu rabaa. Raaxo wax degdeg ah kuma jiro iyada. Kolleyba laba usbuuc ayay haysataa, maantana waa maalintii labaad. Jimcaha ayay ballameen. Sidii ay taqaannay, hore ayay ka baxday. In hadal kale dhex maro iyada iyo qofka ay heshiis shaqo wada gelayaan, khalad ayay u aragtaa iyo meel ka dhac xeerka ganacsiga ah. Iyada oo aan sugin, hoteelkii markay joogto, teleefan waata la boodday. Werwer aan yarayn, ayaa haatan hadheeyay. Lambar aad u dheer oo ay fareheedu barteen, faraha waata la boobtay. Sariirta aadka u ballaadhan, dhinaceeda bidix ayay aayar kor fadhidaa iyada oo lebbiskii weli wadata. Gacanta bidix ayay teleefanka kor ugu haysaa kuna cadaadinaysaa dhegteeda. Laba dhawaaq markii uu sameeyay ayuu ka qabtay.

- Haloow! Ayuu cod xabeebsani ku soo gaadhay.
- Fahad! Huuno waa anigee sideed tahay?

Jawaab ayay weyday.

- Fahad! Maad i maqlaysaa?
- Anigu waan ku maqlayaa, maad i maqlaysaa adigu?
- Haa, haaye ma fiican tahay?

Haddii uu su’aashaa si sax ah uga jawaabi lahaa, jawaabtu ”maya” ayay noqon lahayd. Jacayl xaasid ma waayo, Fahadna waa la haleelay. Hadallo ayaa soo gaadhay. Kuwo aan wacnayn. Tiraba

saddex qof ayaa soo gaadhsiiyay. Raaxo nin ay guursanayso ayaa Shiinaha jooga. Sidaas ayay u baxday, waa intii uu maqlay. Fahad waa qof hadal gaaban. Dareenkiisa aan la akhrisan karin. Odhaahdiisuna aanay xanaf lahayn. Intii uu wax idin kala geeya odhan lahaa, aamuska ayuu ka jecel yahay. Sidaas darteed iyada waxba ma uu weydiin. Balse uu rumaystay. Wuu ogaa in ay jiraan rag Shiinaha jooga oo aad u danayn jiray iyada. Imikana in ay kuwii yihiin, hoosta ayuu ka xarriiqay. Niyadda ayaa ka jabtay, wuu isla yaabay. Murugo uu dareemi lahaa, cadho uu naftiisa u qaado ayaa beddeshay. ”Naftaydaay ku nacay, maxaa ku kellifay? Meel aanad joogin ayaad is geysay. Naag aanad jeclaan karin ayaad iska jeclaatay. Naag kaa sarraysa ayaad isku doonatay. Miskiin aan waxba haysan ayaad tahay, sidaas in aad u noolaato ayay ahayd. Imikana wixii habboon uun samee. Gabadhan niyadda ka jar. Dad ay isku darejo yihiin ayay doonatay. Sidaas ayaanay caddaaladdu ku jirtaa. Adna mid kuu qalanta meelahaa ka raadso”.

Xaaladda Fahad hooyadii ku jirto, way kasii daraysay. Xaaladda uu isagu ku jiro, way kasii daraysay. Adduunkiisa oo bad ahaa, badda teeda deggan, haatan way kacsan tahay. Duufaan ayaa ku kacday. Gabbalna waa u dhacay. Jacayl aanu filayn, isaguu dul hurdaa. Dareen aanu sugayn, isagaa dul hurda. ”Bal maxaa i kallifay?”, hoos ayuu u yidhaa. Noloshaydii wacnayd gabadh ayaa isku laaqday. Dhulkii doogga lahaa, dharabku uu ku dul jiifay, saxare ayay ka dhigtay. Gu’gii ii da’ayay, jiilal waakan noqday. Aayar ayaan shaqaysanayay, shaqo aan aad u aqaan. Bal maxay iga soo doontay, haddii ay sidan ii gelayso. Bal maxay iga rabtay? Maalintii qaboobayd, kursigeedoo bannaan, maxay agtayda ka doontay? Toloow ma meel bannaanayd ayay igu buuxinaysay? Ma ku-meel-gaadh ayaan ahaa? Ma qaboobahaa la’igu dhaafayay? Inta

ay samada iila baxday, maxay faraha iiga qaadday? Maya, maya. Iska dhaaf. Dhibku waa aniga. Aniga. Haa, waan is moodsiiyay. Wax aan jirin ayaan is tusay. Wax ayay i tustay, wax kale ayaan u qaatay. Walaaltinimo ayay i tustay, jacayl ayaan u qaatay. Nasakh. Alla naanaabsaniyaa. Gabadhu malaha inaan keli ahay ayay aragtay. Wehel u noqo ayay is lahayd malaha. Anna wax kale ayaan mooday. Iska daa waa sidaase. Ha ila yaabine anna meel i bannaanayd ayuun baan ku buuxsaday dareenka aan iyada ka helay. Qof qof u baahan ayaan ahaa. Dareen meel mugdi ah ku jiray ayay ii ifisay. Anna waan iska raacay uun. Fahad uu is illoobay. Fikirka ayuu ku fogaaday. Haddana fikir kiisa ka weyn ayaa dhirbaaxo ku dhuftay. Hooyadii ayuu xasuustay. Mawjad kale ayuu galay. Ilaahayoow hooyaday caafi. Duco dheer ayuu galay. Laba qof oo uu adduunkan ugu jeclaa, labadiiba way sii socdaan. Raaxo nin kale ayay doonatay. Hooyana wakhtigeedii ayaa la joogaa. Inkasta oo ay qof adag tahay, xanuunkana qarsanaysa. Haddana way ka muuqataa. Way sii socotaa. Muddo ayay xanuunsanaysay. Intii aanay gogol-yaal noqon, way shaqaysan jirtay. Lo' badan ayay lahayd. Gabadh ay eddo u tahay ayaa la joogta. Tobankii sanno ee u dambeeyayba la degganayd. Walaalkeed ayaa dhalay. Ilaahay ha u naxariistee. Keligeed ayuu dhalay. Markii uu geeriyooday, Fahad hooyadii ayaa gacanta ku haysay. Si wanaagsan u soo xannaanaysay. Maantana way is beddeleen. Iyada ayaa la hayaa. Haatan way tabar gabtay. Dhaqaaq kuma jiro. Jiifka ayaa wax lagu siiyaa. Qaaddo ayaa biyo loogu qaadaa. Isaga iyo inaabtidii ayaa iska nasiya. Labadooda ayaa jala. Adduunka dhanka uu ka joogo, dhinaciisa kale, Raaxo ayaa jiifta. Sariir ayay dhinac yar ka isticmaashaa sidii marti dhowrsan. Habeenka oo badh tegay ayay daba socotaa. Maalinta oo aan dhalan ayay ka hor tegaysaa. Maskaxdeedu ma joogto, nin

ayaa la wareegay, qalbigeedana qaatay, xiskeediina xambaartay. Maankeeda idil isagaa ka dhex guuxa. Xaaladdiisa ayay rabtaa in ay ogaato. Xaaladdeeda ayay rabtaa in uu ogaado. Teleefanka ayay kolba qaadaysaa, haddana way dhigaysaa. Lambarrada ayay gujinaysaa, haddana way habranaysaa. Yartu way hakanaysaa. Ugu dambayn way ku hagaagtay. Dhawaaqa ayay dhegaysatay markii ay dhegta ku haysay teleefanka aan weli laga jawaabin. Cod gaaban ayaa u celiyay hadal.

- Haloow!
- Fahad! Alla walaal ii warran? Maanta farxaddii adduunka, ninkii wax walba waan ka saxeexay. Shiinaha dhan innaga ayaa iska leh. Wax walba waan ka dhammeeyay, isna uu iga yeelay. Wallaahi sidaan u farxay maanta haddaan og tahay, weliba waxaan..
- Walaal hooyo way hoyatay.
- Yaa?!!
- Hooyo Ilaahay ha u naxariisto. Mar kale i soo wac walaal.

Wuu dhigay. Hadalka uu yidhi gaabnaayee, haddana awooddiisu weyneydee. Faraheeda ayaa midba dhan u jeedsatay. Gacmaha ayaa jidhidhico la bararay. Lugaha ayay dareemi weyday. Caloosha ayaa laga dhex saaray. Beerka ayay furaashka ku qabatay. Afka ayay barkinta ku hagaajisay. Baroor ay iyada uuni maqlayso ayay hoos ugu oyday. Murugo aanay saddex sanno dareemin ayaa jidhkeeda saaqday. Murugada dareen kale ayaa u dheeraa. Mid qoomammo. ”Sheekada aan u wadey, midda uu ii hayey, cirka iyo dhulka ayay ahaayeen. Bal maxaan u sugi waayey. Isaga maan waraysto, weligayba sidaasaan samayn jiree, maanta maxaa i qaaday?”. Dhaqaaqa uu dhabarkeedu samaynayo marka ay

laabteedu qadhqadhayso ayaa sariirta ruxaya. Halkii ayay ”hiq”-da gurtay. Hal usbuuc ayaa laga joogaa maalintii geeridu dhacday. Indhaheeda oo aan libiqsanayn ayaa ku qallalay muraayadda ay ka muuqato baalka diyaaradda ee dul ordaya laammida madow ee madaarka magaalada Kampala. Gudaha ayay soo gashay, intii aanay ka dhammaan dhismaha ayay aragtay isaga. Baroor ay xuub caaro ku haysay ayaa kasoo fakatay. Garabkiisay ku oyday. Aayar ayay qulquleen. Baabuurka ayay ku dhaceen. Meel ay shaah ka cabbaan, makhaayad ay jeclaayeen, ayay kuraasideeda fadhiisteen. Wakhti way haystaan ay isku waraystaan, hadal ayay bilaabeen. Midba dhan ayuu u warramay. Balse mid labadooda ka mid ah ayaa wax u laaban yihiin. Fahad weeye qofkaasi. Hadal aanu odhan ayaa xasillooni u diiday. Daboolka waaka ka qaaday.

- Hooyo keligeed ayay noolayd..
- Ax walaal miskiinta yar.
- Waxa la degganayd inan aannu ilmaabti nahay oo Xusni la yidhaahdo, iyada ayaa..
- Dee haa walaal wehel way isaga baahnayd.
- Hooyo walaalkeed oo beri hore dhintay ayaa keligeed dhalay. Markaa..
- Alla Ilaahay ha u naxariisto.
- Markaa hooyo ayaa igu la dardaarantay in aan..
- Walaal anaa inanta ilaalinaya maad tidhaahdid.
- In aan guursado.
- ...
- Markaa laba habeen kahor ayaan aqalgalay, gurigii ay hooyo ka dhimatay ayaan degayaa, halkaa ayaan nolol cusub ka bilaabayaa. Adna walaal waxaan kuu rajaynayaa

in noloshaada cusub uu Ilaahay mid khayr qabta kaaga dhigo. Markaa imikaan baxayaa, markaan guriga ku geeyo.

Madfac aan dadka kale saamayn ku yeelan ayaa keligeed ku dhacay. Shaah ay afka ku haysay ayaa dhuun kale ku khaldamay. Way saxatay. Si xun. Qufac badan kadib ayay aad u ilmaysay. Isagu wax ayuu arkayaa, waxna uu u macnaystay. Iyadu wax ayay dareemaysaa, waxna way ogtahay. Isagu ilmada uu arkayaa, saxasho ayuu u macnaystay. Iyadu wax kale ayay dareemaysaa, ilmaduna waa qalbiga. Inta ay aayar masaxday, ayay hadal kooban u qadhiidhay.

- Walaal waa wax fiican. Hooyo dardaarankeeda inaad fulisay, anna waan iska noolaan uun kolley. Orod walaal xaaskaagii ayaa ku sugaysee u tag. Halkan ayaan kaaga hadhayaaye.

Cidhibta kabihiisa ayay sii daawanaysay markii uu kasii socday iyada oo sida qalfoofka u dul yuururta kursi aan raaxo badnayn. Ilmo kale oo aan meel fog jirin, ayaa soo qubatay. Laabteeda ayaa dareentay qoyaanka ay keentay ilmada ku daadanaysa korkeedu. ”toloow maxaa iga khaldan?” ayay hoos isu su’aashay. ”Qofkii aan jeclaadaba miyaa la’iga qaadayaa? Kii hore Ilaahay ayaa qaatay, waan ku samray. Muddo dheer ayay igu qaadatay inaan qof dib u jeclaado, kiina ma islaantii dhashay ayaa iga qaadatay? Miyaanay ogeyn in aan aad u jeclaa? Toloow qabriga ma loogu sheegayaa xaaladdayda? In ay i cidlaysay, toloow ma ogaan doontaa? Ilaahay ha u naxariisto iyada, anigana mooyi. Mid ayaan ballan ku qaadayaa, in aanan weligay jacayl dambe doonan, isaga oo isoo doonta mooyaane. In aanan dareen dambe la saaxiibin. Laakiin

ma dembi ayaan galay? Qof ayaan jeclaaday. Qof in la jeclaado rabta ayaan ahay. Ma dembi baa? Maya, waan gartay. Jacaylkaygii waan soo qaatay. Intaas ayuu ku ekaa. Aniga ayaa khasbaya". Fikir aan dhammaad lahayn, su'aalo aan jawaabbo lahayn, dareen aan dawo lahayn, intaba way koobsatay markii ay kasii dhaadhacaysay jidka Hanlon Road ee gurigeeda taga. Gacanta bidix kabo dhaadheer oo ay xidhnayd ayay ku sidataa, gacanta midig teleefan aan shaqaynayn ayaa ugu jira, shandaddeedii gacantana miiskii ay shaaha ku cabbaysay ayay dushiisa taallaa.

3 XUSUUS-QORKII SUHUUR

Warqaddii 1-aad

Arbaca 8/10/2014 7:30pm

Qolka debeddiisa eedaan ayaa ka baxaya. Qolka gudihiisa gurxan hoose ayaa ka baxaya. Laba-laba ayaa la'isugu jeedasaday. Anigu keligay ayaan ahay. Waxa aannu nahay shan wiil iyo laba gabdhood. Qolka werwer ayaa hadheeyay. Nin ayaa na wada. Hadda nala ma joogo. Hudheel magaalada ku yaalla ayuu na keenay. Qol ayuu nagu xareeyay. Isaguna uu iska baxay. Faallooyin kala duwan ayaa laga bixinayaa meesha uu tegay. Qaar waxay leeyihiin ninku malaha uu inna dhacayaa. Qaar kalena waxay leeyihiin malaha ninku ciidanka ayuu la shaqeeyaa. Ciidanka la sheegayo ma garanayo anigu. Hadal kumaan darsan. Wax aanan garanayn ma rabo in aan ka faalloodo.

Qalinkayga iyo buuggayga ayaan isku mashquulinayaa. Waa labadayda saaxiib ee aan weheshado meel kasta oo aan joogo. Iyaga ayaa dad iigu xiga. Iyaga ayaa sirtayda oo dhan og. Iyaga

ayaan ku ciil baxaa. Qolka aan dhex joogo ma weyna. Waa laba tallaabbo oo dhinac ah iyo saddex tallaabbo oo dhinac ah. Hal sariir ayaa dhinaca bidix taalla. Maryo ay oogadoodu jidhkaaga xoqayso ayaa si qaab daran u dul saaran. Hal barkimo oo aad u buuran ayaa dul taalla. Dhulka caw cidhifyada go'an ayaa sibidhka qabow dushiisa dul dhaxmoonaysa. Markii aannu soo galnayba innamadii aannu wada soconnay cawda ayuu midba meel qabsaday. Hablaha ayaa sariirta leh ayay markiiba ku dhawaaqeen. Aniga iyo Nimco ayaa sariirta sii kala jeedna. Dhammaantood isku iskuul ayaannu ahayn. 29-kii sebtember ayaannu ka qalinjabinnay jaamacadda. Anigu waxa aan bartay xidhiidhka caalamiga ah. Nimcona sidoo kale. Muxumed iyo Abshir waa laba dhakhtar. Cabdinaasir iyo Cabdikhadarna waa laba macallin. Hanadna waa qareen. Waxaan is idhi waxbarashadii dheerayd ayaa wax u dhintay. Aad ayuu u aamusan yahay. Okiyaale weyn ayaa dhegaha u sudhan. Dhammaantood aqoon saa'id ah iskuma lihin. Dhowr jeer hore waanu isku aragnay. Aniga iyo Nimco ayuun baa aad isu naqaanna. Afar sanno ayaanu meel wada fadhiisan jirnay. Laakiin waxaan filayaa in safarkani uu noqon doono mid aanu dhammaan isku baranno. Gaar ahaan mid aan anigu naftayda ku barto. Nimco ayaa kolba i gujinaysa oo igu leh soo jeedso. Anna qalinka ayaan la haasaawayaa. Way igu daashay. Dhegtayda waxa soo gaadhaya faallada ay wadaan. Walaaca badan ee Nimco iyo duryanka hoose ee wiilasha. Berri iyo waaga ayaannu sugaynaa. Meel aannu u bixi doonno ma garanayno. Goor aannu bixi doonno ma garanayno. Caawa halkaas ayaan qoraalka ku joojinayaa. Waa innoo mar kale.

Warqaddii 2-aad

Khamiis 9/10/2014 6:14am

Garaaca dhanka albaabka ka imanaya ayaan ku toosay. Haddana dhawaaq kale ayaa xigay. Codkiisa ayaan gartay. Cagahayga oo barkimada la wadaagaya madaxa Nimco ayaan ku gujiyay. Hurdo-weyni ku maan aqoon. Hadal ayaan u raaciyay. Weji yaabban ayay kor ula boodday. Abshir oo "sug" ku dhawaaqaya ayaan arkay. Codkii iyo shanqadhii qolka ka yeedhay ayaa intii kalena kicisay. Shan innamood ayaa dhulka ka toosay. Show innamaa qolka joogay. Ceeb weynaa. Waa wax igu cusub ayay ahayd balse waan la qabsan doonaa kolley. Qof kasta fikir aan dhoweyn ayuu ku jiraa. La'iskuma mashquulayo.

Intii albaabka laga furayay ayaannu is hagaajinnay aniga iyo Nimco. Sidii marwooyin aan weligood seexan ayaannu sariirta dhinac kaga fadhiisannay. Gudaha waxa soo galay Cali. Ninkii na waday. Kolley magaciisuna waa been. Gacmaha waxa uu ku sidaa baco yaryar. "Haye waa kacaysaan, quraacdan waa cunaysaan

markaana waa soo baxaysaan. Shan daqiiqo waa haysanaysaan". Balaayada afka adag leh intaas ayuu is raaciyay. Quraac aanan dhadhankeeda xasuusan oo midho jiidh ah iyo biyo saliid lagu laaqay isugu jirta ayaan roodhi ku liqay. Roodhida oo keliya ayaan dhadhankeeda saxay. Inta kale ma garanayo wixii ay ahaayeen. Bannaanka markii aannu qolka uga soo baxnay ayaan arkay Cali oo meel wax yar iga durugsan taagan. Waa diyaar. Laydh qabow balse caafimaad wadata ayaa sambabbadayda buuxisay. Hawadii xidhnayd ee qolka ayaan iska sifeeyay. Debeddu waa mugdi. Gacanta Cali ee uu wadhfinayo ayaan arkay. Waanu daba kacnay. Shan daqiiqo wax aan gaadhayn ayuu na hor socday. Dad aan badnidooda ka yaabay ayaa suuqa jooga. Saacadduna weli lixdii may gaadhin. Waa wax la yaab leh.

Derbi weyn oo wareegsan ayaannu soo galnay. Faras caws cunaya ayay markiiba indhahaygu ku dheceen. Hore ayaannu u dhaafnay. "I suga" ayuu na la soo tiigsaday. Waan istaagay. Indhahayga ayaa sii raacay kildhi bun oo ay gabadhi sidday. Iibso ayaan is idhi. Lacag ayaan iska waayey. Wixii aan hayayba Cali ayaa haysta. Laba shuuli iyo silis ay hooyo i siisay intii la'iga siistay. Waa illaa Sudan ayuu yidhi. Cali ayaa nagu soo noqday. "Kaalaya" ayuu noo dhawaaqay. Waanu daba galnay. Bas weyn ayuu albaabkiisa nagu hagaajiyay. Waannu fuulnay. Kuraasi xagga u dambeysa ah oo na sii sugayay ayaa na loo tilmaamay. Caligu waaba nin khatar ah. Wax kasta uu sii hagaajiyay. Waxaan is weydiiyay toloow imisa qof ayuu hortaa jidkan mariyay? Imika se halkee ayay joogaan? Ma nool yihiin? Ma dhinteen? Dhaqaaq aan u gartay in uu baabuurka yahay ayaan dareemay. Dhankii albaabka laga baxayay ayuu ku hagaagay. Markaa ayay anigana calooshu i xanuuntay. Imika ayaan safar dheer bilaabayaa. Aanan

garanayn meel uu ku dhammaan doono. Laakiin ma rabo in aan kasii fikiro. Qaybta dareenka waan iska xidhay. Qalbiga waan qufulay. Marka ay hooyo maskaxda ku soo dhacdaba wax kale ayaan isku dhaafiyaa. Marka uu aabbo maskaxda ku soo dhaco waan is diidsiiyaa. Wakhti aan ka fikiro ma joogo. Calool-jileec looma baahna. Magaalada ayaannu dhex qulqulnay. Sidii ilmo yar ayaan daaqadda baabuurka muraayadda madaxa ku hayaa. Wax kasta ayaa ii cusub. Weligay Jigjiga maan arag. Waxaan u haystay in ay soomaali oo keli ahi deggan tahay magaalada. Xabashida ayaad mooddaa in ay ka tiro badan yihiin. Soomaaliduna xabashi ayay u eekaadeenba. Kolley waa deegaanka. Wadada dhinaceeda waxa socda dad dumar u badan oo madaxa xaabbo ku sida. Qiiq ayaa meel kasta kor uga baxaya. Baska ayaa ka hor jeedsaday buuro waaweyn oo dhakadooda sare la dhalaalayso cadceedda arooryaad ee keligood haysa. Waa subax si aan habboonayn aan u kacay. Balse aan rejo iyo deegaan qurxoon la toosay. Baska dad badan ayaa nagu weheliya. Hadal badan ma jiro. Hadda ayaannu dhaafnay kaantaroolka Jigjiga ee cabsida badan. Qiyaastii 12 saacadood oo safar ah ayaa dhiman. Warqadda tan xigta waxaan kasoo diri doonaa Addis haddii aan nabad tago.

Warqaddii 3-aad iyo 4-aad

Jimce 10/10/14 12:27 pm

Labadayda cagood ayaa fidsan dusheeda kaabadda guriga badhtankiisa cirka daawanaysa. Wejigayga ayaa eegaya daaradda kooban ee aad ku soo hagaagayso marka aad albaabka ka soo gasho. Saddexda jiho ee kale qolalkii la jiifsanayay ayaa kaga

wareegsan. Qolalkaas oo saddex ka mid ah annagu yeellanay. Aniga iyo Nimco ayaa isku qol jiifsanayna. Wiillashuna laba qol ayay qaybsadeen. Magaalada laba saacadood kahor ayaannu soo galnay. Waa markii u horreysay ee aan arko Addis. Waddooyin waaweyn iyo dhismeyaal dhaadheer oo kulaalaya. Dad aad u tiro badan oo gees kasta u gooshaya. Inkasta oo aan dawakhsanaa markii aan soo dhex marayay, haddana waxa aan jeclaysanayay daawashada magaalada. Dhammaan waa markii noogu horreysay, marka laga reebo Hanad oo dhowr bilood joogi jiray. Sida uu noo sheegay waxa uu degganaa xaafadda Booli Mikael. Xaafaddan imika aanu joognana maaha. Weli mageceeda na looma sheegin. Laakiin sida aan maqlay waxa noo dhow suuqa Markata. Salaaddii duhur ayaa socota. Sheekha codkiisa waxa weheliya dhawaaqa jalaska kiniisadda, iyaga oo isku maran ayay dhegahayga soo gaadhayaan. Daal badan ayaa iga muuqda, gaajo ayaa ii dheer. Cabsi badan ayaa iga muuqata, rejo ayaa ii dheer. Sida ay u kala horreeyaan ayaan u kala xallin doonaa. Gaajada ayaan ku bilaabi, daalka ayaa xigi. Cabsida markaan tirtiro rajada ayaa rumoobi.

Jimce 10/10/14 10:49 pm.

Dadka intooda badani way hurdaan. Nimco sidoo kale. Qaar ayaa soo jeeda weli. Aniga sidoo kale. Gaajadii waan ka guulaystay, daalkii waan ka badiyay. Cabsidii ayaan u hawl galay. Sidii aan u baabi'in lahaa ayaan hawsheeda galay. Markii aan soo toosay casarkii ayaan xog-ururin bilaabay. Runta haddaan sheego,

cabsidii i haysay imika ayay sii badatay. Way igu korodhay. Waxyaabbo badan oo aanan ogeyn sida ay u dhici doonaan ayaa jira. Waa waxyaabaha cabsida igu dhaliyay. Waa weydiimo bilaa jawaab ah. Waa jawaabbo aan dhammaystirnayn. In aan ogaado khatarta i sugaysa ayaan ka doorbidayaa in aanan ogaanin. Taas ayaa i cabsi gelinaysa. Caawa dhan waanu is wareysanaynay. Wax aannu isla qaadannayna ma jirto. In badan ayaannu hadalnay, inyar ayaan fahmay. Su'aalo badan ayaannu is weydiinnay. Imika maxaa xigi doona? Goorma ayaynu Addis ka baxaynaa? Ninkani illaa Sudan ayuu inna wadayaa, maxaa xigi doona? "Waynu eegi" ayay jawaabtoodu noqotay. Qof jawaab haya ma jiro. Dadku waa ila wada mid. Mid ayaannu isla qaadannay. In aanaan dadka waxba u sheegin. Dhowr soomaali ah oo meesha deggan ayaa jira. In aannu nahay arday safar shaqo u socota ayaannu isla qaadannay. Waa shayga keliya ee wax ku ool ah ee aannu go'aan ka gaadhnay. Inta kale marka ay timaaddo ayaa tallaabada ku habboon laga qaadi. Waa go'aan halis ah. Khatartiisa leh. In aannu sugno inta ay wax nagu dhacayaan, kadib tallaabbo la qaadno. In aannu sugno inta uu 'Ma-gafe' na helayo, kadib go'aan gaadhno. In aannu sugno inta ay doontu dalooshamayso, kadib go'aan gaadhno. In aannu sugno inta ay lacagtu naga dhammaanayso, kadib go'aan gaadhno. Waa waxyaabaha werwerka igu abuuray. Waa waxyaabaha hurdada ii diiday caawa. Laakiin mid ayaannu ka midaysnayn. In aannu midaysnaanno xaalad kasta oo timaadda. In aannaan kala hadhin wax kasta oo dhaca. In wixii lagu kala duwanaado loo qaado afti lagu kala baxo. Tiro kala dhiman ayaannu nahay oo taasi noo sahlaysa. Cali waxa uu nagu yidhi marka ay ku habboontahay ayaan idiin imanayaa ee i suga. Taasi waxay keenaysaa in aannu mar kasta heegan ku jirno. Markasta diyaar ahaanno. Illaa marka aannu hurudno. Hurdo. Hurdo waa

inaan helo. Durba waa kow iyo tobankii habeennimo. Waa in aan seexdo.

Warqaddii 5-aad

Sabti 11/10/14 09:33 pm

Waan garanayay in aanu safarkani noqon doonin mid masaafada oo keliya ah. Mid aan waxyaabbo badan ku barto in uu noqon doono weeyaan. Inkasta oo aanan weli meel fog gaadhin, haddana waxaan durba dhadhaminayaa nolol aad iigu cusub. In aan ahay qof weyn, in la'iila dhaqmo sidii qof weyn. In marka go'aan aniga i khuseeya la gaadhayo aan la soo weydiinayn hooyaday. Waa wax igu cusub. Runtuna waxay tahay waa dareen fiican. In aan masuul ahay ayaan is dareemayaa. La-qabsi ayay u baahan tahay iyada lafteedu. Weli waan baranayaa. Weli layli ayaan ku jiraa.

Noloshaydu waxa ay ka bilaabantay Hargeysa, waxay ka unkantay iyada. Intaa aan jirayna ka maan fogaan. Weli habeen ka maan dhixin. Adduun aan iyada ahayn ma aqaan. Iyada ayaa i soo korisay, i barbaarisay. Iyada ayaa i bartay sida loo hadlo, sida loo dhaqmo, sida asxaab loo samaysto, sida asxaab looga tago.

Hargeysi iyada ayaa i bartay waxa aan aqaan. Qiimaha ay agtayda ka leedahay ma cabbiri karo. Haddana sidaas oo ay tahay waan ka tegay. Waan ka dal doorsaday. Abaalkeedii maan gudin. Maalintii aan garaadaystay, maalintii ay wax i bartay, jaamacaddeeda aan ka baxay, maalintaasi maalintii aan ka tegay ayay noqotay. Waa wax laga xumaado. Waa wax aan ka calool xumaaday maalintii aan ka soo baxayay. Maalintii ay dhabarka iga qabatay. Maalintii aan ka sii jeedsaday. Balse waxa ii muuqda ayaa ka awood weynaa. Kolley aniguba waan ka xumaan lahaa haddaan iyada ahaan lahaa. Waan hinaasi lahaa. Magaalo kale oo qayrkay ah in la'iga doorto aniguba maan yeeleen. Haddii ay ila gar-naqsato way iga gar heli lahayd. Wax aan ugu jawaabbo maan garteen. Laakiin nasiib wanaag way dulqaad badan tahay. Ma cadhooto. Ilaahay ha ugu wado. Duco ayaan kaga tegay. Duco. Haa duco. Duco aniga ayaa u baahan. Aniga iyo inta aannu wada soconno. Hablaha weliba. Aniga iyo Nimco. Annaga ayaa u baahan. Innamaduna kolley way u baahan yihiin. Alla innamada ayaan xasuustee, waa dad riwaayad ah. Qaarba waa nooc. Labada macallin ee C/naasir iyo C/khadar ayaa ugu riwaayadsan. Waxaan is idhi maalintii hadalka la qaybinayay, iyaga waa loo badiyay. Maalintii aanu Wajaale ku kulannay illaa maanta way hadlayaan. Habeenkii aannu Jigjiga wada seexannay qolka xitaa way hadlayeen iyaga oo hurda. Horto la'aantood safarkani muu dhadhameenba. Waa labada naga qosliya, na illowsiiya werwerka. La'aantood walbahaar ayaa nagu dhaca. Labadooda ayuun baannu dhegaysannaa. Waa xummad-jebin. Labada dhakhtar ee Muxumed iyo Abshir waa laba nooc kale ah. Wallaahi nimankaa waan ka yaabay. Waa laba keligood uun sheekaysta. Sheekada ay dhexdooda wadaagaan way ka duwan tahay midda ay dadka la wadaagaan. Si gaar ah oo kaa xanaajinaysa ayay isugu xidhan yihiin. Waxaan is idhi adduun kale

ayay ku soo koreen. Waayo maaha dad bulsho. Maaha dad xaaladda isku salayn kara. Mar kasta waxaad arkaysaa sir u laaban, iyaguna waxay u haystaan in aanad fahmayn. Bal aan eegno halka ay nagaga hadhaan. U malayn maayo in ay labadani dad la dhaqmi karaane. Mid ayaa soo hadhay. Waa Hanad. Horto haddii aan qof ammaani lahaa, isagaan ammaani lahaa. Horto bilowgii waxaan is lahaa uu dhiman yahay. Qof aamusan, duni kale ku jira oo aan la fahmi karin. Okiyaale aanu la'aantood waxba arki karin ayuu markasta xidhan yahay. Waa qof marka aannu hadlayno aan wax badan ku darsan. Anna waxaan is odhan jiray "qofkan maxaa ka qaldan?" Markii dambe ayaan go'aan gaadhay. Waxaan bilaabay inaan raadiyo shakhsiyaddiisa. Derbi uu isku wareejiyay ayaan damcay in aan u dhaco. Qoloftiisa gudaheeda qofka ku dhex jira ayaan doonay inaan ogaado. Wakhti ayay igu qaadatay. Hadallo ayaan ku tuuray. Si qabow ayuu iigu jawaabay. Doodda marka aannu wadno ayaan dhowr jeer hadal ku gujiyay. Jawaabbo qumman ayuu i siiyay. Runtii waan u bogay. Isaga oo aan is kallifin ayuu hadal ku deeqaya ku siinayaa. Sida loo hadlo ayuu aad u yaqaannaa. Dee sow qareen maaha. Waa qasab in uu hadlka sida loo dhigo garanayo. Laakiin weji kale ayaa iiga soo baxay maanta. Sawir qaldan ayaan ka haystay. Waa qof xiiso leh. In aad la joogto ayaad xiisaynaysaa. Markasta uu kaa yaabinayaa. Inta muuqata waxa ka badan inta u aasan. Waa sida geed weyn oo boqol sanno jiray. Inta muuqata waxa ka badan inta dhulka ugu aasan. Adna waxaad doonaysaa inaad dhulka qoddo, si aad u aragto xididdadiisa. Laakiin maaha waxlaga geyoonayo. Maaha wax maalin lagu ogaan karo balse waan ogaan doonaa. Aniga ayaa raba.

Warqaddii 6-aad

Jimce 17/10/14 10:22 pm

Maanta ayaa siddeed ku ah maalintii aannu nimid Addis. Sida uu Cali noo sheegay, toban maalmood ku gaadhi mayno. Waxa ay ahaayeen maalmo dhowr dareen oo isku laaqan ka kooban. Maalmo maskaxda ka shaqaysiiyay. Marka koowaad waxa uu werwer iga haystaa joogitaanka magaaladan. Maaha meel ka durugsan Hargeysa. Dadku way ku badan yihiin. Cid ku garata waayi maysid. Sidaa darteed ayaannu magacyo kale ula baxnay. Dadkii aannu beenta u sheegnay ayaa iyaguna su'aalahoodu soo badanayaan kolba marka aannu sii joogno. Innamada qaar ayaa qaadka cuna, taasi waxay sababi kartaa in ay hadlaan. Hadal badan uma baahnin maanta. Werwerka labaad ee i haya ayaa ah waalidkay. Toloow maxay dareemayaan imika? Weli miyay fahmeen in aan tahriibayo? Kolley haa. Waxa kale oo i cabsi-gelinaya in ay suurtogal tahay in la'iga soo raadiyo Addis. In uu aabbo la soo xidhiidho dadka uu magaalada ku leeyahay. Waxa aan ahay qof magaalada dhan difaac kaga jirta. Qofkii i soo eegaba waan ka jeedsanayaa. Qofkii isha igu nasiyaba waan ka shakiyayaa.

Xitaa waxa aan beddelay qaabkii aan u labbisan jiray; hagoogta ayaan nooc kale ka dhigay. Qof waayeel ah ayaan iska dhigay. Waan ogahay in uu shakigaygu badan yahay, laakiin sida Nimcana ma noqon karo. Iyadu qosol iyo farxad ayaabay ka qaadday safarkan.

Laakiin ayaamuhu werwer keliya iguma ay dhaafin. Magaalada ayaan u baxay. Addis ayaan dhaayaha la dhex qaaday. Magaaladu weynaa oo kala jiidanaa! Weligay magaalo intan le'eg maan arag. Axaddii ayaan baxay markii u horreysay. Aniga, Nimco iyo gabadh hudheelka deggan. Gabadh af-xabashiga taqaan oo meesha muddo dheer joogtay. Ninkeeda oo Ingiriiska jooga ayaa dacwad ugu maqan. Laba sanno ayay joogtay imika. Ninku laba jeer ayuu u yimid. Marna toban cisho ayuu la joogay. Marna toddoba. Eesh calaa aroos ayaan idhi. Waa nolol riwaayad ah. Samir ayay haysaa wallaahi.

Inantii ayaa na kaxaysay. Markata ayaannu ku hagaagnay. Alla suuqu weynaa. Fajac ayaa igu dhacay. Markasta waxaan is-barbar-dhig ku samaynayaa wax kasta oo aan arko iyo wixii ay magaaladaydu lahayd. Horto dhanka weynida Hargeysa waa la ciyaalleeyay. Waddooyinkana hadalkoodaba daa. Dhowr waddo oo uu Xirsi xadhiga ka jaray ayaa ila weynaa. Wax kale ayaan arkay. Markii aannu ku sii soconnay suuqa Markata, suuqii Gobonnimo ayaan sawiranayay. Dhowr dhibcood ayaa Gobonnimo la diray. Intii aanan gaadhin suuqa ayaa waxa sii bilaabmay yeedhmada ka imanaysa ganacsadeyaasha yaryar ee wadada dhinaceeda agabka kala duwan ku iibinaya. 'Naayaa' ayay dhammaantood ku dhawaaqayaan. Cadho ayay naftu iga baxday. Sababtee ayay 'naayaa' iigu odhanayaan? Ma iyaga ayaa i

naagaystay? Waanigaa jiq noqday. Xitaa way qoslayaan marka ay sidaa ku leeyihiin. Wasakh bilaa edaab ah. Waxaan soo xasuustay nin maalin 'naayee' igu yidhi. Wallaahi runi Allay taqaanne suuqa ayaan wadhay. Wax naf yar ayuu ahaa. Nasiib ayaan lahaa. Waayo kolleyba nin xoog weyn haddii uu ahaan lahaa faraha la maan galeen. Ma nacas baan ahay? Laakiin kani mid aan siqir-suujin karo ayuu ahaa. Laba mijood oo birqaab ah iyo qoor yar oo dhuuban ayuu lahaayoo cagaha ayaan dhulka uga qaaday. 'Waar naagta ninka ka qabta' ayaan xasuustaa in ay dadku ku dhawaaqayeen. Markii aan ka dhaqaaqay muddo kadib ayaa dhulka laga qaaday isaga oo la moodo in uu gaaji jiidhay. Imikana dareenkii maalintii ayaa igu kacay. Ciil weynaa, waxba waan samayn kari waayey. Ma magaalo dhan ayaan la dagaallamaa? Laakiin xaaladdu sida aan moodayba may ahayn. Markii dambe ayaa la'ii sharraxay. In aanay xumaan ka ahayn ayaan fahmay.

Gudaha ayaannu u sii galnay. Badweyn dad ah ayaannu dhex muquurannay. Araggayga, maqalkayga iyo dareenkayga ayaa hal mar oo keli ah wada shaqaynayay. Si xawli ah weliba. Baayacaadda igama badiyaan oo tabobar ayaan soo qaatay. Wixii ay wax iigu sheegaanba, badhkeed ayuun baan uga bilaabaa. Anigu waxba ma iibsan, waayo lacag maan haysan. Laakiin Nimco iyo inantii kale ayaa dhowr shay soo iibsaday. Isniintiina sidoo kale waan tegay. Markan aniga iyo Nimco oo keli ah. Laakiin salaasadii ayay sheeko dhacday. Sidii caadiga ahayd ayaan waaga la baryey. Cadceedda oo soo badh-jeedda ayaan caadi u toosay. Daaqadda dhankeeda kale ayay shanqadha kabaha dadka bannaanka maraya aan kala socdaa. Shanqadh kasta cod gaar ah ayay leedahay. Qofka cagihiisu sida ay dhulka u taabanayaan ayaad ka garan kartaa socodkiisa. Tallaabadu inta ay isku jirto ayaad ka garanaysaa in uu nin yahay

iyo in ay naag tahay. Waxyar markii aan dhegaystay socodka dadka oo ay soo dhex gelayso khuurada Nimco, ayaan ka kacay gogoshii. Intii aanan bannaanka u bixin ayaan masarka hagaajistay wejigana sacabbada mariyay. Musqusha si aad u tagto, marka aad albaabka qolka kasoo baxdo waa in aad bidix u soo martaa daarad yar oo luuq ah, luuqaas oo kuu geynaya barxad ballaadhan oo loogu talo galay in ay dadku ku caweeyaan. Telefiishan fiidkii la daawado, sida ay soomaalidu u fahamto ayaan garan waayee, ayaa miis dheer dhakadiisa si qaab daran u dul yaalla. Marka aad meeshaas soo dhex marto ayaad kaabado saddex ah ugu soo dhaadhaycaysaa daaradda dusha bannaan. Midig ayaad u gelaysaa luuq kale oo qolal kale ku sii dhex marinaya, waxyar kadibna qolka midigta kaa qabanaya ee albaabkiisu dhulka ka kacsan yahay ayaa mushqishii ah. Waa jid aan maritaankiisa necebahay. Subixiina hadalkiisaba daa. Markii aan kasoo dhammaaday daaraddii dusha bannaanayd, intii aanan soo wada gelin luuqii labaad ayaan arkay. Indhahayga oo ay ta bidixda oo keli ahi ii shidan tahay ayaan naxdintii tii midigna kala qaaday. Okiyaallihii ma xidhna. Labbiska sidii innamadii reer Hargeysa ayuu dhexda iska xidhay. Surwaal aan wax badan ka dabacsanaynna hoos ayuu u dhaadhacay illaa inta uu kabaha madowga la dhalaalaya korkooda fuulayo. Feedhaha aan aadka u weynayn korkooda waxa ku dadan shaadh maro aan dun ahayn ka samysan oo si dheellitiran u raacaya qaabka jidhkiisa illaa halka qoortu ka bilaabanto. Timo aan kala dheerayn ayaa dhakadiisa dul fadhiya. Nasiib wanaag isagu i muu arkayn. Albaabka uu soo xidhayo ayuu ku jeeday intii aan ka boganayay. Waxa yari ma sidanuu u qurux badnaa? Runtii weli nin si gaar ah u ma eegin noloshayda. Maanta haddii aan wax qiran lahaa, in aan si fiican u toosay markii aan arkay, intaas ayaan qiran lahaa. Dabeecaddiisa hore ayaan ula

dhacay. Araggiisa ayaa i farxad geliyay maanta. Marna i naxdin geliyay. Wax ayaa halkaa laabta hoos iiga go'ay. Subax hore ayay ahayd, waanan iska kala daadsanaa. Waan soo kala hor toosay, diracayga sida aan u jiidayo weli uu hurday. Masarka si kala janjeedha ayaan u xidhnaa. Dacas kala kaan ahna dhulka ayaan si basar xun u jiidayay. May ahayn wakhti rag la la kulmo. Gaar ahaan Hanad. Mar ayaan is idhi dib u noqo. Baxso sidii wax waalan. Laakiin taasi mid ka macquulsan ayaan ku dhaqaaqay.

Horto hurdadii markiiba way iga duushay, gacmaha oo farba meel u jeeddo ayaan hagaagga kula rooray. Masarka ayaan toban farood midba meel ka geliyay. Markii aan ka saarayna waxaan kala garan waayey in aan hagaajiyay iyo in aan uga sii daray. Wax laba tallaabbo ka yar marka aan u jiro, welina uu albaabka ku sii jeedo ayaan damcay in aan aayar daba maro isaga oo aan i arag. Malaha kaneeco ayaan is moodayey. Indhaha buurbuuran ee i soo eegaya ayaan ku war helay. Alla illeyn naxdin dhulku kula ma go'o. ”Qalladi kugu dhacday” ayaan hoos u idhi aniga oo afkana ilkaha muujinaya. Haddana shan ”istaaqfurullaah” ayaan ka daba geeyay. Codkiisii gaabnaa ayaa xigay. ”Subax wanaagsan Suhuur!”. Subaxdaaba kala dhacday. ”Wacan oo wanaagsan walaal Hanad!” ayaan sidii qof cunaha la hayo dirqi dhuunta u soo mariyay. Alla khajilaad weynaa! Xuf ayaan ku dhaafay aniga oo maqiiqan. Hadal intaa ka badan ma karayo. Suuliga oo albaabka uu taagan yahay ku xiga ayaan ku hagaagi waayey. Sidii naag meel kale u socota ayaan suuligii dhaafay. Hal albaab oo keli ah ayaa suuliga ka shisheeya. Dibna uma soo noqon karo oo weli uu taagan yahay. Dantu waxay igu qasabtay in aan qolkii galo. Iga walle daf ayaan idhi. Ma aqaan dadka gala qolka. Markii aan qolkii dhex istaagay ayaan arkay qof sariirta dul jiifa. Qofkii ayaa shanqadhaydii ku soo

jeedsaday. Guux iyo codad kale ayuu isku daray. Wuu i soo eegay. Gadh weyn ayaan arkay. Waa isagii. Waa odayga ugu sheekada badan hudheelka. Naxdintii ayaan dhaqaaqi kari waayey. Odaygii waan eegaa uun. Isna in uu i soo eegayaa. Uu guuxayaa oo ma fahmayo waxa uu leeyahay. Markii aan waxoogaa sidii ahaa ayaan maqlay codkiisa. 'Adeer tumaad ahayd?' Degdeg waaniga u soo kala jeestay. Sidii wax waalan waaniga qolka ka soo booday. Nasiib wanaag Hanadna uu dhaqaaqay intii aan meesha ku jiray. Aniga oo ordaya ayaan qolkaygii orod ku soo galay. Maalintii oo dhan qolka ka maan bixin. Naxdin ayuu jidhku i dubaaxinayay. Markii aan Nimco uga sheekeeyayna qosol ayay igala hor timid. Habeennimadii markii la'isugu yimid goobtii sheekada ee uu telefiishanku yaallay, ayuu odaygii sheekadii ka sheekeeyey. In saaka gabadh aanu garanayn u soo gashay ayuu sheegay. Hadalkii waxa uu ku dhammeeyay in la dardaray. Anna waxaan ugu daray ”adeer malaha waa suuligan aad ag deggan tahaye qolka iskaga guur”.

Caweyskii markii aniga iyo Nimco aannu ku keliyownay qolkayaga ayaannu sidii caadiga ahayd faallo galnay. Inta badan dadka ayaannu xamannaa. Dadku in la xanto way ku kala fiican yihiin. Dadka qaar waxaad is odhanaysaa yaa caawa dhan ka sheekeeya. Hanad ayaa noocaas ah. Waa dadka aad caawa dhan ka sheekayn karto. Waa dadka lagu dambaabbo. Haddii aanad dabeecaddiisa aqoonnin, qof wax u dhiman yihiin ayaad moodaysaa. Isaga ayaannu ku qosli jirnay habeen kasta. Laakiin caawa maya. Ma garanayo balse markii ay Nimco tidhi ”kii indhaha kalluunka ah lahaa maanta wuu xarragoonayay”. Qosol ayaan iska waayey. Maskaxda ayaa diidday. Waan ka aamusay. Waan la sii wadi kari waayey. Keligeed ayay qososhay. Markii

dambe ayay i weydiisay sababta aan u sheekayn waayey. Waxaan u sheegay in laga wanaagsan yahay in dadka la xanto. Illeyn waa Nimco oo ka ma nabad helayee waa ta hadal iga dayn weyday. ”Naa yarka ma calankaa kuu saaran ba'naye?”. Waan u jawaabi kari waayey. ”Maya” iyo ”haa” midna way ku habboonaan weyday. Fursad ayay iyaduna heshay. Waa ta bilowday. ”Alla inanta waa la hayaa, bisinkee indho-buluc ayay jeclaatay, naa ma Aamusanaad caashaqsan tahay?” Bal adba aamusii. Inta aan is duuduubay ayaan sidii ku seexday iyada oo duryamaysa.

Subax dambe oo aan wakhti hore kaco waan ka caagay. Laakiin arbacadii Nimco ayaa i kicisay. Waxay ii soo jeedisay in aannu suuqa tagno. Aniguna wax aan ku diido ayaan waayey. Qorshe aanan ogeyn ayay wadataa. Markii aan diyaar noqday ayaannu is raacnay. Albaabka weyn goortii aan ka baxnay ayaan arkay. Sidii shalay si ka sii qurux badan ayuu u labbisnaa. Sidii qof wax sugayana uu u taagan yahay. Markii uu na arkay ayuu wejiga oo dhan ka ka qoslay. Nimco ayaa si lama filaan ah ugu dhawaaqday ”malaha waad na raagsatay”. Waan fahmi waayey waxa ay ka waddo. Hanad ayaa hadal deggan u celiyay intii aanu nagu soo cag darin kahor. Gadaal waxa aan ka ogaaday in ay iyadu soo ballamisay isaga. In ay ku tidhi ”kaalay waannu baqaynaaye noo wehel-yeel”. Si goosgoos ah ayaannu sheeko-wadaag u lahayn in door ah. Markii dambe ayaannu meel sharaabka qabow laga cabbo soo galnay. Dhammaantayo afokaado qabow ayaannu dalbannay. ”Telefoon ayaan ku hadlayaaye sii fadhiista” ayay nagu soo dhex tuurtay intii aanay iyada oon jawaab iga sugin aanay albaabka ka bixin kahor. Waa sheeko ay ku talogashay. Waa wax ay sii diyaarisay. Anna in aanan fahmayn ayay i moodaysaa.

Wadnaha ayaa aniga oo arkaya garaaca labajibbaaray. ”Dhug”-tiisa ayay dhegahaygu maqlayeen. Afar kursi oo miis yar ku wareegsan ayaan dhankooda u dhaqaaqay. Mid koonaha gidaarka ugu xigay ayaan haabhaabtay. Salka ayaan la haleelay. Isna waa ka fadhiistay. Hortayda waa kan soo yuurura. Alla Nimcooy lagu qaad oo samada laguula bax!

Warqaddii 7-aad

Sabti 18/10/14 11:04 pm

Naxdinta i haysay weyneydaa. Baqdinta aan dareemayey badnaydaa. Xaaladda ay Nimco igu cidlaysay oo igu cusbayd awgeed, gariir ayaan bilaabay. Codka ayaa iga go'ay. Naqaska ayaa cuslaaday. Indhaha ayaa dhaqaaqa joojin waayey. Faraha ayay midba gees isu taagtey. Dhegaha ayaa guux bilaabay. Maxaan ku idhaa? Halkeen ka bilaabaa? Laakiin maanta Hanad isbeddel ayuu keenay. Magaca Ilaahay uu iga yaabiyay. Qasabad aan is idhi way xidhnayd ayuu furay. Hadal uu hayay ayuu sida daadka iigu qaaday. Maan fileyn. Malaha kayd uu hayay ayuu ii furay. Dee illeyn hadal badan nagu muu darsan jirine. Maanta intii uu na odhan lahaa maalmihii tegay ayuu aniga dusha igaga qubay. Alla maxaan nafisay. Waxaan islahaa adiga ayaa kaxayn doona. Adiga ayaa jiidi doona. Aniga ayaaba dusha la'igu qaatay. Badweyn sheeko ah ayuu i dhex dhigay, markaasuu gacanta i qabtay si aanan u quusin. Aayar ayuu adduunyo aanan aqoon i dhex geeyay, inaan kufo ayuu iga ilaaliyay. Uu i daadeheeyay sidii ilmo socod-

barad ah. Anna agjooggiisa waan ku qabowsaday. Sharaabkii hortayda yaallay maan haleelin. Afkiisa yar ayaan daawanayay. Carrabkiisa kolba ilkaha dhexdooda ka soo boodayay ayaan la haystay. Debnihiisa... Naga daa. Uu i deeqay. Waxa yari wanaagsanaa. Waxaan is idhi aniga ayaa la'ii dhalay kan. Aniga ayaa la'ii soo koriyay. Markaasaa Hanadna loo bixiyay weliba. Kani waa Hanadkaygii iga walle. Car bal waa naagta faraha la soo gasha. Ta ku dhacda in la yaabi, balaayaa dhici markaasuu Bilaalna eedaami. Aniga oo tii u dambeysay ku jira uun ha iska soo gasho tii Nimco. Alla show ciil naftu kaa ma baxdo. Cagaheedii waaweynaa oo dhulka dharbaqda ku haya ayuun baan ku war helay. Naa walaaleey maad iska yara maqnaatid. Markaan kuu baahnaaba waadigii sii ordayee maxaa imika ku keenay? Waaniga indhaha ku gubay. Isna markii uu arkay iyada waaka aamusay. Dee waata agtayada uun 'harbash' tidhi. Fadhi weynaa naagtu.

Suuqa markii aannu soo wareegnay ayaannu soo guryo-noqonnay. Daal badan oo cagaha iga hayay aan doonayay in aan ka nasto markii aan maqlay war maskaxda iga daalin doona. Intii aannu maqnayn ayuu Cali yimid. Cali Qoti marka uu yimaaddo waa laba mid uun. Amma waa la baxayaa amma waa la diyaargaroobayaa. Waxba kama dhexeeyaan. Markan diyaargarow ayay ahayd. Sida uu Abshir iyo Muxumed u sheegay, caawa saqda dhexe amma aroorta salaadda hore mid ahaan ayaannu jarmaadaynaa. Waanu dhaqaajinaynaa. Jiho aannaan weligayo u dhaqaaqin ayaannu u kicitimaynaa. Itoobiya oo ahaa dhul aannu dhowaansho ka dareemaynay ayaannu ka tegaynaa. Intii u dambeysay ee aannu raad soomaalinnimo arkaynay iyo bulsho deggan ayaannu ka haajiraynaa. Qol madow ayaannu toosh la'aan gelaynaa. Mustaqbal aan la garanayn ayaan u xadhko-xidhay.

Dagaal aanan garanayn hubka la isticmaalayo ayaan dacas iyo dhowr dirac ula huleellay. Waaga aanan garanayn wax uu la baryi doono ayaan sugayaa. Maryo intii aan haystay afka ayaan ka xidhay shandadda yar ee ay ku jiraan oo aan dhabarka u ridan doono. Buuggan aan hayo iyo saddex qalinna khaanadda sare ayaan ku ridayaa saacadda u dambeysa. Innamada ayaa waxoogaa roodhi ah shandadahooda noogu sida. Laba caagadood oo biyo ahna dharkayga ayay weheliyaan. Nimco subag aannu roodhida ku cuni doonno oo marka ay xaaladdu adkaato aannu isticmaali doonno ayay siddaa. Sheekooyin badan ayaad maqlaysaa, warar badan ayaad tahriibka kaa soo gaadhaya, waxyaabaha ku habboon iyo kuwa aan ku habboonayn. Qaar wax ayay kuu sheegayaan si ay kuwo kale u buriyaan hadhow. Wixii macquul ah ayaannu ka qaadannay fikirradaas. Imika sariirta ayaan dul aallaa sidii maro la wadhay. Calooshu xanuun way dhammaysatay. Maduxu fikir aan dhammaad lahayn ayuu rogrogayaa. Qalinka dhuux aan dhammaanayn ayaa ku jira. Buugga waraaqo aan la isticmaalin ayaa ka buuxa. Waagana saacado kooban ayaa ka dhiman.

Warqaddii 8-aad

Axad 19/10/14

Weli waagu ma baryin. Weli caadi u maannu kicin. Baska aannu saaran nahay aad u ma weyna. Sagaal aan toban gaadhin ayaannu nahay. Addis oo hurudda ayaannu dhex soconnaa. Jiho aanan garanayn ayaa loo socdaa. Waddooyinka ayay midiba mid nagu ridaysaa. Wadaha dhinaciisa waxa fadhiya Cali oo hadal aan dheerayn luuqaddiisa kula wadaagaya wadaha. Laba kursi oo hore waxa fadhiya Muxumed iyo Abshir. Dabcan hadal ka ma madhna.

Aniga Nimco ayaa ila fadhida. In ay huruddo iyo in kale ma sixi karo. Madaxeeda ayay ku nasinaysaa muraayadda uu naqaskeedu dusha ka hadheeyay. Kuraasida iga dambeysana waxa qaybsaday saddexdii kale. Laba dhinac ayay gaar ugu baxeen. Hanadna dhinaca kale ayuu indhaha ku illoobay muraayadda dhankiisa ah. Kolba hoosta ayaan ka eegayaa. Laba jeer ayuu igu qabtay. Dhaqaaqiisa ayaan la socdaa. Ma garanayo sababta. Marka uu nuuxsadaba aniga oo aan is ogeyn ayaan eegayaa.

Laakiin maanta wax isaga ka weyn ayaa i sugaya. Maskaxdu wax kale ayay isu diyaarinaysaa. Safarkii dhabta ahaa ayaa i sugaya. Waxaan ku qasbanahay in aan fikirkayga dhankaa u jeediyo. Sida aan u fahmay, baabuurkani waxa uu na geynayaa meel magaalada ka baxsan oo aanu mid kale ka raaci doonno. Sidaas ayaan u macnaystay mar uu Cali hadal is dhex dhigayey.

Inkasta oo aannu nahay dhowr wada socda oo isku mawqif ah, haddana keli ayaan dareemayaa. Ma sababayn karo. Qof kasta noloshiisa ayaa xannaano gaar ah uga baahan. Sidaa darteed qof walba tiisa ayaa cuslaysay. Anna in aan keligay xarbiyayo ayaan dareemayaa. Kursiga aan ku fadhiyo ayaan dhaqaaq yar la dul yuururaa. Dhinaca muraayadda Nimco ayaa iga xigta. Gacantayda bidix oo uu faraheeda dhaxanta la qallafay kala qaybiyo qalin biiroo "Bic" ah ayaa marka ay qoraalka joojiso si ay u habayso kolba ku dul nasanaysa buugga ay xaashiyihiisu jactadka bilaabayaan ee lugtayda bidix dul wadhan. Madaxayga oo aan dhaqaaq badan lahayn ayaa inta badan hoos u jeeda si uu marmar magaalada kor ugu eego. Madowgii badnaa ayaa soo yaraanaya. Cirka ayaad mooddaa in uu indhaha soo kala qaadayo. Dadka iyo baabuurta ayay imika indhahaygu qabanayaan, haba yaraadaane.

Nimco oo i weydiinaysa "naa meeshu fogaa, sowkii lahaa labaatan daqiiqo weeyaan. Wuxu xagguu nagu wadaa?" ayaan jawaab u waayay. Maxaan ugu jawaabaa? Ma "labaatan maahee afartan daqiiqo ayay qaadanaysaa" mise "naa walaal markaynu gaadhno uun baynu arkiye iska aamus" mise "kuma dhaamee iga daa hadalka" mise "calaacalka dib u dhigo". Jawaabta aan ka fikiraaba way ku habboon tahay. Balse midna waan siin waayey. Aamusnida ayaan jawaab uga dhigay.

Inkasta oo aan roodhi yar isa soo dhaafiyay markaan kacay, haddana durba calooshu durba way i dafirsan tahay. Alla baabuurku waxa uu u eeg yahay in uu istaagayo. Waaxay meeshani? Wuu istaagay. Waa in aan..

Warqaddii 9-aad

20/10/14 isniin

Eedaanka salaadda ayaa dhegahayga si xooggan u soo gaadhaya marka aan fadhiyo geerka daaqadda dabaqa saddexaad ee mandaqad ku taalla xaafadda Jireef ee magaalada Khartuum. Intii aanu sheekhu dhammaysan dacwaddiisa ayay hore ka yaaceen innamadii si ay casar ugu soo tukadaan masjid aan naga fogayn oo na loogu sheegay in uu imaam ka yahay sheekh magiciisa la yidhaahdo Maxamed Cabdikariin. Cagahayga oo bararsan ayaan kolba isha ku xadayaa. Iftiinka cadceedda ee isaga oo xishoonaya ka soo gelaya daaqadda aan garabka midig ku hayo ayaa marka uu xaashida lugtayda dul taalla ku dhaco indhahayga ka bajinaya. Gacantayda bidix oo diyaar u ah in ay qoraal badan xarriiqdo ayaa maskaxda oo daallani ka gaabinaysaa. Safar dheer ayuu ahaa oo jidhka iyo maankaba gudhiyay. Shalay ayaannu

kasoo baxnay Addis. Dhowr saacadood oo aannu koonaha magaalada taagnayn marka laga reebo.

Baabuur badan ayaa meesha ka baxaysay. Baabuurta xammuulka ayaa dhinac isugu tegay oo sidii wax shiraya afka isa saarayay. Dhankooda bidix basaska nooca waaweyn oo qaarkoodna dheegga qoraallo kaga xardhanaayeen ayaa sii kala jeeday. Baabuurta nooca 'Land Rover'-ka loo yaqaanno ayaa sida shinnida dhinac isugu yimid. Badhtankooda aniga ayaa taagnaa. Sida ay u kala waaweyn yihiin waxaad moodaysay qoys is dhalay oo xubnihiisii u dhammaystiran yihiin. Markiiba waxa aan fahmay in aannu raaci doonno mid iyaga ka mid ah. Sidii ayaanay noqotay. Intii aannaan dhaqaaqin ayuu Cali Qoti noo keenay roodhi iyo canjeero badan. 'Kii way u baahaneesaa, imika adiga cun maya' ayuu ka daba keenay. Balo kugu dhacday. Anna sidaan u gaajoonayay Ilaahay ayaa ogaa. Saacad la hadlo ma joogo, afka ayaan xidhay. Markii aannu dhammaan fuulnay ayuu baabuurkiina hinqaday.

Waa deegaan aanan weligay hore u arag. Cagaarka oo ay cadceed caafimaad qabtaa si gaaban u hayso ayaa indhaha shucaac ku abuuray. Jid bilicsan ayaannu cagta saarnay. Inkasta oo ay cidhiidhi tahay haddana bilowgii maan dareemayn. Indhaha ayaa bannaanka la haystay. Wax kasta oo aan arko maskaxda ayaan u dhaadhicinayay. Wax kasta way ugu cusbaayeen. Ashqaraar ayaan la dawakhay. Daqiiqado ayaa tegay, durba saacado isku bedelay. Webiga naylka ayaan arkay markii iigu horreysay noloshayda. Ka buluugga ah. Waxa ay ahayd aragti cajiib ah. Marka hore hoos ayaad ugu dhaadhacaysaa. Laba kiiloomitir ayaannu dhulka hoos ugu dhaadhacnay, biriishka ayaannu ka tallownay si aannu

haddana labadii kiiloomitir kor ugu baxno. Biriishka hoostiisa waanu istaagi kari weynay milatariga ilaallinaya awgeed, balse isha ayaan kusoo qaaday wax kasta. Runtii aragti cajiib ah ayay ahayd. Waan u qaadan waayey in webigii uu nooga sheekayn jiray macallinkaygii Maxamed Salaad aan maanta arkay. Afka ayaan isku qaban kari waayey. Nimco oo hadalkayga dhibsanaysay ayaa kolba igu lahayd "naa bal tan dalxiiska ku jirta eega".

Baabuurka ayaa socodka dhimay, inyar kadibna waan arkay. Waa degmo yar. Carruurta bannaanka yaacaysa ayaan markiiba isha la raacay. Waxaan u gartay in ay tahay bartii u horreysay ee aannu ku nasan lahayn. Cali oo maanta sheekaynaya aadna u qoslaya ayaa nagu soo jeedsaday si uu noo maqashiiyo hadalkiisa. "Meeshan magaceeda waxa la odhanayaa Bahidar, imika cunto waa cunaynaa".

Caloosha ayaan soo kiishay. Goor la istaagi Ilaahay ayaa og. Canjeeradii waxaan ka door biday roodhi aan af aqaanno. Laba jab ayaan is dhaafiyay. Qof walba kursigiisii ayuu ku hagaagay. Aan idhaahdee qaybtiisii kursiga. Safar labaad ayaannu hore ka bilownay wakhti cadceeddu tii Berbera ka kulushahay. Hortayda, jihada safarkayaga, barta araggu ku dhammaado waxa ka bilaabma daruuro madowgooda dhuxushu ay 'Nuura' noqonayso. Hadallo gaagaaban oo ay dirawalka iyo Cali is dhaafsanayaan ayaan werwer ka dhadhansaday. Halkaa markii ay sheeko maraysay ayaan dareemay indhaha dhanka bidix igaga soo maqan. Nimco maaha oo way igu xigtaa iyadu. Weji ay 'maya' ku qoran tahay ayaan si caajis ah ugu eegay. Caajis markiiba iga duulay markaan arkay inuu isagii yahay. Hanad. Nasiib-darro markiiba uu sii jeedsaday. Indhahayga ayuu hayn kari waayey. Aniga oo aan ogeyn

ayuu rabay in uu iska kay daawado. Huuno markaan seexdo sug. Wax aannu soconnaba maalinta ayaa dhammaad ku dhow. Indhaha oo adduunyo dhan doonayay in ay duubtaan ayaa haatan istaagay. Intaa wax ka badan ayay qaadi kari waayeen. Waan daboolay. Iyaga oo aan muddo xidhnayn ayaan ku war helay codka Cali. "Meeshan waxa la odhanayaa Gonder, buurahaa waxa la odhanayaa Simiyen. Qurux badan way noqonaysaa". Dhegta oo guuxii buux-dhaafiyay ayaa haddana hadalkiisa ii soo gudbinaysa. Afka oo hadalku ku yaraa balse aan hayn wax uu ku hadlo ayaa su'aal ku tuuray Cali oo isaguna jawaab iga nixisay si qabow laabta iiga siiray. Waxaan ogaaday in safarku aanu dhoweyn. Ugu yaraan aannu kala badhkii joogno. Tuuladii ayaannu waxyar taagnayn annaga oo cunto iyo musqulba wakhti u helnay. Musqul aanan ka sheekaynayn siday u eekayd. Istaaqfurullaah. Waanu dhaqaaqnay.

Saacado dhowr ah iyo jid wada buuro ah oo hurdaba ii diiday kadib ayaannu ka gudubnay xadka Suudaan. Mugdiga hareerahayaga fadhfadhiya ayaa nalkii baabuurka ka dhigay wax laga tiro badan yahay. Safarka intii ugu caajiska badnayd ayay noqotay. Afkayguna kii furnaa ayuu noqday markaan hurdo dheer madaxa daaqadda saaray. In uu Hanad i daawanayay Ilaahay ayaa ogaa. Sidii ayaannu Khartuum ku soo galnay.

Qorshahayaga oo ku dhammaanayay imaanshaha Khartuum ayaa soo dhammaaday. Cali oo aan is idhi boqolaal soomaali ah ayuu jidkan mariyay ayaa nagu hagaajiyay guri soomaali degto. Salaan degdeg ah inta uu gacanta na mariyay ayuu dhaqaajiyay. Uu iska tegay. Toloow muu nala joogo. Shaqadiisii uu gutay laakiin agtiisa waxaan dareemayey sidii ilmo yar oo waalidkii la jooga. Imika waa in qorshe cusub aannu keennaa. Salaaddii waa

laga baxay. Marka ay innamadu yimaaddaan waa in aannu tashanno. Taasi waa ta guud. Mid gaar ahaaneed ayaa ii taalla. Waa in aan hooyo waco. Markii u horreysay muddo dhowr iyo toban maalmood ah. Toloow miyay og tahay in aan tahriibay? Dabcan, sideenay u ogeyn? Way! Maxaan rafaad baday miskiinta. Kolley way igu waalatay. Calool-jileec looma baahna laakiin. Marka aan la hadlaba way farxi doontaa. Iyadana farxad ayaan siin, anna kharash aan Liibiya ku tago ha i siiso.

Warqaddii 10-aad

Xaggeen ka bilaabaa, sideen u bilaabaa, goormaan ka bilaabaa? Qalinku maaha qalinkii, buuggu maaha buuggii. Intaba waxa ka daran, anigu ma ihi anigii. Wallee in aanan ahayn. Anigu waan joogaa, iyadu way joogtaa, isagu uu joogaa. Intii kale meel ay joogaan, Ilaahay ayaa og. Labaatan maalmood ayaa kasoo wareegay maalintii aannu Khartuum kasoo baxnay. Maskaxdu waa boqollaal maalmood ayay I leedahay. Maalintii koowaad, oo aad mooddo in ay dhowr bilood kasoo wareegeen, ayaan xasuustaa. Farxad iyo rejooyin badan ayaa I dhex mushaaxayay. Riyooyin indho la' ayaa I hadheeyay. Iftiinka ismoodsiiska ah ayaan eeganayay, waxa ka sokeeya ee balaayo kasta leh maan arkayn. Maya, waan eegayay laakiin ma doonayn in aan arko. Indhaha ayaan ogaan uga qabsanayay. Waxaan u haystay in haddii intan aan adkaysi ku dhaafo aan gaadhayo riyadayda iyo nolosha Yurub. In adkaysigu meelaha qaar aanu ku dhaafin karin ayaanan ogeyn. In adkaysigu adkaysi u baahan yahay ayaanan ogeyn. In

cadaadiska ay naftu iska caabbin karto uu xad leeyahay ayaan ogaaday. Xadkaasina in aanu meel fog gaadhsiisnayn ayaan fahmay. Farxaddii uu safarku iigu bilaabmay, maalin ayay ku ekayd. Talooyin badan oo sahayda ku saabsan sideeda ayaannu u qaadannay. Runtii dhankaa waanu iska tiirinnay. Timir badan ayaannu sidannay. Qofba in ayuu siday. Balse in ay nagu filnaan doonto, cidiba ismay weydiin. Baabuurka aannu soo raacnay ayaa ahaa mid kuwa xamuulka ah. Alaabta saaran awgeed, baabuurku ma muuqan. Alaabta hoosteeda in ay hoygayaga noqon doonto maalmaha soo socda, anigu maan ogeyn. Balse meel laga noqdo maan joogin. Markiiba waan fadhiistay, fadhi ay dhowr jawaan hareerahayga yuururaan. Midna uu iga hooseeyaa. Dhanka baabuurku u jeedo, waan ka jeedaa. Dhinacayga midig baabuurka ayaa ku dhammaada. Cagahayga waxa soo fadhida Nimco. Dheegga baabuurka ayay dhabarka ku haysaa, wajahaddeedana jawaanno waaweyn ayaa ah. Meel iga durugsan, aan se iga fogeyn waxa iga soo dhowraya indho araggooda aanan hayn karayn. Hanad ayaa aniga iyo deegaanka oo keliya indhaha u qaybinaya. Dabcan aniga ayaa deegaanka kale ka badsanaya. Wakhtigeedii la ma joogo, haddana waa laga-ma-maarmaan. Marka aan fikir ku daalo, jidhku “bes” I yidhaa, isagaan indhihiisa doontaa. Tamar ayaan ka helaa, haddana waan ka jeedsadaa. Sidii ayaan ahaadaa, wakhtiguna aayar ayuu shaqadiisa watay. Baabuurkuna sidoo kale. Saacadba saacad ayay ii dhiibtay. Indhahayga oo dhinacayga midig ka daawanaya dhulka baaxadda weyn ee aannu kala jeexayno ayaa dareemay iftiinka cadceedda sii carraabaysa. Iyada oo aad mooddo in ay nala yaabban tahay oo ay na hayn kari la’ dahay ayay degdeg u hoyatay. Annaga iyo madowga ayay noo kala baxday. Waan ogahay in ay saacado kadib haddana naga daba iman doonto.

Maskaxdu hadal ma deyso. Anigu walaac ma joojiyo. Naftu rejo ma dhaafto. Habeenkuna naxdin ma baajiyo. Afarta shaag oo wada socda ayaa ciidda godad ka qotay. Baabuurka oo socodkii joojiyay ayaan ku war helay markii aan laf timireed debnaha naqas kaga soo tuurayay. Cod ku dhawaaqaya “uu galay, uu galay” ayay durba dhegtaydu doonatay. Codkii dirawalka iyo qaar la socday ayaa xigay. Af-carbeed aanan fahmayn ayay kaga onkodiyeen. Waan fahmay in aanu cod farxadeed ahayn. Waan is nabay. Cod iyo shanqadh ka yeedhay dhirbaaxada uu dirawalku ku dhuftay janbiga baabuurka, barta aan fadhiyo dhinaceeda, ayaa ii diiday in aan isasii nabo. Dhammaan cagaha ayaannu dhulka saarnay. Kabihii maan haleelin in aan raadiyo. Cagahayga ayaa ciidda bilaa itaalka ah dhex quusay. Agtayda Nimco ayaa taagan. Gacantayda iyo teeda ayaa dhowr jeer isku laalaabma. Haddii aynu dhimanayno, meel aynu ku wada dhimanno ayay taladayadu ahayd. Wax kasta oo dhaca ma sii daynayo, iyaduna sidoo kale. Indhahayga ayaa kala furan. Maya, way kala tageen. Sidii oo ay soo dhacayaan ayaan ka dhigay. In aan wax arki doono marka aan sidaa yeelo ayay naftu moodaysaa. Balse naqaska Nimco mooyaane, ma garan karo in ay iyada tahay. Iftiin qof iyo bannaan kuu kala saara ayaan jirin. Mugdiga awoowgii ayaa dhinac walba naga xiga. Iftiinka keliya ee noo muuqda waa iftiinka baabuurka hortiisa sida miskiinnimada ah u jiifa. Kaasina isaga ayaaba wehel u baahan. Cagaha ayaan kolba dhulka kala boodayaa, masaskii iyo bahalladii kale ee la sheegayay ayaan kolba isleeyahay way ku taabteen. Dabcan fulaynimo ayay iga ahayd. Sidii marka horeba na loo sheegay, haddii uu baabuurku wax noqdo, waa in la’is caawiyaa. Sidii ayay noqotay. Itaal aanan garanayn wax uu ku kordhin doono baabuurka afarta jilib aastay, ayaan aayar ku darsaday kii dadku ku gujinayeen baabuur dhego adag. Qaylada

dirawalka oo lagu daray guuxa dadka baabuurka riixaya ayaa si dheellitiran isula fal galay. Nasiib-wanaag baabuurkiina dhaqaaq ayuu ku jawaabay. Dhaqaaq aan joogsi lahayn. Dirawalkii ayaa istaagi waayey. Waa in la daba cararo illaa inta dirawalku meesha uu rabo uu istaagayo. Aniga iyo Nimco oo gacmaha is haysanna ayaa daba orday baabuurka guuxiisu dhegaha kasii dhammaanayo. Iftiinka guduudka ah ee ay laydhadhkiisa dambe bixinayaan ayaan eeganayaa aniga oo kolba Nimco guubaabinaya. Hanad oo aan iga dheerayn, codkiisa oo ii dhow awgii, ayaa isna dhiirrigelin dhinacayga ka wada. Dhul kala dheer, ciid isku dhow, haddana kala fog oo ku liqaysa, baabuur kaa dheer, dirawal haddii uu ku waayo kaa tegaya. Intaasi aniga ayay wehel ii ahaatay. Orod aanan hore u aqoon ayaan kusoo gaadhay baabuurkii. Markii aan birta haleelay ayaan fantay. Qof kasta meeshiisii ayuu fadhiistay. Jug aan garaaceeda caawa dhan la taahi doono ayaa iga soo gaadhay kubka markii aan fuulayay baabuurka. Habeenku dheeraayee, haddana dhererku gaabnaayee marka loo eego waxa na sugaya. Indhihii aan nafta silica ku illowsiinayayna iima muuqdaan. In aan tamarta kaydsado oo aan degdeg hurdo aan jirin isaga baadho ayay naftu door bidday.

Walow ay dhibteeda wadato, haddana wacanaa cadceeddu. Walow aanay weli soo wada bixin, haddana wacanaa iftiinkeedu. Ayeeyday ayaa odhan jirtay “habeen waa hiil”. Wax uu yahayba xalay ayaan ogaaday. Dadku way soo wada jeedaan. Illaa shan iyo labaatan qof ayaannu nahay. Waa konton indhood. Laakiin labadii indhood ee aan jeclaa, iyaga si fudud ayaan u helay. Eegmo ka dhigan salaan iyo “subax wanaagsan” iyo “maad gaajoonaysaa” iyo dhowr wax oo kale ayaannu is weydaarsannay. Su’aalaha ayaa ka muhiimsanaa jawaabaha. Sidaa darteed jawaab ka maan helin.

Anna maan siin. Waxa kale oo aanan helin islaantii Cibaado ee jaarkayaga ee subax kasta marka waagu baryo salaanta nala soo mari jirtay. Iyadana waan tebay. Wax aan ku xasuustay ma garanayo. Haddana waxaan soo xasuustay heestii aan adduunka ugu jeclaa. Xasan Aadan ayaa keligey hoos iigu heesayay oo lahaa "guddoonkii taladaydaay, galacda waaga cadceeddaay, gallad Eebbahay i siiyoo, go'aankeedu i diirshaay. Golahaan ku gam'aayaay, go'aan huwanaayaay, gogol raaxo u taallaay, geed magool bixiyaay, hablaha geyiga oo dhan, gaarridaan ka xushaay...". Kolley nafta oo aan been u sheegayay ayuun bay ahayd. Maaweelana iimay dhaafsiisnayn. Waxyar waxaannu illownay safarkii, sheeko iyo qosol ayaannu wadaagnay. Mararka qaarkood wax aan nafta kaa qaban ayay kugula kacaysaa. Xaaladda oo aannu ku jirno oo ah mid qofkii caqli lihi uu ilmayn lahaa, waxay naftu ka dooratay in ay qososho. Ha I weydiin sida ay macquul ku tahay, waayo aniguba maan fahmin. Balse mararka qaarkood waxa muhiim ah in aad raacdo mawjadda, in ay ku qaadato dabayshu, intii aad ka hortegi lahayd. Sidii ayaanay noqotay. Maalintii oo dhan waxa aannu ka sheekaysanaynay cirka iyo dhulka iyo waxa u dhexeeya. Ma hadal ayaa dhammaanaya? Kolba dhinac ayaannu ula kacnaa sheekada, maya, sheekada ayaa kolba dhinac noola kacda. Wixii aan tahriibka ku saabsanayn oo dhan waa la ogol yahay. Waxa uu ahaa sharci aanay cidi ku dhawaaqin haddana qof kastaa uu ku dhaqmayo. Qosolkii oo marka horeba qasab igaga soo baxayay ayaa farsamadii beddelay. Dhawaaqii dheeraa Khartuum ayaan kaga imid, codkii gaabnaa xalay ayaan soo isticmaalay. Debnaha in aan kala jiido oo keli ah ayay talo ku dhammaatay. Waxaan u gartay farriin jidhka ka timid. Si fiican ayaan u fahmay. Xabbad timir ah ayaan jawaab-celin uga dhigay. Dhambaalka ay naftu ii soo dirtay iyo jawaabta

aan u celiyay ayaa kala weynaa. Balse maanta oo kale, muhiimaddu waa jawaabta, maaha inta ay jawaabtu le'eg tahay. Maalintii saddexaad ayay cadceeddu shaqadeedii bilaabatay. Waxaad mooddaa in aannu haatan isku indho badannay. Waan soo dhibsanayaa, mugdigii ayaan ka dooranayaa. Kulaylkeeda iyo iftiinkeedan ay naftayda daaha uga qaadayso deegaankan naxariista daran ayaan dhibsaday. Balse waxaas oo dhan wax kale ayaa igaga daran. Calooshan madhan, jidhkan wadhan, carrabkan adkaaday iyo indhahan hagoogtay. Feedhaha ayaa iga xanuunaya halka ay ku dhammaadaan ee hoose. Qoorta ayaa hayn kari la' madaxa. Laakiin maaha qoorta oo keli ah midda wax hayn kari la'. Baabuurkuna culayska ayuu hay kari la' yahay. Goor duhur ku beegan, meel bannaan tuuro leh ku beegan, ayuu eegtay. Bartii ayuu ku jabay. Shanqad qaylo dheerayd oo aan u fahmay "shaqadaydii waan gutay" ayaa ka yeedhay. Bartii ayuu istaagay. Dhaqaaqii ayaa mar keli ah go'ay. Rajadii ayaa mar keli ah tidhi "nabadeey". Dhulka in loo daato ayay noqotay. Dadkii habeenkii u horreeyay baabuurka riixayay, haatan naftooda ayay qaadi kari la' yihiin. Qofba qof ayuu kasoo daba degay. Cagaha ayaa sidoodii dhulka hoos u galay. Hareerahayga ayaan eegay. Dhul cas, buuro waaweyn oo dhinaca bidix igaga beegan ayaan isha ku xaday. Cir aad mooddo in ay daruurihii is giriifeen ayaa isaga oo qaawan dushayada ka qoslaya. Cadceedda oo wixii ay haysayba la eeganaysay midhaha yaryar ee ciidda ayaa dhalaal khasab ah ku samaynaysa oogadooda. Waxaan soo xasuustay moofo roodhida lagu samayn jiray oo uu lahaa nin Cali Xaaji la odhan jiray. Waxaan daawan jiray sida uu daqiiqda u gelinayo godka kulaylka badan, kadibna ay roodhi bisil uga soo baxaysay. Maanta moofadii dhexdeeda ayaan taaganahay, roodhiduna waa aniga.

Warqaddii 11-aad

Marka aad gaajooto, cunto ayaa la cunaa. Marka aad harraaddo, biyo ayaa la cabbaa. Marka cadceeddu kululaato, waa la hadhsadaa. Waa sharciga dabiiciga ah ee Ilaahay innoo sameeyey. Waxa aad mooddaa in meeshan aan joogo uu sharci kale ka jiro. Amma aanu sharciba ka jirin. Laftii timirta ee u dambeysay ayaan afka ku hayaa. Ma doonayo in aan tufo. Waxa aad mooddaa in noloshayda oo dhan ay ku xidhan tahay laftaa aan afka ku hayo. Carrabka ayaan ku ciyaarsiinayaa aniga oo gowsaha kolba ku cadaadinaya. Waa laf aad u adag, haddana waan dareemayaa in ay dhilmayso. Ciyaalnimadii ayaan xasuustaa mar uu macallinku na weydiiyay "haddii aad harraaddaan, biyana aad weydaan, sidee ayaad harraadka u bi'in kartaan?" Waannu ka jawaabi kari weynay. Kolley carruurnimada ayay ahayd, iyo in aanay biyo la'aani nagu dhicin. Maalintaa ayuu noo sheegay. "Dhagax yar ayaa gowska u dambeeya lagu qabtaa, kadibna afka ayaa dhareer samaynaya" ayuu noogu jawaabay. Maalintaa markii aannu guriga kusoo soconnay ayaannu kolba dhagax kulul afka gelinaynay. Maan ogeyn in cilmiga aan maalintaa korodhsaday uu maanta i anfici doono. Dhagax aan afka ku qabto ma haysto, sidaa darteed ma rabo inaan laftan tufo.

Meel la hadhsado ma jirto. Alleylehe meel ayaa jirta. Waa baabuurka dhinaciisa bidix. Hadh aan hal mitir gaadhayn ayaa agtiisa jiifa. Dad aad u badan ayaa dhankiisa jooga. Meel la istaago ma laha. Waa la boobay. Aniga iyo gabadh kale ayaa meel waynay. Hore ayaan u socday bal in aan meel kale helo. Xanuun kululaa ciiddu. Way ku xaganaysaa marka ay cagtu dhex xuluulanayso uurkeeda baylka ah. Gacan ii yeedhaysa ayaan hadhkeeda arkay.

Kor ayaan u eegay. Waa Nimco oo hadalka kaydsanaysa. Hanad ayaa agteeda taagan. Isaga ayaa soo dhaqaaqay. "Kaalay soo soco, halkaygan istaag" ayuu cod naqas u badan igu soo gaadhsiiyay. Aniga oo aan kor u eegin ayaan meeshiisii istaagay. Isna milicda ayuu istaagay. Dhinac ayuu u dhaqaaqay. Waan arkayaa in uu iskakay qarinayo. Wax aan ku idhaahdo ma garanayo. Qalbiga qaybtii naxaysay Khartuum ayaan kaga imid. Haddii aan cid ka naxayo, naftayda ayaan ka nixi lahaa.

Ma garanayo intii aannu taagnayn, balse laba saacadood ayaan ku qiyaasayaa. Amma saddex. Amma afar. Ma garanayo. Qiyaastii ayaa iga luntay. Hadhkii uu dheeraaday, dadkii oo dhanna uu ku filnaaday. Nimco ayaan kor u eegay, indheheeda oo keliya ayaa dhaqaaqaya. Lugahayga ayaan hoos u eegay, jilibka inta ka hoosaysa oo dhan ayaa qarsoon. Cagahaygii ayaan waayay, isha ayaa qaban weydey. Aragga oo keli ah ka may dhuumman, dareenkana way ka dhuunteen. Ma dareemayo. In aan hawada dhexdeeda heehaabayo ayaan is moodayaa. Gacantayda bidix ayaa ku qallashay birta dhinaca baabuurka ee aan tiirka ka dhiganayo. In aan fadhiisto ayaan damcay, haatan ciiddii salka waa lagu la hagaagi karayaa. Markii aan sii fadhiisanayay ayaan gacanta sii mariyay garabka bidix ee Nimco. Way fahamtay. Way fadhiisatay. Cagahayga ayaan agtayda dhigay. Haa waan dhigay. Sida alaabta ayaan kolba mid qaaday, haddana dhigay. Muddo kaddib ayuu dareenkii kusoo noqday. Waan ka naxay in uu dareenku kusoo noqday. Xanuun iga maqnaa ayaa i bilaabay. Waxa xanuunka keenaya ayaan is weydiiyay. Waxaan arkay in ay faraha dhexdooda ciiddu godad ka qodatay, oo ay buuxisay. Cadkii iyo ciiddii ayaa isku eekaaday. Waan sii eegi kari waayey. Dhaqaaqa ayaan ka yareeyay, garaaca ayay igu kordhiyeen. Waan inkiray.

Hareerahayga ayaan eegay, dadka madaxa ayaa laallaada. Dhammaantood geed qallalay ayaad mooddaa, anna sidoo kale. Safarka hadal, socod iyo in aannu baabuurka riixno ayaannu ku bilownay. Hadalkii aammusni ayaa beddeshay, socodkiina taagni, taagnidiina fadhi, imikana fadhigii ayaan xammili waayey. Mar kasta oo ay cadceeddu naga sii fogaataba dhulka ayaannu u sii dhowaannaa. Way soo madoobaatay, waan sii gam'ay. Mugdiga ayaan diidayaa in uu i daawado. Waan seexday. Mise waan suuray. Ma hubo mid ay ahayd. Laakiin mid ayaan hubaa. Maan soo jeedin.

Galab ayay ahayd, aniga iyo Nimco ayaa taagnayn jidka weyn ee kasoo dhaadhaca xaafadda Jigjiga-yar. Xijaab sibidhi ahaa oo aan jeclaa oo gacmaha dhalaal ku lahaa ayaan xidhnaa. Agtayda waxa ka duryamaysa Nimco oo ka sheekaynaysa wiil maanta indhaha ku illoobay. Baska ayaannu sugaynay, haddana waannu dhaqaaqnay. Hoos ayaannu u soo raacnay waddada annaga oo dhinaceeda bidix marayna. Dukaanka Buurane ayaannu ku leexannay, nacnac-qori ayaannu ka iibsannay. Hoos ayaannu u sii dhaadhacnay. Mishiinka laydhka ee Ina aw Daahir ayaannu dhaafnay, laagta ayaannu ku dhaadhacnay, haddana waannu sii soconnay. Hudheelka Safari hortiisa ayaannu saambuuse ka iibsannay, biyo ayaannu kasii qaadannay dukaan yar oo gooladda ku yaalla. Aad ayaan u harradanaa, waan ka dhergay. Casar ayay ahayd. Cadceed gaaban balse kulul ayaa indhaha iga haysay. Way i gubtay, indhaha ayaan kala rooray. Waan adkaysan kari waayey, indhaha ayaan isku qabtay. Waan kala qaaaday. Dhul saxare ah oo foolxun ayay indhuhu qabteen. Riyadii ayaan ka kacay. Ciil weynaa. Weligay intii aan soo riyoonnayay, riyo noocan ah ku maan riyoon. Xaqiiqo ayay u eekayd. Ciil dartii ayuu cunuhu i

xanuunay. Show cadceedda indhaha iga haysay cadceeddan ayay ahayd. Haddii ay ugu badato waa lixdii subaxnimo, haddana cadceeddu biyo way karin kartaa. Walow aanay dhulka in badan kor uga kicin, haddana way na soo tooganaysaa. Xalay oo dhan ayay soo wareegaysay si ay dhanka kale noogaga timaaddo.

Waa maalin cusub. Maalin dhan oo dhowr iyo toban saacadood ah ayaa imika uun bilaabantay. Qorshe aannu ku qaabbilnana ma hayno. Dadka qaar guurguuranaya ayaan arkayaa si ay baabuurka dhanka kale ee hadhka leh uga maraan. Madaxa oo aad u culus ayaan aayar dhulka ka qaaday. Nimco oo weli indhaha isku haysa ayaan aayar ruxay. Debnaha oo kala furan ayay dhaqaajisay. Waxa aan u fahmay ishaaro ay iigu jawaabayso. Dhankan kale ayaan aayar eegay, waa Hanad oo innamadii kale dhex jiifa. Afkiisa iyo ciidda ayaa hal ah. Aniga oo aan karayn ayaan soo guurguurtay. Muxumed oo labada indhood ta sare u furan tahay ayaan sii dhaafay. Cagta Hanad ayaan haleelay. Surwaarka jiiniska ah ayaan cidhifta hoose qabtay. Jiid ayaan damcay. Farta iyo suulka dhexdooda ayuu ka siibtay. Haddana waan qabtay, xoog ayay maskaxdu amar ku bixisay, aayar ayay gacmuhu ku jawaabeen. Dhaqaaq uu ku kaco maan samayn. Muxumed oo i arkayay ayaa i caawiyay. Ugu dambayn indhaha ayuu kala qaaday, wuu i soo eegay, anna waan eegay. Hadal la'aan ayaannu sheekaysannay. Waxba in aannaan is dhaammin ayaannu isla garannay. Dhankii Nimco ayaan u soo noqday aniga oo jilbaha ciidda ku dul xoqaya. Haddaba dadkii way keceene, maxay la keceen? Xaggee la tegayaa? Jawaabtu waa meelna. Maxaa la cunayaa? Jawaabtu waa waxba. Naxariista Eebbe laga ma quusto, beri hore ayaan quustay. Markii aan laftii timirta ahayd afkayga ka waayey ayaan quustay. Ma garanayo meel ay tagtay. Xalay aniga

oo afka ku haya ayaan seexday, saakana la maan soo toosin. Waa la'iga xaday.

Markii aannu hayn kari weynay kulaylkii cadceedda ayaannu dhanka kale u soo wareegnay. Dhulkii uu gabbalku iigu dhacay iyo dhulkan uu waagu iigu baryay isku ma eeka. Buurihii dhanka bidix ku yaallay ma joogaan. Dhulkii bannaanaa ee dhanka midig ahaana buuro ayuu isku beddelay. Buuro waaweyn. Wax la aaminaaba ma jiraan. Qof kasta afkiisa ayaan hoos u eegayaa. Mid laf jaqaya ayaan rabaa inaan ku qabto. Laakiin dhammaantood dhulka ayay wada jiifaan. Naqaska ayay hoosta ka xadayaan. Naftu daciifsanaa. Aayar ayay awooddu sii daciifaysaa. Awooddu way daciiftay mar hore. Daciifka ayaa sii daciifaya imika. Indhaha ayaa muuqaalka hummaag gelinaya. Waan kala jiidaa, weli waa sidii. Waan isku qabtaa, waan yara nasiyaa. Waan kala qaadaa, caadi ayay ku soo noqdaan. Wax yar ayuu sii nagaadaa, haddana hummaag ayaa gala. Sidii ayaan ku celiyaa haddana.

Carrabka ayaa qori i noqday, lugaha ayaa dareenkii ka tegay. Calooshana maan dareemayn. In la goostay oo kale ayay ahayd. Waxaan xasuustaa casharradii sayniska, marka uu geedku biyo waayo uu iska daadiyaa caleemaha si uu tamarka u kaydsado. Dareen-la'aanta jidhkayga waxa aan u fahmay jidhka oo tamarta kaydsanaya. Dadka qaar ayaa jiifa, qaarna jiif iyo fadhi ayay u dhexeeyaan. Anigu kuwa jiifa ayaan ku jiraa. Sacabkayga bidix ayaan derbi uga dhigay wejigayga aniga oo sanka hortiisa dhinac-dhinac ugu taagaya si uu iiga qabato ciidda sanka iga gelaysa. Midabka bunniga ah ee gacantayda ayay indhahaygu ka door bideen midabka cawlan ee ciidda.

Iyaga ayaan indhaha ku hayay markii aan kolba sidii qof suuxaya indhuhu i madoobaanayeen. Shanqadha guud ayaa lasii gaabanaysay cadceedda. Maskaxda qudheeda ayuu gabbalku u sii dhacayay. Inta aan bilaa dareenka ahay ayaa ka badnayd inta aan soo jeeday. Dhan marka laga eego waxa uu ahaa dareen aan jeclaysanayay. Hurdo ayaan moodayay laakiin may ahayn. Marka aan suuxo waxa aan gelayay duni bilaa werwer ah. Meel aan u baxsanayo ayay ahayd. Mar kasta oo aan soo noqdo waan ka naxayay. Mugdi iyo silic ayaan indhaha ku kala qaadayay, waxa aan raagsanayay inta aan sidii ku noqonayo. Aniga oo aan ogeyn ayaan haddana miyir beelaa. Sidii ayaan ahaa.

Ereyga rejo ayay maskaxdaydu mar hore illowday macnihiisa. Mar kasta oo aan soo tooso waxa aan ka gaadhsiinayay xuska Ilaahay. Waan ashahaadanayay. Igamay ahayn xasuus kale, jannada aad tagtid ayuun baan is lahaa. Daciifnimadayda ayaan ogaaday. Iyo dabcan fulaynimadayda. Mar hal mar ayaan ashahaadda ka gaadhsiiyaa, mar shan jeer, marna "Laa Ilaaha Illa" markaan marayo ayuu dareenku iga tagaa. Waa dareen cajiib ah. Marka la dhimanayo ma sidanaa? Mise waa si kale? Sakaraadkii la sheegayay mee? Aniga oo moodaya in aan dhintay ayaan haddana soo kacaa. Kolba malaa'iig igu soo socota ayaan sawirtaa.

Marka ay naftu iga baxdo, toloow yaa hooyo u sheegi? In aanan noolayn aabbo siduu ku ogaan? Sidee ayay ku ogaan doonaan in inantoodii ay jeclaayeen ee ay kusoo tabceen ay meel cidlo ah jiifto oo ay naftu ka gurmayso. Inantoodii ay mar walba caqliga wanaagsan ku sheegi jireen in ay caawa caqlixumo halkaa dhigtay yaa u sheegi? Alla Ilaahayoow waan arkayaa in aan dhimanayee, haddii aad mar uun i celin lahayd, wallaahi in aanan

weligay caasiyeen. Waxa aad mooddaa in dhaarta aan dhaaranayaa ay hooyaday iyo aabbahay dib iigu celinayso. Laakiin runtaa fiicane waan addeeci lahaa haddii dib la'iigu celin lahaa. Laakiin waa habsan. Waan lasoo daahay. Haatan geeri ayaa i sugaysa. Waxaan maqlayay mid maanta ooyayay oo lahaa haddaan dhinto yaa i aasi? Nasakh. Wuu dhintaybee muxuu aasitaan ku falayaa. Istaaqfurullaah. Ilaahayoow tooba. Ilaahayoow dhankaaga ayaan u soo socdaa aniga oo aan nolosha waxba ka arag, aniga oo aan weli la'i guursan, weli ubad dhalin, aniga oo aan weli inantayda timaheeda feedhin, aniga oo aan weli inankayga Maxamed u bixin, aniga oo aan weli ayeeyo noqon. Adiga ayaan Ilaahayoow kugu soo socdaa ee kulankeenna ka dhig mid aad ka raalli noqoto, mid aad igu soo dhoweyso. Ilaahayoow waan gafay ee ciqaabteeda ha igu fulin. Waan jeclaan lahaa in aan ogaado sida ay u eeg yihiin carruurtaydu, balse caawa waxaan ka baqayaa in marka aynu kulanno aad i ciqaabto. Waxa aan ka baqayaa in aan kaa cadhaysiiyay. Ilaahayoow ii dembi dhaaf, carruurnimo ayaa i waddaye Ilaahayoow i saamax. Mardhow marka aynu kulanno Ilaahayoow jannada i gee. Waan ogahay in aanan u qalmin laakiin haddana waan ku weydiisanayaa. In ducada la'iga aqbalo iyo in kale, mardhow ayaan ogaan doonaa. Haddii la'iga aqbalo waan qosli doonaa, haddii kalena weligay ayaan barooran doonaa.

Warqaddii 12-aad

Waxaan ku soo kacay buuq. Dhawaaq hal mar aguugay iyo qoyaan wejiga igaga yaal. Carrabka oo bannaanka yaalla ayaa dareemay biyo lagu dul tuujinayo. Aniga oo dareemaya sidii qof la xidhxidhay ayaan carrabka oo keli ah ka dhaqdhaqaajiyay. Waxba ma arkayo laakiin waxaan dareemay in qofkii biyaha igu shubay

uu iga dhaqaaqay. Waxa uu ahaa nin cod weyn, af-carabina ku dhawaaqaya. Waxa uu leeyahay si fiican u maan maqlayn, haddaan maqlayayna maan fahmin. Waa wakhti uu mugdi badan igaga jiro xusuustiisa. Dhabankayga bidix iyo ciidda aan ku jiifaa halka ay iska galaan ayaan qabow yar oo ay biyihii ka tegeen aan ka dareemayey. Indhaha ayaan is idhi kala qaad, waan garan waayay sida loo kala qaado. Awooddii oo dhan ayaa iga maqan. Xubin jidhkayga ka mid ah ma qaadi karo, carrabka mooyaane. Waxa aan ahaa sidii qof hurddo laga kiciyay oo kale. Hurdo bilaa riyo ah. Dhinac marka laga eego, waxaan dhibsanayay in aan hurdadaa ka kaco. Waxaan doonayay in aan mugdigaa ku jiro. Sidaas ayaan rabay. Waayo waxay ahayd meel bilaa cabsi ah, bilaa harraad ah oo bilaa gaajo ah. Imikana buuq ayay dhegahaygu maqlayaan.

Indhahayga oo araggoodu soo noqonayo ayaa arkaya kabo qadh ah oo dhulka kala goynaya. Waxaan arkayaa hummaagga baabuur badan oo hortayda taagan. Muddo ayay sidii ahayd xaaladdu. Waxba maan fahmin, halka aan joogo ayuun baan garanayaa. Maskaxdaydu si buuxda uma fikirayso, waayo weli is maan weydiin asxaabtii kale iyo xaalkooda. Kolley iyaga laftoodu xaalkayga is may weydiin. Waa wax caadi ah. Qof walba tiisa ayaa cuslaysay. Toloow miyay nool yihiin? Haddana kabta wejigayga agtiisa dhulka kaga gariirisay ayaan arkay. Isla markiiba dhulka ayaa sare la'iiga qaaday. Meel aan u gartay in ay tahay gaadhi dushiisa ayaa sida marada la'i dhigay. Dhaqaaq igu ma jiro. Fikir ma karayo. Ka garashana hadalkeeda daa. Ma garanayo muddada aan baabuurka saarnaa. Waxaan dareemayaa in dad kale agtayda la soo dhigayo. Caadi u ma xasuusto oo kolba waan ka baxayay khadka.

Waxaan ku soo toosay aniga oo jiifa sariir. Waa sariirta aan imika dusheeda fadhiyo. Xadhko dhaadheer ayaa gacmahayga ku xidhnaa. Waa markii u horreysay ee aan indhaha wax ka arko muddo aanan garanayn. Hareerahayga ayaan eegay. Dhankayga bidix miis yar oo buluug ah ayaa gidaarka cad si bilaa qaab ah ugu dhejisan. Dushiisa waxa yaalla qalab isugu jira mindiyo yaryar iyo qalabka uu dhakhtarku wax ku dhegaysto. Dhanka lugahayga waxa soo yaalla waxba. Gidaarkaasi uu madhan yahay marka laga reebo sanduuq yar oo koonaha ku dhejisan. Waxaan u fahmay in uu yahay kii xashiishka lagu ridayay. Madaxa oo aad u culus ayaan dhankayga midig u soo duway. Waxaan arkay daah ku dherersan sariirta, xagga sarena aan meel sare gaadhin. Daah caddaan ah laakiin dhibco buluug ah meelaha qaar ku leh. Shanqadha ayaa aad u yar marka laga reebo qof dumar ah oo meel durugsan codkeedu iga soo gaadhayo. Miyirka ayaad mooddaa in uu ii soo noqday mar keli ah. Maskaxda oo fasax ku jirtay ayaa mar keli ah ku soo toostay shaqo dheeraad ah. Su'aalaha aan hayo ayaa saddex jeer ka badnaa jawaabaha aan heli karo. Su'aalaha qaarkood in la'iiga jawaabbo maan doonayn. Ma rabo in aan ogaado war i naxdin geliya oo khuseeya asxaabtayda. Haa asxaabtayda, horto meeye? Xaggee ayay joogaan? Albaabkii cagahayga ku beegnaa ayaa dhaqaaq sameeyay. Gacan dumar ayaa ka soo horreysay jidhka ay ku taallo. Inyar kadib way i soo garab istaagtay. Waa gabadh da'deeda aan ku qiyaasayo dhowr iyo afartan. Weji uu qabow ka muuqdo ayay leedahay. Shalmad yar oo buluug ah iyo maryo cadcad oo ka hooseeya ayay xidhan tahay. Way aragtay in aan soo jeedo, hadal se i may odhan. Caagaddii biyaha ahayd ee igu socotay ayay iga beddeshay. Mid kale oo tii hore u eeg ayay igu xidhay. Waxaan damcay in aan la hadlo. Af-carabigii aan soo dhigtay ayaan is idhi ku dhawaaq. Waan iska waayey. Kii

musalsalka aan ku daawan jiray ayaan baadi goobay. Waxba waan ka xasuusan waayey. Xaggii diinta ayaan u orday. “Salaamu calaykum” daxalaysatay ayaan dirqi ku maqashiiyay. Inta ay aayar I soo eegtay ayay gacanteeda bidix madaxa iga saartay, gacanta midigna laabta iga saartay, markaasay waxoogaa hadal ah oo sida uu u dhacayay mas’uuliyadi ka muuqatay igu tidhi. Dhabanka ayay sacabka iga sii marisay markii ay sii baxaysay. Ilaahay ha i cadaabbo haddaan wax ka fahmay hadalkeeda. Waxaan ku qasbanaa in aan anigu buuxsado macnaha ereyada. “Hooyo iska jiif imika hadal kuuma yaallee” ayaan ka dhigtay. “Ma adigoo naftaada halligay ayaad muslin sheeganaysaa” ayaan haddana ka dhigtay. May, tii hore ayaan ku adkaystay. Ta hore ayaa ka naxariis badnayd. Laakiin hal erey ayaan dib u xasuustay. Hal erey ayaan ka dhex helay codkeedii gaabnaa. “Shurdah”. Shurdah miyaanay ahayn booliska? Oo maxay uga jeedday? Ma boolis ayaa ii hadhay? Malaha waa la’i xidhiba? Aniga oo raba in aan fikirka ku sii fogaado ayaa dareemay xanuun iga soo jeediyay wixii aan ku maqnaa. Cagaha ayaa garaac xoog leh aan ka dareemay. Hoos ayaan u eegay aniga oo aan madaxa qaadi karayn. Way duuban yihiin labaduba. Dhaqaaji ayaan is idhi, waan ku guuldarraystay. Waan iska dhaafay. Cagaha oo keli ah iska maan dhaafin. Fikir oo dhan ayaan iska dhaafay. Inta aan caafimaadayo waa in aan nastaa. Kolleyba hawl ayaa ii dhimane. Sidaa ayaan go’aansaday. Weydiimaha kale ee aan hayana dib ayaan u dhigtay. Kolleyba wakhti ay iigu jawaabaan ma hayo waayo waxay ku mashquulsan yihiin qof daaha dhinaciisa kale jiifa. Kolba waa lagu ordayaa. Ilaahay ha caafiyo qofkaa, kolley waa qof waayeel ah.

Subaxii dambe ayaan la soo toosay firfircooni saa’id ah. Inkasta oo aan xalay ku kacay shanqadha qofka dhinacayga jiifa,

haddana si fiican ayaan u seexday. Markii u horreysay muddo dhowr maalmood ah, macaanka nolosha ayaan dareemay. Hurdada oo ay riyooyin badani weheliyaan ayaan ku raaxaysanayay. Sidii ayaan ahaa. Hadda waan fiicanahay, cunto yar ayaan cunay. La'iima ogola in aan in badan cuno. Ilaahay ha iigu wado laakiin aad ayaan u wacanahay imika.

Waa subixii dambe, shaqaalihii qaar ka mid ah iyo qolka aan jiifo. Aan idhaahdo'e qaybta aan qolka ka jiifo. Waa laba hablood oo kalkaalisooyin ah. Way i salaameen intii aanay ii dhaafin dhanka uu qofka kale jiifo. Daaha ayay dhanka shishe ka mareen. Cod qabow ayay mid ka mid ahi kula hadashay qofkii bukaanka ahaa. Waan dhegaysanayaa. Qofkii bukaanka ahaa ayaa aayar jawaabaya. Ma maqlayo laakiin waan qiyaasayaa. Cod aad u googo'aya oo tamar darro ka muuqato ayuu u celinayaa. Waa la gartaa in uu yahay qof gaboobay. Waan dhegaystay. Codkii ayaan si fudud u maqlayaa. Waa qof dumar ah. Kalkaalisooyinka ayaa su'aalo weydiinaya, iyaduna jawaab ayay u celinaysaa. Afka ay ku hadlaysaa ma fiicna. Waan u fiirsaday, illaa aan maqlay. Illaa aan maqlay odhaahdii ay halhaysta u lahayd. "Eeneey.." Ayay u dhex raacisay. Waa Nimco. Waa Nimco qofka dhinacayga jiiftay. Waa Nimco qof daahu noo dhexeeyay. Waa iyada qofka aan moodayay qof waayeel ah. Waan is hayn kari waayey. Xubnaha jidhka oo dhan ayuu dhiiggu i dhex yaacay. Aniga oo aan is ogeyn ayaan labada gacmood ka buuxsaday furaashka labadiisa dhinac. Qoorta ayaan markii u horreysay sare u soo qaaday aniga oo daaha u soo dhowaanaya. "Naa Nimco, ma adigaa?". Jawaab ayaan waayey, aamusni ayaa la'iigu jawaabay. "Nimco... ma adigaa qofkaasi?". Oohin ayaan maqlay. Cod dhuuban ayay sida siidhiga ugaga dhawaajisay. Hablihii ayay midi daaha dhexda fayday. Waan

arkay. Qalab aad u badan ayaa ku xidhan iyada. Way I soo eegtay, waan eegay. Waan aqoonsan waayey wejigeeda. Way aqoonsatay kayga. Baroor aanay maamulkeeda haynin ayaa ka soo boodday. Aniga codka ayaa igu xidhmay. Ma garanayo sidii aad dareemay, ma sixi karo. Dhinac iyada ayaan isku dayaa in aan aamusiiyo, dhinac aniga ayaa ka ilmaynaya. Isma gaadhayno, labadayaduba waanu jiifnaa. Ma halkan ayaannu ku dambaynay? Labadii hablood ee lebbiskooda ka shaqayn jiray, maanta ma sidan ayay ku dambeeyeen? Kolley iyadana waan ka sii foolxumahay.

Waannu is wareysannay. Wax badan isku maanu dhaammin. Dadkii kale meeye? Jawaab u ma hayno. Imisaa nool, imisa ayaa se dhintay? Jawaab u ma hayno. Mar keli ah ayaan dareemay awood saa'id ah oo ii soo noqotay. Qariibnimadii ayaa iga ba'day. Qof wehel leh ayaan noqday. Iyaduna sidoo kale. Waanu sheekaysannay, maradii dhexe waa nalaga qaaday. Waannu qosolnay, in ka badan ayaannu oynay. Waxaannu go'aansannay in aannu kalkaalisooyinka ka waraysanno in dad kale joogaan meesha. Waxaannu ogaanay in qof kale joogo, in kalena la xidhay. Qaarna laga yimid oo ay dhinteen. Caloosha ayaa ii xanuuntay si aanay weligay ii xanuunin. Waxaan doonayaa in aan ogaado dadka dhintay, haddana ma doonayo. Horto mar haddii ay Nimco nooshahay waa si wanaagsan. Inkasta oo ay dhiman gaadhay iyada lafteedu. Mid kale ayaannu ogaannay, in marka aannu caafimaadno nala xidhi doono. War naxdin leh. Waxa kale oo aannu ogaannay in qofka kale ee dhakhtar jiifaa uu yahay wiil, wiilkaasna la yidhaa Hanad. War farxad leh. Dhako ayaannu degnay. Dhako aannu cimri-dherer ka dhiganayno. Dhakadaas oo odhanaysa in aannu helno telefoon aannu ka wacno reerahayagii, gaar ahaan aabbo. Sidii ayay u dhacday, waannu helnay. May

fududayn in aan aabbo la hadlo, laakiin calool-jileec looma baahna. Waxaan u dedejiyay xaaladdayada. Waxaannu heshiis ku gaadhnay in uu saddex sawir oo aannu leennahay uu ku soo sameeyo saddex baasaboor, kadibna saddex tigidh soo gooyo. Isaga oo dowladda metelaya uu si dhuumasho ah noogu yimaaddo. Kaddibna sidaa ku baxsanno oo aannu diyaaradda raacno illaa Jabuuti kaddibna Hargeysa. Inta ka horreysana aannaan caafimaadin.

Warqaddii 13-aad

Warka kolba noo immanaya ayaa ka xumaa ka kale. Adduunka waxa ugu xun wax kaa maqan oo aanad ogeyn. Haddii aan ogaan lahaa xaaladda ay ku sugan yihiin asxaabtaydii, waan degi lahaa. Haddii geeri la'iigu sheego, waan ka samri lahaa. Haddii nolol la'iigu sheegana, waan ku farxi lahaa. Waxa aan moodayey in aan imika nastay oo uu dhibkii iga joogsaday, laakiin maya. Werwer cusub ayaa ii bilowday. Waxaan ogaaday in dad badan la xidhay. Aniga, Nimco iyo Hanad ayuun baa goobtan jooga. Afartii kale meel ay joogaan Ilaahay ayaa og. Marka aan aad u werwero waxa aan eegaa dhankayga midig, markaan arko Nimco oo jiifta ayaan qaboobaa. Mid ayaan go'aansaday, midna go'aan ayaan ka gaadhi kari waayey. In aan werwerka joojiyo illaa inta ay wax kala caddaanayaan ayaan go'aansaday, in aanan Hanad ka werwerinna go'aan ayaan ka gaadhi kari waayey. Isagu dadka la mid maaha. Isagu waa Hanad. Hanadna waa kaygii.

Qorshihii aannu degnay ayaannu fulinnay. Aabbo ayaa sidii noogu yimid, wakhti duhur ahna dhakhtarka ayaannu si fudud oo

tuugo ah uga soo baxnay. Isla maalintiina Itoobiya ayaannu u soo duulnay, halkaas oo aannu laba maalmood joogi doonno. Markii aannu hawada sare galnay ee aannu ka duulnay Tripoli ayaa iigu horreysey in aan aabbahay wejigiisa caadi u eego. Waan arkayay in uu maanta dhan hoosta iga eegayey, waan ogaa in uu kolba ilmada si tuugo ah isaga masaxayo. Waxaas oo dhan waan ogaa, in aan iska dhigo qof aan ogeyn ayaan ka doorbiday. Weligey maan arag aabbahay oo sidan ah. Weligey wax dabacsanaan ah ka maan dareemin, maanta se weji kale ayaan ka helay. Dhinac aanan ka aqoon ayaan ka bartay. Aabbahay oo aan u aqaannay qof geesi ah, qof aan dabacsanaanta aqoon, qof ku dhex jira siyaasad aan la'isu nixin, waa sawirkii aan ka haystay aabbahay tan iyo intii aan garaadsaday. Balse qoloftiisa adag ee uu difaaca u haysto in ay hoosteedu baruur tahay maan ogeyn. Indhaha ayaan ku hayn kari waayey indhihiisa casaanka u badan. Afkiisa oo qallalan ayuu qasab ku kala jiiday. Dareenka ay indhihiisu i tusayaan mid ka geddisan ayuu doonayaa in uu afkiisa iiga muujiyo. Laakiin is ma qabanayaan. Waa saliid iyo biyo la'isku daray, is la ma falgelayaan. Indhihiisa ayaa ka daacadsan afkiisa, iyaga ayaanan ka dareen qaatay. Sidii oo waran la'iga taagay laabtayda oo aan awood badan haatan lahayn ayaan beerka is qabtay. Dhanka daaqadda ayaan u jeedsaday aniga oo diidaya in uu arko wejigayga sidii liin dhanaan la tuujiyey mar keliya murugadu isu keentay. Laba dhibcood oo illin ah oo aan is idhi waa intii jidhka wax qoyaan ah ku jirtayba ayay midba il ka timid iyada oo dhabanka oogadiisa qoyaan iyo kulayl ku reebaysa. Ma aabbahay oo keligey i dhalay ayaan maanta ka oohiyay? Haddii hooyo ay sidan oo kale u ilmayso waxa aan is odhan lahaa waa dumar oo dareen ayaa ka oohinaya iyo hooyonimo, balse aabbo, isaga tiisu aad ayay ii damaqday. Waxa igaga sii daran farxadda uu ii muujinayo marka aan eego wejigiisa

ay murugadu daashatay. Habaar ayaan ka shaqaystay. Ilmadii yarayd ayaa mar keliya isku beddeshay baroor aanan anigu maamulkeeda haynin. Naqaska ayaa igu xidhmay. Gacmaha oo i qallalay ayaan jilbahayga ku dul qabtay. Cunaha ayaa qof aad u xoogweyni i qabtay, waan neefsan kari waayey. Laabta ayaa sida mowjadda badda I sabbaysay. Waan is xejin kari waayey, Nimco oo i ag fadhiday ayaa ku soo jeedsatay codka dhuuban ee dhuuntayda sida foodhida uga soo baxaya. Nasiibdarro aabbo ayaa isaguna soo jeedsaday. Nimco ayuu kursiga ka beddeshay, agtaydana uu fahdiistay. In uu ila hadlo ayuu bilaabay isaga oo aan garanayn waxa igu dhacay. U jawaab ayaan is idhi, afka ayaa “maya” i yidhi. Dhankiisa u soo hinqo ayaa i qabatay, xubnaha ayaa dhaqaaqi diiday. Isaga ayaa ii soo dhowaaday, sacabbadiisa ayuu labadayda sacab ku daboolay isaga oo aan indhahayga ka jeedsanayn. Waan ka sii daray, naxariista aan dhankiisa ka helayo ayaa dhankayga raad kale ku yeelanaysa. Mar kasta oo uu codkiisa qabow “aabbo” igu soo gaadhsiiyo aniguna badweyn aanan madowgeeda darteed muuqeeda arkayn ayaan sii muquuranayaa. Illinta iga socota ayaa ahayd mid aanan joojin karayn oo sida daadka qulqulaysa. Cunaha ayaad mooddaa in ay lafi ku istaagtay. Waa la’isugu kay yimid. Shaqaalihii diyaaradda ayaan arkayaa oo midna biyo i dul hayso, midna ay leedahay “hawo ayay u baahan tahay”. Xagga dambe waxaan ka maqlayaa qof dumar ah oo odhanaysa “inanta maa la dardaray?”. Toloow ma sidanaa la noqdaa marka qofka la dardaro? Waayo ma garanayo wax i helay. Weligay sidan maan noqon, qof noqdayna maan arag. Goor dambe ayaan soo qaboobay, naqaskii ayaa si fudud iiga soo baxay, illintii ayaa iga joogsatay. Inaan hadlo ayaan damcay, waan dhawaaqi kari waayey. Laba jeer markii aan ku guuldarraystay ayaan markii saddexaad si dirqi ah ku idhi “biyo”. Afka ayuu iigu

qabtay sidii ilmo yar. Aayar ayaan kolba inyar dejiyay. Gadhka ayaan sare u qaaday, aabbo ayaa u fahmay “bes” oo iga fogeeyey biyihii. Aniga oo gacantayda midig ku maranaya gacantiisa bidix ayaan madaxaygana ku tiiriyay garabkiisa bidix. Markii ayaa dareen iigu dambeysey. Hurdo qabow ayaan galay.

Maalintii labaad oo ahayd maalintii u dambeysey ee aannu Addis joognay ayaan maqlay warka. Markaas ayaan ogaaday. Muxumed, Abshir, Cabdinaasir iyo Cabdikhadar. Waa laba dhakhtar iyo laba macallin. “Ilaahay ha u naxariisto” ayuu yidhi oday meesha joogay markii warka la’ii sheegayay. Waan u qaadan waayey in odhaahdaasi loo isticmaalayo asxaabtaydii. Sowtii dadka dhintay loo isticmaali jiray odhaahdan. Waan ku qanci waayey in ay geeri ku dambeysay naftoodii. Laba usbuuc kahor ayay ahayd markii aannu halkan wada joognay ee aannu timirta iibsanaynay. Hudheelkii aannu degganayn ayaan aad iiga dheerayn. Sheekadii Muxumed iyo Abshir ee aannu habeenka oo badh tegay quudan jirnay ayaa i hor timid. Cabdinaasir oo dhegta hadal ugu sheegaya Cabdikhadar ayaa ii sawirantay. Caloosha ayaa i wareegtay, matag ayaa i qabtay. Cagaha ayaa culayska jidhka hayn kari waayey. Indhaha ayaa i madoobaaday. Bariis aan cunay goor aan fogeyn ayaan bannaanka soo dhigay. Geeridu way ku soo degdegtay. Istaqfurullaah.

Maalintii Hargeysa loo baxayay ayay gaadhay. Inkasta oo ay geerida la’ii sheegay wax badan iga kala ridday, haddana waxaan ku howlanaa in aan wejiga iyo jidhkaba sii xannaaneeyo inta aanan hooyaday arag kahor. Dhowr shay oo kala duwan ayaan mariyay wejiga, gacmaha iyo lugaha oo aad mooddo qori gubtay. Nabarro aan weli i bogsan ayaan aayar korkooda salaaxay. Nafta

ayaan u diyaariyay in ay ku laabato magaalo ay bil kahor ka ordaysay. Nafta ayaan imika ku lahaa “waa been” war aan bil kahor ku idhi “waa run”. Nafta ayaan farxadda uga lullayay geed aan bil kahor ku lahaa midhihiisa ha cunin. Iyada ayaan ku qancinayay quud aan bil kahor u quudhi waayey. Markee ayaan waalanahay? Markee ayaan miyir qabaa? In aan imika miyir qabo ayaan nafta u subcinayaa. Miskiinta yari waxay u eeg tahay in ay iga qaadanayso. Waa daacad naftaydu.

Saacad iyo shan daqiiqo oo ay diyaaraddu hawada ku jirtay ayaan kolba tuulo Itoobiya ku taalla dusha ka daawanayay. Hoostayda magaalo ka muuqata ayuu aabbo iigu sheegay Jigjiga. Agteeda waxa ahayd magaalada xadka ee Tog-Wajaale. Isku dhowaa! Intaa wixii ka dambeysa waan garan karaa. Jidkii baabuurka oo kale ayay diyaaradddu maraysaa. Marka ay ku beegan tahay degmada Kalabaydh ayay bari u jeedsatay iyada oo afka saaraysa jihada magaalada Hargeysa. Ciyaalnimo igu jirtay ayaa bannaanka iiga soo baxday markii aan daawanayay jid aan si fiican u kala aqaanno. Durba Gebilay ayaa ii muuqatay, dooxyo waaweyn ayaa xigay, Arabsiyo ayaa haddana dhul kala midab ah cagaarkeeda isku muujisay. Intii aanan arkin Abaarso ayaan durba dareemay diyaaradda oo soo yaraynaysa masaafada ay u jirto oogada masallaha magaalada Hargeysa. Goortii aan dareemay jugta ay samaysay diyaaraddu markii cageheedu laammida hurudda korkeeda ka naxsadeen ayaan anna sidii qof imika dib u dhashay farxad nooc kale ah dareemay. Waxa aan sugi kari waayey inta ay diyaaraddu istaagayso. Waxa aan diyaar u ahay in aan hooyaday macaan arko. Waxa aan diyaar u ahay in aan hooyaday macaan madaxa ka dhunkado, in aan hooyaday macaan dhabteeda ku jiifsado oo aan dhabteeda ku ooyo, in aan hooyaday

macaan ka ducaysto ugana raalligeliyo intii aan dhibaato iyo rafaad mariyey. Albaabkii markii la furay ayaan ka baxay aniga oo ay i weheliyaan aabbo, Nimco iyo Hanad. Sallaanka ayaan ka dhaadhacay aniga oo isha ku baadhaya hooyaday macaan. Waxba waan arki waayey. Aabbo ayaa ii sheegay in ay bannaanka joogto oo aan loo ogolayn in ay gudaha soo galaan dadka ehelka ahi. Illeyn qof aan hore u dhoofin ayaan ahaye, waxaan ogaaday in ay muddo qaadanayso inta aan bannaanka u baxayo. Nimco iyo Hanad ayaan hoosta ka eegay, farxad ayaa wejiyadooda dhuudhuuban ka muuqata. Hoos ayaan u idhi “toddoba ayaynu ku baxnay, saddexna waynu kusoo noqonnay, waa khasaare”. Hore ayaannu uga gudubnay goobtii lagu hubinayay baasaboorrada.

Dhismaha ayaan ka soo dhammaaday goortii aan arkay dad konton kor u dhaafaya oo soo taagan meel aan aad u durugsanayn. Waxaan moodayaa in ay dadku dano kale u socdaan, laakiin maya. Markii ay muuqayaga arkeen ayay guux bilaabeen. Hanad ayaa arkay hooyadii iiyo aabbihii, anna waxaan arkay Nimco hooyadeed iyo aabbeheed. Inyar kaddib ayaan arkay qofkan safka hore soo taagan ee sacabka bidix ku xadaysa ardaaga indhaha. Waa hooyo.

Warqaddii 14-aad

Daaha sida dabacsan uga hor laallaada daaqadda qolka aan jiifo dhinaciisa bari ku taalla ayaa ii soo gudbinaya iftiin midabkiisu saxarihii Liibiya u eeg yahay. Waa cadceedda oo ii sheegaysa in ay maalintii siddeedaad iigu soo baxday aniga oo aan weli ka bixin guriga. Saddex koob oo laba madhan yihiin iyo bac ay dawooyin ku jiraan ayaa saaran miiska cagahayga ku beegan. Waxa ay noqotay shaqo, in habeen kasta saqda dhexe marka aan

soo kaco aniga oo qaylinaya la'i siiyo daawooyin kala duwan. Riyooyin dhowr ah oo hurdadaba i nacsiiyay ayaa igu soo noqnoqda habeen kasta. Maanta waxa aan damcay in aan bannaanka u baxo, walow ay hooyo ii diidayso. Toddoba maalmood ayaanan guriga meelna uga bixin, toddoba maalmood ayaan sariirta iyo furaashka wehel u ahaa. Maanta waa bes. Maanta waa in aan qof iska dhigo, waa in aan soo celiyaa Suhuurtii la yaqaannay. Inkasta oo aan ka dhuubanahay tii hore ee aan ahaan jiray, haddana hilib saa'id igu ahaa oo aan garan la'aa si aan isaga gooyo ayuun baa iga go'ay. Dhuubnidii aan weligeyba raadin jiray ayaan helay. Waa shay wanaagsan oo ka dhashay arrin aad u foolxun. Aniga oo diyaar ah ayaan kaabadda guriga cagta saaray, waan ka dhaadhacay. Dareen cajiib ah ayaan dareemayay, wax kasta oo aan sameeyo waxay ii samaynayeen macno gaar ah. Aniga oo aan gaajoonayn in aan guriga ka baxo ayaa ahayd wax la yaab leh. In calooshaydu aanay wax cabasho ah ii soo gudbinayn ayaan aad ula yaabbanaa. Waxaan diiday in aan baabuurka raaco, waxaan ka door biday baska. Waxa aan u xiiso qabaa dhulka aan dushiisa soconayo, dadka afsoomaaliga ku hadlaya ee aan dhegta la raacayo, laydha udgoon ee guryaha dhexdooda is eryanaysa. Wax kasta oo iga soo hor baxa ayaa qiimo gaar ah iigu taagnaa. Wax badan oo aan ka indho la'aa markii hore ayaan imika si gaar ah u daawanayay. Waxa aan xasuustaa gabadh aannu wax isku nahay oo beri dhoweyd qurbaha fasax kooban kaga timid, inantaasi riyaha ayay sawiranaysay. Aad ayaan ugu qoslayay oo waxa aan u haystay qof bilaa macni ah. Maanta aniga ayaa sidii wax waalan iska dhoolla-cadaynaya marka aan dhex marayo xaafadaha aannu jaarka nahay ee ay carruurtoodu aadka u qaylinayaan. Waxa aan arkay nimco aan ka indho la'aa markii hore. Waxa la yaab leh, in aan silic intaa le'eg u maray si aan u

ogaado barwaaqada aan ku jiray. Hab ka fudud oo la'igu dareensiiyo miyaanu jirin toloow? Baskii ayaan gacanta u fidiyay, wuu istaagay, waan fuulay oon fadhiistay. Cajiib, wuxu wanaagsanaa. Muraayadda dhinacayga ayaan ka daawanayaa marka uu dhex mushaaxayo xaafaddayda isaga oo u sii jeeda dhanka suuqa hoose. Meheradihii oo sidoodii u furan, islaantii Xaliimo ee caanaha iibin jirtay, kii kale ee saambuusaha iibin jiray, wixiiba waa sidoodii. Noloshu si caadi ah ayay u socotay, aniga ayuun baa ka maqnaa. Haddii aan sidaa ku dhiman lahaana sidan ayuun bay u socon lahayd. Cid kuu joojinaysaa ma jirto. Si kasta oo aad muhiim u tahay, haddaad u badato laba maalmood ayaa lagu hadal hayn, bes dabeedna. Aniga oo fikirka ku fogaaday ayaan durba arkay aniga oo maraya goolladda shacabka. "Waar ii jooji walaal" ayaan hadal qabow ku maqashiiyay yarkii. Qaybta naxariista ayaa i shaqaynaysa, maalmaha qaar si kale ayaan u la hadli jiray.

Gurigii Nimco ayaan ku hagaagay. Markii la'ii sheegay in aanay joogin ayaan helay lambarkeeda, dabeedna wacay. Waxyar kaddibna way ii timid. Baabuurka iyada ayaa wadata, qosol ayaa debnaheeda ka muuqda, codka Cabdiqaaddir Jubba ee uu kula hadlayo Khadra Daahir ayaa dhegahayga soo gaadhaya:

Jacayl ma halmaami karo,
Aabbahaa ma hagaajin karo,
Adduun aanan heli karayn,
Ayuu ku hawoonayaa.

Haddii ay dhiman gaadhayna hees dayn mayso. Hadalka ayay igaga horreysey.

- Naa heblaayo! Bal ii warran?

Runtii codkeeda aad ayaan ugu farxay, waa qof la'aanteed aan kala dhimanahay. Muuqeeda ayaan ku farxaa. Aniga oo aan is ogeyn ayaan iska qoslay. Noloshu macaanaa. Ilaahay ayaa mahad leh. Baabuurka aniga oo aan fuulin ayaan hadalka sii bilaabay.

- Naa waan wacanee bal ii warran? Alla hoogi weynay, naa sowdiga adna meeshii ka baxay, aniguun baa is moodayay inaan dhuubtee.
- Ma Ilaahay baa kugu og? Iga daa iga daa ha'igu dhaqdhaqaajine waan is illowsiiyaaye. Weji qumayo ayaan soo korodhsadaye waxba maan tahriibine. Hoogay hoogay!
- Oo naa kaalay, ma dirac shiidaad bannaanka ugu baxday?
- Naa dee meel maan tagayn, lacagtan ayaan soo sarrifayay.
- Oo ma meel aad ka sarriftaad weyday, ma intaas ayaad gaadhiga u kaxaysatay? Naa bal naagtan eega!
- Naa bal naga aamus inaan bannaanka u baxo ayaan isa ga xiisee, waxaan ku idhi, dee waanigii arkay kii.
- Kuma?
- Dee inankii calanku kuu saarnaa.
- Haye!
- Alla walaalo haddaad aragto, surwaalka ayaa ka dhacayay ayaan ku idhi.
- Hee.
- Dee inta uu dhuubtay, dhuubtay, dhuubtay ayuu jabayaa ayaan ku idhi. Dabayshaa qaadaysa ayaad is odhanaysaa.
- Alla miskiinka yari meel buu igaga yaallaaye ha ku fogaan naayaahe.

- Naa maxaan ku fogaadaa kan sidiisa kalaa loogu fogaadee. Wallaahi haddaad aragto ayaan ku idhi, indho keliya ayaa kasoo hadhay.
- Ax, miskiinka yar. Dee ma innagaa dhaanna, innaguba soynagaa xuuro u eekaannay.
- Alla hoogi waayayeey, naa iga aamus. Farahaan jidhka kala baqaa markaan maydhanayee.
- Naa iga aamus, beerkaad i casaysee.
- Waxaan ku idhi, yarka maynu u yeedhno, aad is aragtaane.
- Alla, naa bal naagtan eega. Adiga maxaa kaa galay? Naa mayee waa runtaaye xagguu joogaa?
- Dee lambarkiisaan ka qortay, waa ku sidee! Hoo ku dhufo!

Lambarkii ayaan ka qortay. In aan la hadlo ayaan doonayaa, haddana ma rabo in aan meeshan kula hadlo. Meel deggan ayaan rabaa. Baabuurka ayaan ka degay, dhankiisa dambe ayaan u wareegay aniga oo doonaya in aan keligay noqdo. Dhegta ayaan ku qabtay telefoonka aniga oo sugaya inta uu jawaabayo.

- Haloow?

Waan ku naxay codkiisa. Waan sugayay, haddana maan filayn.

- Hanad! Waa Suhuure ii warran?
- Walaal Suhuur! *quxuu quxuu* Suhuur ii warran walaal, sow ma roonid? Maalmahanba waan raadinayay lambarkaaga oo waxaan is lahaa toloow caafimaadkeedu siduu yahay. Nimco ayaannu is aragnay oo ...
- Walaal waan fiicanahee ha iga werwerin aniga, ayaan ka dhex galay hadalkii uu waday.
- Alxamdu lillaah walaal haddaa.

- Weli maad naaxin baa la yidhiye.
- Haha, ma Nimcaa kuu sheegtay? Maxaan naaxi walaal dhowr cishoo wada canaan ah ayaan ku jiree.
- Walaal waan fahmi karaa, ma reerkaa ku canaantay?
- Adigu haa, way ii cadhoonayaan weli. Inay ku farxaan in aan noolahay ayay ahayd laakiin. Waa waayeeloo kolley dhinac kale ayay ka eegayaan.
- Dhib ma leh walaale iska dul qaado. Kolley innagaa khaladka leh mar walba.
- Waa run walaal, dee goormaynu is aragnaa?
- Aniga iyo Nimcaa caawa tegayna Summertime. Waad noo iman kartaa.
- Walaal waa qasab, imisadaad tegaysaan?
- Siddeedda walaal.
- Haye waan imanayaa, lambarkan ayaan kaa soo waci doonaa insha Allah.
- Haye walaal, bye.

Baabuurka ayaan ku soo noqday aniga oo faraxsan goortii ay Nimco iga hor keentay hadalka ah:

- Naa goormaynu Summertime inaynu tegayno ku heshiinnay?
- Maad i maqlaysay? Adiga yaa ku yidhi dadka dhegeyso horto?
- “Maad i maqlaysay” kuteh, seenan kuu maqlayn! Xitaa sidaad codka u bedelaysay ee aad wax yaroo daadaxa isaga dhigaysay ayaan ka yaabayba.
- Naa haddaa maxaan ahay? Bal naagtan eega!

- Wallaahi waa runtaaye daadax waad tahay. Waxaan ku idhi, markaa imika miyaynu isku qorannahay caawa?
- Caawa iyo Summertime iyo siddeedda diyaar ahow nayaa imikaba!
- Naa haaye walaal maad Summertime naga daysid, kii baa joogee.
- Kee? Alla kii. Dee adiga yaa ku yidhi mudalabyada wax weydii. Afkaaga dheer ayaa meel kasta ku gelinayee

Warqaddii 15-aad

Labbis kiisa u qurxoon ayaan maqaarka kor sudhay. Kabaha kuwooda ugu dhaadheer ayaan dhulka ku muday. Farxad teeda ugu badanna wejiga ayaan ku suntay. Nimco oo bannaanka igu sugaysa ayaan u imid. Baabuurka markii aan dhexdiisa fadhiistay ayay goorsheegtu siddeeddii fiidnimo wax dhaafsanayd. Jidka weyn ayaannu qabsannay, Deeqa Axmed ayaa dhegahayga haysatay, maankana Hanad ayaa afduubtay. Caloosha ayaa i gargariiraysay, naqaska ayaa si aan dheellitirnayn iiga soo baxayay. Waxa iga horreeya ayaan saadaalinayay, caweys aan la qaadan doono laba qof oo aad iigu dheer. Caweys aan laabta ku hayay fulintiisa wakhti ay naftu iga gurmaysay. Sidii aan rabay ayuu habeenkii iigu dhacay. Badweyn ka kooban sheeko, qosol iyo eegmooyin diirran ayaan dhex mushaaxayay. Saddex saacadood markii ay tageen ayaan qasab ku soo afmeeray fadhigii. Guriga markii aan imid ayaan dharkaygii aniga oo xidhan sariirta isku tuuray. Bustaha ayaan illaa madaxa ku duubay aniga oo wejiga oo keliya bannaynaya. Indhaha ayaan daboolay, qalbiga ayaan furay, sheekadii ayaan dib ugu soo ceshaday. Wixii aan saacado kahor dhex joogay ayaan dib u naqtiimay. Markii aan ku qabtay isaga oo

igu soo maqan ee uu degdeg baastada ugu foorarsaday, markii aan indhaha ku illoobay ee uu xishood dhididay. Markii uu iiga sheekeynayay berigii uu eygu qaniinay ee aan beerka ka qoslay, markii aan uga sheekeeyey in aan ka cabsado dameeraha ee uu qosol la ilmeeyey. Markii aannu hadalka joojinnay ee aannu aamusnida ku kala boganaynay. Duni ii gaar ah ayaan galay, duni aan nolol iyo geeri midna ahayn. Mid aanan rabin in la'iga kiciyo. Haddana jiifka ayaan hayn waayey. Saaxiibkayga labaad ayaan dhankiisa u cararay, qalinka. Buugga ayaan dul qabtay. Dareenka dhexdayda sida mowjadda badda laabtayda u ciyaarsiinaya ayaan rabaa in aan xaashida ku xardho oo aan bannaanka u soo saaro. Waxa aan damcay in aan warqad isaga u qoro. Sidan ayaan ku bilaabay:

"Waxa mahad leh Ilaahay, Ilaahay oo adiga iyo aniga inna kulmiyay. Maanta waxa aan xaqiiqsaday in tahriibkayguba aanu ahayn mid aan dhoof ku helayey, balse uu ahaa mid aan adiga kugu helayey. Qiimaha aad ii taagan tahay ayaa halkaa ka muuqda. Dartaa ayaan u dhiman gaadhay. Naftayda ayaan ku siisan gaadhay. Haddii aad wiil caadi ah ahaan lahayd, aniga oo aan tahriibin ayaan kula kulmi lahaa. Balse silica dhan ee aan maray ayaa dartaa ahaa. In aan waddamo kale u tahriibo ayaan rabay, way noqon weydey. In aan magaaladayda ka tago ayaan rabay, way dhici weydey. Wixii aan haystay oo dhan ayaan ka tegay si aan u doonto wax aanan lahayn. Waan ku hungoobay. Laakiin maya. Wax aanan ogeyn ayaan helay. Wax kasta oo aan u baahnaa ayaan soo helay, goor aanan ogeyn in aan u baahnaa. Goor aanan ogeyn qiimahaaga ayaan kula kulmay. Aniga oo aan waxba haysan ayaad wax walba ii noqotay. Aniga oo daqiiqado gudahood ku dhimanaya ayaad maskaxdayda ku jirtay. Inta aan

naftaada ka fikirayay ayaa ka badnayd inta aan magacayga xasuusanayay. Maan garwaaqsanayn macnaha uu Ilaahay ka wado safarkayga. Imika marka aan dib u eego ayay ii caddaatay. Adiga ayaan ku baadigoobayay, adiga ayaan kuu socday, in aan adiga ku soo helo ayaan Hargeysa uga tegay. Qof ila socda oo safarka igu la jira ayaan raadinayay. Haddii aan sii ogaan lahaa cidhibta safarkayga, maalintii aynu magaalada ka baxaynay ayaan adiga kula hadhi lahaa. Hargeysana dhinacna u maan dhaafeen.

Waxa aan in badan jecelahay in aan kuu sheego qiimaha aad agtayda ka leedahay. Aniga oo aan jeclayn in aan ka badbadiyo ayaan aayar kuu yara tilmaamayaa halka aad iigu jirto. Cadceedda oo hoyatay, xiddigaha intooda kale oo i cidleeyey, ayaad noqotay dayaxa ii iftiimiyay kurtinka cagtayda ku aaddan si aan uga leexdo. Maalintii aan afkayga qoyaanka ka waayey, waxaad ahayd laftii timirta ahayd ee aan gowska dambe ku qabtay ee i waraabisay. Qorraxda oo korkayga cartamaysa, carrada arxanka daran ee kubkayga dhalaalinaysa, markii meel aan ka hadhsado waayey adiga ayuu ahaa qofkii hadhka iigu yeedhay ee booskiisa ii banneeyey. Markii aan ku naaxi waayey cisbitaalka, magacaaga ayuu ahaa wixii aan ku caafimaaday. Muddadii aynaan is arag waxa aan dareemayay in aanan dhammaystirnayn. Markii aan ku soo wacay, codkaaga markii aan maqlay, maxaan hoos u raxleeyey. Maxaan codka toosiyay anoo hoos u ilmaynaya. Maxaan jawaabtaada dhegaystay aniga oo aan su'aalba ku weydiin. Adiga oo aan ii dhawaaqin maxaan 'hee' ku idhi. Adiga oo aan u socon maxaan hadal kaa sugay, aamusnidaadu maxay i deeqday. Markii aad i aragtay caawa, wejigii furnaa ee aad igu qaabbishay, walow aan kaa soo habsaamay in saacad ku dhow, dhoollacadayntii aad iga la hor timid. Markii aynu fadhiisannay

sidii aad hadalka ii deeqsiinaysay, innaga oo saddex ah sidii aad keligay iigu sheekaynaysay. Marka aan damco in aan hadlo sidii aad iiga sugaysay.

Dabcan ma ogi sida aad adigu dareemayso, ma ogi in aynu meel ka wada taagan nahay xidhiidhkeennan curdinka ah, balse haddana in aanad iga fogeyn ayaan ogahay. Runtii anigu waxba kuu ma sheegi karo oo qof dumar ah ayaan ahay, in aan adiga hadal cad kaa helana ma doonayo. Siyaabbo badan oo dareenka la'isugu soo gudbiyo ayaa jirta, qaarkoodna waan kaa helay imikaba. Walow aynu muddo kooban is naqaannay haddana muddo sannaddo ka badan ayay u dhigantaa, muddo qof si fiican loogu barto is maynaan aqoon, balse xaalad qof si fiican loogu barto ayaynu isla soo marnay. Sidaa darteed ayaan diyaar kuugu ahay, waxa aan diyaar u ahay in aan ooridaada noqdo, in aad xaajigayga noqoto. Waxa aan diyaar u ahay in aan oori xalaal ah kuu noqdo, in aad hooyaday farxad darteed ka ilmaysiiso. Waxa aan rabaa in aad aabbahay soddog ka dhigto. In aad hooyaday ayeeyo ka dhigto, anna hooyo iga dhigto, adna Hanadka aad tahay halyey ayaan kuugu dari. Inta kaa dhiman ayaan kabi, inta kaa maqan ayaan buuxin, inta kugu badan ayaan dheellitiri, waan is kaa leekeysiin. Subixii inta aanad guriga ka bixin ayaan raqabadda shaadhka kuu hagaajin, kabaha ayaan kuu sii masixi, qayrkaa ayaan ku dhaafin. Waayo anigaba boqorad ayaad iga dhigi lahayd. Laakiin waxaas oo dhan imika kuu ma sheegayo, warqaddanna imika kuma tusayo. Habeenka arooskeenna, marka aan ooridaada noqdo, markaas ayaan ku tusayaa. Imika adiga ayay kuu taallaa in aad warqaddan calfato iyo in kale. Inta ka horreysa Hanadoow, wax kasta oo agtayda qiimo ka leh, adiga ayaa baro dhaafay. Wax

kasta oo dhadhan leh, adiga ayaa ku jira. Wax kasta oo aan jecelahayna, adiga ayaan kaa sii jecelahay."

Warqaddii 16-aad

Qof aad ka jeceshahay dadka kale, qof aad codkiisa danaynayso, qof aad rabto in uu kula hadlo oo uu kuu sheekeeyo, sidee ayaad ugu sheegi kartaa? In uu dayaxu xiddigaha kale ka weyn yahay sidee loogu sheegaa? Aniga oo hurda, aniga oo soo jeeda, in aan isaga ku riyoodo sideen ugu sheegaa? Hanadoow miyaad igu riyootaa? Jacaylkaygiiyoow dadka kale miyaan kaaga dhowahay? Marka aad qososho ma i xasuusataa? Marka aad i xasuusato ma qososhaa? Marka aad murugooto ma i xasuusataa? Marka aad keli dareento ma i weheshataa? Marka aad dad ku jecel la joogto ma i tebtaa? Aniga oo aan kula joogin ma ila sheekaysataa? Keligaa ma iska qososhaa? Adiga oo aan meel tegin haddana ma fooftaa? Basku ma kula dhaafaa meeshii aad ku socotay? Wakhtigu ma istaagaa? Aniga oo aan waxba ku weydiin ma ii jawaabtaa? Dadka oo aan kula hadlin ma u dhoollacaddaysaa? Iyaga oo kula hadlaya ma ka aammustaa? Anigu ma ahay sonkorta wixii qadhaadhba kuu macaanaysa? Ma ahay milixda wax kasta cunaha kuu marisa? Ma ahay ta kuu xigta? Ma ahay ta labaad iyo ta saddexaadba? Ma ahay dhammaantood oo la'isku daray? Si kale haddii aan kuugu dhigo, dadka oo dhan anigu ma kaa xigaa? Malaha su'aalahaan kugu badiyay? Iga raalli ahow huuno. Waan yara taraaraxee. Aniga haddii aad i weydiin lahayd, dhammaantood "haa" ayaan kaga jawaabi lahaa. Weliba haddaad rabto waan kuu faahfaahin lahaa mid walba. Waan kugu riyoodaa, dabcan midda soojeedka ah ayaa ka badan ta hurdada. Laakiin haa. Dhowr jeer ayaan saqda dhexe soo toosay aniga oo ku qoslaya hadal aad riyada iigu sheegtay,

markaan hareertayda kaa eegayna aan ku waayey. Imisa habeen ayaan hurdada dib ugu noqday aniga oo raba in aan riyada halkii ka sii wado, balse aan ku hungoobay. Imisaan iska qoslaa anigoo Nimco la jooga oo dhegeysanaya hadal aan lagu qoslin, amma aniga oo hooyo la daawanaya telefiishanka oo uu ka socdo Daacish oo dad biraynaysa. Imisaan sidii qof dhiman weji ballaqan bannaanada la istaagay. Marka aan qosolka dhammaysto ayaan haddana kuu sheekeeyaa, miyaad i maqashaa? U malayn maayo. Adduunka tahriib ayaan ugu necebahay, balse haddii aad maanta Yurub u dhoofto, mar labaad ayaan dhexda u xidhan lahaa saxarihii Liibiya si aan kuugu imaaddo. Waxa aad tahay furaha ii fura quful kasta oo aan leeyahay. Waxa aad tahay ganjeelka weyn ee laga galo qalbigayga. Dunidoo hurudda, habeenkoo badh tegay, mugdigoo hantiday qaaraddeena madow, dhaxantoo dul hawaarta geyigeenna dhammaan, marka aan ku xasuusto dhulkaa ii iftiima, dhaxantaa iga duusha. Aniga oo aan maalmo quud dhadhamin, adigaa i dhergiya. Caddaynteedana inaad haysato waan filayaa.

Sidii aan kuu bartay, waxaan noqday qof hadal badan. Haddii aad dadka weydiiso, waxaan noqday qof aan hadlin. Waxay ii haystaan in aan ahay qof aan hadal badnayn. Waxaanay ogeyn in aan ka mid ahay dadka adduunka ugu hadalka badan, keliya iyaga ayuun baan i maqlayn. Waa hadal aan keligey maqlayo. Waa fikir aan keligey rogrogayo. Waa hadal aan sida aan doono ka yeelayo, waa su'aalo aan jawaabahooda sii hayo. Marmar ayaan iska yaabiyaa oo aan jawaab qalad ah bixiyaa, haddana sidii aan doonayay ayaan ku soo afmeeraa. Waa duni aan anigu iska leeyahay. Alla macaanaa! Mar waan kuu sheekeeyaa, markaasaad i dhegeysataa. Haddana waad ii sheekeysaa, markaasaan ku dhegeystaa. Haddana waan kaa dhex galaa. Aniga oo fahmay

ayaan haddana ku idhaa ”maan fahmin”, markaasaad iigu celisaa. Waan jecelahay sida aad iigu samirto. Habeenkii labada habeennimo ayaan jecelahay in aan kaa xanaajiyo, hadalka ayaan kugu celceliyaa. Waxaan doonaa in aad xanaaqdo. Laakiin inta aad iga xanaaqdo waxa ka badan inta aan ku hungoobo. In qof sidan oo dhan looga fikiro in ay mamnuuc ahaato ayay ahayd. Waa xad-dhaaf. In ay dembi ahaato ayay ahayd. In ay meel-ka-dhac ku ahaato qofka laga fikirayo ayay ahayd. Laakiin markaana xuquuqdayda fikirka ee aan wax isugu geeyo ayay farogelin ku noqon lahayd. Inta uu xeer cusub kasoo baxayo amma aad iga guursanayso waan wadayaa. Wallaahi in aanan ku daynayn! Oo horto maxaan isaga dhigayaa qof wax dooran karta, waan ku qasbanahay in aan kaa fikiro. Runta ayaa fiicane wax dhib ah igu ma hayo. Waan ku raaxaystaa. Mararka qaarkood ayaan isweydiiyaa, toloow sidan aad u sawiranayso iyo sida uu yahay ma is waafaqayaan. Inta aanan su’aasha dhammayn ayaan jawaabteeda Liibiya ka doonaa. Markaasay farxad darteed indhuhu ila yaraadaan. Xabiibi laakiin waxyar oo badownimo ah ayaa kugu jirta, illeyn runtaa fiicane. Anigu gabadh ayaan ahay, waan xishoonayaa. Hadallo sarbeeb ah oo aad i tidhi ayaa jira, balse igu ma filna oo qof kugu waalatay ayaan ahay. Fadlan kordhi, fadlan maalintii dhowr jeer i soo wac. Aniguna sidii qof aan waxba ogeyn aan kuugu jawaabbo. Dabeedna aynu si wadajir ah isu jeclaanno. Sidaa ka warran?

Warqaddii 17-aad

Marka aan arko qof jacayl ka sheekeynaya, waxaan ku odhan jiray “naa waxaa ka bax oo wax faa’iido leh qabso wakhtiga ha iska lumine”. Maanta aniga ayaa u baahan in aan isla hadlo, in aan isku

idhaahdo “heblaayooy ka fiirso, qofna intaa in le’eg la ma jeclaadee”. Balse waxaad mooddaa in qaybtii sidaa i odhan lahayd uu jacayl ku dhacay. Malaha waxani jacayl ka weyn, jacayl tareen iska soo dhigay ayaa i jiidhay. Ma anigii dadka ku odhan jiray kala hubsada jacaylka iyo xiisaha ayaa maanta maankeeda uu qof kale yeeshay? Waxaan maqli jiray wadaad xadhkaha goostay cidna ma soo qaban karto, waxay illoobeen in ay ku daraan Suhuur jacayl ku dhacay. Waan fogaaday. Bad-weyn wada Hanad ah ayaan habeen madow dhex muquuranayaa mana rabo in aan ka baxo. Waxa uu noqday naf naftayda ku weyn, ka weyn oo la weyn. Waxaan is weydiiyaa markii uu iga maqnaa, intii aanan isaga baran kahor sideen u noolaa? Nolol aan ku qanacsanahay ayaan ku jiray, nolol aan moodayay in ay dheelli-tiran tahay, show anigaa is moodsiinayay. In uu jiro qof aan aniga ahayn oo ay farxaddaydu ku jirto ayaanan ogeyn markaa. Ayeeyday ayaa ku ducaysan jirtay Ilaahoow farxadda aadame kale ha naga gelin, anna aammiin ayaan mar kasta odhan jiray. Laakiin farxaddii Ilaahay Hanad ayuu iga geliyay, wax ka fiicanna garan maayo. Ilaahayoow adiga ayaa mahad iska leh in aanad iga aqbalin ducadii ayeeyday. Waan u qaadan la’ahay in aan isasoo habaarayay intaas oo sanno.

Jacaylku waa sida xanuunka oo kale, marka uu doono ayuu kugu dhacaa. Isaga oo aan ku waraysan, inaad diyaar u tahay aan hubsan, in aad iska xejin karto aan danaynayn. Sidii waran lasoo ganay ayuu laabta kaa haleelaa, gilgilashana kaaga ma go’o. Weligaaba is adkee, weligaaba jacaylka nac, weligaaba sidaydii ha aaminin. Maalinta uu ku haleelo ayuu ku tusayaa waxa uu yahay. Maalinta uu mid aanad hore u aqoon afka kuu geliyo ayaad ogaanaysaa waxa uu yahay. Nin gacan dumar ah oo bas ka laallaadda jeclaadayna waan maqli jiray, anna Hanad sii

dhimanaya ayaan jeclaaday. Haddaba laba ayuu u kala baxaa, amma qofkii ayaad heshaa amma waad weydaa. Haddii aad weydo Ilaahay ha kuu naxariisto, ma rabo in aan ka faalloodo kaa waayo waa wax Ilaahay laga magan galo. Waa xanuun dawadiisii la waayey oo sidii dadkii la yaqaannay ayaad aayar dhiman. Marka aad hesho qofkii aad dhabta u jeclaydna waa xanuun dawadiisa la helay oo waad caafimaadi. Haddaba anigu waan helay qofkaygii, isaguna uu i og yahay ayaan u malaynayaa. Laakiin kuma qanacsani weli xaaladdayada. Waa yara fulay inanku, ma saasoo dhan ayuu iiga baqayaa bisinkee. Ma khaakh baan ahay toloow. In badan waannu wada hadalnaa, hadallo badan oo intooda badan aanay meel gaadhsiisnayn ayaannu is nidhaahnaa. Waanu kala baqaynaa. Maalin dhoweyd xitaa wuxuun baan arkay annagoo ka sheekaysanayna sida laxooxda loo dubo. Subxaan! Laba fulay uun dheh. Laakiin xalay ayuu hadal kasoo dhacay. Wuxuu yidhi “ninka ku helaa nasiib leh Suhuureey”. Naanaab! Waar waa adiga yaa ku yidhaa haddaba. Anna qaybta naagnimadaa i shaqaysoo waxaan ku idhi “waayo?”. Dee in uu i ammaanaan iska rabay. Wax kasta oo wanaag ah oo qof lagu sheego oo wax lagu sii daray ayuu igu yidhi. Ammaan intii uu yaqaannay iyo in uu soo ergistayba uu isugu kay daray. Mar baan shakiyay oo aan is idhi “naa imika ma adigaa qofkan uu ka hadlayaa?”. Waan is garan waayay runtaa fiicane. Waan dhegaystay, qalbigaan rushaystay. Markii dambe ayaan u celiyay “oo walaal adiguba wax yaroo wacan baad tehee”. Haddana anigaa isku khajilay, ninkii maanta dhan i ammaanayay ayaan intaa yar u qadhiidhay. In aan u kordhiyo ayaan damcay. Carrabkayga iyo qalbigayga ayaan toos isugu xidhay, maskax wax dillaashana waan ka dheereeyey. Waan u bilaabay, sawirkiisii qalbigayga ku xardhanaa ayaan tilmaam ka bixiyay. Aniga oo iska dhigaya qof kale ayaan ku bilaabay “naagta ku heshaa waxay

odhan doontaa nin wada naxariis ah ayaan helay, nin ragga soomaalida ka duwan oo aan adadayg lahayn ayaan helay, nin ii dhiman kara haddii aannu wada tahriibno ayaan helay, nin marka aan la joogo i dareensiiya in aan boqorad ahay ayaan helay, nin marka aan la hadlayo i dhegeysta ayaan helay, nin rabitaankayga fuliya isaga oo aan kiisa waraysan ayaan helay. Hanad waa god macdani ka buuxdo, kolba inta aad qoddo ayaad sii nimcaysanaysaa. Maaha qof laga dhergo, maaha qof la'iska dheereeyo, waa qof la wada jeclaan doono oo anaa huba laakiin waxa nasiib leh naagta uu isagu jeclaado.." Halkaa markii aan marinayo ayaan hakaday, naqas ka badan kii ku jiray qolkii aan dhex jiifay ayaan damcay in aan mar keliya sambabbada ka buuxsho. Candhuuf aad u weyna markaan liqayay dhawaaqeedii ayaa hooyo kicin gaadhay. Waannu kala aammusnay mar keliya, aammusni aannu isku weydaarsanayno weedho aan la maqlayn oo ay ka mid yihiin "maxaynu isu fogeyneynaaa? Innagaa is jecel, anigaa ku jecel, adigaa I jecel, qofka ku ammaanaysaa waa aniga" isaguna hoos ayuu kolley ii lahaa "Suhuureey Ilaahay ninkaa nasiibka leh ee ku hela aniga ha iga dhigo". Markii aannu muddo kala aammusnayn ayaan ku idhi "walaal Hanadoow hooyaa ii yeedhaysee habeen wacane iska seexo". Waa hooyo beri hore seexatay. Bustihii aan huwanaa ayaan meel isugu keenay si aan laabta u gashado. Dee ma Hanad buu ii noqon.

Hanad ayaa noqday meesha ay noloshaydu ka bilaabanto kuna dhammaato, isaga ayaa noqday ka aan niyada ku hayo markaan sii seexanayo habeenkii iyo ka ugu horreeya ee aan xasuusto marka aan soo tooso. Habeenkii oo ay hurdadaydu ka kooban tahay toban saacadood, shan ka mid ahi waxay igu dhaafaan riyo soojeed ah, shanta kale aniga oo isaga la jooga uun

baan ku riyoodaa. Aniga oo shan carruur ah u dhalayna waan ku riyooday, markaan soo toosayna keligay ayaan sariirtii ka kacay. Alla ciil weynaa! Weli riyo aad ka toostay dib ma u raadisay adigoo indho is diidaya qasab isugu keenaya? Weli riyadu runtaada ma ka wacnaatay? Weli isaga oo aan kula joogin ma u yeedhay oo codku ma kaa dheeraaday oo ma lagu yidhi “naa yaad la hadlaysaa?” Weli intaad hadal uu ku yidhi soo xasuusato ma iska dhoolla-caddaysay? Weli inta aad saacad la hadlaysay markii dambena “nabadgelyo” inaad tidhaahdo ma kugu adkaatay? Hadda maanta dhan ayaad la hadlaysay. Aabbo ayaa i weydiiyay in ay riyooyinkii xumaa iga yaraadeen imika, waxaan u sheegay in aanay xabbadi igu hadhin oo aan dawooyinkiina joojiyayba. In ay riyooyin kale beddeleen ma oga, in inantiisii caafimaadkeeda uu Hanad qayb laxaadle ka qaatay ma oga, waxba ma oga. In habeen oo dhan aan guuxo yaa u sheega. In sidaan u qoslayo aan gam’o yaa u sheega. Maalin kasta waxaan u mahadceliyaa kii telefoonka sameeyay, waayo telefoon la’aantii waraaqo ayaannu dhagaxaanta isu hoos dhigi lahayn.

Adduunyo aan leeyahay ayaan dhisaa, isaga ayaan dhex dhigaa markaasuu roobku ii da’aa oo adhigu ii dhalaa, si kaftan ah ayaan uga dhex saaraa markaasay abaartii Dabadheer igu habsataa, degdeg ayaan ugu soo celiyaa haddana. Noloshayda ayaan sidaa u eegaa, mustaqbalkayga dhan magiciisa ayaa ka buuxa, magiciisa ayaan ka saaraa markaasaan mustaqbalka dhanba waayaa. Carruurta aan dhali doono oo dhan ayuu magiciisu magacooda labeeyaa, Muxumed iyo wax aan loo joogin ayaan ku beddelaa markaasay carruurtu foolxumaadaan. Waxa uu gaadhay heer aanan weligayna u oggolaadeen in uu gaadho. Waa qof marka aan muddo codkiisa maqli waayo aan dhego beelo,

marka isaga oo tukanaya aan farriin aan u diray uu kasoo jawaabi waayo aan werwero, naa ma anigaa dhalay?! Noloshayda dhan ayuu maammulkeeda la wareegay, wuxuu haystaa furayaasha dareen kasta oo aan dareemi karo. Haddii aan gaadhi ahay, isaguna waa wadihii. Waa hagehayga. Waa isaga ka aan dhibka ku illoobo, waa isaga ka aan farxadda ku dheeraysto. Waa isaga ka iyada oo aan cirku daruur lahayn haddana ii hoora. Waa isaga ka caloosha oo i madhan haddana i dhergiya. Waa isaga ka baahi kasta oo aan leeyahay codkiisa ku daboola. Waa isaga ka jiritaankiisa oo keliya igu qanciya ee aan u baahnayn in wax kaleba sameeyo. Ilaahay anigana ha iga dhigo ta dunidiisa u dhammaystirta.

Warqaddii 18-aad

Markii uu waagu baryay ayaan garanayay in ay maalintu noqon doonto mid ka duwan maalmaha kale. Jewiga guud, midka roobban, neecawda sida qabow loo soo afuufayo ee dadka laabahooda xasilisay, dadka ayaan ula sinnaa. Middayda gaar ahaaneed ayaa ii dheerayd, Hanad ayaan dadka dheeraa, hadalka uu maanta i odhan doonaana hadalladii hore ayuu wax dheeraa. Aniga oo moodayey in dareen kasta oo macaan aan hore u soo qaatay ayaan maanta si kale dareemay. Si aan si ahayn, balse ka wanaagsan, ka calool-gariir badan. “Suhuureey haddii uu inan ku jeclaado maxaad samayn lahayd maanta?” ayuu si yar iigu kediyay. Xariif iyo badh, naa waxa yari ma Suhuur baa? Anba sidaasaan u dhigi lahaa haddaan nin ahaan lahaa. Naa wallaahi waxna uma dhigeene naag kasta waan ku hurgufi lahaa. Faraha-laga-qaad ayaan noqon lahaa kolley, kolba mid habeen been u sheega. Bisinka, naa wax muslinaan ahaan lahaa. Aynu Hanad ku soo

noqonnee, markii uu intaa i weydiiyey ayaa la'igu duulay, waxa soo socda ayaan ogahay illeyne. Wax yar ayaan aammusnaa, hadalku aniga ayuu i taagnaa. Jawaabta aan bixiyo ayuu hadalkiisu ku xidhnaa. Haddaan "bisinka, waar jacaylku waa maxay?" ugu jawaabbo, waxa hubaal ah in uu la noqon doono waxa uu ii soo wado. Karis xun iyana wax ku la' ayuun baan maqli jiray, imikaan fahmayaa macnaheeda. Waxaa qasab noqotay in aan anigu goglo madasha uu fadhiisan doono, in aan anigu goolka uga dhaqaaqo si uu kubadda u dhaliyo. Ilaahay waa i baray, "alla walaal dee jacaylku ma dembi baa? Dee waan soo dhoweyn lahaa" ayaan si qabow u idhi. Imika isaga ayay kubaddu dhankiisa taallaa, haddii uu dhalin waayo waaba khasaare. Wax la jeclaadaba maaha, mayee wax la jeclaado uu yahee laakiin waan ka xumaan lahaa. Doqon maaha, wallee nacas maaha, ma garaad la'a, sidii uu u soo sallaxdayna way ugu dhacday oo jawaab uu sugayay ayaan siiyey. Wuu ku dhuftay, walow aan diyaar u ahaa waxa uu soo wado haddana odhaah guriga igu dumisay ayuu iska soo jaray. "Ka warran hadduu inankaasi aniga yahay?". Weli candhuufi ma kugu istaagtay oo caloosha ma iska dhex weydey? dhegahaa i awdmay, guux ayay bilaabeen illaa aan afka aad u kala qaadana wax waan maqli waayey. Wuu iga gashaday, waxaan xasuustaa sidii aan u taagnaa markii uu hadalkaasi i soo gaadhayay, lugtayda midig ayaa jidhkayga dhan haysay halka lugta bidixna ay dhulka si dabacsan u dul taallay, gacantayda midig ayaa dhabankayga ku cadaadinaysay teleefan aan adduunka ugu jeclaa maalmahan xagga ay gacantayda bidixna ciddiyaheeda ku aammintay ilkahayga oo kolba mid si dabacsan u qaniinaya. Indhaha oo in ay iska furan yihiin mooyaane waxba aan arkayn ayaa daaqadda dhinaca aan ka taaganahay dhinaceeda kale gidaar soo yaalla ku dheygagsan. Taagnida ayaan hayn waayey, sariirta oo dhabarkayga

ahayd ayaan degdeg ugu fadhiistay. Aniga oo fahmay hadalka uu igu yidhi, aniga oo gartay ujeeddadiisa iyo dareenka uu ii soo gudbiyay ayay haddana naftu i tidhi “iska hubso”. “Haye?” ayaan si weydiin ah ugu celiyey aniga oo ka raba in uu iigu dhaarto. Waxaan dareemi karaa in ay weedhaydaasi isaga ku noqotay culays saa’id ah, balse waxba iga ma gelin, waa in uu iigu celiyo wixii uu yidhi. “Inankaasi haddii uu aniga yahay ka warran?” ayuu cod gariiraya igu soo gaadhsiiyay. Markii aannu saxaraha Liibiya sii dhimanaynayba sidan u muu baqayn miskiinku. Ma anaa gaajadii iyo harraadkii kaga xun? Sidaasay u eeg tahay. Weedhaa labaad markii ay i soo gaadhay ayaan gariir bilaabay, gacmuhu dhaqdhaqaaq aan jiho lahayn bilaabeen, wadnuhu uu laabtayda gilgilay, naqasku marna uu iga soo baxaa marna uu iska nastaa oo ma ba soo baxo. Aniga oo fadhiya ayaan hiinfaadhayaa, xitaa beri uu ey i eryaday sidan u maan xiiqin. Oo dadka filimaantu sowkuwa “ay loof yuu” uun aayar iska yidhaahda. Anigu toloow ma badawad baan ahay haddaba? Sowniga dawakhay, mise wax filin ka weyn ayaa igu dhacay toloow? Waan suuxi gaadhayba, inankiina waan illoobay in aan u jawaabbo, maxaan ku odhan? Ma hadal baan waayayaa, “dee walaal waan ku soo dhoweyn lahaa Hanadoow” ayaa iga soo go’day. Alla af-adakiyaa! Degdeg ayaan u soo afjaray hadalkii waanan fasaxay. Waayo hadal noocaas ah dabadii waxba la’isma odhan karo. Waa halkii u dambeysay, waa in aan soo gaggab gooyo. Waan in soo kala miiro oo aan dhowr jeerna soo haadiyo. Waa in aan boqol jeer in ka badan ku cel-ceshadaa. Tilifoonkii inta aan laabta ku qabtay ayaan sidii ilmo yar is laabay anigoo barkinta madaxan iga culusaaday ku wadhaya. Inanku muxuu i yidhi? Keligey marka aan ahay, waxaan hoos isugu sheegayaa in aan helay sidii aan rabay oo aan guulaystay. Haddii la’i weheliyana waxaan ahay naagta u yeeshay sidii uu

isagu rabay ee ka oggolaatay arrin uu isagu u la yimid. Oo haddaa ma “waar bagaad igaga horreysee waa ban kuu soo socday” ayaan odhan lahaa. Wallay ka tahay, isagaa ii la yimid anna inantaa ka aqbashay ayuun baan ahay. Haddii uu hadhow ogaado marka aannu fara badanno, anigu ma sheegin. Galabtaa illaa habeenkii oo dhan sidii aan u jiifay iska maan rogin, buste xitaa ma huwan. Haddii aan dhaqaaqo wax baa iga lumaya ayaan aamminsanaa. “Naa hooyo Suhuureey!” ayaan ku war helay. Show hawlihii aan fiidka qaban jirayba waan ka mashquulay. Aniga oo sidii beel col galay kor u boodaya ayaan la kulmay madaxa hooyo ee sida bilaa jabaqda ah iiga soo qooraansanaya albaabka iyo gidaarka dhexdooda. “Naa hooyo maxaa ku helay?” ayay ii raacisay markii aan dhulka si qumaati ah u istaagay. “Yaa baas ee ku dilay?”. Intii aanan su’aasha uga jawaabin ayaan arkay indhaheeda oo ku maqan tilifoonka gacantayda ku xabagaysan. “Yaad saacaddan la hadlaysay, hooyo?”. Hadal meesha sii kharribay oo aan sii-jeedkiisa iyo soo-jeedkiisa la kala garanayn ayaan isku rakibay markaasaan dhegaheeda ku qasbay in ay maqlaan. Intii aanan odhan hadalkaa ayaan sii ogaa in aanu faa’iido lahayn, dabcan sidii ayay u dhacday oo muu noqon mid iyada qanciya oo macno sameeya. Hooyaday waa qof wax fahmaysa, weligeyba saaxiibadday ayay ahayd. Gacanta ayay aayar i qabatay, dhankii sariirta ayay ii la kacday. Way i fadhiisisay, hadal iga nixiyay ayay si qabow ii weydiisay. “Yaa kaa oohiyay, hooyo?” ayay cod kalgacayl ku jiro ii weydiisay. Madaxayga ayaan kor u qaaday, indhaheeda ayaan kuwayga aadka u qoyan la doontay, dhabannada ayaan aayar kala jiiday, cod aan iyada dhaafayn ayaan ugu celiyey “hooyo, hooyo, caawa waan faraxsanahay”

Warqaddii 19-aad

“Hooyo, waan faraxsanahay” ayuu ahaa hadalkii aan ku idhi. Wax kale u maan raacin, wax kale i may weydiin. In ay wax kasta fahantay, waa sidaan u gartay. Sidii ayaan ahaa. Farxaddii ayaan dhex dabbaalanayay. Wixii aan doonayay iyo wixii uu isagu doonayay ayaa hal mid noqday. Baabuurka uu saaran yahay iyo midka aan saaranahay ayaa hal jiho u wada socda. Imika u ma baahni in aan hadalka ka la gabbado amma aan hadalka u sarbeebo. Isagana wadno-xanuunkii ayaa ka joogsaday. Dad is oggol ayaannu noqonnay. Haddii uu xidhiidhkayagu ahaa mid, imika waa laba. Haddii uu laba ahaana, imika waa afar. Waannu kordhinnay, mar kasta waannu wada hadalnaa. Xidhiidhka aan isaga la xidhiidhayo ayaa la mid noqday hawada aan neefsanayo. Waa shay aan mar walba fulinayo oo aan hawlaha kale ku dhex wado. Gacantayda ayaa noqotay mid lagu xabkeeyay dhabankayga. Doqonniimadayda maan garan xadhko soo iibso aad dhegaha gashato. Miyaan haleelayaa Hanad baan la hadlayaaye. Markii dambe ayaan dhako keenay. Masarka iyo dhabanka dhexdooda ayaan gashaday telefoonkii. Gacmihii way ii nasteen, afkiina mid marna qoslaya marna duryamaya ayuu noqday. Qof aad saacad wada hadlaysaan waad ka la boganaysaan, qof aad shan saacadood wada hadlaysaan ka warran? Wax aannaan ka wada hadal ma laha. Cirka, dhulka iyo inta u dhaxaysaba waannu is la soo qaadnay.

Qof qolka uun ka dhex sheekaynaysa ayaan noqday, wax kasta oo kale waan nacay. Wax kasta oo aan codkiisa ahayn. Illaa warqadihii aan qori jiray ayaan illoobay. Subixii marka aan soo kaco, qofka ugu horreeya ee aan salaamaa waa isaga, habeenkiina waa qofka u dambeeya. Wuu i seexiyaa sidii ilmo sebi ah. Marka aan seexdana farriin ayuu ii soo diraa si marka aan tooso u

akhristo. Waxa yari waa daadax. Waxaan is weydiiyaa, toloow dadka waaweyn ee is qabaa maxay sidan oo kale u dareemi waayeen? Waxani ma wax dhammaanayaa? Qayb maskaxdayda ka mid ah oo aan beenta sheegin ayaa “haa” iigu jawaabaysa. Haddii ay sidaa tahay, waan ka soo go’ayaa inta aanu dhammaan. Waxba kaga ma tegayo. Dareen kan ka macaanba ma anaa arkay! Illaa inta uu ka dhammaanayo waan jaqayaa sida iskiriinka. Laakiin sidan lagu ma jiri karo illaa weligaa, sidan uun “macaanoow”-da la ma hayn karo. Waa in tallaabada xigta loo gudbaa. Dee waa in uu i soo doonaa! Naayaadeheen! Ma hadal uun baan illaa aakhiro ku jirayaa haddaa? Illaa hooyaday ayaa iga yaabtay oo si dadban ii xasuusinaysa in hablaha la soo doono. Intaan qoslo ayuun baan sidii wax aan fahmin is ka dhaafaa. Xabiibi Hanadoow, aroorta marka aad soo toostana waan kugu gujin doonaaye, dee qaaliyoow i soo doon. Intaad adeerradaa soo kaxaysato, suudh madowna xidhato, kaabaddii Maansoorna istaag dhowr sawir oo aad qoslaysana ha lagaa qaado, sawirkaaga iyo kaygana inta la'isku dhejiyo dadku Faysbuugga ha wadwadaan, dee anna aroos waxba ku fali maayee i kaxayso. Miyaan khaldanahay xabiibi? Mise waan degdegayaa toloow? Mayee waxoogaa degdeg ah ayaa kolley igu jira. Walow aad imika uun shaqo heshay haddana kolley waxaad rabtaa in aad yara dhiigaysato. Huuno ragga qaar iyagoon shaqaba haynin ayay is maqiiqaane maad adna iska timaadid! Kolley anigaad ii shaqaynaysaaye sii yara wad laakiin. Aad u shaqee xabiibi. Way fiican tahay in aad xooggaaga ku xisaabtamayso oo aanad aabbahaa wax ka sugayn. Adna yara shaqee, anna aan dulqaato. Inta ka horreysana tilifoonka ayaan weheshan. Alla cimri dheeraa, sowka i soo wacay...

Warqaddii 20-aad

Erey kale ma jiraa? Ereyga “farxaddu” igu ma filna. Farxad waxa la yidhaa marka aad imtixaan iskuulka ah baasto, marka cunto aad jeceshahay hooyadaa kuu kariso, marka musalsal aad daawanaysay laba qaybood laguu xidhiidhiyo, marka shaah barraad ah caano riyaad laguugu daro. Haddaba marka uu Hanad ku soo doonayo waxa la dareemo maxaa la yidhaa? Marka yarkii aad jeclayd uu isna ku jeclaado, marka aad waalidkaaga barto ee ay ka helaan, marka ay odayaashu ballamaan ee Arbacada lagu soo doonayo sidee la dareemaa? Haa, sidaa la dareemo magaceed? Farxad maaha, waa farxadda hooyadeed, “marxad” ma ugu yeedhaa toloow? Caawa aniga ayaa dadka ugu sarreeya! Madaxaygu dayaxa ayuu la yaallaa, qalbigayguna daruuraha ayuu kii Hanad ku la caweynayaa. Nasiibkaygu wacanaa! Cawo-dhalad ayaan ahay. Qofkii aan adduunka u jeclaa ayaan helay, aan helo ma xuma ee waalidka ayaan baray. Barasho kale maaha ee markii ay odayaashu aabbo u imanayeen ayuu soo raacay. Horto hooyo way ansixisay markiiba. “Waa wax yaroo wada akhlaaq ah” ayay igu tidhi. Aabbo ayaa isagu hadal yar ka keenay. “Inanku wuu sii bakhtiyayaa” ayuu igu yidhi. Intaan qoslay! Sow nin tahriibay maaha dee, alla aabbahay miskiinsanaa. Hadduu dhaqdhaqaaqayo oo uu guur u socdo waabu ladan yahay, qayrkii way dhinteene. Waxaan ugu jawaabay “anaa calool ka soo saariye i sug aan cidlo ka helee, hadduu laba can oo buurbuuran iyo waxoogaa dabo ah soo tuuri waayo Suhuurba la’ima yidhaahdo”. Dabcan hoos baan u idhi.

Waxaan xasuustaa ciyaalnimadii marka ay ciiddu berri oo kale tahay, waxaad dhibsanaysaa saacadaha ka hadhay, waxaan odhan jiray haddaan hore u seexdo ciidda deg-deg ayaan u gaadhayaa. Imika sidii ayaan ahay. Afar maalmood ayaan rabaa in

aan hurdo isku dhaafiyo, waan sugi kari la' ahay. Markii hore waxaan odhan jiray "Hanadoow i guurso", imika waxaan leeyahay "Hanadoow degdeg ii guurso". Hoogay, waaba la'ila yaabi. "Oo maxaad ku degdegaysaa dee iska sug ceeb weeyaan inaad sidan u sii hadal-haysaaye" ayay aayar iska tidhi islaan yaroo aan laba dirac ka tolanayay maanta. Hanad ayaan helin dee, sidaa may tidhaahdeene. "Annagu waxaa waannu ka xishoon jirnay" ayay sii raacisay. "Dee waa lagu siiyaye miyaad soo dooratay" ayaan u celiyey intaan xanaaqay. Ma islaan lixdanka kor u dhaaftay ayaad ka gar helaysaa, hadal aan dhammaanayn ayay dabada ka gashay. Haddii la'i weydiiyo imika wixii ay lahayd, wallay iga tahay ma xasuusto. Hanadka ay leedahay jooji hadal-hayntiisa ayaan ka fikirayay. Laba adduunyo ayaannu ka la joognaa. Qarni badhkii oo da' ah iyo dhowr qarni oo waayo-aragnimo ah ayay iga horreysaa. Anna waxaan ahay mid imika uu madaxa la kacday oo aqoon iyo cilmi is bidaysa, waa suurtogal in ay waxyaabbo badan igaga saxsan tahay, balse waayo-aragnimo la'iiga sheekeeyo ma rabo. Mid aan anigu shaqaysto ayaan rabaa. Ceel ay saaka u kallahday ayay galabta ii sheegaysaa in ay biyihiisu adkaayeen, aan soo arko, aan waadaanta dhowr jeer ku dhaadhiciyo, aan xayaabada iska afuufo dabeedna sacabbada ku cabbo. Markaa ayaan ku soo gaadhayaa. Sidaas ayaan rabaa in aan nolosha u dhadhamiyo. Buug qoran ma rabo in aan raaco, waad iiga sheekayn kartaa wixii ku soo maray balse dariiq aad tunka ku sidato aniga ha ii wadhin. Sidee ayaad gabadh yar oo imika la guursanayo ugu odhan kartaa "raggu naxariis kuu ma hayaan"? "Raggu waa cadow"? Sidee ayaad Hanadkayga uga dhigi kartaa kii konton sanno kahor ku xumeeyey? Cadho uu nacas kusoo gaadhsiiyey sideed habaaskeeda iigu afuufi kartaa? Culays ay kuwii kaa horreeyey heeryo kaaga dhigeen in aad maanta anna seeto iiga dhigto anaa diiday. Ragga

iyo dumarkaba qaar xun waa laga helayaa. Maaha in aniga oo maanta ku faraxsan in aan jacaylkaygii la aqal-gelayo la'iga ciideeyo farxadda. Islaan kasta oo kula kulantaa waxay kuu sheegaysaa belaayo. Naa haddaba ma dagaal baan gelayaa? Miyaanan u tegayn kii aannu farxad wadaagi lahayn? Waa maxay waxan oo digniin iyo difaac ahi? Habaryartay ayaaba ugu daran, kuye "weligaa ina-rag ha aamminin". Horto dee waa la la guursaday iyada oo hadalku halkaa ayuu ka immanayaaye, laakiin in ay aniga igu afuufto miyay tahay? Haddii islaan waliba inanta guursanaysa ay ku tidhaahdo "ragga ha aamminin", oday kastaana uu inanka guursanaya ku soo yidhaahdo "dumarku waa carruur cag weyn" sidee loo heshiinayaa? Miyaanay iyagu burburkiiba soo dhoweyn markaa? Dabcan waa dood aan dhammaad lahayn, anna ka bixi maayo haddaan bilaabbo ee waxaan leeyahay islaamaha aniga igu nafisaya: camal kale oo aan Suhuur ahayn samaysta. Habaryar haddii lagu la guursaday waa yeelkadaa, islaantiiyeey haddii uu hebel ku xumeeyey waa nasiibkaa, anna in aan Hanad helay waa cawaday.

Warqaddii 21-aad

Naa haddaba ma disdi baan ahay, sowta la'i facsay. Labadii usbuuc ee u dambeeyeyba aniga ayaa noqday mid lagu mashquulo. Huruud in aan wejiga marsado ayaan ka bilaabay, qasil ayaa xigay, labada oo la'isku daray ayaan imikana marsanahay. Inanku miyaanu inankii aannu is naqaannay ahayn? Ma isagii ayaan isu qurxinayaa? Naa maxaa ka fiican in Hanad la'isu qurxiyo? Anigaaba nasiib leh! Maanta ayaa xinne la'ii saaray. Inkastoo ay dadku leeyihiin uu qurux badan yahay, haddana anigu ka maan helin. Uu yara far waaweyn yahay. Ka farta yaryar ayaan

jecelahay. Laakiin dee waxaan u marsaday si kaalay arag ah. Gacanta oo dhan illaa halka ay garabka ka gasho ayaan xinnaystay. Markaasaan laabtana laba baal oo shimbirood wax u eeg la'iigu sawiray. Kubka wax badan ku maan samayn isaga, kuraanta korkeeda ayuu ka bilaabmaa liid dheer oo aan laba farood ka ballaadhnayn oo illaa jilibka agtiisa ka soo noqda.

Timaha ayaa iyaga oo duuduuban masarka hoostiisa fadhfadhiya. Weligey sidan u maan farxin! Berri ayaa la'i guursanayaa. Berri ayuu Hanad i guursanayaa, bal ka warran? Cajiibatul qudra, nin walowba Allahaaga sug! Waa naagtaydii dhowr bilood kahor geerida ku sii socotay. Maantana yarkii aan adduunka dhan u jeclaa ayaan helay oo berri i mehersanaya. Aroos iyo waxyaabbo noocaas ah ma rabo, waan iska daayey. Marka berri meherku dhaco isla habeennimadana waa la'i hoynayaa si maalinta xigtana duco loo sameeyo. Sidaas ayaan reer ku yeeshay. Ilaahayoow cabsi weynaa laakiin. Waan baqayaa. Farxadda iyo cabsida i haysa ayaa is le'eg. Haddii la'i weydiiyo ma garanayo waxa aan ka baqayo. Ma in aan hooyaday ka tegayo, ma in aan nin aan jecelahay la degayo mise in aan masuuliyadda i sugaysa ka sii baqayo. Intaasiba waa suurtogal. Aniga oo sidaa uu baqaya ayaan haddana xasuustaa sidii aan u rabay waxan aan helay. Markaas ayaan aad u farxaa haddana. Geed saxaraha engegan oogadiisa aan iniintiisa ka dul taagay ayaa si la ma filaan ah u biqlay oo aan midhihiisa berri guranayaa. Beeyo aan sacabbada ku qotay ayaa soo maaxatay oo maanta biyo keentay. Gu' aan xilligiisii la gaadhin ayaa ii curtay. Nimcada in aan weelaysto, aniga ayay ila gudboon tahay. Waa midda aan ku hawlanahay imika.

Waa nolol cusub, kadin iga awdnaa ayaan oodda ka gurayaa berri. Marka aan irriddaas galo, ma rajaynayo in aan dib uga soo baxo. Boqortooyo aan leeyahay ayaan rabaa in aan alkumo. Isaga ayaa boqor ka noqonaya, boqor fuliya qodobbo aan soo ansixiyay. Qolof aan ku dhex jiro. Bisinka, kaftanku reebban. Dhigaha aqalka hadduu noqdo, udub-dhexaadka ayaan noqon. Kebedda haddii aan noqdona, isaga ayaa xeerkayga noqon. Daadka ayaan reerka ka moosi doonaa, dhaxanta ayaan isaga ka jiri doonaa. Agtayda ku gaajoon maayo isagu. Rag ayaan dhaafin, inta uu yahay ayaan wax ugu dari. Marka uu socdo, tukubo ayaan u noqon, haddii uu ciirana, tiirkiisu waa ani. Waxa aan oggolahay in aan noqdo geenyo uu xakamaheeda hayo. Waan ogahay in aanu igu giijin doonin. Duni aan gaar u leeyahay ayaan samaysan doonaa, mid aan la'iiga wakiil ahayn. Mid aanay islaan rag necebi fikir ku darsan. Mid aan oday dumar yasaa erey ka dhiiban. Mid aanay bulshadu majaraheeda habaabin. Mid aniga iga bilaabanta, Hanadna ku dhammaata. Inta u dhaxaysana ay buuxiyaan ubad ku abtirsada Hanad. Waa ilma Hanad, carruurtii Suhuur. Naa wuxu wanaagsanaa! Balse intaas oo dhan waxa aan samayn doonaa marka aan afadiisa noqdo, imika se waxa aan sugayaa saacadaha ka hadhay inta ay taasi dhacayso. Muddo badan waan soo sugay, in sannado u dhiganta waan soo sabray. Waxa aad mooddaa in saacadaha hadhay ay igaga badan yihiin wixii i soo maray. Ma sugi karo. Markii aan saacad kahor la hadlayay ayuu ii sheegay, isaguna wuu raagsanayaa. Wacanaa in rabitaankaagu waafaqo qofkaaga rabitaankiisa.

Su'aal aan ku qoslay ayuu i weydiiyey, kuye "meherkaagu waa imisa?". Waan qoslay, waayo waan illoobayba in aan anigu dooranayo. Haddana markii aan arkay in uu jawaab iga sugayo

ayaan qosolkii joojiyay. Bal maxaan ku idhaa? Toloow intii tahriibka iga gashay ma ka soo saaraa? Mise sidii islaantii ila talinaysay ayaan sahayda badsadaa. ”Naa sahayda ha isku yarayn” ayay igu tidhi. Cajiib, waan fajacay. Meel aan rabo in aan dego ayaan u socdaa, maaha in aan u socdo meel aan ka tegi doono. Cirka iyo dhulka ayaannu ka la joognaa aniga iyo islaantaasi. Intii aanan u jawaabin ayaa Nimco oo halkan timaha ii furfuraysay ay ku wada tuftay. Intii aan islaanta ku odhan lahaa iyo in ka badanba way u hagoogtay. Haddii aan ereyo asturan u gudbin lahaa, iyadu weedho qaawan ayay ku dhufatay. ”Xabiibi waxba ma doonayo” ayaan ku idhi Hanad. ”Ma bilaa meher ayaan ku mehersadaa?” ayuu lasoo booday. Naa ka yari malaha adeerradii ayuu kiilooyo lacag ah kasoo qaaday dee illeyn waa kan waalwaalanayee. Hanadku waa kii aan aqaannoo wax uu meher gashaanti maanta joogta ku bixiyo muu hayne. Hooyo oo hore ii weydiisay su’aashanna waan uga jawaabi kari waayey. Runtii u ma arko wax muhiim ah anigu. Walow ay xaqayga tahay, haddana haddii aad hesho qofkii aad wax kasta ka jeclayd, maxaad wax kale ku falaysaa? Miyaanu isagu kugu filnayn? Qasab ayuu igaga dhigay in aan wax uun sheegto. Dahab ayuu sugayay malaha in aan ku idhaa, ”in aanad weligaa i furayn” ayaan ku idhi. Isaga oo aan fahmin ayuu ”maxay?” ii celiyey. Xabiibi meherkaygu waa in aanad weligaa i furin, ayaan si qabow ugu celiyey. Qosol dheer ayuu ku dhuftay. Weli isaga oo sidaa u qoslaya laba goor ayaan arkay, caawa iyo habeen aannu dhammaan ku sheekaysanaynay Khartuum. ”Quruxeey taas aniga ayaaba bilaash kugu siinayee meherka ha iska khasaarin ee wax kale sheego” ayuu iigu jawaabay. Allow daa Hanad! Markii dambe ayaan u sheegay wax ili qabato gacanna gaadhin. Sidaas ayuu ku hurdo tegay. Anna waa in aan imika hurdo tago. Aroorta haddii Alle yidhaa ayaan soo toosi

doonaa iyada oo ay tahay maalintaydii. Indhaha ayaan imika isku qaban doonaa aniga oo og in ay caawa tahay habeenkii u dambeeyey ee aan keligay seexdo. Berri ayaan indhaha kala furi doonaa aniga oo og in aanan maalin dambe soo kacayn aniga oo aan wejiga Hanad ka dhigan shayga u horreeya ee aan subixii daawado. Gashaantinimadii ayaan caawa ka baxayaa, aroosad gurigeeda tagtay ayaan noqon doonaa. Marwo Hanadkeeda dhammaystirta ayaan noqon doonaa. Muddo ayaan soo gudbinayay waayaha noloshayda. Warqaddan haddii aa ka dhigi lahaa middii u dambeysay, waxay ka dhignaan lahayd ramadaan 15 maalmood oo keliya la soomay. Ma dhammaystirna. Ilaahay guurka naxariis ayuu ku sheegay, naxariistaasi sida ay dhadhamayso ayaan warqaddan midda xigta kaga soo warrami doonaa, waa intii aan awoodo dabcan. Wax walba ka sheekayn maayo illeyne. Waa caruusadda Suhuur oo berri la guursanayo oo idin leh nooli kulantee.

Warqaddii 22-aad

Sariirta aan is idhi afar qof ayaa loogu talo galay ee afarta rukun dhulka ku aasatay ayaan dusheeda beerka u jiifaa. Madaxayga iyo madaxa sariirta ayaa sii kala jeeda. Wax dhaqaaqaya waxa qolka igu wehelisa laydha qabow ee bacadka barqada Hargeysa ka soo ordaysa si ay marada korkayga sida waafiga ah u dul saaran ugu ciyaarto. Cagtayda bidix ayaa si kalsooni ku jirto ugu dul nasanaysa dhiggeeda midig iyaga oo si wadajir ah cidhbaha cirka ugu aaddinaya. Dhanka hore ee midigtayda waxa ku beegan albaabkii qolka oo hoosta aan ka xidhay. Soo-jeedka waxa iiga muuqda wejigayga niyad-samida la soo toosay wax aan laba saacadood gaadhayn kahor ee ay

muraayadda weyni i tusayso. Timahayga dhaqaaqooda yar ee ay samaynayaan ayaa la jaan-qaadaya xarakaadka mawjadda oo kale ah ee uu samaynayo daaha ay laydhu ciyaarsiinayso ee iiga muuqda muraayadda dhexdeeda balse ku aaddan garabkayga bidix. Waa markii u horreysay ee aan haleelo buuggan uu xaashiyiisa inta badan khadku qariyay. Buug waayahaygu muuqaalkiisa beddelay. Maalintii aan qorista bilaabay, su'aalaha aan hayo ayaa ka badnaa jawaabaha aan heli karo. Maanta, jawaabaha ayaa badan. Gacanta bidix ee aadka u xardhan oo gadhkayga sida udubka kor ugu haysa ayaan hoos u dhigay si ay buugga baalkiisa bidix dhanka sare qabato. Indhaha oo muraayadda ku maqnaa ayaan hoos u dhigay si ay u arkaan xaashi cad balse goor dhow madoobaan doonta. Gacanta midig oo qalinka si dabacsan u haysay ayaa garatay in ay tahay xilligii shaqada. Su'aashii u horreysey ee aan qoray ayaa noqotay guuroow xaggeed ku maqnayd? Guuroow dhuumaalaysi ayaad ila ciyaaraysay, waayo? Ma adiga oo nool ayaan tahriibayay? Ma aniga oo aan ku dhadhamin ayaan dhiman rabay? Ceelkaaga "Malable" aniga oo aan qaaddadayda darin ayaan carraabayay? Haddii aanan weligay hore kuu mashkaxin, sideen u ogaan karaa macaankaaga? In aad ii sheegto ayay ahayd, in aad is kay barto ayay ahayd; "magacaygu waa guur, naxariis socota ayaan ahay, haddii aad habeen i la caweyso, tahriibi maysid". Intaas ayay ahayd in aad i tidhaahdo, mar labaad ayaan fikiri lahaa markaa. Dabcan waan fahmayaa in aanad rabin in aad dadka daba cararto. Aniguba haddii aan adiga ahaan lahaa, waan kibri lahaa. Miskiin ayaad tahayba. Waxa aad iiga yaabisay, in qof kasta oo guurka soo maray aanu wax badan kaa sheegin. Waa maxay sababtu? Dadku way qarsanayaan, ma rabaan in ay is ka sheegaan midhaha ay muudsanayaan. Anigu ma ihi sida dadka. Aamusi maayo. Weligey

khamri ma cabbin, laakiin haddii sakhradda la'iga waraysto waan ka sheekayn lahaa. Adigu dhanka aad doonto u la kac. Dhulka waan joogaa, ku ma se taagni. Hawo dhexe ayaan heehaabayaa. Waan soo jeedaa, waanan riyoonayaa. Weli maan dhiman, jannona waan ku jiraa.

Dadka aan weli guursan, gaar ahaan hablaha, hawlaha guurka ka horreeya ayaynu xoogga saarnaa. Adiga oo gaajoonaya ayaa saxan cunto aad u macaani ku jirto hortaada la soo dhigay, markaas ayaad ka doodaysaa saxanka la isticmaalay noociisa iyo qaabka loo sameeyey. Biyo laguu soo shubay goor aad cunaha wax qooya u baahnayd ayaad cabitaankooda ka doorbidaysaa falanqaynta sida laguu guddoonsiinayo. Huunnada guurdoonka aheey, haddaad ogaan lahayd qabowga ka dambeeya rabitaankaaga aan micnaha lahayn, carruur adiga kuu eeg ayaad daaddihin lahayd imika. "Waa in dad badan ka soo qayb galaan meherka", "waa in hudheel hebel la'iga soo doono", "magaalada dhan waa in ay ii mashxaraddo". War nabad ah lagu sii, waxaas oo dhan waxa kaa raacaya waxba. Noloshu maalintaas wixii ka dambeeya ayay bilaabmaysaa. Sidii laguu soo doonay cid danayn doontaa jiri mayso, sida aad reerkaaga u dhaqdo mooyaane. Aniguna taas ayaan ku dedaalayaa. Wixii aan u baahnaa Ilaahay wuu i siiyey, keliya in aan dhowrto ayaa aniga la iiga fadhiyaa. In aan dareensanahay taas, waa mid aan ku faraxsanahay. Qofkii aan adduunka u jeclaa ayaan helay, waa guul ka weyn mid kasta oo aan ku riyoon karo.

Markii aan guriga hooyaday iyo aabbahay ka soo baxayay waan ooyayay. Si kasta oo aan u rabo in aan guri gaar ah dhisto, haddan ma aan rabin in aan ka tago iyaga. Waa wax ay iyaguba

soo mareen. Guri ay leeyihiin ayay samaysteen, imikana waa markaygii. Aad ayaan u ilmaynayay sidii qof aan waalidkiisa dib u arkayn, markii aan gurigayga cagta midig soo geliyeyna aad ayaan u farxay. Tallaabbooyin aan markii ugu horreysey dhigo ayaan hagaajintooda ka fikiray. Si qumman ayaan daaradda dheer u dhex socday illaa aan ka imid qolka laga maammulo qasrigayga, hurdada. Korka dirac iga ballaadhan, wax aan hore u arkay ka qurux badan ayaa si fudud ugu dedan. Madaxa maro yar oo aan timaha oo dhan qarinayn ayaa si dabacsan u dul taalla. Kabo aan shanqadh dheer bixinayn ayaa dhulka iga xiga. Markiiba waxa ay indhahaygu ku hagaageen sariirta aadka u ballaadhan ee hortayda wadhan. Waxa aan ogaaday in ay noqon doonto saaxiibaddayda koowaad. Warqad aan si duuban u soo laabay ayaa gacantayda midig ku jirta. Waad hadyad aanan ogeyn in uu calfan doono maalintii aan qorayay. Si taxaddir leh ayaan sariirta korkeeda u dhigay meel ay indhihiisu qaban doonaan marka uu soo galo. Mid ayaan xaqiiqsaday, midna waan u diyaar-garoobay. In ay qayb noloshayda ka mid ahi dhammaatay ayaan xaqiiqsaday, in aan qayb cusub Hanad la bilaabi doono ayaan u diyaar-garoobay. Keligey ayaan ducaystay, waxyar kaddibna wadar ayaannu u ducaysannay. Sheeko dhowr saacadood socon doonta ayaannu bilownay, nolol illaa geerida nagu simi doonta ayaannu is la handaafinnay. Warqaddan ayaa noqon doonta middii u danbeysay ee mooska u noqota qulqul biyo ah oo muddo socday. Wixii aan rabay waan helay, wixii aad rabtaan Raxmaanku ha soo dhoweeyo!

4 XALIIMO & XUSEEN

Xuseen oo geed hoostii ku garaacayaa birtii uu quudkiisa kala soo bixi jiray ayaa meel fog ka arkay qof dumar ah oo si kala daadsan dhankiisa ugu soo ordaysa. Goortii uu u fiirsaday ayuu arkay in ay tahay gabadhii ay is jeclaayeen, Xaliimo, oo maanta socodkeedu beddelan yahay. "Toloow maxay waddaa?" Ayuu hoos u yidhi.

- Alla waa tan Xaliimo, soo xiimi ogaa, sidii qof dhiilo xambaarsan, waa tan haysata xaynkee, cagaheedii sida xaabbo, xabbadba geesta u jeedday, dhulkii sowtan ku xaquuqday.
- salaamu calaykum.
- Naa xabiibi na dheh.
- Xabiibi salaamu calaykum
- Haddeertaan ku xantoo, waxaan is lahaa, xuuralcayntani yay ahayd.
- Alla Xuseenoow adowgaa, iyo awowgaaba ku xiintay.
- Odayaashaa xabaalaha, ku xarkagay iska dhaafoo, xaad waddaa maanta?

- War xanuun kulul, ayaan Xuseenoow wadaa.
- Bisinka, naa yaa xijaabtay?
- Cidna may xijaaban.
- Haddaa yaa xanuunsan?
- Cidna ma xanuunsan.
- Naa ma xatooyaa la dhacay?
- Xaaji mayee i dhegayso, gabadhii aad lahayd xaas, iyo ka dhigo xalaal, xero kalaa lagu wadaa
- Belo kula xaf tidhi! Naa xaad ku hadlaysaa?
- Xaaji qurbaha, muddooyin ku xannibnaa, ayaa xoogaa kharasha, u xambaarshay aabbo.
- Aabahaagii xayraanka ahaa was! Naa inaadeer qalbiga xanxantada ka daa.
- Wallaahi xaalku waa sidaa.
- Naa walaaleey wallaahidaa xooji
- Oo adigu Xuseenoow, xayraannimo adoo dhammeeyay, miyaad cid ku xamataa?
- Xaajooyinkaa ka baxoo, imika waaxay xanuunkaan aad iila timid?
- Xuseenkaan jeclaayoow, Xuseenkii i jeclaayoow, xaajiyaddaadii waa lagugu haystaa.

Xuseen oo maanta ay hawshu aad ugu badan tahay, ayay Xaliimana arrinkan cusub ula timid. Birtii uu ka shaqaynayay ayuu dhinac isaga riixay, wax uu sameeyo ayuu garan waayey. Qaddar markii uu fikiraayay ayay Xaliimo is hayn kari weyday.

- Alla eega miskiinkii Xuseen, oo show waad i jeclayd!
- Horto kaalay Xaliimooy, xabiibi maad dhimantay?
- Xuseenoow aflagaaddadu reebban.

- Xaal qaado inaabti.
- Hayee talo keen dee xabiibi

Xuseen inta uu waxyar aamusnaa ayuu lasoo booday:

- Aabahaa ayaan la xaajoon.
- Oo maxaad odhan lahayd?
- Dee Xaliimadaada i sii
- Kkkkkkk Xuseenoow geesinimadu, waa waxaan kugu doortee, xariifnimo wixii aad hayso, iyo xoolo dhammaan, giddigood isu keenoo, aabahay bal wax tus
- Igu daa anigoo, orodoo ii xinnayso, naftana khayrka u sheeg, Xuseen nimaanan ahayn, ku xalaashani maayee.

Xaliimo oo qoslaysa ayaa farxad la jeedsatay. Fikir iyo werwer aanu hore Xuseen u qabin ayay kaga tagtay. "Waa aniga iyo raganimaday" ayuu ku fikiray.

Shaqadii uu hayay ayuu kaga dhaqaaqay saaxiibkii. Maryo uu soo ergistay ayuu isku giijay. Galab goortii ay ahayd ayuu dhankii reerka u dhaqaaqay. Albaabkii ballaadhnaa ayuu aad u garaacay. Ilaaladii gurigaa durba aad u soo dhoweysay. Odaygii reerka ayaa loogu yeedhay. Xuseen oo garaaca wadnuhu shaatiga gilgilaayo ayaa salaanta bilaabay.

- Salaamu calaykum adeero Xaamud.
- Wacalaykuma salaam.

Isagoo oday Xaamud salaantiiba afkiisa aanay ka dhammaanin ayuu maqlay codka gadaashiisa ka yeedhi. Waa islaantiisii Xaali.

- Waar dee inanka maanad garanayn waa Xuseene?

Xuseenoo anfariirsan ayaa xusuusta islaanta aad ula yaabay. Laba maalmood oo keliya ayay hore isu arkeen. Oday Xaamud oo gartay Xuseen ayaa hadalka sii watay.

- Xuseenaa? Oo dee waa inankii halkan jaarka meheradda ku haystay.

Xuseen oo aamusan ayaa hoos u yidhi "meherad kulahaa, hadda uu og yahay inaan geed hoos fadhiisto oo aan biraha ku garaaco".

Hadal kooban oo ixtiraam u badan kadib ayuu Xuseen ujeedadii socodkiisa usoo bandhigay.

- Xaamudoow adeero, waxaan kuula socdaa arrin aad u xasaasiya. Inantaada Xaliimo xidhiidh aanu wadaagno ayaa adeero jira. Anna jidkii xabiibkeenii, rasuulkeenii wacnaa inoo jeexay baan rabaa inaan qaado. Dee Xaliimo waanu heshiinay, adna waan ku xurmeeyay, adeer inantaada i sii.

Oday Xaamud markii uu maqlay hadalka Xuseen kasoo yeedhay ayuu fadhiga hayn waayey. Sidii wax kacaya ayuu laba jeer ruqaansaday. Haddana fadhiga ayuu ku nagaaday. Waxyar ayuu aamusay, candhuuf weyn ayuu liqay markaasuu hadal kooban iska soo jaray.

- Adeer Xaliimo way doonan tahay.
- Adeero ninku sowkii xalay uun yimid.
- Xuseenoow baddaa ka bax, Xaliimo nin baan siiyey.

- Adeero Xaamudoow horto kula murmi maayo, laakiin halkaa ku yara noqo.
- Xuseenoow su'aal, haddaan ku siiyo Xaliimo, xaggee baad dejin lahayd?
- Een..
- Maxayse quudan lahayd? Xubbigaad sheegaysaa kaalmahaa ma buuxin karaa?
- Adeero Xaamudoow rabbigaa wax bixiyee..
- Rabbigu Xuseenoow muxuu ku siiyay?
- Horto illaa hadda xagga hantida weli waa la'iigu maqan yahay.
- Bixinta Xaliimo kusoo dhawoow haddaba anaa ku casuumee.

Xuseen oo aad u madluunsan oo madaxa hoos u foorarinaya ayaa albaabkii kasoo baxay. ”Maxaa igu watay odaygan?” ayuu is weydiinayaa, haddana wuu is dhiirri-gelinayaa ”adigoo aan u tegin ayaa ka xumaan lahayd, imika waad dedaashay”. Geedkiisii ayuu hoos tegay. Buug aad u madoobaaday oo uu isticmaali jiray iyo qalin ag yaalla ayuu soo qaaday. Warqad dheer ayuu u qoray Xaliimo. Wuxuu ka bilaabay:

”Maxaan ku fikirayay, maxaan is lahaa toloow? Maalintaan ku jeclaanayay sideen ahaa? Maxaan waxan oo dhan uga fikiri waayey? In jacaylku hanti noqon karin, maxaan uga fikiri waayey. In hantidu jacayl samayn jarto, maxaan uga fikiri waayey? Adiguse Xaliimooy, maxaad ii qaban weyday? Maxaad jacaylka iiga guddoontay? Maxaad adna ii jeclaatay? Adoo aabahaa yaqaanna, maxaad ii lug goysay? Laakiin khalad ma lihid. Anna khalad ma lihi. Nolosha ayaa khaladka leh. Inta ay isku keen keentay ayay

haddana ina kala eriday. Intay iskeen jeclaysiisay, ayay ina kala geysay. Noloshaa awoodda leh, siday doonto yeesha. Anna sida mawjadda badda ayaan u raacayaa dhanka ay ii kaxaysaba. Kolley marka aad warqaddan akhriyaysid waxay ka dhigan tahay in aanan kuu dhoweyn. In aan kaa fogaaday. Ninkaaga cusub jeclow. Isaga la hadal. Xabiibi uun ha ku odhan. Mayee ku dheh haddaad doonto, waayo uu mutaystay. Waa xaajigaagii. Isaga jeclow. Anna birtaydaan iska garaacanayaa. Meel fog aan la tegayaa. Aan kaala fogaanayaa. Waxaan isku deyayaa in jacaylka iyo lacagta aan kala horreysiiyo, in lacagta aan soo horreysiiyo jacaylkana dib u dhigo. Malaha markaasuu ka macaan yahay. Jacayl faqiiraa i dilaye, bal ka hantida leh ayaan ka war keeni. Xaliimo, nooli kulantee"

Xaliimo oo aan ogayn sida uu ku dhammaaday kulankii dhex maray Xuseen iyo aabeheed ayaa u soo carartay dhankii geedka. Goortii ay soo gaadhay goobtii uu Xuseen ka shaqayn jiray ayay araggiisii weyday. Muddo kadib ayaa loo sheegay in uu Xuseen tegay, warqadna uu u reebay. Sidii uu khadka qalinku is masaxayo oo kale ayay degdeg faraha ugu kala furtay warqaddii loo dhiibay. Waxyar markii ay ku foorartay ayaa ilmadii warqadda ku dhacday ay isku yaacisay eraygii ay ku hagaagtay. Dhibic labaad oo isha bidix ka timid ayaa ku hagaagtay eray kale. Xaliimo oo u eekayd in ay warqadda ka bogatay ayaa haddana ka jeedsan weyday. Muddo dheer ayay ku foorartay. Iyada oo dhabannadeeda qoyaan badan ka masaxaysa ayay u carartay dhankii guriga. Qol madow ayay isku soo xidhay. Barkimada ayay wejiga ku foorarisay. Cod aad u xoog badan ayaa dhuumaheeda laabta u soo jiidhay si maqiiqan. Kabihii ay xidhnayd ayaa midna dhulka taallaa midna weli cagtii xidhnayd ay ka laallaadaa. Oohinta ciilka og ee beerkeeda lulaysa ayaa jidhkeeda oo dhan dareenkii ka qaadday. Wakhtiga ay jiiftay

furaashka dushiisa awgii ayaa xubnaha jidhkeeda tacbaan ka dhigay. Weji intiisa badan aan muuqan ayay kor ula soo kacday. Qayb timaheeda ka mid ah ayaa qoyaanku ku dhejiyay wejigeeda kuwaas oo qarinayay isha iyo dhabanka bidix. Isha midig waxa ka muuqday midab casaan ah iyada oo daal badan tirsanaysa. Xaliimo ayaa damacday inay qoraal dareenkeeda ku muujiso. Qalinka ayay dul qabatay warqad aan waxba ogeyn. Oogadeeda in calool-xumo lagu xardhi doono aan dareensanayn. Sidan ayay ku bilowday:

Xaliimo ayaa ku bilowday warqaddii sidan:

”Waxaan ahay waxba. Waxba ma ihi. Waxbayahay ayaan ahay. Dumar ayaan ahay. Dumar aan waxba la weydiin ayaan ahay. Saddex nin ayaa ii heshiiyay. Saddex nin ayaa isugu kay tegay. Saddex nin ayaa noloshayda qaybsaday. Midi waa aabahay. Midi waa xaajiga i soo doonay. Midna waa adiga Xuseenoow. Saddexdiinuba waad i dumarsateen. Midkiinna waxba ima weydiin. Midkiina ima qaddarin. Odayga i soo doonay waxba ima weydiin. Gabadh da' yar oo uu naftiisa ku xannaaneeyo ayuu rabay, aniga ayuu i doortay. Aabahay waxba ima weydiin. Dareenkayga muu wareysan. Inantiisu inay cid jeclaan karto ismuu weydiin. Sidaas ayuu igu bixiyay. Adiguna waxba i maad weydiin. Waad iska dhaqaaqday. Waad iska tagtay adigoon waxba ii sheegin. Aaway jacaylkii? Aaway kaftankii? Aaway qosolkii? Haddaad tegayso maxaad iigu sheegi weyday? Inkasta oo aanan ku fasaxeen haddana waad i dhayalsatay. Maxaad ii cidlaysay? Dad aan iga naxayn ayaad ii dhaaftay. Adiga oo keliya ayaa xaalkeena ogaa oo aan ku weheshan jiray, adiguna waad iga tagtay. Imika maxaan sameeyaa? Laakiin maxaan samayn karaa? Waa inaan

xaas u noqdaa oday aanan aqoon. Waa inaan adeecaa oday aanan weligay arag. Waa inaan nolosha la qaybsadaa oday aan dareen ila qaybsan. Waxaan rajaynayaa inaan mar uun ku arko. Su'aalo badan ku weydiiyo. Kolley waan ku arki doonaa. Qiyaastii anoo shan dhalay. Waa haddii uu odaygani wax dhali karo. Xuseenoow ii soo ducee, anna aan kuusoo duceeyo. Inkasta oo aanan imika kuu ducayn karin. Mar kale ayaan Ilaahay kuu baryi. Anna wixii Alle i baday ayaan yeeli. Ma hubo in aad warqaddan heli doonto iyo in kale laakiin haddii aad hesho waxaad ogaataa in Xaliimadaadii ay aad u liidatay markii ay warqaddan qoraysay. Waxaan rajaynayaa inuu walhtigu dhayo nabarrada qalbigayga gaadhay. Haddii aan sii wado qoraalkan waxa aan hubaa inuu dhowr buug noqonayo dhowr qalinna ku dhammaanayaan oo aanan dhammayn karin. Sidaa darteed ayaan halkaa ku joojinayaa. Ilaahay ha i kaa tuso."

Wakhtigu uu soconaayay, sidoo kale noloshooduna. Hal laba loo qaybiyay dabadeed la kala geeyay, waa siday noqdeen. In uu waayuhu siduu doono ka yeelo, waa siday ku tashadeen. In Xaliimo loo guuriyo xaajiga dabadeed aqalgal loo sameeyo, waa halkay ku dambaysay. Xuseenoo cadhaysan inuu aad u shaqeeyo dabadeed lacagaysto, waa siduu ku taamaayay. Sidaasay u dhacday. Midkastaa noloshiisa ayuu toos ugu faylay. Sidaasay ku dambaysay. Haddii ay ahaan lahayd filim ama khiyaali kale, bartaasay joogsan lahayd. Waa sheekada'e. Balse waanay ahayn. Nolosheenan adduunyo wax kastaa dhici kara. Si kasta oo ay labadoodu u kala fogaadeen, si kasta oo wakhtigu u kala qarinayo, goortay meel gaaban isaga soo bixi doonaan weli lama garan. Wakhtigu waa ordayaa. Iyaguna way la socdaan. Inuu wakhtigu noqday sida laba bas oo magaalada ka dhex shaqeeya,

labadooduna uu midba mid saaran yahay, oo inta ay labadii bas sii kala jeesteen dabeed ula ula kala carareen bari iyo galbeed, waa sida ay dareemayaan. Sidaa ayay u kala jiiteen, maalinba maalin ugu dhiibtay, bilba bil, sannadba sannad.
Afar sanno ayaa tegay, wax badan ayaa is bedelay. Waraaqihii ay isu qoreen way afar jirsadeen. Sidii caadiga ahayd maalin kasta oo jimce ah, ayay Xaliimo iyo saaxiibaddeed Xusni suuqa adeeg u soo doonteen. Dhowr dukaan ayay mareen. Iyagoon waxba iibsan ayay ka baxeen. Mid ayaa se u dhiman. Aanay weli gelin. Waa meherad cusub aadna u kala jiidan. Iyada oo aamusan ayay daf tidhi. Indhaha ayay ku dhufatay. Waa isagii. Waa laftiisii. Waa Xuseen biroole.

Indhihii ay qac ku siisay ayaa la dhex rooray. Araggii ay jalleecday ayaa laga raacay. Dareenno ay illowday ayaa durba toosay. Wakhti ay kasoo gudubtay ayaa soo dabo raacay. Nolol ay iska illowday ayay dhexda kaga dhacday. Kulayl aanay filayn ayaa jidhka oo dhan saaqay. Indhihiisa oo ku soo maqan ayay ku war heshay. Deg-deg ayay hoos ugu jeedsatay. Haddana kor ayay ugu eegtay. Dhankiisay u dhaqaaqday iyadoon is ogeyn. Sanka goortay ka gashay ayay ku war heshay.

Sidii dhagax meel la dhigay ayuu Xuseen ahaa. Indhihiisa ayaa libiqsan waayey. Afar sanno kadib. Afar sanno kadib ayuun bay aayar iska soo gashay. Aayar iska soo gashay. Adduunyooy. Adduunyooy ku nacay. Ku nacay. Muddo ayay kala aamusnaayeen. Hadalna aanay is odhan. Aamusni ay isku waraysteen. Cod xabeebsan oo lasoo kallifay ayay ku weydiisay:

- Iska warran?

Codkeedii markii uu maqlay ayuu ilkaha muujiyay. Isha bidixna hoortay. Tii midigna meel ay ku hadhay weyday. Af waafiya ayuu ku yidhi:

- Adigu iska warran?

Su'aalaha maskaxdooda dhex jiifa afkoodu ma soo wada saari karo. Su'aalaha qaar erayo turjuma looma hayo. Su'aalaha qaar wakhti deeqa looma hayo. Balse qaar aan loo baahnayn ayaa kolba soo fakanaya.

- Sowdigan caddaaday.
- Sowdigan sii quruxaystay

Xaliimo ayaa xishood la foorarsatay intii aanay hadal kale odhan.

- Maanta kululaa!
- Maanta waa arbaca

Way isku qosleen. Haddana Xaliimo ayaa su'aalo bilowday.

- Ma halkanaad ka shaqaysaa?
- Mayee anaa la'ii shaqeeyaa.
- Birtii maad ka dallacday?
- Birtii iyadaa i fasaxday
- Oo maxay kugu nacday?
- Dee shan dukaan ayay ii furtay. Markaa ”iska soco” ayay igu tidhi.

Wax yar ayay kala aamuseen. Haddana Xuseen ayaa bilaabay.

- Adigu sideed tahay?
- Waxba ma xuma.
- Imisa carruuraad leedahay imika?
- Adigu imisaad leedahay?
- Tii dhali lahayd weli ma helin. Xaajigaagiina ka warran? Sow ma roona?
- Waan sii soconayaaye. Waa inoo mar kale.

Si dhakhso ah ayay uga baxday dukaankii. Saaxiibaddeed ayaa kasoo dabo baxday. Markii ay muddo kala aamunaayeen ayay weydiisay:

Xusni: naa heedhe, walaal waa ku sidee?

- Hii.
- Miskiinka maxaad beenta ugu sheegtay?
- Been u maan sheegin.
- Dee imika wuxuu moodayaa in lagu qabo.
- ...
- Maxaad ugu sheegi weyday in aad kala tagteen xaajigii?

Goortii ay hortiisa timid ayay margatay. Candhuufta ayaa ku istaagtay. Cunahaa is xidhay. Durba way hogatay. Isagaa ka darnaa. Farxad keentay qosol, qosol keenay farxad, labadaaba uu muujiyay. Way isku soo dhaqaaqeen. Erayo aan cod lahayn ayay aayar yidhaahdeen. Iyaguun baa is fahmay. Xaliimo oo damacsan inay xaalka u sheegto iyo Xuseen oo aan ogolayn inay maanta ka tagto ayaa is helay. Suxullada ayay kor saartay miiskii u dhexeeyay. Sidaasuu isna yeelay. Indhaheeda ayaa ku maqan fureyaal ay ku dheelayaan gacmaheedu. Indhihiisa ayaa marka ay kasii jeeddo wejigeeda dhowraaya. Xaliimaa biloday.

- Haye?
- Waxaan islahaa kuu soo noqon maysee
- Imikaba maxaad ka og tahay inaan adiga kuu soo noqday?

Aamusni ayuu ku jawaabay.

- Waxaan la yaabbanahay maad taqaannaa?
- Hee?
- Berigii hore sidaynu u wada sheekaysan jirnay. Dhowr saacadood ayaynu wada hadli jirnay, maantana waynu kala baqaynaa.
- Alla weliba adiga wax kaa hadal badnaa ma jirin.
- kkkk sow maaha? Haddaba Xaliimo Xaliimadii aad taqaannay maaha.
- Hee walaalo maxaa dhacay?
- Maxaad isa ga dhigaysaa nin aan waxba ogeyn. Sowdigii farxaddii igala tegay.
- ...
- Qosolkiiba waan illoobay wallaahi. Dadka ayuun baan canjilaa markay qoslayaan. Kala-maqan baa la'iigu yeedhaa imika. Dadkoo qosol dhammaystay ayaan 'ihi' iska idhaa. Xiisihii ayaa iga tegay. Waxba ma daneeyo. Laakiin waan la qabsadayba, sidanaan caadi u haystaa. Alla noloshu cajiibsanaa Xuseenoow.
- Hee walaal.
- Si ay hadhow inoo kala geyso ayay noloshu isku keen bartay berigii. Xaasidsanaa bahashu. Laakiin wallaahi weligay ma moodayn in qof kale uu noloshaada sidaas oo kale u saamayn karo. In nin dartii aan sidaa u noqon

doono. In Xuseen dartii aan furaashka ka dul oolli doono. In aan adiga dartaa ciil la ooyi doono. Waa wax la yaab leh.

Way aamustay. Dhaqaaqii ayay joojisay. Xuseen ayaa bilaabay.

- Maalintaan ku bartay nolosha sawir ayaan ka haystay. Maanta mid kii ka duwan ayaan ka haystaa. Maalintaan ku bartay farxad carruurnimo la moodo ayaan ku noolaa. Wax walba way qurux badnaayeen. Birtii daxalka lahayd ee aan garaaci jiray ayaan daawan jiray xitaa. Qosolka iyo kaftanka waxba may dheerayn. Maantana nolosha sawir madow ayaan ka haystaa. Waxay tahay ayaan ogaaday. Waa sidii qol madow oo aad ku dhex jirto. Ma ogid wax kugu dhici doona. Noloshu intay kaa qosliso ayay haddana dhulka kula goynaysaa. Galab keliya ayuun baa la yidhi Xaliimadaadii nin kalaa la siinayaa. Calooshu siday ii xanuuntay weli waan xasuustaa. Dareenkii jilbahayga ka gariiriyay weli maan illoobin. Hadalkii uu aabbahaa igu yidhi weli dhegahayguu ka guuxayaa. Ciil iyo cadho ayaan seexan waayey. Magacaagaan subcin jiray. Dadku waad waalatay ayay igu odhan jireen laakiin kolley waan miyir qabey.

Waxyar ayuu aamusay, haddana wuu sii watay.

- Alla maxaan riyo kugu guursaday, oo aad ubad ii dhashay. Alla maxaad agtayda kasoo toostay. Alla maxaynu isku gabownay. Balse riyo run noqon weyday. Anigoo keligay ah ayuun baan is arkaa. Aniga mid ayaa aad iiga yaabisay Xaliimooy.

Xaliimo oo dhabannadeedu qoyan yihiin ayaa "hee" lasoo boodday.

- Adduunka balaayiin qof ayaa ku nool. Hal qof ayaan ka doortay, hal qof ayaan iska jeclaannay, halkii qof ayaa la'ii diiday. Taasaan la yaabay.

Inyar ayay kala aamuseen.

- Laakiin dee adigu waad iga nasiib badnayd. Waayo nin baa ku qaboo kaa qoslinaaya kolley. Aniga cidladay iga heshay.
- Ilaahoow ninaan wax ogeyn ha cadaabin.
- Hee, xaajigu miyaanu ku maaweelin? Bal horto wejigiisa aan arkee maalin soo kexee.
- Xuseenoow nin ma jiro.
- Inantu maxay leedahay?
- Odaygii kala tagnay! Hadda waa keligay. Oori ma ihi la qabo.
- Oo odaygii mee?
- Odaygii berigii markii uu meherkii dhacay waa kii iska dhoofay, sidii ayuu ku maqan yahay. Saddex sanno markuu sii maqnaa ayuu aabbo xanaaqoo wuu iga furay.
- Maxaad tidhi Xaliimo? Imika laguma qabo.
- La i ma qabo.
- Ma cid kalaa jirta oo yaa...?
- Waar maya maya. Albaabkii ragga waanigii iska xidhay.
- Ma wallaahi baa?
- hhhh wallaahi waa iga dhab.
- Oo imika cidi igama kaa xigto.
- Waar noloshayda nin kuma jiraan ku idhi.

- Alla hoogi waayey hhhhh Ilaahoow waa mahaddaa! Oo heedhe huuno... Een... Een...
- Hee waa maxay?
- Een... Albaabkaa aad xidhay haddaan kugu soo garaaco maad iga furi?
- Hhhhhhh adiga albaabku wuu kuu furan yahay mar kasta.

Farxad ayuu kor u booday isagoon is ogeyn. Debnihiisaa kala jiidmay, si kaleetana diiday. Inay casho aadaan ayay hadda doorteen. Baabuur aad u weynoo kala jiidan dhexdiisa intii aanay fadhiisan ayuu Xuseen hadal tuuray Xaliimana qososhay.

5 QADDAR-JAB

05.09.2013, khamiis.

Si fiican ayaan u xasuustaa maalintaa. Khamiis gelin dambe. Istaanka basaska magaalada laga raaco ayaan taaganahay. Baskii iskuulka iga keenay ayaan ka degay aniga oo sugaya kii guriga i geyn lahaa. Xagaagii oo wakhtigiisii dhammaaday ayaa weli goob-joob ah. Qorraxda badhtanka cirka waxyar galbeed u dhaaftay ayaa dhabankayga midig dhalaalinaysa. Dadka faraha badan ee hortayda is weydaaranaya ayaan kolba mid isha la raacayaa. Indhahayga ayaa soo jiitay gabadh daba ordaysa laba wiil oo ay dhashay oo ka ordaya. Qiyaastii 9 illaa 10 jir. Kursiga nasashada ayaan dabadayda dhuuban ku taagay aniga oo hoos u eegaya gabadha agtayda fadhida cagaheeda intooda badan muuqda ee kabaha dusha qaawan ku dhex jira. Dhallinyaro dhowr ah, rag iyo dumarba leh, codkooda dheer ee ku faraxsan cimiladan kulul ayaa xoog ku soo jiidhaha codka Maxamed BK ee dhegahayga ku mudan. Hablaha maryaha gaagaaban korkooda sudhay ayay indhahayga dhallaannimo kolba mid walafsanaan sii dhowrayaan. Waa eegmo aan saacado kaddib qoommamayn doono. Nolosha

ayaa ii dhoollacaddaynaysa. In ay dabada ii jeedin doonto mardhow, anigu ma ogi iyaduna ii ma sheegin. Baskaygii ayaa yimid, aniga oo madaxa ruxaya ayaan fuulay. Kaadhkii ayaan mariyay meeshii loogu talogalay, waan fadhiistay. Codkii Bk waxa beddelay codka uu ku soo dhaco telefoonkaygu. Aniga oo dhibsanaya ayaan degdeg hoos ugu eegay. Waa lambar aan ahayn kuwii aan aqaannay. Waan ka qabtay.

- Haloow?
- Khaalid miyaa?

Markii aan ajnabi u gartay ayaan codka toosiyay.

- Iga raalli ahow, waa Khaalid, adiguna?
- Magacaygu waa Henrik, waxaan kaa soo wacayaa cusbitaalka weyn..

Halkaa markii uu marayo ayuu hakaday. Labadii ilbidhiqsi ee uu aammusnaa ayaan is weydiiyey sababta uu ninkani ii soo wacay. Dabcan waan illoobay in aan Isniintii la soo dhaafay baadhitaaan la'igu sameeyey jawaabtiisa sugayo. Hadalkii ayuu sii watay.

- Jawaabtii ayaan gacanta ku hayaa, ma ila kulmi kartaa maanta?

Markiiba qaybta bacda ayaa i dhaqaaqday.

- Maxaa jira? Imikaba ii sheeg, ma wax xun baa?
  - Marka aad ii timaaddo ayaan kuu sheegayaa, shanta iyo badhka ma iman kartaa?

Wakhti ayaabu iska qabsaday. Waa laba saacadoo oo wax dhiman kaddib. Oo markaa shanta waxaan la kulmayay Hodane. Hodan wax ka weyn ayaa yimid.

- Qof qaraabada ahna hore ka soo kaxayso fadlan, ma helaysaa?

Waar ninku su'aalo xumaa! Waxaan go'aansaday in aanan hadalka badin.

- Haye, nabadeey.

Heestii aan dhegeysanayay ayaa is bilowday. Waan maqlayaa balse ma dhegaysanayo. Ma dhawaaqayo balse waan hadlayaa. Toloow muxuu arkay? Ma calool-xanuunkii yaraa iyo dawakhaaddii ayaa wax weyn noqday? Maya, u ma malaynayo. Kolley kiniin yar ayuu ii qori doonaa. Oo haddaa muxuu iigu yidhi qof qaraabbo ah soo kaxayso? Madax-xanuun! Calooshii ayaa i xanuuntay. Xanuunkii caadiga ii noqday iyo werwer ayaan u kala saari waayey. Bartii aan baska kaga degi lahaa ayaa la soo gaadhay, gurigii ayaan ku hagaagay. Hal mar markii aan garaacay ayay hooyo iga furtay.

- Waar hooyo cuntadaa miiska saaran cun , xaggeed ku soo habsaantay maanta?

Jawaabta ayaan la daahay, may ahayn in aan la daaho. Way igu soo noqotay. Indho daallan ayay kor iigu eegtay.

- Hooyo maxaa ku helay maanta? Ma cadceeddaa kululayd bisinkee sowdigan engegay!

Maaddaama oo maalmihii la soo dhaafay ay dhowr jeer i weydiisay in aan helay jawaabta dhakhtarka, qasab ayay igu noqotay in aan u sheego. Runta marka laga hadlayo, aniga laftayda ayaa u baahnaa qof aan ku nafiso. Nafis ilbidhiqsiyo sii jiray intii aanay hooyo calaacal dheer bilaabin. Su'aalo aan jawaabahooda hore u waayey ayay dusha igaga keentay. Cuntadii oo kuuskuusan ayaan is dhaafiyay. Illaa maanta ma xasuusto dhadhankeedii. Waxa i sugaya ayaa ka weynaa. Biyo qabow ayaan isku rogay. Dhar kale ayaan xidhay. Hooyo oo diyaar ah ayay ishaydu ku dhacday markii aan qolkayga ka soo baxay. Shanqadha dheer ee ka imanaysa kuulaha ay isku dhufanayso marka ay wardiyayso waxa dheer naqaska aabbo. Agteeda ayuu fadhiyaa. Midkoodna ma hadlayo. Anigii ayaa naxay. Ma wax aanad ogeyn ayay og yihiin? Waannu baxnay. Dhakhtarka oo toban daqiiqo noo jira ayaannu gaadhi weynay. Maanta uu ka dheeraa intii hore. Nin safar magaalo kale ku tegaya ayaan ahaa. Wuxu sowkii dhowaa! Anigu waan aammusanahay, aabbo sidoo kale. Hooyo ayaa daqiiqaddiiba mar su'aal aanan jawaab u hayn igu soo tuuraysa. Waa dabeecad ay leedahay marka ay naxdo. Aabbo shookaanta baabuurka ayuu isku mashquulinayaa. Baabuurka ayaa ugu dambayn istaagay. Degdeg ayaan uga booday aniga oo ka ordaya hawada calool-xanuunka ah ee gaadhiga dhexdiisa haysata. Tallaabbooyin ay shanqadhooda weheliso ducada guuxa u badan ee hooyo sida moogganaanta ah uga soo baxaysa ayaan la galay dhismaha. Dhowr daqiiqo kaddib qaybtii ballantu ahayd ayaan soo gaadhay. Gabadh kalkaaliso ah ayaan ku hagaagay. Muraayad ayaa na kala qaybisa. Ballan in aan leeyahay imika ayaan u sheegay.

- Ma Khaalid ayaad tahay? ayay la soo boodday. Waaba la'i sugayaa show.

- Haa waa aniga, ayaan u celiyay aniga oo la yaabban sida degdegga ah ee ay magacayga ugu dhawaaqday iyada oo aan meelna ka eegin.
- Fadlan kursigaa fadhiiso, waxyar kaddib ayuu dhakhtarku kuu imanayaa.
- Sidii ayaan yeelay. Aniga oo aabbo u sheegaya naagta magacayga korka ka haysa ayay hooyo maqashay.
- Oo hooyo maxaa saancadlayda magacaaga baray? Ayay la soo boodday.

Aniga oo aan hadalkii dhammayn ayuu halkaa ka soo baxay. Cagihiisa yaryar waxa ku jiray kabo aan shanqadh samaynayn oo cawlan. Surwaalka dabacsan ee laydhu qaadayso baallashiisa waxa hadheeyay koodh dheer oo jilbaha soo gaadhaya. Weji aan wax dareen ah haba yaraatee lahayn oo aan waxba ka akhriyi kari waayey ayuu ila dul yimid. Gacanta inta uu soo fidiyay ayuu ii raaciyay:

- Khaalid ma adigaa?

Salaan kaddib uu na hor kacay. Dhowr luuq kaddib qol ayuu noo furay. Qolkii ayaannu galnay. Qolku u ma eeka mid cisbitaal ku dhex yaalla. Waa markii aan sii shakiyay. Kursi aad u raaxo badan ayaa dhanka bidix soo yaalla, kasoo horjeedkiisana miis iyo kursi uu digtoorku leeyahay ayaa yaalla. Waa xafiis oo kale. Haddana maaha. Maalmaha qaar waan ku raaxaysan lahaa daawashada qolkan, laakiin maanta maya. Kursigii dheeraa ayaan aabbo iyo hooyo dhexda u galay. Toloow muxuu soo wadaa inkaari ku dhacday? Waxaan rabaa in uu degdeg u yidhaahdo, haddana ma rabo oo waan ka baqayaa hadalka uu soo wado.

Waraaqihii inta uu hoos u eegay, sidii wax hubsanaya hadalka uu odhan doono, ayuu kor ii soo eegay.

- Khaalid, jawaabtii ayaa nagu soo noqotay shalay galabtii. Waan isku dayay in aan ku soo waco laakiin ma ay suurto gelin.

”Waan gartay” ayaan la hoos ordayaa si uu ujeeddada ugu dhaadhaco.

- Wixii aan ka baqaynay ayaa dhacay, waan ka xumahay, laakiin kansar ayaan kaa helnay.

Ereygii uu yidhi ayaa iga degi waayey. Ninku muxuu yidhi? Kansar! Hadalkii ayuu sii watay. Laakiin sidee ayaad u dhegeysan kartaa hadalka ka dambeeya ereyga noocaas ah. Markii uu “kansar” yidhi ayaan ka hadhay. Madaxa ayaa qaadi kari waayey. Waxa aan noqday haan yar oo biyaha ceelka ku jira oo dhan lagu shubayo. Waan buuxsamay. Nasiib-wanaag aabbo iyo hooyo ayay haammahoodu madhnaayeen oo saa’idka qaadayay. Muddo dheer ayuu sii hadlayay, intaa in le’egna waan aammusnaa. Indhuhu i ma ay libiqsan. Way furnaayeen, waxna ma arkayn. Codka hooyo ee “bisinka iyo salliga” ku celcelinaya waxa dheeraa su’aalaha uu aabbo weydiinayo ninka. Anigu ma aan danaynayn faallada dambe. Waxa aan haddana maqlay digtoorkii oo leh “waa iska caadi in uu qofku naxo marka war noocan oo kale ah loo sheego”. “Inta aad dil igu xukuntay ayaad sidaa leedahay weliba” ayaan u celiyey aniga oo keligay is maqashiinaya. Miskiinka yar isaga ayaa dhibban. Imisa qof ayuu sidan oo kale ugu soo sheegay? Imisa qof ayaa ku xanaaqay?

Marka laga tago naxdintii u horreysey, waxba maan dareemin. Illaa maanta waan u qaadan la' yahay in aanan waxba dareemin. Qolof socota ayaan ahaa. Maskaxda ayaan weli fahmin. Wax ka weyn ayaa helay, sidaas darteed way is dabooshay. Dareemmadii oo dhan ayaa is xidhay. Caag socda ayaan noqday. Qof aan jixinjixayn. Dhinac marka la eegana, waan dafirsanaa waxan la'ii sheegay. Waayo waan caafimaad qabaa, dushayda xanuun ka ma muuqdo. Waan ordayaa. Dadka Kansarku hayo sowkuwa jiifa. Ninku miyuu igu ciyaarayaa? Ma maalintii beenta adduunkaa? May, waa bishii sagaalaad. Haddaa ma qof kale ayuu igu qaldayaa. Kansar igu ma dhici karo. Dadka kale ayuu ku dhacaa. Markaasay dhintaan. Aniga maya. Warbixintii uu afka iiga sheegayay oo qoraal ah ayuu ii soo fidiyay. Waan ka soo baxnay. Markii aan albaabka cusbitaalka ka soo baxayay ayaan xasuustaa. Si saafi ah ayaan u xasuustaa. Cadceedda oo midab casaan u badan dhulka ku wadhay ayuu tiix yar oo aanu dhibicdiisu weyneyn dhulka si teelteel ah ugu dhacayay. Caleen yar oo laydhu wadato ayaa hortayda ku dheelaysa. Waxba ma oga. Iyaduba way soo dhimatay. Beri ayay geed qurxoon ka lulan jirtay.

Guriga markii aan soo gaadhnay ayaan qolkayga ku orday. Ma rabo in aan illinta hooyo sii daawado, naqaska culus ee aabbo sii dhegaysto. Waxan ayaan rabaa in aan fahmo. Weli afka ma kala qaadin sidii warka la iigu sheegay. Kabihii oo cagahayga ka laallaada ayaan sariirta isku tuuray. Wejiga ayaan barkinta ku daboolay. Caloosha ayaa i xanuuntay, laabta ayaa i culusaatay, cunaha ayaa la ii fadhiistay. Madaxa ayaan ka jidhidhicooday. Dhafoorka ayay wax kulul i yaaceen, baroor beerka i xanuujisay oo aanan anigu maammulin ayaa dhuunta xoog ku soo jiidhay. Oohintu waa dareen ereyo lagu cabbiri kari waayay oo ku soo

dhaafaya. Mid foolxun ayay taydu ahayd. Cabsi, waxoogaa cadho ah iyo khalkhal kale oo isku laaqan ayay ka turjumaysay ayaan is idhi. Ma garanayo, in aanan weligey sidaas oo kale noqon ayuun baan garanayaa. Muddo kaddib ayaan caadi noqday. Oohintii ayaa iga joogsatay. Feedhahaygii yaryaraa oo i xanuunaya ayaan dhabarka u jiifsaday. Waraaqihii oo agtayda ku daadsanaa ayaan dib u eegay. Kansarka noociisa iyo waxyaabbo aanan doonayn in aan ogaado ayaan akhriyay. In dadka intooda badan aanay u dhiman xanuunkan ayaa ku qoran. Haddana xagga hoose waxa ku qoran in dad badan u dhintaan. Taas waxa ay ku xidhan tahay inta uu le'eg yahay Kansarkaasi iyo sida loo daweeyo. Markaa anigu kuwee ayaan ku jiraa. Ma kuwa dhakhso u dhimanaya, mise kuwa muddo sii noolaanaya. Weli maan fahmin. Digtoorka laftiisu ma uu fahmin. Baadhitaanno badan ayaa taas lagu caddayn karaa. Si dhakhso ahna waa in loo bilaabbo. Usbuuca soo socda weeyaan ballantayda dambe. Cajiib. Saaka aniga oo caafimaad qaba ayaan guriga ka baxay, galabtana aniga oo dhimasho ka fikiraya ayaan guriga soo galay. Dharaartii ayaa gudcur isu rogtay. Walow aan ogaa in aan dhimanayo, haddana marka laguu sheego xanuun ku dili doonaa in uu ku hayo, way ka xun tahay. Aniga oo aan nolosha wax badan ka arag ayaan ka tegayaa. Aniga oo aan Hodan guursan ayaan ka tegayaa. Iyada oo aan ubadkayga habin ayaan la dhimanayaa. Sidaasi waa kallahaad. Ma rabo in aan degdeg u dhinto. Waan rabaa in aan Ilaahay la kulmo, laakiin ma rabo in aanan awoow noqon. Nolosha waxa loo joogaa in lagu noolaado, kaddibna laga tago. Anigu iyada oo bilow ah ayaan ka carraabayaa. Aniga oo fikirro badan oo noocaas ah daaddihinaya ayuu teleefanku yeedhay. Waa Hodan. Sideen ugu sheegaa? Maxaan ku idhaa? "Waan dhimanayaa!". Sida aan doono aan ugu sheegee, waa in ay ogaato. Maaha wax la qarin karo. Waan isku deyi in aan

u khafiifiyo. Haddii ay jirto si loo khafiifiyo. Markii aan ka qabtay ayay hadal hore ka gashay.

- Xabiibi Khaalidkaygiiyoow ii warran? Maanta ta dhacday ma ogtahay? Dee waan kufay, alla hoognayeey markaasay magaalidii oo dhanna i daawanaysay. Dee waaniga anna baroor qabsaday! Weligaa wax noocaas ahi miyay kugu dhaceen? Silicii adduunka! Ii warran adiguna, macaan!
- Macaankaagii Kansar ayaa laga helay.

Waan ogahay in aanay ahayn habka ugu fiican ee qof wax loogu sheego. Sidee ayaan ugu sheegi lahaa? Ma jirtaa hab wanaagsan oo aad qof ugu sheegi karto in kansar lagaa helay? Dabcan way i rumaysan weydey. Muddo ayaan jawaab ka waayey. "Hodan" ayaan ku celiyey si aan u hubsado in aanu khadku go'in.

- Sorry xabiibi, khadkaa go'aye maxaad tidhi? Ayay si hufan iigu celisay.

Dhib badanaa, waa in aan haddana dib u idhaa hadalkii xumaa.

- Kansar ayaa la'iga helay maanta, ayaan xoog isku soo dhaafiyay.

Si aad uga fudud ayay "kansar hee?" iigu tidhi. Waa erey odhaahdiisa aanay afkayga hore uga maqal, walow aannu boqollaal saacadood wada hadalnay. Wax yar inta aan kululaaday ayaan haddana is qaboojay.

- Xabiibi waxaan ku idhi, jawaabtii ayaa maanta timid. Kansar ayaa la'iga helay!

Sidii tiix qaaday ayay aammustay. Markan khadku ka ma uu go'in. Naqaskeeda ayaan maqlayaa iyo sida uu u kordhayo.

- Khaalidoow huuno ciyaarta iga daa.

Waan rajaynayaa in aan iska ciyaari lahaa. Waan doorbidi lahaa in ay kaftan tahay. Waan jeclaan lahaa in aan riyadan xun ka tooso. Laakiin maya, ma ciyaarayo, ma kaftamayo, ma riyoonayo. Xaqiiqda ayaa ah sidan; dhallinyar nolosha meel macaan ka maraysa, inantii adduunka ugu qurxda badnayd helay, guur u diyaargaroobaya oo kansar ku dhacay. Macnaheedu tahay dhowaan dhimanaya. Waan sugay inta ay wax aan fahmayo i odhanayso. Cod aad uga fog hadal, baroorna aan u dhoweyn kaddib ayay ii sheegtay in ay ii imanayso. Bannaanka ayaan u baxay si aan u la kulmo marka ay timaaddo. Ma soo dhowa. Waan iska lugeeyay. Socod aan ujeeddo lahayn ayaan u dhaqaaqay. Nafta in aan wakhti la qaato ayaan rabaa. In aan waraysto in ay fahantay waxa ku dhacay ayaan rabaa. Waxa ay ii sheegtay in aanay weli caadi u fahmin waxa helay. Geerida ayaan ka waraystay. Way didday! Diyaar in aanay u ahayn hadalka noocaas ah ayaan u gartay. Jawaab in aan ka rabo ayaan u sheegay. Su'aasha ayaan si kale ugu dhigay. "Muddo intee le'eg ayaad rabtaa in aad noolaato?" ayaan ku idhi. Wax aan macquul ahayn ayay ii sheegtay. "Isku xishoo!" ayaan jawaab uga dhigay. In ay sannad gudihii ku dhiman karto ayaan u sheegay. In aan gaboobi doono ayay ii sheegtay. Xaqiiqada ayay ka ordaysaa. Weli ma ay fahmin waxa ku dhacay amma ogaan ayay isu dhaafinaysaa. Dib ayaan

ugu dhigay. Imika Hodan ayaan arkaa. Weji aan maryo saarnayn, balse aad u daboolan ayay la soo ordaysaa. Gacmaheeda oo aad mooddo in uu roob ku da'ay ayaan qallajinayay goortii ay garabkayga ku ooyaysay. Aniga ayaa xanuunsanaya, iyada ayaa barooranaysa. Waxa la moodaa in ay iyadu dhimanayso, kolley haddii aan anigu dhinto iyaduna si kale ayuun bay u dhiman doontaa. Aniga nafta ayaa iga bixi doonta, iyadana qalbigaa kun qurub noqon doona. Waxba dareemi maayo dhimasho dabadeed, geeridayda kaddib ayuu silic u bilaabmi. Muddo dheer kaddib ayay kor ii soo eegtay. Indho tamaandho aad mooddo iyo dhaban dooxyo ka jeexmeen, indhahaygii arkay way aammusi waayeen. Inkastoon xejinaayay, jiibta way la bilaabeen. Ilo aan beryahaa, muddo soo burqannin ayaa haatan bilaabay in ay soo fatahaan. Illintii berrito ugu horreyn iman lahayd ayaa galabta iyadoo aan bislaan soo baraarshishiyaysa. Kulayl aanan filayn dhabankayga ku reebi. Dib ayaan u ceshaa intii aan awoodo. Waa intii aan awoodo. Anigoo hoos u ooyi ayaan ku idhaa "Hodaneey iska aamu". Codkayga ay maqasho ayay sii kordhisaa. Muddo ay rafataa, dabadeed is tidhaa hadal oo wax ku dheh. Codkeedii aan jeclaa ayay iska weydaa. Mid kaloo aad u foolxun ayay soo malmalluuqdaa. Marka aan fahmi waayo waxa ay odhanayso ayay baroortii halkii uun ka waddaa. Madaxeedaa garabka aan idhaa ku naso, afkeedaa hadalka aan idhaa iska daa. Qalbigaygaan faraa wixii ay odhan layd in uu ii turjumo. Wuu ii dhigdhigaa isagoon is dhibin. Illinteedan i radisay ayaa iiga dhigan badweyn aad u madow badhtankeeda nin jiifa. Biyahaa dhegahayga daloolkooda gufeeyey. Cagahaan gunta hoose ku hagaaji is leeyay. Waanay suurto galayn. Nin in uu quuso ku xukuman, anigaa ka dhigan. Sidaasay u badan tahay. In aan dhiman doono dhowaan, anigu waan ogahay. Sidii aan xanuunka uga yarayn lahaa iyada, waa in

aan ku dhaqaaqaa. Waa in aan fogeeyaa inta aan noolahay. Iyadoo ah noloshayda qofka aan ka ba eegto, waa in aan ku qasbaa in ay aayar i hiifto. Waa in aan u diyaarsho ninkii ay guursan lahayd maalinta aan ka huleelo adduunkan foosha xumaaday. Jacaylka aan u qabo ayaa sidaa i faraaya.

Waa la gaadhay, maalintii waa la gaadhay. Maalintii dhakhtarka, ballantaydii labaad. Maalintii noloshayda, gebigeed beddeshay, maantaa iigu xigta. Toloow muxuu i odhan? Ma wax kalaa ii hadhay? "Kansar ayaa ku haya", ma wax ka xun ayaa jira oo uu maanta i odhan? "Berri ayaad dhimanaysaa", ayuun baa ka xun. Taasna Ilaahay ayaa ka masuul ah. Dhinacii dhakhtarka, markii aan u dhaqaaqay, calooshaa i xanuuntay. Beerkaa i sabbeeyay. Carrabkaa i qallalay, candhuuf ayaan iska waayay. Weligey waan necbaa, cusbitaal in aan aado. Sabab aan ku naco, kahor maanta ma haysan. Indhahayga oo maalmahan wixii ay arkaanba, dameer madowna ha noqdee, kolba sii yara eega ashqaraar aawadeed ayaa haddeer dhowraya wejiyada i weydaaranaya marka aan si madluunsan u kambadhuudho baabuurka dhexdiisa. Wejiyaal qoslaya, laba hablood oo yaryar oo hawadaa la haysta. Kansar baan ku dhicin. Laba kale ayaa ku xiga, gacanta ayay haysataa ninka ay la lugayni iyadoo qoslaysa isna uu afka buuri. Bal maxaa ka xun ee qosolkii u diiday, awoowgii la gubka! Waan cadhoonayaa ayuu odhan doonaa, doqonkaa qanjaha buurani. Muxuu ka cadhoonayaa? Ballantii in ay ka soo habsaantay miyaa? Mise in ay qof is laayeen? Mise shaqadii ayaa laga soo eryay? Dhammaantood u ma dhigmaan qof la yidhi "dhowaan ayaad dhimanaysaa". Balse maxaan u la yaabi? Anba maalmo kahor, baska oo iga tegay ayaa iga xumayn jiray hawadee. Telefoonka oo dhulka igaga dhacay ayaan ka dul barooran jiray. Bal u fiirso. Inta

aan soo habsaamay, cuntadii la'iga dhammeeyey ayaan wax weyn ka dhigaayay. Bal u fiirso hadda. Waxa aad moodaysay, in aan anigu, cadho raadsanayo. In farxaddii iga badatay oo aan murugo gudcur toosh ku baadhaayo. Maanta yaa i siiya bal wixii aan maalmo kahor uun aan haystay! Toloow yaa xanuunka iga qaada dhammaan. Bal in aan dib u cawdo! Bal in aan is xariifsho! Bal in aan salaadda illaawo oon ka mashquulo! Maanta ayaan garanayaa. Balse cajiib miyaanay ahayn in casharkani yahay mid aad u adag? Miyaanay jirin si sidan ka fudud oo wax la'igu tuso. Toloow ma anaa madax adag? Kansar wax aan ahayn miyaa wax la'igu fahansiin kari waayay? Calool-xanuun iyo wax la mid ah miyaa la'igu tusi kari waayey? Shil baabuur oon maalmo u jiifo miyaa la'ii heli waayey? Masiibo aan i dilayn miyaa la soo heli waayey? Mise toloow anigaaba nasiib leh oo geeridayda ogaaday? Malaha waa jacayl uu Alle ani ii qabo oo, in aan is hagaajo ayaa la'iga rabaa? Illeyn waan is ogoo nolol janno goysa ma ay ahayn tayduye. Anigoon is ogeyn oo sidaa uun ku hoyda ayaa ka xumayde, malaha sidanaaba la qaatay? Akhristoow ha ila yaabin, qaddarkii i helaan kolba doc ka fiirinayaaye. Walaalow ha ila yaabin, qol aad u madow baan dhex haabhaabanayaaye. Hal iyo hal ku heshiiyey laba ayaan leeyahay wadareey "fadlan iigu noqoo saddex maad iiga yeeli?". Sanduuq la'igu dabooloo, aan lahayn dalool yar ayaan daaqad ka raadinayaaye. Qorrax hadda uun hoyataan, "imikay soo noqon", qalbi dhiig da'aya, ku sabaalaynayaaye. Codkiisii aan necbaa ayaa iga soo jeediyey fikirkii aan dhex mushaaxayay.

- Waa in qalliin lagugu sameeyo.
- Iigu celi, maxaad tidhi? ayaan si caajis ah uga hore keenay aniga oo fahmay hadalka uu yidhi.
- Si degdeg ah weliba.

- Goorma? ayuu aabbo la soo booday
- Imika, wax walba waannu kuu diyaarinnay.

Intii aan sariirta la'i jiifin ayaan warbixin digtoorka ka guddoomay. In la goyn doono qayb ka mid ah caloosha. In bir beerka gaadha caloosha la'iga gelin doono si loo hubiyo in uu caafimaad qabo. Ilaahayoow beerka uun ii ilaali. Xaaraamigaasi dawo ma lahee. Warbixin dheer oo "haddii" u badan ayuu i siiyay. "Haddii uu beerka gaadhay qalliin ma samayn karno". "Haddii caloosha la gooyo qaybta bukta oo dhan waa si wacan, markaa in aad caafimaaddo ayay u badan tahay". "Haddii laakiin uu fido qalliinkani faa'iido ma laha". Wax aan aamino ayaan garan waayey. Runtaa fiicane maan fahminba waxa uu ii sharraxayo. Kolleyba ma garanayo wax ii wanaagsan iyo wax kale. Isaga ayaan aaminayaa. Isaga ayaa iga masuul ah. Madaxa oo taayir baabuur ka wareeg badan ayaan jiifsaday. Waxa aan xasuustaa aniga oo digtoorka ku leh "fadlan iga wada goo caloosha dhan". Calool xanuunsanaysa ayaan wax ku ritaa. Duco waan dhammaystay, fikirna weli waan wadaa. Hodan ayaa i hor imanaysa. Miskiinta yar waan ka naxay. Xanuunkaygaba iyada ayaa iga la weyn. Bal dhibka aan la soo doontay eeg. Gabadh yar oo nolosha ay bilow u tahay weeyaan. Jaamacad ayay ku jirtaa, mustaqbal fiican ayaa sugaya. Weligeed dhib ma ay soo arkin. Bal maxaa i baray? Dhib ayaan la soo doontay. Weliba aniga ayaa doontay oo waan ogaa. Inkasta oo ay iyaduna i rabtay, laakiin aniga ayaa afka la galay. Sidaas ayaan isku barannay. Waa qof yar oo da'deeda ka weyn. Imika uun labaatanka joogta, si ka weyna u fikiraysa. Been ma sheegayo, noloshayda iyada ayaa dharaar ka dhigta. Si kasta oo aan u murugoodo, xusuusteeda ayaan la dhoolla-caddeeyaa. Wax badan ayay noloshayda ka beddeshay. Waa dadka aad is

odhanayso "ma duni kale ayay ka timid?". "Meeshan wanaagsan ee ay ka soo xagaa-baxday waa halkee?". Codkeeda ayaa iga hadliya, qosolkeeda ayaa iga qosliya. Naqaskeeda ayaa dhegaha u dawo ah. Iyada ayaa aragga u roon. Wax kasta oo iga maqan iyada ayay ku jiraan. Wax kasta oo aanan lahayn iyada ayaa haysata. Halka aan ku dhammaado ayay ka bilaabantaa. Waannu is dhammaystirnaa. Hadalka ay tidhaahdo ayaan dhammaadkiisa garanayaa. Midka aan odhan doono ayay bilowgiisa haysaa. Waa qofkii aan u baahnaa. Waxa aan isu arkaa in aan nasiib leeyahay haddii aan Hodan helay. Waa intii aanu digtoorkan habaarka qabaa wax kale ii sheegin kahor. Waa markii geeri soo dhowaatay la'iigu bushaareeyey kahor. Imika iyada ayaan rabaa in aan fogeeyo. Iyada ayaan rabaa in aan ku idhaahdo "i illow". "Waan dhiman rabaaye qof kale doono". "Mid aan ku cidlayn fadlan raadso". "Xussuteennii iska masax". Sidaa maskaxdayda ayaa rabta, qalbigu wuu ilmaynayaa. Si kale ayuu doonayaa. Si aan macquul ahayn ayuu ila rabaa. Inkasta oo aan isaga doorbido, markan waa in aan maskaxda raacaa. Iyada ayaa ka miisaan wacan. Laakiin sidee loo tirtiraa xusuus noocan ah? Sidee xaqiiq jirta loo inkiraa? In aan garabkeeda ku dhinto iyo in aan xanuunka ka yareeyo sideen u walaaleeyaa. Labadaa sideen u mideeyaa? Weydiin aan jawaab lahayn oo dhexdayda ku wareegaysa ayuu miyirkii iga tegay.

Filimaanta ayaan ka arki jiray marka uu qof qalliin ka soo kaco iyo sida kamaradda looga metelo indhaha qofka. Si aan caadi ahayn ayaan wax u arkayay. Indhaha ayaan inyar xoog u kala qaaday. Hooyo oo gacantayda midig ku duuban iyo codkeeda oo aanan fahmayn ereyada ay leedahay ayaan dareemay. Digtoorkii ayaa dhankayga bidix taagan. "Miyaa lagu guulaystay?". In aan kor u dhawaaqayo ayaan is moodayaa laakiin cod ma hayo. Inyar

kaddib ayaan qasab ku soo saaray: "Digtoor, digtoor, wixii ma iga goysay? Miyaan caafimaaday?"

"Maan bogsaday? Ila hadla dee, maan bogsaday?". Rejo carruurnimo ayaa iga hadlinaysa. Waxa i haya ayaan wax sahlan u haystaa. Kursi aan dhabar lahayn ayuu soo jiiday isaga oo lugaha dhexdooda ka soo saaraya si uu salka ugu beego. Waraaqo uu hayay ayuu dhinac u dhigay, gacmihiisa gaagaaban ayuu midba jilib ku cadaadiyay. Madax weyn ayuu dhankayga u soo foorariyay isaga oo aan aadna iigu soo dhowaanayn. Afka ayuu kala furay. Hooyo oo dhanka midig iga fadhidaana, wardigii ayay joojisay.

- Khalid, laba war ayaan kuu hayaa. Mid wacan iyo mid xun.

Naqas qosol u eeg balse weydiin ka dhignaa oo iga soo baxay, kaddib ayaan u raaciyay:

- Ka farxadda ah ii sheeg.
- Warka farxadda ahi waxa uu yahay, kansarku ma uu gaadhin beerkaaga.
- Haye?
- Warka kale ee aan wanaagsanayn ayaa ah, qalliinkii caloosha waannu samayn kari weyney. Sababta oo ah, intii aannu moodaynay in ka badan ayuu ku faafsan yahay.
- Waar muxuu yidhi?
- Qalliin imika la sameeyo, faa'iido ku ma jirto.

Waar ninku muxuu yidhi? "Wuu faafay" miyuu yidhi? Imika ma farxaddaydii ayuu waxbayahay ka dhigay? Intii aan suuxsanaa ayaan ku riyooday aniga oo caafimaaday. Been ayay noqotay. Riyooyinkii hore ka daba gee. Rajadii way baaqatay. Sidii hore

waan ka xanuun badanahay. Sidii la moodayay xaaladdu way ka xun tahay. Sownigii moodayay in aan caafimaaday. Sidii aan rabay ayay noqon weyday. Roob ii da'ay ayaa dhado lagu sheegay.

- Maaddaama oo aan qalliin hadda la samayn karin, waa in marka hore la soo koobo goobta xanuunku saameeyey. Si taas loo sameeyo, laba dawo ayaan kuu bilaabayaa.

Aammusni ayaan kula socdaa.

- Weerar ayaynu ku qaadaynaa unugyadan sida xun u tarmaya ee kansarka loogu yeedho. Mar waynu tooganaynaa oo meeshooda ayaynu ku dhalaalinaynaa, marna dawo ayaa xididka lagaa siinayaa oo joojin doonta tarankooda. Balse hal dhib ayaa jira.

Wuu hakaday. Waan margaday. Wuu sii watay:

- Dawadan dambe, waxa ay weerar ku qaadaysaa unugyada oo dhan. Kuwa xanuunsanaya iyo kuwa caafimaadka qaba.
- Maxay ka dhigan tahay markaa?
- Waxa ay ka dhigan tahay in aanad qaadan karin in ka badan inta uu jidhkaagu qaadi karo. Waxa kale oo ay ka dhigan tahay in jidhkaaga uu is beddel weyni ku iman doono.

Halkaa marka uu marayo ayay indhaha ilmo dhaadheer iga soo daadatay. Wax aanay maskaxdu fahmin ayay garteen. Anna waan xaqiiqsaday. Is beddelka uu ka hadlayo ayaan gartay. In aan iska hubsado ayaan doonay.

- Ma wixii timaha daadinayay baa?

Jawaab cod ah ayuu iga la xishooday. Madaxa ayaan ruxitaankiisa "haa" u gartay. Garashadaa ayuu qalbigu naxdin u fahmay. Fahamkaa ayuu jidhku cabsi la dabcay. Timaha dhan ayaa iga go'aya. Sunniyaha, xirribaha iyo dhammaan xaadda jidhka. Murux ayaan noqonayaa. Kuwii aan filimaanta ka daawan jiray ayaan u eekaanayaa. Ma rabo! Ma rabo in aan sidaa ku dambeeyo. Ma taasaa ii dambeysay? Khaalid oo timihiisa la ogaa sida uu u dhaqaalayn jiray.

- Markaa ma caafimaadayaa digtoor?
- Ma sheegi karno taas, keliya waxa muhiim ah in aan qabanno wax kasta oo awooddeena ah.

La ma hubo in aan ku caafimaadi doono. Markaa inta aan foolxumaado ayaan haddana dhintaa? Mamnuuc. Foolxumo ku dhimo, qurux ku dhimo ayaa dhaanta. Inta aan silco, geerina ku darsan maayo. Ma oggoli silic, haddii aan dhimanayo, aniga oo feedhanaya aan dhinto.

- Imika waad fasaxan tahay, Isniinta 8-da subaxnimo ayaa innoo ballan ah. Markaas ayaad qaybta koowaad qaadan doontaa.

Waa hadal uu kun jeer uu hore u soo yidhi. Waxa aan ahay tiro ka mid ah boqollaal uu hore u qaabbilay. Jid loo jeexay ayuu marayaa, haddii aad dhimato iyo haddii aad noolaato, isaga dantiisa maaha.

Weji madow, timo geeri og iyo Hodan oo dhegta iigu jirta ayaan muraayadda suuliga ee guriga aan la hor tegay. Timo aan macno badan ii samayn jirin ayaa maanta dheemman noqday. Indhahayga guduudka godka kula jira ayaa sunniyaha gaadhka ka haya si gaar ah u dhowraya. Waxa aad mooddaa in ay fahmayaan kaalinta ay bannayn doonaan. In iyaga iyo dhididku cidlo iska heli doonaan. Xirribaha ayuu soo xiirtay ayaan maqli jiray. Ilaahay marka uu xiiro ka warran? Hodan ayaa igu qancinaysa in aan dawada qaato. Laakiin haddii aan kolleyba dhimanayo, maxaan ku falayaa dawada? Maaha su'aal jawaab leh. Maaha mid la weydiiyo qof ku jecel. Balse waa mid in badan ka oohisay Hodan. Codsi odhanaya "fadlan sidaa ha igu odhan" ayaan "haye" kaga jawaabay.

Talo waalid iyo codsi Hodan ayaan ku soo gaadhay maalintii ballanta. Maalintii jidhkayga sun lagu mudi lahaa. Diyaar ayaanan u ahay. Afar caagadood oo cagaar ah ayaa korkayga sudhan, dhammaan jidhkayga ku dhammaan doona. Awooddayda hoos u dhigi doona. Difaacayga dili doona. Waanan ku faraxsanahay.

"Yalaallugo iyo madax-xanuun ayaa kuu bilaabmi doona" ayay si qabow iigu sheegtay iyada oo xididkayga mudaysa. Ereyo madhan ayaan u qaatay, ma ogi waxa ay uga jeeddo. Affar caagadood ayaa igu dhammaaday. Dhankii guriga ayaan u soo dhaqaaqay, wax dawakhaad ahna maan dareemin. Sidaas oo ay tahay, daawooyin saddex ah oo dawakhaadda la dagaallama ayaa gacanta la'iiga soo dhiibay. Habeenkaa si fiican ayaan u seexday, si aad uga duwanna subixii ayaan u soo kacay. Culayska madaxa, qof xoog weyn ayaa igu fadhiyay. Dhaqaaq iska dhaaf, indhaha ma rogi karayn. Weligey wax noocaan ah ma arag. Xubnaha jidhka waan dhaqaajin karaa, madaxa ayay se damqayaan. In aan kaco

ayaan rabaa, waan awoodi waayey. Guuxa ka baxaya dhakadayda gudaheeda, suuqii Bakaaraha ayaad mooddaa. Wareeg xoog ah ayuu samaynayaa, ma joojin karo. Gacmahayga ayaa furaashka cantuugay. Farahaa lugaha ayaan isku soohay anigoon is ogeyn. Indhahaan kala qaaday, derbigaa ii dhaqaaqay, degdeg baan u daboolay, mugdigaa ka daran. Sidaasaan sii ahaa, muddoo saacad ku dhow. Kiniinno aan fogeeyey ayaan dhowr ka liqay. Madaxaa i qaboobay, calooshaa i bilowday. Biyihii ku jiray ayay rabtaa in ay soo celiso. Madaxaan ku daboolay barkin aan silciyay. Dhareer baan ku qooyay dhammaan cudbigii barkinta. Muddo waan galgashay, toddobaadkii dambena sidaasaan sii ahaa. Xanuun guuraya baan, gebigey aan noqday. Noloshaa macaankii iyo dhadhankii ka tegay. Anigoo is lahaa, silic kuu ma hadhin, ayay timihiina bilaabeen. Gacantaan mariyay dhakadayda dusheeda. Rucub timo ah ayaa farahayga soo raacday. Naxdin weynaa, hooyooy. Laba maalmood kaddib, dhammaan way iga daateen. Haddii ay timuhu, jidhka dhar u yihiin, nin qaawan baan noqday. Tin baa ugu yare, xabbadna waan iska waayey. Dhakhtarkaan ku noqday, si suntii aan u qaato. Mar labaad ayaa la'igu shubay, wax cagaaranoo foolxun. Dawakhaaddii badnayd iyadoo yaraanaysa ayay mid cusub i bilowda haddeer. Way daciiftay naftaydii, cuntadii waan nacay, jidhkaygii xoogga miidhan ahaa, maanta waa boqol jir. Sidii duqaydaan raacayaa derbiga. Debed aan u baxo, hadalkeedaba daa. Waan kacaa-kufayaa. Codkaygii onkodaayay maanta waa naqas iyo foodhi. Sidaas oo aan ahay, difaacaygii jidhku, markii uu yaraaday, wax kasta waan u nuglaaday. Hargab baa i haleelay, toban jeer iyo saa'id. Kun xanuun oo yaryar ayaa la'iga daweeyaa. Sidaasaan sii ahaa, saddex bilood oo kale.

Maalmihii u dambeeyey, xaaladdayda darteed, dhakhtarkaa la'i geeyey. Meel nadaafad badan ayaan keligey iska jiifaa. Kalkaallisooyin jaraysan anigay i la joogaan. In booqashada la'iga yareeyo, dhakhtarkaa hooyo u sheegay. Markay ii imanayso hooyadaydii macaan, markuu i soo booqanayo aabbahaygaan jeclaa, markay iftiinkii noloshaydu, Hodan ii soo gelayso, dhammaantood waa inay maro soo huwadaan, afka soo dabooshaan, taabasho ay iga dhowraan. Maanta ayay ii timid Hodan, indheheeda oo keliya ayaa ii muuqday. Quruxdooda ayaan sidaydii daawanaayay. Murug ay iga qarinayso ayaan ka daallacanaayay. Illin ay celinayso ayaa soo burqanaysa. Aayar bay masaxdaa, haddana way qubataa.

- Hodaneey ha ilmaynin, anigu waan hoyanayaaye, ayaan u idhi si gaaban.

Jawaab ayay iska weydey. Waxyar ayay foorarsatay.

- Fadlan ha ii ooyin maanta, adna waan kuu duceeyey. Intaasuu ka waday, Ilaahay nolosheenna.

Waxyar bay hinqatay, indho ay hagayaan, baadad aad u dhaadheeri ayay igu dhowrtay, markaasay i tidhi:

- Khaalidoow i guurso!

Maxay tidhi inantu? "Khaalidow i guurso". Guur, guurkii nolosha. Haddii aan qosli karayo, waan qosli lahaa. Nin dhimanaya ayay leedahay nooloow. Sariirtii geerida ayaan saaranahay. "Waan dhimanayaaye, maxaad igu falaysaa?" ayaan ku idhi. "Adigoo ninkayga ah inaad dhimato ayaan rabaa", ayay ii

celisay. Gudaha ayaa la'i yaacay. Xubnahaa i dabcay. Ma run baa waxan ay dhegahaygu maqleen? Gabadh da' yar, jaamacad ku jirta, qurux Alle siiyay oo doonaysa in ay guursato nin maalmo sii noolaanaya. Waa maxay sababtu? "Riyadii ahayd in aad ninkayga noqoto ayaan rabaa inay rumowdo" ayay sii raacisay. Hadal waan iska waayey. Bal maxaad odhan lahayd? Runtii waan jecelahay Hodan, in aan guursadana waxay ahayd riyada weyn ee aan lahaa, laakiin in aan xaaladdan ku guursado maan jeclayn. Maaddaama oo ay iyadu sidaa rabto, anna xaalad aan wax ku diido ku ma jiro. Noloshayda dhan waa loo taliyaa imika, guurkan ayaaba ah midka ugu wacan ee aan ku farxi doono. Si aan mar uun u idhaahdo "Hodan ayaan qabi jiray" ayaan u oggolaaday. Ma garanayo cidda aan ku odhan doonee. Aabbeheed iyo hooyadeed ayay u soo sheegtay, anna kuwayga ayaan cod daciifa ku gaadhsiiyey. Way soo wada hadleen, laba reer oo saaxiib ah ayay ahaayeen marka horeba. Maaddaama oo aan dawooyin culus qaadan doono toddobaadka dambe, inta ka horreysa ayaa laga dhigay. Waa maalin kaddib. Waana la gaadhay.

Maalintii meherkayga, inta aan noolahay maalintaan ku lahaa. Maalin aan muddo dheer sii qorshayn jiray weeye. Maalin uu Ilaahay qorshe gaara u yeelay. Maalin aan is lahaa adigoo qoslaya, maalin aan is lahaa aad u weyneysid aad. Maalin qayrkay dhammaan boqol baabuur kaxaystaan, dabadeed iyagoo qoslaya la ciidaan asxaabtooda. Hudheel weyn ayaan qorshaystay, cusbitaal ayaa beddelay. Boqollaal qof oo aan casuumi lahaa, dhowr qof ayaa beddelay. Anigoo fadhiya ayaan gacan-qaadi lahaa sheekha, maanta waa jiifka uun. Dhinacayga midig, garabkayga ku beegan, sheekhii Maxamed ee quraanka dhigaayay ayaa soo kambadhuudha. Dhiniciisa midig aabahay ayaa fadhiya. Dhankaa

cagahayga, muraayaddii noloshaydaa weji aad u furan igu soo daawanaysa. Labadeeda garab labadeedii hooyaa midba baal fadhiyaa. Garabkaygan bidix aabbeheed Xasan baa isna ii fadhiya. Saddex kalkaalliso oo qaybtaydan ka shaqeeya ayaa albaabka agtiisa si dhowrsan u taagan. Iyagaa oggolaaday in maanta laga dhigo meherka. Shamac baxaya, keeg aan aad u weyneyn iyo dhal-dhalaal kale oo dul yaalla miis agtooda ah ayay iyaguna soo diyaariyeen. Way ii dhoolla-caddeeyeen iyagoo illinta si qarsoodi ah u masaxaya. Sheekhii ayaa bilaabay hadal aanan maqlayn, indhahaa ku nagaaday wejigii Hodantayda, iyadaan fiirsanaayay. Ma maqlayn wax kale oo aan naqaskeeda ahayn. Ma arkayn wax kale oo aan indhaheeda ahayn. Duni kale ayaan dhex tegay, intii aan daawanayay waan illoobay xanuunka. Illaa uu sheekii, shaqadiisa watay iga jiidhay dareenkii. Su'aal aanan is weydiin ayuu laabta ii saaray.

- Meherku waa imisa?

Nin dhimanayuu meher weydiinayaa! Anigoo aan ka gaadhsiin jawaab ayay dhawaaqday Hodan:

- Hal dollar.

Dhammaan waa la aammusay. Way sii wadatay.

- Haddii uu caafimaado, isagaa kun wax ii iibine, imika se hal dollar ayaannu ku heshiinnay.

Dabcan waa heshiish aanan ogeyn, hadda se aan ku raacay.

”Waa hagaag” ayuu yidhi sheekhii intii aanu sii wadan hawshiishii. Daqiiqad kaddibna xaaskaygii ayay noqotay.

Nin sii dhimanaya oo guursaday, waa aniga. Xanuunkii ugu foosha xumaa ayaa i helay, inantii ugu qurux badnayd ayaan helay. Miyaanan ka badin? Way ila tahay. Dhan marka la eego waan nasiib xumahay, dhanka kalena aniga ayaa dadka ugu nasiib wacan. Xaaskayga, garabkayga midig, Hodan caddey markii ay noloshayda ku soo biirtay, ayaa qabow iigu horreysay. Qalbigayga luuqyadiisa kuwa uga madow ayay fallaadho kalgacayl la nuuraya ku iftiimisay. Qalbi murugo la qallalay, korkiisana qaac ka baxayo ayay noqotay dhibica oogadiisa duxdii u soo celiyey. Wakhtiga intiisa badan iyada ayaa i la joogta, intaana inteeda badan way ii sheekaysaa. Intii aan awoodo, waan u celiyaa. Su’aalo badan oo aan is weydiin jiray waxa beddelay codkeeda qabow. Keli ayaan dareemi jiray, wehel ayaan helay. Dhinac kale ayay nolosha iga tustay. Markii u horreysay muddo shan bilood ah ayaan si dhab ah u dhoolla-caddeeyey. Muddo waannu is naqaannay, haddana dhinac cusub ayaan imika ka bartay. Laba qof oo caafimaad qaba ayaannu ahaan jirnay, si aan sidan ahayn ayaannu isku naqaannay. Imika sidan ay tahay hore u ma aan arag. Tamarta ay iigu sheekayso ayaa ah mid aan dhammaad lahayn, xilli kasta iyo xaalad kasta is ma dhinto. Siyaabbo kala duwan ayay igu illowsiisaa xanuunka. Waxaanan ugu jecelahay marka ay ila kaftanto, runtana ii sheegto. Qof xanuunsanaya runta ayaa laga ilaaliyaa, laakiin maya. Si aanan u dareemin in aan buko ayay kaftan aan jecelahay iigu tidhaahdaa. Shalay ayay ahayd markii ay garabkayga fadhiday, kursigeedii ay iska yeelatay; waxoogaa ayay wejigayga dhowrtay, si deggan ayay igu soo gaadhsiisay “acuudu billaah! Islaan yaroo coodhcoodhay ayaad u eekaatay”.

Odhaahdaasi dhowr caagadood oo dawo ah ayay ka faa'iido badnayd. Maalintii meherka maalintii ku xigtay ayay aragtay kalkaalisada oo jiifka dawo igu siinaysa. "Stop" ayay ku dhawaaqday, way i soo fiirisay. "Xabiibi ma oggoli inaad jiif daawada ku qaadato, nin weyn ayaad tahay ee fadhiiso". Kalkaalisadii oo weli yaabban ayay intii u sheegtay. Waan u qaadan waayey runtii hadalka ay i tidhi, waan is qasbay, fadhiistay, qaatay daawadii, haddana jiifsaday. Markii ay kalkaalisadii tagtay ayay ii sharraxday hadalkii ay tidhi. Kolley way fahamtay in aan la yaabay. Si qumman ayay ii tidhi "xabiibi ducadu waa gaar, laakiin haddii aanad adigu caafimaadka raadsan miyuu kuu imanayaa?". Weydiin aan jawaab u waayey. Way sii wadatay, "ka soo qaad in uu kansarku yahay qof, dee iska celi xabiibi, ha tusin daciifnimo. Inta aad awooddo iyo in aad ku dartayba samee". Maalintaa wixii ka dambeeyey, waa lixdii maalmood ee u dambeeyey, daawo dambe ku ma qaadan jiifka. Socodka ayaan kordhiyay, inta aan awoodo ayaan wax ku daray. Hadalka ayaan kordhiyay. Qof geeri sugaya ayaan ahaa, qof nool ayaan noqday imika. Dhimbiil sii damaysa ayay dambaskii ka afuuftay, qalbiga ayay ii siraadday. Dhakhaatiirtii ayaa ka yaabay saamaynta ay igu yeelatay, taas oo keentay in wakhtigii koobnaa ee booqashada meesha laga saaray. "Wakhtiga aad doonto u kaalay" ayaa lagu yidhi. Inta ay huruddo iyo inta ay wax dhiganayso ayay iga maqan tahay. Nolosheeda dhan ayaa aniga iga bilaabanta, iguna dhammaata. Inta ay iga maqan tahay ayaan tebaa. Sidii ilmo yar ayaan cabsadaa marka ay iga sii baxayso. Habeenka madow ayaan ka baqaa. Marka aan muuqeeda arko ayaan farxad la ilmeeyaa. Inta ay ila joogto ayaan nolosha jeclaystaa. Mararka qaar ayaan is weydiiyaa sababta ay sidan oo dhan iigu tahay, hooyaday maaha, isku dhiig ma nihin, muddo

aan dheerayn ayaannu is naqaannay, haddana nolosheeda oo dhan qof sii dhimanaya ayay ku koobtay. Dadka qaar ayaa maalintan oo kale garabkaaga ka dhaqaaqa. Iyadu way igu soo dhowaatay. Waa maxay sababtu? Ma jacayl keliyaa? Maya, dadnimo ayaa u dheer. Weli ma arag iyada oo murugaysan, mar kasta farxad ayay ii la soo gashaa. “Car bal inta aan kaa maqanahay wax is weydii” ayay igu tidhaa marka ay sii baxayso.

Sariir ayaa dhinacayga loo soo dhigay, fadhigii badnaa way ka raysatay. Halkaas ayay soo jiifsataa. Anna dhinaceeda ayaan u jeedsadaa. Indhaha ayaan ka laliyaa dhulka noo dhexeeya si aan indhaheeda u daawado. Aammusni ayaannu is dhowrnaa. Indhaheeda ayaan kolba mid u eegaa. Naxariis ayaan ka dhex arkaa, waan ka foorarsadaa. Ma eegi karo in badan. Haddana ta kale ayaan eegaa, si qabow ayay ii daawanaysaa, “waan ku jecelahay Hodaneey” ayaan u tebiyaa. Sidii wax fahmay hadalka aanan odhan ayay libiqsataa. Sida sabirka leh ee ay u soo jiifto ayaan ka qiiroodaa, waan u duceeyaa. In aanu Ilaahay riyadeeda ku hungayn ayaan u Eebbe u weydiiyaa. “Ilaahayoow iyada darteed caafimaad ii sii, Ilaahayoow qofka sidan u wanaagsan ha iga kaxayn, Ilaahayoow aniga oo aan abaalkeeda gudin noloshan ha iga qaadin. Nin caafimaad qaba ayay u qalantaaye Ilaahayoow haddaad caafimaad i siiso, maalin keliya indheheedaa malabka u eeg ka oohin maayo. Wax ka farxiya mooyee wax kale tusi maayo. Ilaahayoow awoodda ii soo celi aan noqdo ninka ay u qalantee”.

Ma jecli in aan xanuunkayga ka sheekeeyo. Sababtu waa laba. Ma rabo in uu calaacalkaygu bato, taasi waa mid, midda labaad waxa ay tahay; marka aan dib uga sheekeeyo xanuunka i haya, waxa ay iiga dhigan tahay in aad mar labaad xanuunkii dib u

marayo. Sidaas oo ay tahay haddana waxa aan bartay in aan isku qasbo in aan dadka la wadaago, waxa ay Hodan ii sheegtay in ay naftayda u fiican tahay. Aammusnidu ii ma fiicna, mid kale oo aan ii fiicnayn ayaa jirta, waa hurdada. Ma rabo in aan seexdo. Waxa aad mooddaa in ay riyooyinka adduunka ugu xumi ii soo kala dheereeyaan. Tii hore oo aan dhammaan ayay mid ka darani booska ka riixataa. Waxa aan noqday neef bakhtiyay oo haaddu rifayso. Sammada ayaa la'iila baxaa, diyaarad ayaa la'i saaraa, meel aan ishu gaadhin aniga oo maraya ayaa faraha la'iga qaadaa. Aniga oo dhulka in yar u jira ayaan soo toosaa aniga oo qaylinaya. Waa riyada u horreysa ee aan habeen kasta ku riyoodo. Iyada ayaa furta xafladda, kuwa kalena way ku xigaan. Dhul bannaan oo geed la fuulo lahayn aniga oo harraad u dhimanaya ayuu libaax gaajaysani i eryadaa. Shan jeer marka aan kufo ayaan marka lixaad indhaha kala qaadaa aniga oo rafanaya. Waxa aan xasuustaa beri ay hurdadu raaxo ahaan jirtay, jiifku wax lagu nafiso ahaan jiray. Imikana sida aan waaga u sugayo ayay indhuhu i dheeraadaan. Nasiib-wanaag Hodan ayaa ku jirta fasax laba toddobaad ah, subaxa horeba way ii timaaddaa. Maalinta oo dhanna way ila joogtaa si ay fiidka iiga tagto. Inta ay ila joogtana waan illoobaa xanuunka. Weligey sidan oo kale nolosha u ma aan jeclaan. In aan noolaado ayaan adduunka ugu jecelahay maanta. Waxa aan rabaa in aannu wada caweyno, aniga oo timo leh. In aan gacanta qabto oo aan la lugeeyo aniga oo aan daalayn marka aan shan tallaabbo qaado. Waxa aan doonayaa in aannu dunida soo wada aragno, annaga oo gacmaha is haysanna. Imika iyada ayaa ii sheekaysa, waxa aan rabaa in aan ka qosliyo habeenka intiisa badan. Walow ay qaddar tahay, haddana ma rabo in aan iska dhinto. Runtaa fiicane Hodan qof laga dhinto maaha. Inta badan ma jeclin in aannu ka hadalno geerida iyo nolosha adduunka marka aan ka

tago kaddib, haddana mararka qaarkood runta ayaa ku soo qabanaysa. Anigu waan la qabsaday oo waan ka faalloon karaa balse Hodan way ku adag tahay arrintaasi. Waa marka keliya ee aan wejigeeda ku arko murugo. Waa markan oo keliya marka ay indhaha iga la oroddo. Waan aqaannaa oo ciddiyaha ayay isku mashquulisaa. Ma daayo aniguna oo waxa aan jecelahay in ay runta isu sheegto. Ma rabo in ay u qaadan weydo maalinta aan hurdada ka kici waayo. Waxa aan doonayaa in ay la qabsato mawduucan si ay aqbalaaddiisu ugu fududaato hadhow. In badan way iga roortay, maanta se waan qabtay. Si qabow ayaan ugu bilaabay.

- Miyaanay cajiib ahayn in innaga oo og in ay dunidu tahay wax dhammaanaya, haddana aynu u nool nahay sidii dad aan dhiman doonin?

Jawaab ayaan ka waayey. Waan sii watey:

- Bal ka fikir, 100 sanno kaddib, dadka aad maanta taqaanno oo dhammi dunidan ma joogi doonaan. Dhismahani sidiisa ayuu u dhisnaan doonaa, jidku halkiisa ka guuri maayo, cirka iyo dhulku sidoo kale, keliya adiga iyo dadkii aad taqaannay oo dhan ayaa meesha ka baxaya, waxa beddeli doona dad aanad maanta aqoon.
- Bes haddaba, Khaalid! Marka dhankaa laga eego waa bilaa macniye naga dhaaf.
- Laakiin xanuunka qof kasta u soo socda ayaa xun, in kolba maalin laguu soo sheego geerida qof aad taqaannay. Amma maanta ha ahaato amma konton sanno kaddib ha ahaatee.

- Wallaahi wax lagu daalo maaha dunidani.
- Sidaas oo ay tahay, haddana waynu ka cabsannaa geerida. Geeridu waa qayb muhiim ah oo nolosha ka mid ah, haddana waynu fogeynaa.
- Innagu ma fogeynee iyadaa inna fogeysa. Iyadaa innaga kaxaysa dadka aynu jecel nahay. Qof dhan oo aad is taqaanneen marka lagu yidhaa weligaa dib u arki maysid, maxaa ka xun?
- Marka hore ayaynu qofka isa siinnay. Marka hore haddaynu nafta u sheegno in uu qofkani kaa tegi doono, way fiicnaan lahayd.
- Taasi xanuunka ma kaa yaraynaysaa? Waa maya! Si kasta ugu sheeg, naftu ma fahmayso. Naftaada sideed ugu sheegi kartaa ”qof aan dhiman ka quuso”?
- Waad u sheegi kartaa, waanay ku qasban tahay in ay fahanto. Xaqiiqada ayaa taas ah.
- Maxaad rabtaa waayee in aan sameeyo, anigaa imika samayne ii sheeg! Ma inta aan ku nabadgelyeeyo ayaan sugaa intaad dhimanayso? Ma saasaad i leedahay samee, Khaalidoow?
- Maya, ee wuxuun baan diidayaa in hadhow ay kediso kugu noqoto oo..
- Kediso?
- Dee haa, yacnii in aad u qaadan weydo marka aan..
- ..marka aad dhimato? Maxaan rabtaa, ma in aan ku farxo? In aan ooyi waayo? Ninkaygii oo dhintay in aan u murugoon waayo? Saaxiibkayga koowaad in aayar uun ka samro?

- Haa! Haa waxaan rabaa in aad aayar uun iga samirto, in aanad ii murugoon oo aad ooyi weydo. Dhimashada dhan waxa igaga daran werwerka aan adiga kaa sii qabo.
- miyaad is maqlaysaa waxa aad leedahay imika? ”Marka aan dhinto ha ii murugoon” ayaad i leedahay. Inta aan noloshayda farxad la soo gashay, inta aad wanaag i tustay, inta aad jacayl ila wadaagtay ayaad aayar iska dhimanaysaa! La’aantaa xaggeen nolosha ka bilaabaa? Nasiib-xumadayda waan garanayaa oo weliba cimrigaygu wuu dheeraan doonaaye, sideen ayaanta uga gudbaa aniga oo aan ku arag? Yaan la qoslaa? Ha ii murugoon ayaan i leedahee waxaasi ma caddaalad baa?

Baroor ayay ku dhufatay. Ilaahayoow maxaa igu watey! Balaayo ay dib u celin jirtay ayaa soo fatahday. Hadal aan fahmi waayey ayay sii wadatay, gacantayda bidix ayaan teeda midig la doontay. Waan soo jiiday, madaxeeda ayaan laabta ku qabtay. Hadalka ayaan ka joojiyey. Marada cawlan ee dhabankeeda iyo laabtayda u dhaxaysa ayaa ii soo gudbinaysa qoyaan ay indheedu u soo tufayaan sida dhibica mahiigaanka. Naqaskeeda ayaa isaguna sida gufaacada feedhahayga duqaynaya. Halkaa marka uu xaal marayo ayuu soo galay, waa digtoorkii oo degdegsan.

- Waan ka xumahay in aan iska soo galay..

Hodan ayaa kor u boodday.

- Muddo ayaad qaadanaysay daawooyin kala duwan, waxa noo caddaatay in ay soo yaraatay oogadii buktay, sidaa darteed..
- Hee, sidaa darteed hee?

Waan is hayn kari waayey

- Sidaa darteed jidhkaagu qalliin ayuu diyaar u yahay. Imika ayuu jiraa wakhti firaaqo ah, waxa na la jooga digtoorkii weynaa ee gobolka, kalkaalisada ayaan kuu soo dirayaa. Waxa ay kuu diyaarin doontaa qalliinka, shan iyo toban daqiiqo kaddibna qolka qalliinka ayaa lagu geyn doonaa. Khaalid, hal shay ayaan rabaa in aan kuu sheego, een.. rejo weyn ayaannu ka qabnaa qalliinkan.

Kalkaaliso ordaysa ayaa ila haadday. Sariirtii ayay igu jiidday. Waan u dhawaaqay, in ay joojiso ayaan ka dalbaday. Way iga yeeshay. Hodan ayaan doonayay in aan la hadlo inta aanan qalliinka gelin kahor. Dushayda ayay soo istaagtay. Wax aan idhaahdo ayaan garan waayey. Indho illintu ka da'ayso ayay igu eegtay. Hadal aanan ku odhan ayay maqashay. Cabsi i haysa ayay dareentay. Gacantayda ayay ka buuxsatay. Madaxa ayay aayar dhiirrigelin u ruxday. "Waan kuu duceeyey" ayaan maqashiiyey. Sidii qof ka tegaya ayaan u sii eegay intii aanay gabadhii i dhaqaajin kahor.

Runtii u malayn maayo in aan nolol kaga soo noqon doono qalliinka aan gelayo imika. Waan daalay, adduunka waan ku silcay, in aan Ilaahay la kulmo ayaan imika diyaar u ahay. Wallaahi waan quustay. Qalfoof meel yaalla ayaan noqday, rajadiina qorrax ay daruur qarisay ayay noqotay. Quraan intii aan ka gaadhsiin karayay ayaan hoos u akhriyayaa. Ashahaadda ayaan xiijiyey. Sariirtii qalliinka ayaa la'igu wareejiyey. Irbado kala duwan ayaa gacmaha la'igaga rakibay intii aan afka iyo sanka la'iga daboolin kahor. Magaca Ilaahay ayaan afka ku hayay markii miyir

iigu dambeysay. Isaga ayaan afka ku hayay markii aan soo toosay aniga oo 10 jir ah, waxa aan joogay garoon kubadda cagta lagu ciyaaro. Hoggaamiyaha kooxda ayaan ahaa, kooxda oo ka koobnayd 10 carruur ah oo guurguuranaya. Siidhi-wadaha ayaa ahaa madax keliya oo hawada heehaabaya. Kooxda iga soo hor jeedda ayaa ah 11 mas oo dhowr midab leh. Haddana cago ayay leeyihiin. Ciyaar wakhti dheer qaadatay ayaa na dhex martay. Waxa meel aan fogeyn soo fadhiya hooyo, aabbo, Hodan iyo waalidkeed. Dharka kooxda ayay xidhan yihiin. Waxa ay diyaar u yihiin in ay i beddelaan marka aan daalo. Dhowr jeer ayay ii dhawaaqeen. Waan ka diiday. Ma rabo in ay ciyaartan khatarta ah ku dhaawacmaan. Kubaddii ayaan kula baxay kooxdii kale aniga oo dhanka goolka u ordaya. Maskii koowaad ee aan dhaafay ayaa dhabarka iga qaniinay, kii kale ayaa gacanta iga dhaawacay, mid kale caloosha. Maan soo jeedsan, goolkii ayaan kula baxay, waxa dhex fadhiya boqorkoodii oo shan madax leh. Cadho i haysay ayaan ku laagay kubbad sida waranka u samaysan. Waan dhaliyey. Markii uu warankii shabagga dambe taabtay ayay masaskii oo dhan dhinteen, inayar kaddibna way baaba'een. Farxad ayaan kula soo orday dhanka Hodan. Gacanta ayay i qabatay, gacan qabow ayay igu maratay. Waan soo toosay. Indhaha ayaan kala qaaday iyada oo gacantii weli igu dheggan. Waxa weheliya afartii waalid. Weli ma ay dareemin in aan soo kacay, faraheeda ayaan si fudud u cadaadiyay. Way i soo eegtay, farxad ayuu wejigeedu u iftiimay sida cadceedda. Kalkaaliso ayaa loo dhawaaqay, qalabkii ayaa la'iga furay. Hodan ayaa dhankayga u soo durugtay, afka ayay dhegta ii saartay, "xabiibi waad caafimaadday".

Ilmo kulul ayaa dhabannada i yaacday. Weli caadi u ma aan fahmin waxa ay uga jeeddo. Iyada oo weli igu soo foorarta ayuu

digtoorkii soo galay. Sidiisii ayuu waraaqo gacmaha ku sitaa. Xusuustii maalintii hore ayaa weli madaxayga ku jirta. Sidii oo kale ayuu u soo fadhiistay.

- Khaalid, warka oo kooban, qalliinkii waannu ku guulleysannay.

Intaa marka aan maqlay ayaan indhaha xidhay, wuu sii watey.

- Intii buktay iyo in saa'id ahba waannu goynay. Calooshaadu way caafimaad qabtaa imika. Muddo laba toddobaad ah ayaad sii joogi doontaa cusbitaalka, kaddibna waad iska tegi doontaa.

Wax aan dareemo ayaan garan waayey, si aan u qaato ayaan garan waayey. Miyaan farxaa? Haa, laakiin sideen u farxaa? Sidii loo farxi jirey ayaan illoobay. Jidhka ayaa diidey, awood ayaanu u haynin dareen noocaas ah. Jiifka ayaan ku ilmeeyey. Madaxa ayaa i shuuqay, guux ayaan ka bixi waayey. Habeenkii markii aan keli noqday ayaan sheekaystay. Waxa aan isku dayey in aan fahmo warkii maanta. Waa la'iga gooyay caloosha intii i xanuunaysay. Markaa imika waan caafimaad qabaa? May, haddaan caafimaad qabo waan socon lahaa. Sidii aan qalliinka kahor ahaa ayaan ahay imikana. Sidii ayaan daciif u ahay. Feedhahaygu sidii ayay u diidayaan qufaca iyo dhaqaaqa kediska ah. Weli waan xanuunsanayaa. May, ma xanuunsanayo. Waan xanuunsan jirey. Haddii ay sidaa tahay, caafimaadku ma intaas ayuu jiraa? Muddo dhowr saacadood gudahood ah miyaa lagu bogsadaa? Ma kansar ayaa intaa lagaga caafimaadaa? Haa, waayo aniga ayaa ah jawaabta aan raadinayo.

Wakhtigu dheereeyaa marka aad madaxa mashquuliso. Sidii ayaan ahaa markii ay Hodan ii soo gashay.

- Subax wanaagsan xabiibi!

Farxad weynaa, codkeeda ayaa iiga farxad badan warkii shalay la'ii sheegay. Indho raalli ka ah ayaan dhankeeda ku eegay.

- Huuno ma in aan seexday ayaad moodaysaa? Xalay oo dhan waan soo jeeday, ayay ii raacisay.
- Ma adna? ayaan weydiiyey.

- haa wallaahi, farxaddii adduunka ayaan ku idhi. Kaalay arag. Xalay oo dhan wax ayaan qorshaynayey.

- Haye?
- Mooyi, farxadda ayuun baa dhankaa ii la kacday. Imika miyaad caafimaadday? Wallaahi waan u qaadan la' ahay.
- Aniguba sidoo kale, macaan. Weli maan fahmin. Kolley way ii soo socotaa sidaan filayo.

Qosol yar oo iyada u gaar ah ayay ku dhufatay. Sacabbadeeda ayay marisay dhabannada si ay illinta farxaddu keentay uga tirto. Wax yar ayay aammustay, weli debnaheedu way qoslayaan iyaga oo daboolan. Madaxa ayay dhankayga u soo janjeedhisay iyada oo gacanteeda bidix dhex marinaysa timaheeda qaybta dambe. Waa ficil ay samayso marka ay fikirayso. Waan sugay inta ay dhammaysanayso.

- Maxaad ka fikiraysay huuno? Ayaan aayar weydiiyey.
- Aniga oo timaha kuu feedhaya.

Caafimaadka meesha ugu hooseysa ayaan guri ku yeeshay. Geeri oo keli ah ayaa ka xun halka aan joogo. Walow mararka qaarkood aan geerida ka door bidayey. Balse dawadii xumayd waa la'iga joojiyey. Taas oo macnaheedu tahay, awooddayda ayaa soo noqonaysa. In aad joogto halka ugu hooseysaa hal shay ayay ku fiican tahay, kor ayuun baad uga soconaysaa halkaas, waayo meel loo dhaafo ma leh. Imikana xaaladdaas ayaan ku jiraa, dhowr maalmood ayaa tegay sidii qalliinka la'iigu sameeyey. Runta marka la sheego, ma ay ahayn in aan caafimaad dareemo imika, laakiin waxa aad mooddaa in aan durba soo fiicnaanayo. Kolley waa qalbiga. Rajadii dhimatay ayaa ii soo noqotay. Dhammaad ayuu Ilaahay bilow iiga yeelay. Imtixaan adag ayaa afka la'iga geliyey aniga oo aan waxba soo dhigan. Waxa aad mooddaa in aan ka gudbay, aan idhaahdee waan ka gudbay. Waxa la-yaab leh, in aan dhibsanayey xanuunka igu dhacay. Mid wax iga qaadanaya ayaan u arkayay, in aan dhammaystiranahay ayaan is moodayey. Imika ayaan ogaaday in aan ka faa'iiday. Cashar aanan meel kale ka barteen ayaan dhigtay, qalanjadii aan jeclaa ayaan guursaday, Ilaahay in uu i jecel yahayna waan ogaaday. Waxaas oo dhan ayaa dhowr bilood iigu dhammaaday. Waxa aan imika xaqiiqsaday in aan sii eegayey caafimaadka iga maqan, taasina iga indho tirtay quruxda waxa aan helay. Ilaahay siyaabbo badan ayuu dadka wax u siiyaa, habkani waxa uu ahaa kii aniga wax la'igu siinayey.

Wakhtigu gaabiyaa marka aad wax sugeyso. Waagu dheeraa. Laba toddobaad ayaa tegay, wax badanna way yimaaddeen. Awooddii ayaa ii soo noqotay, taas oo ka dhigan in aan socon karo. Kursi-curyaankii waan ka raystay. Intaaba mid kale ayaa igala weyn: timihii ayaa ii soo baxay. Dhammaan wada xaad ayaan noqday. Waan u qaadan waayey, waayo dhukhurkii ayaan la

qabsaday. Daanyeer ayaan is moodayaaba imika. Caadigii ayaan ka qalooday. Waan la qabsan doonaa.

Wax aan sugaba albaabka ayaa is furay. Qolkii cusbaa ee aan maalmahan dambe degganaa ayay soo gashay. Waa kalkaalisadii jabka ila soo martay. Waxa ay ii sheegtay in ay ku faraxsan tahay tegitaankayga, balse ay i tebi doonto. Si kal iyo laab ah ayaan ugu mahad naqay. Walow ay shaqadeeda tahay in ay i xannaanayso, haddana naxariis ayaa u dheereyd. Inyar kaddibna kalkaalisadii labaad ayaa soo gashay. Nasiib wacan ayay ii rajeeyeen iyaga oo farxad la dhoolla-caddaynaya. ”Waxyaabbo badan ayaa kuu qorsheysan sow maaha?” ayay igu tidhi labada tii gaabnayd. Su’aashu adakaa. Hal mid ayaan ogahay, in aanu qorshuhu ahayn ka aad adigu samaysato. Intaa wax ka badan ka ma aan fikirin. ”Ma garanayo, weli waa degdeg in aan wax qorshaysto. Imika waan ciidayaa oo keli ah” ayaan u celiyey.

Hadalka ma aan dhammayn markii guux iyo shanqadha kabaha ee labada ka badani dhegahayga soo gaadheen, inyar kaddibna indhahayga ayaa qabtay markii ay qolka soo galeen afartaydii waalid iyo qummantii aan jeclaa. Sidii ilmo yar oo nacnac loo keenay ayaan kor u booday aniga oo salaan kala hor tegaya. Way i soo dhoweeyeen, waan fadhiisiyey. Hadal ayaa bilaabmay, ugu yaraan laba qof ayaa markiiba wada hadlayey. La’is ma dhegeysaneyn anna waan ku raaxaysanayey. Hodan oo dhinac isu barbarinaysa ayaan u fiirsaday, gacanta bidix ayaa duuban. Si naxdin leh ayaan u weydiiyey waxa dhacay. Dhammaan waa la wada aamusay, in ay kaabadda ka siibatay saaka ayay ii sheegtay. Aniga oo u fiirsanaya gacanteeda iyo inta dhaawacu gaadhay ayuu digtoorkii soo galay. ”Maxaad meesha ka qabanaysaa?” ayuu

salaan iiga dhigay. Kaftan kooban kaddib waraaqo aan yarayn ayuu ii dhiibay. Bil kaddib in aan soo noqdo ayuu ii sheegay, haddana saddexdii biloodba hal mar muddo sannad ah. Intaa kaddibna fasax ayaan ahay.

Waan raagsanayey in aan bannaanka u soo baxo intii aan nabadgelyeynayey shaqaalaha qaybta aan cusbitaalka ka degganaa. Labadii aabbo ayaa alaabtaydii gacmaha ku sida, labadii hooyo ayaa ducada dhabarkayga la dhacaya, garabkaygana waxa ku dherersan tiirkaygii Hodan. Qorrax sidii hore ka nuur weyn ayaan hawada la qaybsaday intii aanan baabuurka fuulin kahor. Dhankii guriga loo ma socdo, anna ma aan danayn imika kahor. Dhanka loo socdo ayaan su'aalay. Dhan aanan ogeyn ayaa la'iigu jawaabay. Hodan ayaan haddana su'aalay. "Xabiibi meeshii aad ka timid meel waliba way dhaantaaye su'aalaha yaree" ayay af cad iigu jawaabtay. Waa runteed, afka ayaan xidhay. Magaalada ayaannu sii dhex marnay. Safarkan waxa ka horreeyey kii aan dhakhtarka ku imanayey maalintii xanuunka la'ii sheegay. Maanta indho kale ayaan magaalada ku daawanayaa. Wax kasta qalbi furan ayaan ku sii eegayaa. Nin dhintay oo soo noolaaday ayaan is dareemayaa in aan ahay.

Wax aannu soconnaba waannu istaagnay. Dhulka ayaa loo dhaadhacay aniga oo yaabban. Meeshani ma aha goobtii uu gurigayagu ku yaallay. Waa xaafad kale. Wejigeysa calaamad-su'aashu saaran tahay ayuu aabbahay ku soo tuuray "ma bilaash ayay inanta gacantu u jabtay?". Maan fahmin. "Soo soco" ayaa la'igu yidhi. Waan raacay. Guri ayaanu ku hagaagnay, waanu fuulnay jaranjarta, albaabkii ayay Hodan furaha ku rogtay. "Dee maad wax ii sheegtaan? Yaa halkan deggan?" ayaan isu raaciyey.

”Waar bal hooyo bisinka qabsoo gal guriga” ayaa qadaadka la’igaga dhuftay. Sidii ayaan yeelay. Kabaha in aan iska furo ayaan u foorarsaday, Hodan ayaa iga soo daba foorarsatay. Si dahsoon ayay madaxeeda kayga ugu soo dhoweysey iyada oo afkeeda ku hagaajinaysa dhegtayda, ”xabiibi gurigeenna ku soo dhawoow” ayay ii raacisay. Naqaska ayaa igu istaagay. Intii igu hadhsanayd wax calool ah ayaa la’i maroojiyey. Qalbigaa i dumay. Hore ayaan u soo socday aniga oo indhahayga dadka ka ilaalinaya. Waa guri wax walba dhex yaallaan. Waan is hayn kari waayey. Hodan ayaan gaar u la baxay. Laabta ayaan geliyey aniga oo gacmahayga ku wareejinaya dhabarkeeda awood badanna u isticmaalaya in aan ku soo cadaadiyo. Markaas, meeshaa aan taagnaa, ilbidhiqsigaa isaga ah, mid ayaan ogaaday. Waxa aan ogaaday in noloshaydu laba shay ka koobnaan doonto. Farxadda Hodan iyo raalli-gelinta Eebbahay.

6 NAJAX

Lix sanno ayaa u raaca labaatanka, qurux ayaa u raacda maskaxda, laydh diirran ayaa u raacda qorraxda. Magaceedu waa Najax. Madaxa maro cawl ah ayaa si khafiif ah ugu dul goglan, hoos marka ay u soo dhaadhacdo ayay dhex gashaa midabka guduudka ah ee diraca garbaheeda hoos uga daaddega. Jooggeeda ayaa salka ku haya cagaheeda oo ku dhex jira kabo dhererkeeda wax ku daray. Marada ay ku dhex jirto ayaa ka noqota gummudka dushiisa, hoos waxa uga soo rogmada gacmo korkooda jugta laga dhowray. Faraha hore ee gacanteeda bidix ayaa laabta ka garaacaya telefoon ay indhaheeda aan wada furnayni hoos u dhowrayaan. Sahra iyo Hoodo oo jidka ku soo jira ayay ku sugaysaa guriga hortiisa. Shinni iyada iyo ubaxa kala garan weydey ayaa korkeeda ku dheelaysa. Ballanbaallis aan u fahmay in ay iyada daawanayso ayaa laan aan durugsanayn soo fadhida. Baabuurkii ay sugaysay ayaa meel aan fogeyn ka soo baxay. Farxad ay xuub caaro ku qarinaysay ayaa meel dhow ka soo boodday. Dhego aan soo gaadhin meel ay wax ka maqlaan ayay dhawaaq ka hor geysay.

- Naayaadeheen, oo shantiinna daqiiqo ma sidanaa? Naa bal naagahan eega.

Baabuurkii agteeda ayuu istaagay, qosolkii dhinaceeda ayuu ka socdaa, BK-na hawshiisa ayuu haystaa. Meel saddex tallaabbo u jirtay ayay sagaal ku gaadhay. Kursiga intii aanay si fiican u fadhiisan ayay la soo boodday ”naa walaal bal heesta iga naaqusa yaanu aabbo i maqline”. Sahra oo aan hadalka meel fog ka doonin ayaa u celisay ”oo aabbahaa muxuu tobanka subaxnimo guriga ka qabanayaa?”. Najax oo aan is dhibin ayaa ku dhirbaaxday ”naa aabbahay ma sida aabbahaa ayuu meelahaa wareegaa, dee reerkiisuu la joogaa”. Hoodo oo meel kale ku maqan ayaa ku darsatay ”naa walaal wallaahi heestani way igu socotaaye!”. Qosol ayay midba in qadhiidhatay. Dhankii jaamacadda ayay u jeedsadeen si ay ardayda kale farxadda ula qaybsadaan inta aan dhanka hudheelka loo kicin kahor. Saddex saacadood ayaa uga hadhay wakhtigii qalin-jabintooda. Shan sanno oo qosol iyo baroorba lahaa ayaa maanta ku eeg. In ka badan oo farxad iyo murugoba leh ayaa maanta ka bilaabmaya.

Waa gashaantimo, haddii aanay guur diyaar u ahayn, maanta waa u diyaar. Marmarsiiyo kasta oo ay la iman jireen, kan maanta ayaa ugu dambeeyey. Balse ha la guursado ma xumee, ayaa guursanaya? Hoodo ayaa bilowday. ”Naa heedhaha, naa walaal raggii xaggay ka dhaceen?”.

Sahra: oo naa ragga maxaad ku falaysaa?

Najax: naa adigu iska aamus, horto maxaad innamada ku neceb tahay?

Sahra: akhas caleeg, oo maxaa rag lagu falaa!

Hoodo: naa tani waa nin.

Najax: waa nin dabeecad xun weliba. Naa maxaad haaye walaal ragga ku nacday, maxay kugu sameeyeen?

Sahra: idinku maxaad guurka kaga degdegaysaan? Anigu haddaan guursadana laba carruur ah ayuun baan dhalayaa.

Hoodo: toban ayaan kuugu duceeyey.

Najax: haa, Ilaahay idamkii.

Sahra: isku baxa.

Hoodo: aamiin, naa ma habaar ayay moodaysaa carruurta. Ilaahayoow sagaal duufle ayaan ku weydiistay.

Najax: naa dee haaye adna walaal duufka ka reeb.

Hoodo: Ilaahayoo duuf iyo dhareerba isugu dar.

Sahra: naagtu duco xumaa, Ilaahayoow intaba sii.

Najax: naa heedhe Hoodo, horto adigaaba mid la sheekaystee, kii ka warran?

Sahra: naa waa saddex.

Hoodo: haaye labada kale waa dhareerleyaale, mid uun baa wax kala garanaya. Kaasina waa kii sheeko la yimid.

Najax: sheeko maxaya?

Hoodo: suuqa anoo jooga ayaan ku idhi ”i soo doon”. Kuye ”i sug aan furaha hooyo ka soo qaadee”. ”Alla hoognay” uun baan idhi, ”waar ma hooyaa furaha gaadhiga kuu haysa?”. Kuye ”haa”, af adakaa! Dee saddex cisho la maan hadal. Kolley hudheelka ayaynu ku arki doonnaaye.

Sahra: weligeed ayay handhikaabka la sheekaysan jirtay. Mid masaasad jaqana waad la hadli doontaa adigu.

Hoodo: bisinka bisinka, hoostaada ma dhaafo. Naa walaal wuu igu carruuroobay kaasiye iga daayoo, adigu maxaad isla haysaa.

Najax: haddaan ku idhaa mid aan ka helaba ma arag miyaad ila yaabi?

Hoodo: oo maxaad raadinaysaa?

Sahra: Jastin Biibar.

Najax: wallaahi walaal waxaasi waa iska kaftane, laakiin weli mid i cajabiyaba ma arag. Imika hablo wax bartay ayaynu nahay, waa in aynaan cid kasta la hadlin dee. Naa mise waa beentay?

Hoodo: mayee waa sidaa wallaahi. Ilaahayoow kuwii jannada ka soo xagaa-baxay na tus.

Sahra: kuwo hooyadood faraqa haysta.

Dhismihii jaamacadda ayaa durba hortooda ah. Halkaas ayay sheekada ka sii wateen intii laga gaadhayey wakhtigii xafladda. Xaflad midabbo badan, dad magacyo badan, iyo farxad noocyo badan. Intuba iyaga ayay diyaar ugu yihiin meel aan aad uga durugsanayn barta ay hadda joogaan. Maanta waa maalintii laga maydhi lahaa daalkii shantii sanno ee u dambeeyey, waa maalin ka mid ah maalmaha kooban ee ay dunida ku leeyihiin. Ehelkii iyo asxaabtiiba way iman doonaan, inta maqanna caawa ayay shaashadaha ka daawan doonaan. Madaxda dalka ayaa hadallo caajis badan ka jeedin doona, marka mid laga reebo. Waa wiilka uu madaxweynuhu dhalay ee la yidhaa Najax. La ma hubo in uu imanayo, haddii se uu yimaaddo, xiddigga madasha ayuu noqon doonaa. Doob aan weli guursan, joog aan tuur lahayn iyo maal aan is aqoon. Qurbaha ayuu ku maqnaa dhowr sanno, waddankana aad looga ma yaqaanno.

Goortii xafladda ayay laba saacadood dhaaftay. Qaybtii fasalkooda loogu talo galay ayay ku hagaageen iyaga oo saddex ka badan. Wax yar kaddibna aayado qur'aan ah ayaa yeedhay. Khudbado dhaadheer ayaa xigay, iyaguna sheeko ayay hoos u wadaagayaan. Najax oo qosol ku maqan ayay dhegaheedu maqleen magaceeda ka yeedhay laba iyo tobanka sameecadood ee goobta ku xidhan. Dhegaha ayay taagtay iyada oo qosolkii degdeg u hakisay. Magaca in la la wadaagi karo ayay illowday. Weliba in wiil la wadaagi karo ayay illowday. Wiilka madaxweynaha. "Ku soo dhawoow makarafoonka mudane Najax". Indhaha ayay dhowr gidaar ka soo jartay intii aanay muuqiisa haleelin kahor. Qoorta ayaa dhowr jeer kala baxday. Way aragtay. Daanka hoose ayaa hoos u dhacay. Haddii ay qurux raadin jirtay, kii ay ku rarnayd ayay aragtay. Dhegaheeda ayaa sacabka dhacaya dhawaaqiisa iska xidhay si ay indhaha u caawiyaan. Qoorteeda ayaa la socotay tallaabadiisa uu ugu dhaqaaqay goobta hadalka. Indhaha ayaa illoobay in ay libiqsadaan. Shanta dareen iyo laba kale oo ay soo ergisatayba isaga ayay siisay. Hoos ayay u tidhi "dhibicdan malabka ahi xaggay ka soo 'tif' tidhi?".

Magaciisaa kor loo yidhi, jabaqdaa hoos loo dhigay. Indhaha hoolka jooga, labadiisa mooyee, inta kale isaga ayay hayaan. Ma

uu sii nagaan markii uu kor u booday, ma uu hakan markii uu hore u dhaqaaqay. Hugiisa caddaanka iyo madowga kala sarreeya u qaybsan ayaa ka dhex muuqda dadka uu sii dhex marayo. Afar askari oo dharcad ah ayuu sii dhaafay isaga oo isha ka salaamaya. Najax oo aan ka dheereyn barta uu marayo ayaa rajaynaysay in uu dhankeeda soo eego. Socodkiisa dhiirran ayuu sii watey. Tallaabbo kasta oo uu u qaado dhanka masraxa, waxa ay ahayd mid uu qalbigeeda ugu dhowaanayo. Dusha ayay ka yeelatay. Dhankeeda in uu u soo socdo ayay laabta gashatay. Way iska dhoolla-caddaysay. Indhaha ayay ka dhex saartay, meel aan ka durugsanayn markii uu soo istaagay, ”i soo eeg” ayay hoos u lahayd. Muuqiisa ayaa deeqay, magaca ayaa u raacay. In uu ina madaxweyne yahay, iyada cabsi ku ma hayso. Laydh beerkeeda lushay ayaa filanwaa ugu dhuumatay. Jidhkeedii ay iyadu lahayd ayaa maammulkiisa laga la wareegay. Xubnaha ayaa dabcay, lafaha ayaa dareeray, naqaska ayaa isku taagay. Iyada oo aan waxba cunin ayay margatay.

Codkii ka soo yeedhay dhuumihiisa hadalka ayaa kiciyey xaadda dhegaheeda dushooda hurudday. In uu iyada u sheekeynayo ayay ka dhigatay. In ay ka gurto ayay damacday. Hoos ayay u guuxday, ”haye, waa runtaa, intaa aad tidhiba waan kugu raacay” ayay isu raacisay markii uu salaanta uun dhammeeyey. Hoodo oo ku xigtay ayaa dareen qaadatay. Cod dheer ayay riyada kaga kicisay.

- Hoognay, naa bal afka uun isku qabo, bisinka iyo salliga.

Sahra oo sii jeedday ayaa soo jeedsatay.

- Maxaa helay?
- Naa dee sowta inanka cuntay.
- Naa inaadeer waad anshax xun tihiine dadka dhegeysta marka ay hadlayaanoo naga aamusa, ayay Najax isu raacisay.

Sahra oo aan weli fahmin waxa socda ayaa su’aalaheedii sii wadatey.

- Maan fahmin, calashaan ma yarkan kuusan bay daawanaysaa?
- Bisinka, show waxba maad arkayn, way ka dhex baxdayba ka yar.
- Alla yaa ii qosla, waa abu beed kaniye ma abu beed ayay rabtaa? Naa yaanu kugu jabin dheh.

Najax waxa ay dhex jiiftaa bustaan uu codkoodu si gaaban u soo gaadhayo. Midho uu isagu soo guray ayay muudsanaysaa goor dayaxu buuxo. Webi malaba ayay farta ku dhuuqaysaa isaga oo aan dhinaceeda ka dheerayn. Haddii qofka dareen lagu kaxaysan karo, maanta inanka way la fogaatay. Dhul biyo baad leh ayay keligood dageen. Nasiibdarro, kursigii hoteelka ayay weli fadhidaa, isaguna iyada aqoonba u ma laha.

Hadal dheer ayuu soo afjaray, riyo dheer ayay ka toostay. In uu dhammeeyey ayay u qaadan weydey. Labaatan daqiiqo oo uu hadlayey ayaa labaatan ilbidhiqsi agteeda ka ahaa. Sahra ayaa soo boodday.

- Naa inaneey, inanta yarka kuusan sii eegaysaay, yarkii labaatanka jeer ku salaami jiray ayaa halkaa soo fadhiya. Hoodo: alla walaal waa miskiinkii yaraa, naa dee inanka la hadal Najaxeey, iska daa kan kunka naagood kala dooranayoo.

Najax: kun naagood aa? Kuma? Naa kolley waa la ilaaliyaa oo naago loo ma oggola.

Sahra: markaa maxaad isla daallinaysaa?

Najax: oo dee anigu ma isagaan rabaa? Anigu hadalkiisa uun baan dhegeysanayee.

Sahra: wallaa? Car bal muxuu yidhi sheeg!

Najax: naa naga tag.

Hoodo: naa soo kaca soo kaca, innagaa ku xignee.

Sahra: alla dee isagaa shahaadadaha inna guddoonsiinaya, alla yarka kuusanoow lagu jecel.

Najax: naa naga aamus belo ku jecelaatee.

Afkeedu hadal ayuu leeyahay, qalbigeeduna mid kale. Jidhkeeda ayaa kala shaqaynaya. Wadnaha ayaa feedhaha hoosta ka soo tumaya. Magacyadii fasalkooda ayaa la bilaabay. Hoodo ayaa kacday. Lugaha ayay isla dhacday. Gacmaha ayaa aayar raxleeyey. Hoodo ayaa soo noqotay iyada oo hoos u leh ”naa Sahraay waa runtaaye waxa yari gacan kuusanaa”. Dhidid aanay filayn ayaa sacabadeeda ka soo maaxday. Magaceedii ayay maqashay. Wadnahaa afka yimid. Cagaha ayaa dhulka loogu aasay. Salka ayaa kursiga ku dhegay. Iyada oo aan kicin ayay damacday in ay tallaabsato. Waxoogaa ayay rafatay. Ilmo yar oo dembi galay sidiisa ayay u hoganaysaa. Cabsi ayaa madax martay. Way calool-adaygtay, si kale ayaan jirin. Bartaas ayuu soo taagan yahay, si fudud ayuu afkiisu u furan yahay, qofkan magiciisa wadata ayuu sugayaa. Qofkan magaceeda wata ayay soo gaadhay. Gacan qoyan ayay si waafi ah ugu dabooshay tiisa. Qoyaan ayay ugu maydhay. shaarubaha ayay dhidid waaweyn ka keentay. Way foorarsatay, way toostay, way foor... digaagad hadhuudh loo daadiyey sideedii. ”Hambalyo, Alle ha kugu anfaco” ayaa dhankiisa ka soo yeedhay. Wax cod u eeg, naqasna u badan ayaa dhankeeda ka tegay. Saddex jeer ayay kufi gaadhay. Kursigeedii ayay ku soo noqotay. Hareeraha waxa ka fadhiya laba maryaha afka ku qariyey, qosolna la gariiraya. Way fadhiisatay. Dhowr ilbidhiqsi oo kale haddii ay sii taagnaan lahayd, way suuxi lahayd. Naqaska ayay soo kala gurtay, qosol-gariirka ayay sii wateen.

Midna hadal ma uu odhan illaa bannaanka loo soo baxayey.
Sahra: naa Najax, huuno ma nabad qabtaa?
Hoodo: wixii ku helaan la yaabay wallaahi, Najaxeey anba markaan suqaar arko waan ilmeeyaa.

Sahra: adigu suqaar-jeceleey ha hadline sug. Naa Najax, bisinkee ma haantii hadalkaa kaa luntay?

Najax: naa dee maxaad rabtaan? Camal la’aan ayaa idin haysa wallaahi.

Runta way dafiraysaa. Booraan afweyn bay, far ku awd is leedahay. Sidii ayay ahaatay, si kaley ahaatay. Gelinkii damboo dhan, dhoof ayay ku maqan tahay. Kolba way fogaataa, haddana way timaaddaa. Riyadeedii oo dhan, rajadeedii oo dhan, Najax ayaa dhex taagan. Isagay dhex legaddey, qalbigeeda oo idil. Maskaxdeeda oo dhan, isagay u xidhan tahay. Way u qaadan la' dahay, sidan uu ku yeeshay. Rag horaa ku xiiqay, salaanta in ay ka qaaddo. Isna aayar maantaba, hantidiisay noqotay. Hadal wuxuu ka joogaa, sidii ay u hanan lahayd. Hadal waxay ku goysay: "Waa in aan haleelaa, dhammaantii afduubtaa, dareenkiisa yeeshaa, habeenkii la'aantay, hurdo seexan waayaa".

Najax waa la taabtay. Baaqigii ayaantaas, farxaddeedii oo dhan, isagaa badh qaatay. Dareenkii ay la timid wuu ka geddisnaa kii ay kala tagtay goobta. Wejigeeda oo dhan, madow ayaa kor saarnaa. Dhoof ayay ku maqan tahay.

Maalin dheer ka bacdi, gurigoodii way timid. Maryihii ay saaka, oogadeeda saartay ayay kala huleeleen. Durba fiidkii weeyaan, tiifiiga fadhiga yaal dhinaciisay aadday. Baahideedu waxay tahay, muuqaalkii maanta dib-u-fiirsigiisa. Cunto miiska saarnayd haf ayay la sii tidhi. Agteeda ayay ku wadhay lugo aad u daallan. Xayaysiiska dhawaqa dheer dhankiisay indhaheedu u dhowrayeen ujeeddo la'aan marka ay gacantu ka dhex shaqaynaysay saxanka iyo afkeeda. Cod aan ka tiifiiga ahayn ayaa dhegaheeda soo gaadhaya. Waa codka hooyadeed oo ay weheliso jabaqda jiitamaysa ee ay samaynayso kabta dacaska ah ee cagta midig laga qadiyey.

- Alla, day siday wax u cunto, nin ma mooddaa? Naa xaggeed wakhtigan ka timid?
- Waxba hooyo dee, waannu iska caweyneynay. Weli waa fiid hooyo.
- Oo haddaa ma saqda dhexaad iman lahayd? Cagaha kuraasida iiga qaadoo, waa ku sidee hooyo.
- Hooyo wallaahi waan soo daaloo waan ku kala bixinayey uun.

- Oo maxaad ku soo daashay markaa? Maantoo dhan waad wareegayseen dee, fartaadoo dhan ayaan fahmayaa illeyne, suuraaf yahay.
- Haa, waannu iska ..
- Alla hoognayeey waxa la odhan dibjirad ayay dhashay. Naa bal i sii rimoodhkaas, filinkii ayaa i dhaafayee.
- Hooyo sug dee waxa soo galaya barnaamijkii maantee.
- Ma kii meesha aad joogtay laga soo duubay?
- Haa.
- Ba'nay! Waad fadhiday bee maxaad ka daawan?
- Sug sug, wuu soo galay, waa kan.
- Naa bal cibaaradan eega. Bal waayee yara naaqus uun, balaayadan codka weynina muxuu ahaa?

Barnaamij socon doona laba saacadood ayay labaatan daqiiqo ku leedahay. Marka uu inyar socdaba hooyadeed ayaa hadlaysa. "Naa kanna muxuu ahaa? Sowdigaa halkaa soo fadhiya! Hadal badanaa, nagnagtaas uun hay adigu meeshaad joogtaba, bal habluhu way xishoodaane maxaa aamus kuu diiday?"

Najax u ma jeeddo hadalladaas. Saacad ayaa tagtay, weli ninkii ay sugaysay la ma hayo. Way is hayn kari weyday.

- Ish! Soomaalidana hadal badni ayaan ku nacay, bal muu soo koobo odaygan xun ee dacayda dheeri.
- Naa maxaad wasiirka ku gashay? Dee inna ga beddel oo musalsalkii innoo gee haddaanad doonayn hadalkooda.

Waa loo yeedhay, "soo dhawoow mudane Najax". Kor ayay u boodday, cagihii ayay dhulka dhigtay, saxan madhan oo dhabteeda ay ku illowday ayay dhinac isa ga tuurtay, horena way u fadhiisatay. Hooyadeed ayaa yaabtay oo dhankeeda soo eegtay. Way ka aamustay. Najax ayaa indhaha ka dhex saartay muraayadda ay daawanayso. Socodkiisii ay saacado kahor u soo joogtay ayay dib u daawatay. "Waa kan kii naanaabka ahaa" ayay ku dhawaaqday iyada oo aan is ogeyn. "Naa kanna maxaad ku cuntay?" ayay jawaab u heshay. "Hooyo nacas-nacas ayuu u eeg

yahay". "Naa waa fariid ayaa la yidhi, waa nin yaroo kaalay arag ah, siduu u shaqaysto ee uu aabbihii u garab joogo waad yaabaysaa". Haddana way aamustay oo ay ku faraxday ereyada wanaagsan ee hooyadeed ka soo yeedhay. Hadalkiisii ayuu bilowday, riyadeedii ayay gashay. "Alla, weliba waa hadal-yaqaan. Bal siduu u hadlo day, waa ba aabbihii oo bartaa taagan". "Hooyo yara aamus biliis" ayay hoos u leedahay. Ma rabto in laga qalin-daaro dunideedan xuubka caaro ka dhisan. Mar kasta oo ay sii dhegeysato, waxa ku kordhaya rabitaanka ay rabto in ay ka ag dhowaato. Badweyn Najax ah ayay dhex muquuratay, roob Najax ah ayaa u da'ay, doog Najax ah..

Wuu dhammaystay, kamaraddana bartaas ayaa lagu jaray si loogu gudbo qofka xiga. "Boolshidh" ayay hoos u tidhi. Hadalka ma ay badin markii ay dhanka qolka jiifka u soo tahriibtay. Sariirteedii oo aad mooddo in ay toban sanno ka maqnayd ayay isku dul tuurtay. Sariirtuna laabteeda ayay u furtay. Fikirkeedii maanta ee ahaa "waa in aan haleelaa" ayaa maskaxdeeda sidii cajalad ugu soo noqnoqonaya. "Wuxu ma rag ayuu ka weyn yahay horto?" ayay is weydiisay. "Dee maya" ayay markiiba meel ololaysay ku bakhtiisay. "Haddii aanan gacanta ku soo dhigin, Najax la i ma idhaa". Way ku seexatay.

Way ku soo toostay. Jaamacad lagu kallaho ma jirto, wax se ka weyn ayaa jira. Dhankii Hoodo iyo Sahra ayay u jarmaadday. Waa saddex marka ay isku yimaaddaan, dheri kasta karin kara. Shir qaran ayay yeesheen. Arrintii ayay u soo bandhigtay.

Sahra: ma anaan garan in Kuusow la jeclaanayo.

Hoodo: naa yarku subag Ilaahay ayuu ahaa bee iska daa dee ha jeclaatee.

Dacaayadda heshiis ayay ku yihiin. In ay iska caawiyaan wixii soo kordhana, waajib ayay u arkaan. Hawshii ayay gudo-galeen. Su'aalo ayaa la is weydiiyey. "Ninkani sidee lagu heli karaa? Asxaabtiisu waa ayo? Muxuu xiiseeyaa? Shaqadiisu waa maxay? Ma dhanka shaqada ayaynu ka soo galnaa mise dhanka asxaabta, mise labadaba? Intee in le'eg ayaa loo dhowaan karaa inta aanay ciidankiisu qoorta kaa jebin?"

Hoodo oo looga dambeeyo falanqaynta iyo dejinta qorsheyaasha ayaa dhankeeda la eegay. Durba su'aal muhiim ah ayay ka jawaabtay.

Hoodo: naa ninkan waxa Ilaah yar u haysata tii "Cambaro Dheer".

Najax: tee?

Hoodo: naa dee tii okiyaalaha waaweyn xidhnayd miyaanad garanayn ee aannu berigii is laynay, ta xun ee miyaanad garanayn..
Sahra: Alla haa haa, naa dee tii caafimaadka dhigan jirtay ee habeenkiina arooska u soo xidhatay googgoradda basaliga ah iyadoo dirac cad xidhan.

Najax: Alla waa sirqadii dheerayd. Haa haa, haye.

Hoodo: naa dee dhegeysta oo, naagtaa ma jecli laakiin waan soo basaasayaa, iyada ayaan waxan oo dhan ka soo ogaanayaa.

Sahra: naa horto waxaan ogahay in aanu ninkani sii joogeyn dalka in badan. Alla sug, naa dee ninku xarumaha agoomaha ayuu caawiyaa. Sowtii barnaamijyo badan laga soo deyn jiray.
Najax: naa show hortay ayaad ninka isku waddayba. Anigu maan aqoon bee!

Sahra: naa fudkan yaree kuusan anigu waxba ku ma falayee dhegeyso, ninku waxaasuu ka shaqeeyaa.

Hoodo: anaa gartay, dhakadii adduunka ayaynu dhigaynaa.

Najax: ka soco.

Hoodo: urur aan jirin ayaynu samaysanaynaa, urur agoomaha caawiya. Haddaynu doonno mid caalami ah ayaynu odhanaynaa waa qaybtiisii dalka oo annagaa ka mas'uul ah.

Sahra: oo dabeedna?

Hoodo: alla dhoohanaa tani, dee markaa isku suuq ayaynu noqonaynaa. Xaflad aan jirin ayaynu qabanqaabinaynaa oo aynu u bixinayno "U gargaar agoonta".

Najax: ii wad, ii wad.

Hoodo: dee dabeedna waynu u yeedhaynaa oo martiqaadka ayaynu u diraynaa, Kuusow haddaan ku hor keeno markaa ka warran, adiga oo guddoomiyihii ururka ah?

Najax: naa haaye walaal billee aan khashifannaa!

Sahra: eeg dee, waa saacaddii ay dabadu gariiri jirtee.

Hoodo: naa waxaa ka bax, adigu sida aan ku idhaa uun yeel.

Najax werwer ayaa galay, in inanka madaxweynaha la shirqoolo ma ay rabin. Balse wax kasta oo isaga u soo dhoweynaya, diyaar ayay u tahay. "Maxaa khaldami kara?" ayay hoos isu weydiisay. Maskax "wax walba" ku jawaabaysa ayay "waxba" ka hor geysay. Ma rabto in ay walaacdo imika, ma doonayso in ay khilaafto Hoodo oo ay wax badan uga soo joogtay. Talo waxay ku goysay, inay addeecdo Hoodo. Dhanka kalena Hoodo, hawshii way bilowday. Inantii "Cambaro Dheer" ayay xog ka keentay. Sidii ay ogsoonayd ayaa loo xaqiijay. Najax waa nin maatada, agoomaha ilaasha. Qof kastoo ka saacida, dadka wuu ka jecel yahay.

Telefoonkaa yeedhay. Cod aan meel fog gaadhayn "haloow" ugu dhawaaqday.

- Naa maad huruddaa?

Codkii Hoodo weeyaan.

- Mayee waan sii seexanayee. Maxaa saacaddan ku wada?
- Naa bal naagtan eega aannu ninka u sallaxaynee sidaa noo la hadlaysa.
- Bisinka, ha i cunin. Bal iska raalli ahow oo, ii warran.
- Si fiican ii dhegeyso, Faysbuuggaaga fur, farriinta ku jirta ee aan kuu soo diray soo qaado oo wajahaddaada soo dhig.
- Bal sug aan eegee, ma "nabiga ku salli" baa?
- Naa mayee fur, inantu hadal badanaa.
- Kkkkkkkk adduunyo, maantaa Faysbuuggaygiina la ila maammulay. Sug bal aan akhriye waxaad ii soo dirtee. Alla, oo naa waayo? Maxaan waxan ugu soo qorayaa?
- Naa Kuusow ma rabtaa?
- Haa dee waan rabaa laakiin waaxay beentu.

- Markaad intaa samayso, gurigii Sahra ha innoo ahaato. Qolkii dambe ee waashmaanka.
- Naa dee haaye...

Way dhigtayba.

Qaddar daqiiqado ah kaddib, wajahadda Najax waxa laga akhristay: "Ii soo duceeya, Nayroobi ayaan safar shaqo ugu baxayaa."

Najax oo lebbiskeeda muddo ku hawlanaan jirtay, maanta durba bannaanka dhakhso waa tan u aadday. Saacad aan wada buuxin waa tan goobtii ku gaadhay. Qol yaroo laga guuray, gidaar daah ku xidhnaa iyo wax yaroo sanku diiday ayay soo martiday. Indhaheedu se maanta, wax kaley arkayaan. Daahaasi korkiisa warqad ayaa ku dahaadhan. "COA Orphanage Assosiation" ayaa far waaweyn ku qoran. Waxba way fahmi weydey. Wax yar uun horteeda, loox yaroo la istaajay, ku dahaadhan maryo si qumman loo sharraxay, makrafoonka dul yaalla.. Waxba way garan weydey.

Bannaankay indhaheedu, wejigeeda ka joogeen. Sahra oo barkin weyn salka aad ugu haysa ayaa halkaa soo fadhida. Hoodo oo maryo dumar, qulubaa-geddiyeysa, halkanay ka sii jeeddaa. Najax way fajacday. Weli wax hadal ah, loo ma soo tuurin dhankeeda. "Naa maxaad waddaan imika?" ayay is hayn kari weydey. "Baddaa ka baxoo, kaalay ku taswiiree, bannaanka soo yara aad" ayay Hoodo tidhi. Sahra oo fadhiga, sii jecleysanaysaa, tilifoon laba waar ah, faro baasto la moodo, in ay ku garaacdo bilowday. Najax oon fahmahayn waxa eeggan socda ayaa aamustay. Qolka ardaagiisa hore, meel dhir cagaaran lahayd ayaa aayar la joojay. Dhexdoodaa la istaajay, qosol aan jirin baa debnaha ay ku dhigeen. Gacantii Sahra ee birta calanka la mooday ayaa hortooda fidsan si ay xusuus uga reebto. "Naa maxaad waddaan imika?" Jawaab loo ma hayo. Qolkii ayay ku xareeyeen. Hoodaa soo tuurtay maryo. "Bal dharkaa isku taag". Iyadoon ka keenin hadal, waa taa isku taagtay. Wax yaroo khatara waa taa u eekaatay. Okiyaalo, kuwii akhriska waa taa la sudhay. Sahra oo halkan taagani waa taa u tilmaamtay bartii ay istaagi lahayd. Hoodaa ku tidhi "naa halkaa bal istaag, yartaadan jacaylku hayaa".

Qosol waa la isku daray. Halkii ayay kor istaagtay. "Makarafoonka qabso". Dhakab waa ta siisay. "Naa Sahraay bal sawir". Sahraa dhawda ka saartay, waxoogaa tilmaam ahna korka waa ta u qaadday. "Naa sida tabliiqiyiinta farta sidaa dheh, oo makarafoonka iska yara fogee, bahalka miyaad ku cadayanaysaa?". Way ku soo dhoweysey, si aan loo ba arkin qolka intiisa kale. Dhabarkeeda warqaddii weyneyd ayaa ka muuqata. Intaasaa la dhammeeyey, dharkii ayaa laga saaray, kuwo kale ayaa loo xidhay, bannaankaa loo la baxay, in kalaa laga qaaday. Laba saacadood kaddib, arrintii way dhammaatay. Hadal se weli wuu hadhsan yahay.

Hoodaa tidhi "kaalay, halkan ii soo fadhiiso". "Labada maalmood ee soo socda, gurigii ayeeydaa ee bilaa internet-ka ahaa ayaad haatan tegaysaa". "Naa maxaad leedahay?". "Dhegeyso, Sahraa ku qaadaysa haddeer".

Sidii waa la yeelay, Facebook-na waa laga mamnuucay. Hoodo iyo Sahra ayaa shaqadooda bilaabay. Caweyskii markii ay ahayd ayay soo geliyeen sawirradii ay ku wada jireen. "Safar khayr qaba Najax, guuleyso weligaa. Shaqo khayr qabta insha Allah, we will miss you 😢😢"

Subaxii dambena iyaday la hadleen. "Naa sawirradaa aan kuu soo diray, qaybtooda koowaad soo geli, waxaanad raacisaa 'mansha Allah si wacan ayuu noogu socdaa shirku', intaa kaddibna ka bax Facebook-ga".

Najax oo dawakhsan, balse aad u ogsoon, in asxaabteedii wacnaa, wanaag uun la rabaan, ayaa yeeshay sidaa. Maalintii xigtayna sawirrada qaybtoodii labaad, oo ay dhar kaleeto xidhnayd, wajahaddeeda wadhay. Dadku "Mansha Allah, hambalyo huuno Najax" ayuun bay ku khafiifeen. Sahra iyo Hoodo, macluumaad wixii ay Najax kari weydo, ayay soo qubayaan. Dadkii way u sheegeen in guddoomiye loo doortay. In Afrikaan badan oo u tartamaayey jagadaas, keligeed ay ka qaadday. Mashxaraddaa is qabsatay. Dadkii way u riyaaqeen, balse waxaanay ogeyn, in magaaladan, dhinac uun ay ka joogto.

- Caawa waa habeenkii, berri ay iman lahayd. Qorshihii sidiisii ayay Hoodo samaysay, fiidkii way soo wacday. Iyaduna way ka jawaabtay.
- Haddaad og tahay Facebook-gii waxa ka socda, ayeeydaa maad ag jiifteen.
- Naa walaal Ilaahaaga ka yaab! Maxaad dee samayseen?
- Naa xiddig baan kaa dhignee adigu sideeda iftiin.
- Kkkkkkkkkk alla naa walaal, weligaaba ma sidanaad dhakooyinka u degi jirtay? Wallaahi waan kaa yaabay. Lug iyo gacan ayaan kuu taagay, shan lugood haddaan lahaan lahaa, waan kuu taagi lahaa.
- Bal dhegeyso horto, berri dee waad soo degeysaa. Diyaaradda Kiiniya ka imanaysaa waxay soo degeysaa tobanka subaxnimo.
- Haye?
- Sagaalka iyo badhka diyaar ahow.
- Oo dabeedna?
- Dee eeriboodhkaannu ku geyneynaa, wuxu badowsanaa!
- Bisinkee ha igu qayline, miyaan dhoofayaa haddana?
- Naa mayee waad soo degeysaa.
- Sideen u soo degayaa markaa?
- lmahani hadal badanaa, naa hooyaa ii yeedhaysee, cashadii ayaan diyaarinayaaye, berri wakhtigaa aan kuu sheegay diyaar ahow.

Gaadhigu waa Indho-cadde, afkoodu dhoolla-cadde, lebbiskuna kaalay arag, markii ay ku soo qulquleen gurigii ay Najax joogtay. Okiyaalaha wejiga intiisa badan qariyey ayay iska rogeen markii ay albaabka soo dhaafeen. Daarad dhuuban ayay cagta saareen, laba gidaar oo madhan ayaa hareeraha ka buquujinaya marka ay tallaabada badhka ah u wadaan dhanka hore ee guriga. Salli yar ayay ku fadhidaa markii ay ku soo baxeen, waa Najax ayeeydeed. Sahra oo waayeelka ka hesha ayaa si kalgacal ku jiro u soo tuurtay "ayeeyo macaan ii warran?" Jawaab

ayay weydey. Hoodo ayaa hoos ugu celisay "naa dee islaantu waa xagga dhegahee kor ugu qaad codka".

Sahra: AYEEYO ISKA WARRAN?

Ayeeyo: naa maxaad la qaylinaysaa? Carruurta ha naga kicine naga aamus.

Hoodo: alla hoognay, naa miskiintu sowta ka sii dartay. Carruurtu xaggey joogtaa?

Hadalka ayay sii wadday markii ay Najax ku soo baxday.

Najax: naayaadeheen, dee maantana ma ayeeydey ayay idin tustay? Bal naagahan eega!

Tallaabada iyo codka ayaa la socday gacmaha jeedalka ah ee ay sida macnaysan u wadhfinayso. Noole kasta oo goobta joogay ayaa wixii uu hayey dhigay si uu u daawado korkeeda. Toobka garbaheeda ka soo bilaabma ayaa soo shuban kuna dhammaada kuraamaheeda, halkaas oo ay kabaha xadhkaha badani ka bilaabmaan. Saddexdooda oo ay boqorraddu ka tilmaaman tahay ayaa dhankii gegida dayuuradaha u dhaqaaqay.
Sahra: naa heedhe, dee show Kuusow uun baad u baahnayd!
Hoodo: naa ma arkaysaa horto! Inantu way sii dhalaalaysaa uun.
Sahra: balaayada kuusani, hadduu ku helo waabu ciidi.
Najax: naayaada, iga aamusa dee waan soo degayaaye, maxay ahaayeen kuwan aan weligoodna dhoofin!

Goobtii waa la yimid, baabuurkii ayaa meel fog la dhigay. Najax ayaa la yaabtay sababta baabuurka loo takooray. ”Naa walaal maxaad baarkinka u dhigi waydeen gaadhiga?” Waxba ma oga. Cagaha ayaa dhulka la saaray, shandad buuran oo xagga dambe saarnayd ayaa gacanta loo geliyey. Hoodo ayaa dhowr tilifoon wacday. Wiil wax fahamsan oo lebbiskii shaqaalaha xidhan ayaa u yimid. Najax ayuu la haaday. Albaab yar oo dhinaca ah ayuu ka geliyey, gudaha ayuu dhex istaajiyey, ”bartan fadhiiso, marka aad aragto in diyaaradda labaad soo fadhiisato, dadka sii baxaya uun raac”. Wuu ka dhaqaaqay. Naxdin. Sidii ayay yeeshay, si kale ma taqaanno. Diyaaraddii koowaad ayay quraaradda ka dhex aragtay, teedii in aanay ahayn ayay ogaatay. Saacad wax dhiman kaddib, way soo caga-dhigatay. Naqas ayaa ka soo booday.

"Ka warran haddii ay diyaaraddaasi hawada ku burburi lahayd? labadii waalwaalnaa 'wax dhintay iska dhig ayay i odhan lahaayeen kolley'". Way sugtay intii ay dadku ka soo dhammaanayeen baadhitaannada kala duwan. Muddo kaddibna qof soo dagey ayay noqotay. Shandad ayay jiidanaysay, bannaanka ayay madaxa iyo cagaha mar u soo wada saartay. Laydha wejigeeda sida fudud u dhirbaaxday waxa xigay dhawaaqa dhanka bidix kaga imanaya. Waa laba cod oo ay si fiican u taqaanno iyo sagaal kale oo aanay garanayn. Way jalleecday, way kufi gaadhay. Qosol-gariir ayay wadne-garaac ku darsatay. Ubaxyo kun nooc ah ayaa lagu la soo orday, qoorta ayaa dhowr kale loo sudhay. Waa asxaab aanay si fiican isu aqoon. Way u qaadan weydey. Soo-dhoweyn fiican ayaa loo sameeyey, Sahra iyo Hoodo ayaa gadhwadeen ka ahaa. Iyaga ayaana kala diray markii ay arkeen in sawirro ku filan la qaaday. Najax oo hambalyo iyo dhunkasho lagu dawakhiyey ayaa baabuurka la fogeeyey dhex fadhiisatay. Su'aalo badan oo ay jawaabbo u rabto ayay soo kala horreysiisay. "Horto heedhaha, maxaa idinka qaldan? Qofka sow wax loo ma sheego! Maxay ahaayeen dadkani?"

Sahra: naa dee waa dad ku soo dhoweynayey.

Hoodo: naa bal u kaadi aan u balballaadhiyee. Waad garanaysaa "Cibaado af-dhowr" sow maaha?

Najax: dee waa tii yarayd ee.. maxaa la odhan jiray qofta? Tii dee macallinka ku cawriday roodhida.

Hoodo: dhegeysoo, maxay caan ku tahay?

Najax: dee kun wax.

Hoodo: naagta wax kasta Facebook-ga soo dhigta miyaanay ahayn, xitaa markay suuliga gelayso?

Najax: naa balaayada iga daayoo, waxay ugu darnayd maalintii ay soo qortay "aabbooy hooyo iska daa". Innaalillaah! Illeyn wax dhintay ma dhuuso!

Hoodo: "Cambaro dheer"-na waad garanaysaa dee.

Najax: iyadu ninka ayay taqaannaa dee, waan gartay.

Hoodo: dhammaan naagahan meesha marayey oo dhan waxa weeyaan kuwa ugu codka dheer Facebook-ga. Midba wax gaar ah ayay caan ku tahay, midna way ka siman yihiin: dad badan ayaa ku xidhan.

Sahra: dee waannu adeegsanaynay. Naag waliba idaacad gaar ah ayay u dhigantaa. Tan dheerina dee Kuusow ayay saaxiib la tahay, markaa markay boggeeda soo geliso sawirrada, fudkii yaraa ayaa arki doona.

Hoodo: allaylehe kaasi waa fud, mise waa dhibic, naa waa dhibice iska daa.

Najax: danihiinna haddaad ku mashquushaan ka warrama?

Hoodo: wallee tan waa lagu weyn yahay. Naa iga aamus, wax wax jecel ayaaban nacay, keligood miyaanay dadkani noolaan karin horto! Wallee nin ma raadsado.

Qorrax kulul ayay hadh iyo sharaab qabow isa ga dhigeen. Sheeko aan dhammaanna dabada ayaa la qabtay. Asxaab kala maqnayd iyo caalkeed. Qosolka iyo sheekada aan la kala sugayn, tilifoonnada kolba hoos loo eegayo iyo okiyaalaha miiska saaran. Sahra ayaa ka soo jeedsatay xantii, ”naa heedhaha, maxaa imika innoo hadhay?”

Najax: dee horto waan soo degay kooba dhaha, dadkii dalka sii joogayoow maxaad haysaan?

Hoodo keligeed ayay isla baxday, way dhoofsan tahay.

Sahra: dee imika waa in aan xidhiidh la samaynaa Kuusow.
Najax: sow maaha? ”Cibaado dheer” ayaan u baahan nahay markaa dee.
Sahra: naa taa Hoodaa ka adage, imika way hor oroddaa markay la hadashee, iyada ayaynu wacaynaa, ninka ha soo qabato.
Najax: haa dee, dabeedna aan aragno waxa yar, socodkiisa.. yaa, maxaan idhi?

Sahra: balaayo kula socod xumaatay! Naa iga aamus haddaba.

Hoodo ayaa soo toostay. ”U kaadiya”.

Sahra: hee?

Hoodo: xafiis ayaan u baahan nahay.

Dhulka oommani sida aannu biyaha u diidin, ayay fikirka Hoodo u oggolaataa. Tixgelin saa'id ah ayay u haysaa. Walow ay saddexdoodu si siman walaalo u yihiin, haddana Hoodo ayaa iyada uga dhow Sahra. Dabeecad ahaan ayay labadoodu isu fahmeen. Sahrina waa lug ka maqnayd oo iyaga dhammaystirta. Marka la rabo in Najax fikir laga dhaadhiciyo, sida in safar degdeg ah loo baxo, Hoodo ayaa la soo diraa. Iyada ayaa si gaar ah ugu sheegta. Najaxna ma diiddo. Cadho kasta iyada ayaa burburin karta. Qosolka Najax ayaa Hoodo ku xidhan. Da' ahaan way isa ga dhow yihiin Sahra. Malaha taas ayaa sababtay in ay sidaa isugu dhowaadaan.

Bartii ay fadhiyeen ayay ku ansixisay fikirkii. Su'aasha xigta ayaa noqotay "xafiis sidee loo kiraynayaa?"
Sahra: oo heedhaha, xafiiska xagee ayaynu ka helaynaa?

Najax: naa xafiis la ma waayayee, lacag xaggee laga keenayaa?
Hoodo: imisa ayuu noqon karaa toloow?

Sahra: dee walaal waa ugu yaraan boqol doollar, meesha aad ka rabtana way ku xidhan tahay.

Hoodo: waxaynu u baahan nahay mid xaafadaheennana ka fog, suuqana aan aad ugu dhoweyn.

Najax: adigu waa in aanu boqol ka badan uun.

Sahra: naa bal suga, qol laba-af-le ah ayaa jira oo waddada ku soo jeeda.

Najax: waddadee?

Sahra: ii sheeg dee, halkan uu ku yaallo macmacaanlihii.. een..

Hoodo: kii dhareerka lahaa miyaa?

Sahra: naa maya, kii suudhka ka weyn xidhan jiray.

Najax: ma Maxamed Soqodhi?

Sahra: haa kkkkkk Maxamed Soqodhi qolka ku dheggan maydaan arag? Qolkii farmasiga ahaan jirey.

Dhawaaqa telefoonka Hoodo ayaa kala jaray hadal aan dhammaan. ”naa aamusa waa tiiye” ayay soo tuurtay intii aanay ka jawaabin kahor.

- Haloow! Xabiibti mayee ii warran? naa huuno haa, miyaan fadhiistayba! Adna? Hii, haye? Kkkkkk Alla Ilaahay dad badanaa! Haye?

Sahra iyo Najax ayaa is eegay. Way sii wadatay.

- Dee xabiibti waa in aan soo dhammaysannaa, ma ku soo doonaa dee hadhow? Miyaad waalan tahay, dee sow imika halkaas uun ka ma adeegto, ma anaa meel kaleba taga. Anigaa ku soo doonaya qaaliyeey. Haa, haye? Imisada? Huuno macaaneey ii seexo waa runtaaye, waa innoo hadhowe, haye.. hay.. ha.. haye macaanto.

Way dhigtay. Afar indhood oo madhan ayay fallaadhahooda dareentay intii aanay telefoonka miiska saarin. Su’aasha aan lagu dhawaaqin ayay ka jawaabtay.

Dee waa tiiye, Cambaro Dheer. Alla naa ba’nay, horto si fiican maan u dhigay, yaanay i maqline? Haa, waa Cambaro Dheer.

Sahra: maxay kaa rabtaa?

Najax: maxay doonaysaa?

Hoodo: kute mayk ab ayaan soo iibsanayaaye maad i raaci. Akhas caleeg, horto siday maanta u marsanayd ma arkayseen? Waa naagta aay laaynarka illaa dhegta jiidday. Akhas akhas akhas.

Sahra: naa adba ma dhaantide wadoo..

Hoodo: oo naa anigu ma sideedaan ku riyoodaa, internetkaan ka daawadaa sida loo marsadee?

Najax: naa bal waxan ka baxa oo, maxaad tidhi markaa?

Hoodo: dee waa in aan mardhow u tago, illeyn dan baan ka leennahee.

Sahra: alla Kuusayoow kugu xiintay oo tif noqo Ilaahay idamkee, bal naagta uu na hoos geeyey eega! Oo naa heedhe, gaadhiga aad ku doonayso yaa leh?

Hoodo: oo dee ma sideedaan dhowr gaadhi leeyahay, dee kaagaan kaa kaxaysan huuno.

Najax: miskiinsanaa markay wax rabto, naa bal aniga gurigii hooyaday i geeya horto, aan dharkan igu dheggan iska saaree.

Magaalada ayay soo dhex qaadeen si ay haddana dhanka xaafaddooda ugu arooraan. Qolkii ayay dusha ka soo eegeen, way isla qaateen. Sahra ayaa warkiisa dooni doonta. Najaxna gurigeedii ayaa la keenay.

Hoodo: dee waa innoo sidaas, anna aan naagtan ka dhex baxo, Sahrina qolkan warkiisa ha soo sugto, adna Faysbuugga uun dadka ”waad mahadsan tihiin” ha u dhaafin. ”Telefoon ayaa innoo dhex ah” ayaa lagu kala tegay.

Najax oo soo boholyowday ayaa hooyadeed macaan dhabteeda barkatay, jidhkana maryo fudud huwisay. Xubin kasta oo jidhkeeda ka mid ah ayaa dhaqaaqa joojisay, indhaha oo si saa’id ah u furan ayaa hawada dhexe aragga u qaybiyey. Hooyadeed oo aan waxba ogeyn, ayaa hoos u eegaysa inanteeda. Dareen ayay ka qaadatay, waxba se ma ay weydiin.

Walow uu qorshuhu, illaa hadda, u socdo si wacan, haddana werwer ayaa ku jira. Way rabtaa in ay hesho Najax, haddana habkan ay u marayso ayaa ah mid ay ku qasban tahay, balse aanay samayseen maalmaha qaar. Waa ficil ka soo hor jeeda shakhsiyaddeeda. In ay lunsan tahay ayay dareemaysaa. Qaladkii iyo saxii ayaa meel wada fadhiistay, isaga ayaana casuumay. ”In aan qof jeclaado, qaladkayga maaha” ayay nafta ku sabaysaa. Mar kasta oo ay fikirka ku dheeraato, dareenka laabteeda fadhiya ayaa sii kordhaya. Culayska garbaheeda fuulaya ayaa farxad kale wata. Muddo yar marka ay jiiftaba, naqas dhowr galaan ah ayay dib u nuugaysaa si ay haddana hore ugu soo tuurto. Wadnaha ayaa dubaaxinaya. Ma rabto in ay ka fikirto, haddii ay joojisana waxay dareemaysaa in ay madhan tahay. Jewi ku cusub, baahi iyo dareen culusna wata, ayaa u bilaabmay. In ay bilowgii uun tahay, ma dareensana.

Hawlaheeda gaarka ah iyo shaqada guriga ayay isku mashquulinaysaa, haddana waxay arkaysaa iyada oo daqiiqda ku

darsanaysa shaaha. Qolkeeda ayay soo gashaa si ay shay uga soo qaadato, muddo dheerna way dhex taagnaataa si ay u xasuusato shaygii ay rabtay. Yeedhmada ayay maqli weydaa, weydiimaha ayay qalad kaga jawaabtaa. Goob keli ah ayay taagnaan kartaa saacad go'an. Indhaha ayay libidhiqsiga ka illoobi kartaa in ka badan. Waa lagu duulay. Haddii uu dareenku tiix ahaa, maanta waa mahiigaan.

Habeenkii dambe ayay damacday in ay asxaabteedii ka war doonto, maaddaama ay soo wici waayeen. Hoodo ayay ku horreysey. Wuu u dhici waayey. Sahra ayay ku dambeysey. Wuu dhacayaa.

- Haloow? ayay maqashay.
- Naa Sahra, bal warran?

Bariido kaddib ayay weydiisay "naa tii Hoodo waan waayey, malaha dabkaa ka dhacay".

- Walaal intay saaka gaadhiga ii keentay, oo ay furahana yaryarka iigu dhiibtay aniga oo maqan, ayay iska noqotay. Xitaa i may soo garaacin.
- Cajiib, dee saaxiib cusub ayay heshay naagtu.
- Sow ma aragtid horto, mid calag haysata dee, illeyn Hoodo waa diinu-lacage.

Waxay u sheegtay in qolkii warkiisa loogu maqan yahay, kadibna "waynu is maqli" ayay hadal ku gunaanadeen.

Maaddaama oo ay imika uun waxbarasho dheer ka soo baxday, Najax waxay dareentay in ay u baahan tahay in ay hooyadeed wakhti la qaadato. Inta ay Hoodo soo hadlayso, qorshehanina dhan u soconayo, hooyo ayaan meel kasta u raaci. Waxa uu noqday go'aan ka mashquuliyey nin maskaxdeeda xoog ku haysta.

Saddex maalmood ayaa tegay, weli wax war ah laga ma hayo Hoodo. Reerkoodii way la hadleen oo way og yihiin in ay nabad qabto. Sababta ay iyaga ula soo hadli weydey ayaa Najax ku noqotay xisaab aan la xallin karin.

Sidii caadiga ahayd ayay laabta u jiiftay sariirteeda, wajahaddeedana shaashadda kombiyuutarka ayaa ku soo aaddanayd. Midabka buluugga iyo caddaanka ah ayay dhex mushaaaxaysay. Bogga Hoodo ayay gashay. Wax warbixin ah ayay ka weydey. Niyadjab ayay faraha dhaqaaqooda yaraysay. In yar kadib ayuu fikir ku soo dhacay. Oo maad eegtid bogga Cambaro Dheer. Qofta magaceedii muxuu ahaa horto? Way heshay. Sawirro dhowr iyo toban ah ayaa u sarreeya. Cinwaanku waa ”xalay iyo baashaalkii”. Iyada oo u khajilsan ayay si caajisnimo leh u sii taabatay sawirradii. Shan sawir markii ay dhaaftay ayuu kii lixaad sidii dhagax la soo tuuray wejiga ka dhirbaaxay. Gidaar in ay jiidhay ayay u malaysay. Inta gacan afka laga geliyey, in wadnaheeda la tuujiyey ayay moodaysay. Dhidid qabow ayaa sanka korkiisa fadh-fadhiistay. Way u fiirsatay sawirka. Waa Hoodo. Debnaha aadka u kala jiidan ayaa indhaheedii yareeyey. Kamaradda ayay soo egaysaa. Agteeda waxa taagan isaga. Najax laftiisii.

Haddii ay taagnaan lahayd, joogga ayay ka dhici lahayd. Imika se wax kale ayaa hoos u dhacay: wadnaheedii. Indhaha ayay ku sii haysay. Kolba way libiqsataa, haddana way eegtaa. Sawirku in uu is beddelo ayay hubisaa. Balse waa isagii, Najixii ay lahayd oo haatan la jooga Hoodo ay oggolayd. Maskaxdeedu ma baandhayn waxa ay qabanaayeen, wakhtigaan saamaxayn. Ruuxdeedii yarayd dareen baa qarqiyey. Indhaheedii caddaa daruur baa hadhaysay. Calooshaa wareegtay, laabtaa dhaqdhaqaaday. Way is hayn kari weydey, Sahra waa ta wacday. Sahra oo aan waxba ogeyn ayaa aayar tidhi ”haloow”. Illeyn waa qof dareen, gebigeedaba saaqee, hadalkay odhan lahayd ayaa soo bixi diidey. Dhuunteedaan furnayn. Qasab ayay ku bannaysay.

- Naa heedhe Sahra, miyaad gashay maanta Faysbuugga?

Sahri may filanayn su’aashaa maldahan. Haddii ”haa” ay tidhaa dembi ayay yeelan kartaa. ”May” haddii ay tidhaa been bay sheegi kartaa. Beenta ayay ku dhaqaaqday.

- May huuno, hee?
- Kombiyuutarkii miyuu ku ag yaallaa?

Dhinac intay u sii riixday ayay deedna tidhi:

- May huuno macaan, maxaa jirana?

Najax oo aan is dhiibayn ayaa sii wadatay.

- Naa dhegihii tilifoonka sow ku ma hadlaysid?
- Haa.
- Haddaba faysbuuggaaga ka gal dee tilifoonka, wax baan ku tusayaaye.
- Oo dee huuno maad i tidhaahdid uun faysbuugga gal, i sug aan galee.
- Ma gashay?
- Wax yar. Wuu wareegayaa. Telesomtii cuslayd weeyaane i sug.
- Ma gashay?
- Haa imikaan galay, haye?
- Cambaro Dheertii magaceeda ku qor.
- Naa maxaad aragtay haaye? Waan ku qoray.
- Sawirrada u sarreeya ma arkaysaa?
- Haa, balaayada madaxa dhuuban.
- Fur oo hore u soco.
- Alla, naa Kuusow ayaan arkaa.
- Naa iga daa waxaasoo bal hore u soco. Sawirka..
- Alla hoognay! Naa ma Hoodaa?
- Ka sheeke!
- Hadhnayeeey! Naa bal sug malaha... wallaahi waa iyadii, acuudu billaah! Afka xun day!
- Waa xalay xafladdaasi.
- Oo dee heedhe, naa bal sug, oo waa xertii eeriboodhka ay isugu yeedhay oo dhane.
- Miyaan garanayaaba! Ma kuwii baa?

- Naa way ka buuxaan, sow taa tii yarayd ee gaabnaydna. Naa dee naagtu maxay u jeeddaa laakiin.
- Maan fahmin wallaahi aniguba.
- Miyey ku la soo hadashay maanta?
- Ma Hoodo?
- Haddaa ayo?
- Huuno maya, bal imikaan garaaci doonaa.
- May, iska dhaaf. Illaa ay soo hadasho la ma hadlayno.

Tilifoonkii ayay hoos u dhigtay, qaybtii ay sariirta kaga jiiftayna way soo koobtay iyada oo jilbaha ku nabaysa beerkeeda. Dareenkii ay u qabtay Najax waxa ka xoog batay kan ay iyadu ka heshay Hoodo. Waxa ay dareentay in la khiyaameeyey. Way og tahay in aanu ninku meel ugu xidhnayn, balse in Hoodo oo qorshaha ku jirtay ay arrin noocan ah ku dhaqaaqdo ayaa dhib noqotay. Waa laga dhex toosay. Qiil ayay u raadisaa sawirka, way u weydaa.

Waxba ma huwana, haddana way gubanaysaa. Way karaysaa. Naxdintii ayaa weji kale qaadatay. Calooshii xanuunaysay ayaa bogsatay. Dareenkii nooca ahaa ayaa mid kale noqday. Cadho iyo ciil ayuu isku beddelay.

Saacadaha ayaa sida daqiiqadaha u weydaaranaya, su'aalaha aan jawaabaha wadan ayaa ku mudan maskaxdeeda. Hal mar ayay is rogtay intii ay jiiftay, iyada oo aan rabinna way gama'day. Laba saacadood kaddib ayay ku toostay dhawaaqa telefoonka. Waa Sahra.

- Naa maad huruddaa?
- Hii..
- Waannu kugu soo soconnaa?
- Adiga iyo?
- Aniga iyo Hoodo.

Xarfaha dambe markii ay dhegaheeda gaadheen waxay uga dhignaayeen biyo qabow oo lagu saydhay. Kor ayay u boodday.

Orod ayay guriga dhexdiisa ka bilowday. Dhar aad u qurux badan ayay isku taagtay, si degdeg ah wejiga ayay u rinjiyeysay. Afkeeda oo muddo xidhnaa ayay qosolka u sii tabobartay. In aan laga dareemin sida ay tahay ayay go'aansatay. Cadceedda oo aan weli fadhiga ka kicin ayay iyadu bannaanka u soo boodday. Wejiga baabuurka dhexdiisa ka soo dhoolla-caddaynaya ayaa hor keenay xusuustii sawirkii xalay. Kun su'aalood ayay rabtay in ay mar keli ah weydiiso, way se kala guri kari weydey. Salaan ay soo qasabtay ayay si dayacan ula eegatay wejiga Hoodo ee werwerku ka muuqdo. Kursiga dambe oo bannaan ayay si waafi ah u fadhiisatay. Bariido iyo hadal korka laga salaaxayo ayaa muddo lagu jirey. Waa la isu bixi waayey. Sahra ayaa go'aan qaadatay, iyada ayaa u bilowday.

- Naa dee Hoodooy, waad og tahay oo afar maalmood war lagaa ma helin. Arrinna waad ku maqnayd, bal dee sidii ay wax kuugu qabsoomeen iyo wixii ku helay noo sheeg.

Cunaha ayay sifaysay intii aanay bilaabin kahor.

- Een, dee horto waa run oo arrin ayaan ku maqnaa. Weliba qorshe aan anigu intiisa badan lahaa ayaynu ku soconnay, sow wax aad garateen maaha?

Najax guux ma leh, gariirna iska illow. Hadalkay dhuganaysaa.

- Markaa maalintii markii aan idin ka tegay waannagii is raacnay aniga iyo tii dheerayd. Adigu dee waan maaweelinayey illeyne, in badan ayaan u sheekeeyey. Wax badan oo aan maalmaha qaar ku diidi lahaana "waa runtaa" ayuun baan lahaa. Adigu al xaasil badweyn ayaan dhex muquurtay. Naago yaryar, ma ba yaryaree laakiin wax sida carruurta u dhaqmaya ayaan dhex tagey. Saddex asaasaq oo ay iyada wax isku yihiin oo qurbaha ka yimidna way jiraan. Koox dhan oo illaa lix naagood ka kooban ayaan toddoba ku noqday. Waxa qasab noqotay in aan sidooda u dhaqmo. Waa dad subixii is raaca, habeenkiina saqda dhexe uun kala taga. Inta subixii la ila haado, ayaa sida marada guriga hortiisa la iigu tuuri jirey labada habennimo. Aniga oo hurda ayaa haddana subaxa la i dul

istaagaa. Waxay noqotay in aan la qasto, dan ayaan ka lahayn illeyne. Iyaga in aan ka mid noqdo ayay dantaasina ku jirtey. Horto sidaas ayaan idiin ka maqnaa.

Sahra: oo ma wakhti aan nagu soo wacdo ayaad weyday?

- Wallaahi sow maan dhaaran, haa waan waayey. Marna iyaga ayaan la joogay, marna waan hurday. Xitaa telefoonkaygu laba cisho oo isku xiga bilaa dab ayuu ahaa oo Ilaahay igu og yahay. Laakiin waan qirsanahay in ay khalad tahay taasi, aniga xaaladdaydu siday doonto ha ahaatee. Waanay ahayd in aan qoraal idiin soo qoro xitaa, balse runtaa fiicane waxaan is lahaa way fahmi doonaan iyaguna.

Najax oo aad u aammusnayd ayaa hadal damacday.

Najax: habeen hore xaggeed ku maqnayd?

Hoodo: habeen hore, habeen hore een.. horto naagahan aan kuu sheegayaa waa naago hawada la haysta oo noloshaba ciyaar iyo qosol uun u haysta.

Najax: ...

Hoodo: dirac iyo xaflad wax aan ahayna ka ma shaqeeyaan. Imika saddex xafladood ayaan afar habeen ku tegay. Habeen uun baannu bilaa xaflad ahayn, habeenkaana hudheel ayay noo casho geysay. Labada xafladood ee hore iska caadi ayay ahaayeen, dharka oo la isugu faanayey mooyaane. Laakiin habeen hore..

Sahra: haa, taa habeen hore ka sheekee.

Hoodo: waanigan soo wadee, habeen hore, naag ayaa sii dhoofaysay. Xafladda la qabtay waxa la yidhaa ”Good bye”. Dad akhyaar ah ayaa imanayey, rag iyo dumarba. Show dadka imanaya, Najax ayaa ku jira. Anigu markaa maan ogeyn. Xafladdii marka ay muddo socotay ayuu soo galay, dee waa ta sidii gaalada la isu sal-salaamay ee dhabannada la iska dhun-dhunkaday. Show Kuusowgan aynu ka xaraabaysanno dad baa ku daba tukada. Waa ta la kala jiiteyba. Isaguna maaha qof waalane, si gaaban ayuu qof walba u salaamayey. Markii ayaa noogu dambeysey. Muddo kaddib markii ay xafladdu sii dhammaanaysay, ayay Cambaro

Dheer u yeedhay. Malaha waxay i tusaysay sida ay isugu dhow yihiin. Hadda naagtaa waa la qabaa!

Najax: tuma, ma iyada?

Hoodo: haa walliyo bille, beri dhoweyd ayaa la mehersaday. Laakiin dee waxaan maqlay in ay iyada iyo isagu wada sheekaysan jireen berigii hore. Adigu waxba yaanan hadal kugu daalline, sidaas ayay ku dhammaatay.

Sahra: sawirro ayaad la gasheen.

Hoodo: haa markii uu sii baxayey.

Sahra: si fiican ayaad u qoslaysaye..

Hoodo: alla, waynagaa jabnay, naa ma saasaa la iigu cadhoonayaa? Dhibku ma sawirkaa? Naa Najax, Sahra! Dee ila hadla!

Najax: naa walaal cidna kuu ma cadhoonayso. Qof xoraad tahay, cidda aad doontana waad isla sawiri kartaa.

Hoodo: Najaxeey i dhegeyso, ninkani markii uu sii baxayey ee uu agtayada ka kacayey, ayay Suleekhi ku tidhi..

Sahra: Suleekhi waa ayo?

Hoodo: dee Cambaro Dheer. Iyadaa ku tidhi ”Najaxoow dee sawir na la gal”. Waxa wallaahi ah oo billaahi ah in la igu qasbay sawirka oo aanan dan ka lahayn waxan yaree dabada buuran. Maxaad is lahaydeen, ma Hoodaa idin ka dhex toostay?

Najax: dee mayee waannu fahmi weynay, adna waxba noo maad soo sheegin. Laakiin dee waa caadi, illeyn ninku ninkaygii maahee.

Hoodo: naa wallaahi bay iga tahaan ku idhi walaal, haddaad i rumaysanayso. Xaggeed ka aragteen sawirka? Yaa soo geliyey.

Najax: ”Siiq Leebal” ayaa soo gelisay dee, balaayada dheer.

Hoodo: waxaasay ka shaqaysaa taasina. Naa heedhaha haddaba, anigu kan yaree dabadii naagaha leh ma xiisaynayo oo wallay iga tahaye, waanad i taqaannaa Najaxeey oo maanta i ma baranayside, qorsheheennii ma sii wadannaa? Maxaa se idiin qabsoomay idinka? Qolkii ma la soo helay Sahraay?

Sahra: qolkii waa diyaar, haa. In aynu heshiis la galno ayuun baa hadhay.

Hoodo: asal, weliba anigaa dhiibaya bisha koowaad lacagtiisa. Najax: naa maxaad u dhiibaysaa, anaa dhiibayee.

Hoodo: alla miskiinsanaa, ma adaa waxba og. Naa waxaan ka imid naago ay bahashu iska ag taal-taallo. Maalmahaa waan ladanahay.

Najax: alla maxaad wax soo aragtay!

Hoodo: naa waxaas oo dhan wax baa ka horreeya, markii uu miiskayaga fadhiyey yarku, wuxuu noo sheegay in uu xaflad casho ah qasriga madaxtooyada uu ku qabsanayo. Tigidho ayuu noo qaybiyey intayadii meesha fadhiday, laba kalena waan ka soo qaaday oo waxaan ku idhi ”keen guddoomiyaha iyo ku-xigeenkiisa tigidho aan u geeyo”.

Najax: haye haye, warkaasaa i maree.

Sahra: naa waxba ku maad odhane Ilaahay ka yaab.

Hoodo: waa taan kaa ku go’aa, sidaasaan ku idhi. Deedna wuxuu yidhi ”waa kee guddoomiyuhu”. Nin buu moodayey. Dee waaniga u sheegee ku idhi ”miyaanad maqal inanta geeska Afrika oo dhan laga xushay ee sidaa iyo sidaa ah”. Wallaahi waa taan hooyaday waayaa, wuu u qaadan waayey. Xitaa waxaan u sheegay in aad isku magac tihiin.

Najax: wallaahi wax nool ayaad tahay Hoodooy, wax yarna waan kuu cadhoodee iska dul qaado. Xafladdu waa goorma?

Hoodo: dee waa caawa, si weyna waa la innoo sugayaa weliba. Adigaa lagu sugayaa weliba.

Sahra: maxaad tidhi?

Najax: naa waa goorma, caawa aa?

Hoodo: caawa sagaalka iyo badhka habeennimo ayaa tigidhada ku qoran.

Degdeg ayay uga hadhay, iyada ayaa isu hadhay. Dareen qasan ayay qolkeedii la gashay. Haanteeda dareenka haddii loo fiirsado, gunta hoose farxad ayaa fadhida oo aayar karkaraysa. Korkeeda sarena rajaa ku dahaadhan sidii labeenta. Labadaa

dareen, haanta waa ka badh uun. Dhowr kiiloo oo shaki ah, badhkii oo walaac ah, saddex rubuc oo cabsi ah iyo qadhiidh quus ah, intaasaa ka korraysa xuubka rajada ah. Way ku kalsoon tahay saaxiibaddeed Hoodo, haddana wax ay rumaysato ayay garan la' dahay. Hadalkii ay ku lahayd ayay ku soo ceshataa, deedna way qanacdaa. Haddana waxay og tahay in ay Hoodo cid kasta hadal ku qancin karto. Biyuhu dhanka ay u shubmayaan in ay u raacdo ayay qoondaysatay.

Warqadda dhan walba laga xardhay ee faraheeda sida dabacsan ugu jirta ayay hoos u eegtay. "09:30 pm" oo far dahabi ah ku sharraxan ayay indhaha ku nasisay. Xiisaha gororka ah ee ay u qabto madal aan laga aqoon ayaa si isleeg siman ah ula kordhayey amminta ay sii eegto xarfahan dhowrka meelood ka laabma. Tamar saa'id ah ayaa gashay. Meel aan lagaa aqoon marka aad tegayso, dhowr waxyaabbood ayay ku fiican tahay. Mid ka mid ah ayaa ah in haddii lebbiskaagu liito, cidi aanay dan kaa galayn. In ay sidii hablaha boqortooyada u lebbisato, go'aan ayay ku gaadhay. "Hadhow sidii ay noqotaba, adigu waxba ha la hadhin" ayay ku tashatay.

Sidii qumac la riday ayay sariirta ay dacalka kaga fadhido uga boodday. Wakhti badan ma hadhin, waanay qorshaysay. Saacad waxa iska leh musqusha oo ay imika sii gelayso. Toban daqiiqo wax ka yar, dharka oo diyaar u ah ayay isku sudhaysaa. Laba saacadoodna waa xaalxaalka dambe iyo is-rinjiyeynta. Tuwaal culays badan ayay ula kacday dhanka qolka la isku dhaqo. Lixdan daqiiqo kaddib ayay ka soo baxday iyada oo qof kale u eeg. Raad qoyan oo ay cagaheedu reebayaan ayay ku hagtay qolkeeda. Timo mayd ah oo aan goorahaa qallalayn ayay tuwaal kale ku maraysaa iyada oo qoorta dhinac u duwaysa. Kor ayay u laabaysaa si ay halkaa ugu illowdo saacadda soo socota. Shaqo aanay jirin cid kaga xariifsani ayay caawa si niyadsan u bilawday. Dhowr nafaqo oo kala kaan ah ayay midna jidhka ku duugaysaa, midna ka korreysiinaysaa, midna labeen uga dhigaysaa. Sidii farshaxan qalabkiisu u dhan yahay ayay xaadda korkeeda midba gaar u raalli gelinaysaa. Iyada oo barta ay ka dhaqaaqdo caraf udgoon kaga tegaysa ayay dhankii maryaha u dhaqaaqday.

Kabadh gidaarka qolka hoos u gashan ayay labadiisa albaab midba mar furtay sidii uu kaare ka soo baxayo. Faraheeda hore oo ay ku aammintay xulidda maryaha ayay hoos u raacisay dharka laallaaban iyaga oo maroba mid uga gudbaya. Meel ay wax ku ogaayeen ayay ku nagaadeen. Amar la siiyey ayay fuliyeen markii ay si qumman u soo jiideen wixii ay hayeen. Gacmaha iyo indhaha oo wada sida ayaa sariirta cidhifkeeda hoose ee bidix dul fadhiisiyey. Maaha maryo ay weligeed hore u isticmaashay. Waa hadyad ay iyada habaryarteed uga keentay Dubay markii ay qalinjabinaysay. Shan jeer oo hore oo ay isku eegtay mooyaane, weli la may bixin.

Iyada oo niyadda ku haysa ”Cambaro Dheer” iyo asxaabteeda ay la kulmi doonto, ayay si qumaati ah muraayadda u hor fadhiisatay. Dhowr burush oo kala kaan ah ayay qunyar ugu salaaxday wejigeeda. Foodda hore iyo dhabannada ayay ku noqnoqotay iyada oo aan degdeg ku jirin. Muddo ayay sidaa ahayd, in kalena way sii ahayd. Ciddiyo aan aad u dhaadheerayn oo bilaa midab ah ayay tii u dambeysay faryarta ku xidhaysay markii ay maqashay hoonka baabuurka bannaanka ka yeedhaya. Wax yar kaddibna, dhawaaqa asxaabteeda ee qolkeeda ku soo dhowaanaya ayaa xigay. Codka Hoodo ayaa soo horreeyey. ”Naa meeday yartii? Way jiiftaa kolley?” Sahra ayaa qosol ugu markhaati furtay. ”Kolley riyadii saddexaad ayay sii dhammaysanaysaa imika”. Way soo dhowaadeen. Sahra oo afka ku haysa ”naa kolley qannaayad ayay ku riyoonaysaa” ayay albaabka soo riixeen. Sankooda ayaa ka dhakhso badnaa indhahooda. Ur udgoon oo qolka dhex hurudday ayaa illaa cidhbaha socotay, xubnahoodana dabcisay oo hadalkii ka jartay. Maskaxda oo aan weli waxba fahmin ayay indhuhuna sixi waayeen jooggan sidii caadiga ahaa ka dheer. Cadar ku jira gacanteeda bidix oo fidsan ayaa meel dheer ka soo tooganayey markii ay indhahoodu qabteen iyada. Hadal ayay iska waayeen. Najax oo saacad dahabi ah dhudhunka ku laabaysa ayaa mar dambe ku tuurtay ”ayaa hurda ee aad sheegayseen?” ”Inna mariya” ayay u raacisay iyaga oo weli sida asnaamta qallalan.

Sahra: uu uu uu.. wallaahi haddaan nin ahay waan kugu boodi lahaa imika.

Hoodo: naa xuural-cayntu ma sidanay u eeg tahay toloow? Huuno ma adigiibaa?

Najax: hadalka badan jara..

Hoodo: naa dee naagtu way innoo xoog sheeganaysaa. Inaadeer adiguu Ilaahay quruxdaa ku siiyee dee ha nagu jimicsan.

Najax: waa imisadii?

Sahra: oo diracanna muxuu ahaa naa? Wallaahi in aan qaawanahay ayaan isu haystaa imika. Qurux badanaa wuxu.

Hoodo: alla, naa bal dhankaa u jeedso. Oo kan maan arage, waan kaa xadi lahaaye.

Najax: ma baxnaa?

Hoodo: bal cadarkaa uun ii dhiib, may ka kale, shaneelka.

Najax oo hoggaaminaysa ayay kaabadda guriga ka soo dhaadhaceen. Baabuur ay indhaheedu garan waayeen nooca uu yahay iyo wadihii oo dhex fadhiya ayay indhaheedu qabteen. Iyada oo aan hadal ka keenin ayay kursigeeda qaniintay. Qorshe ay xafladda ku geli doonto ayay asxaabteedu diiyaariyeen, iyaduna waa mooge.

Afartan daqiiqo kaddib ayay ku soo hagaageen qasri magaalada ka baxsan oo nuurkiisu xiddigaha u jawaabayo. Saddex isbaaro oo kala dambeeya ayay ka gudbeen markii ay magacyadooda oo sii yaallay ku dhawaaqeen. Qasri mataan la ah kan weyn oo garabkooda bidix ka soo eegaya ayuu waduhu ku hagaajiyey isaga oo raacaya fallaadhaha iftiimaya ee dhulka waddada labadeeda dhinac lagu dhigay. Taallada badhtanka taalla dhismaha hortiisa ayuu ku wareegay isaga oo si aan dareen kicinayn u istaagaya. Hoodo ayaa degtay, Sahra ayaa raacday. Najax oo soo siqaysa ayaa la yidhi ”joog”. ”Naa waa maxay?” ayay weydiisay.

Hoodo: horto doqonsanidaa huuno.

Najax: maxaad leedahay?

Sahra: ma adigoo sidan u dhalaalaya ayaad aayar uun iska soo geli xafladda. Waa in la ogaadaa marka aad soo gelayso.

Hoodo: walaal inankoow, inanta kaxee, baabuurka ku wareeji illaa inta aannu kula soo hadlayno. Canjaladdii aan kuu dhiibayna u shid oo magaalada ku soo wareeji. Adiguna xabiibti, yarkii kuusnaa oo jooga mooyaane, soo geli maysid xafladda. Markaa dib u fadhiiso, illeyn muusig maynaan soo doonane.

Najax oo amakaagsan ayaa albaabkii lagu xidhay. Qasrigii ayay dib uga noqotay iyada oo amarka qasab ku qaadanaysa. Soddon daqiiqo ayay sii jeedeen markii uu telefoonka waduhu yeedhay. Wadihii ayaa kala jeediyey. Haddana telefoonkeeda ayaa yeedhay. Hoodo oo hoos u hadlaysa ayay ka heshay ”naa waa la wada yimid kow dheh, dee waad taqaannaa sida xafladaha loo soo galee, adigu ha kufin uun”.

Saacad badhkeed oo kale ayay haddana u soo socdeen dhankii madaxtooyada. Lugta midig ayay iska soo horreysiisay iyada oo cidhibta dheer ku kala kaxaynaysa jayda dhulka cabbaysan. Diraceeda oo aan wax badan qarinayn, marka laga tago caleemo cagaar-dahabi ah oo si farshaxanaynsan oo gudban u qarinaya laabteeda, dhexdeeda illaa jilbaha inta u dhaxaysa mooyaane.

Labadeeda gacmood ayay xagga hore isugu keentay iyaga oo ku kulmaya shandadda aadka u yar ee caatada ah. Garbasaarta ku xidhan timadeeda inta kuusan ee dambe, baallahana u raacda garbaheeda ayaa hoos ula daadegta gacmaha dhererka la jalaqsan.

Afar kaabadood ayay midba mar kabta saartay. Albaab jooggeeda laba jeer kor uga dheer ayay dhismaha ka gashay. Midig ayay u leexatay markiiba iyada oo raacaysa ishaarooyinka ay bixinayaan shaqaalaha asnaamta aad mooddo ee madowga ku lebbisan. Tallaabada ayaa soo dhoweyneysa dhawaaqa ay dhankiisa u socota. Muusig qalaad oo la naaqusay ayaa ku badhxan codka ay dadku sida shinnida ugu guuxayaan. Qosol talantaalli ah ayaa labadii ilbidhiqsiba yeedhaya. Koox-koox ayaa loo taagan yahay, qaarna u fadhiyaan. Meel ay ku hagaagto iyada oo aan garanayn ayay soo istaagtay afaafka hoolka ee ubaxyadu ku wareegsan yihiin. Intii aanay waxba fahmin ayay maqashay

dhawaaq ka soo yeedhaya dhanka hore ee hoolka. Waa Hoodo iyo Sahra oo si farxad leh magaceeda ugu heesaya. Waa qayb qorshaha ka mid ah. ”Najax ayaa timid, Najaaaax!! Wuuuuu”. Magicii yeedhay ee u eekaa kii inanka madaxweynaha ayaa dadkii soo jeediyey. Laba boqol oo indhood oo jidhkooda wata ayaa mar keli ah soo eegay dhankeeda. Naxdin ayay bawdyaha isla dhacday. Guuxii ayaa mar keli ah joogsaday. Waxay ogaatay in uu habeenkeedii yahay. Alle waa baray sida fursadaha looga faa’iideysto. Labada gacmood ee boorsada yar ku dheggan ayay ta bidix kor u soo qaadday si ay sacabkeeda oo ballaadhan timaha u dul mariso, iyada oo dhafoorka bidix ka bilaabaysa kuna joojinaysa dhegta iyo qadaadka inta u dhaxaysa. Isla gacantii ayay dhaadhicisay iyada oo faryarta ku soo qabsanaysa diraca qaybtiisa ku beegan jilibkeeda bidix, korna u soo dallacaysa in aan badnayn. Tallaabbo Alle baray sida loo qaado ayay ku hoggaamisay jidhkeedan carbisan. Dad hoos u leh ”qoftan yari maxay ahayd?” ayay kolba laba dhaaftaa illaa ay ku dambaysay Sahra iyo Hoodo oo dhoollacaddayn aan jirin illaa gowsaha ku muujinaya. Sidii carabta ayaa kolba dhaban la isu dhiibay. Afar hablood oo ag taagnaa, oo ay ”Cambaro Dheer” ka mid tahayna, xisaabta ayay ku saxday. Kuusow oo jidh ahaan la jooga afar asxaabtiisa ah oo laba dumar yihiin, ayaa indhihiisa iyo qalbigiisuba xaggan u soo maqan yihiin. Inta uu isha ku soo xadayo, iyadu waxay uruursanaysaa hambalyooyin ay dadkii maqlay shaqadeedu dusha uga tuurayaan. ”Shaqo fiican ayaad qabatay walaal”, ”dumarka ayaad hormood u tahay Najaxeey”, ”geeska Afrika ayaad u horraysaa” iyo in u dhiganta oo aanay garanayn sababta ay u mutaysatay ayaa lagu rusheeyey. Intii taasi socotay ayay Hoodo isha kala hadashay ”Cambaro Dheer”. Iyaduna isaga ayay si dahsoon ugu dhawaaqday. Najax oo goorahaaba garan la’aa si uu ugu yimaaddo ayaa soo dhaqaaqay isaga oo iska dhigaya qof aan waxba arkin.

Cambaro Dheer: Najaxoow walaal maanta waxa aan ku barayaa inantan aad isku magaca tihiin.

Isaga: mansha Allah, ma Najax ayaa lagu yidhaa walaal?

Najax oo hoosta ka shanqadhaysa gariir dartii ayaa is adkaysay, u na celisay ”walaal haa, barasho wanaagsan”. Gacan

kun nooc oo kiriim ah lagu duugay ayay si dabacsan u soo fidisay. Degdeg ayuu uga qaaday. Way og tahay in aanay urtaasi ka ba'ayn illaa berri.

"Cambaro Dheer" oo aan haatan waxba looga baahnayn ayaa damacday in ay xaaladda hoosteeda ku soo celiso. "Inanta miyaad garanaysaa? Waa inantii toddobaadkii hore ku guulaysatay shaqadii ay dhallinta Afrika oo dhammi u tartamayeen". Isaga oo aan indhaha iyada ka qaadin, shaqadana aan fahmin ayaa soo celiyey "wallaa! Shaqaduna?" "Dee waxay noqotay guddoomiyaha COA ee bariga Afrika". Haddii uu dherigiisu bilaa milix ahaa, imika ayaa cusbo loogu daray. Markii uu maqlay magaca "COA" ayuu indhaha kor u taagay. Si toos ah ayuu iyada ugu yidhi "waaw, marwada hambalyo ayaan leeyahay marka hore." Hoodo iyo Sahra oo sidii ay rabeen wax ugu socdaan ayaa "Cambaro Dheer" cidhifka jiiday si ay u keliyoobaan labada isku magaca ahi.

Meel ka durugsan ayay sharaab u doonteen iyaga oo ka fogaaday goob ay ka maqli karaan hadalkooda. Shaqada Hoodo iyo Sahra ayaa haatan ah in ay dadka ka ilaaliyaan si ay u kala bogtaan. Saaxiibaddood Najax oo aanay uga baqayn in markabka loo soo xidhay ay alaabteeda kala degto ayaa isku kala bixisay Kuusow. Wixii u eekaa bariido iyo isbarasho ayaa u gudbay hadallo dhankiisa ka imanaya iyo dhoolla-caddayn ay inani siin karto nin ay rabto oo dhankeeda ka imanaya. Walow uu la joogo ninkii ay jeclayd ee madaxweynuhu dhalay, haddana mar keli ah jooggeeda waxba ka may beddelin. Kalsooni ayay dhabarka la dhiibinaysay iyada oo eegmada ay indhihiisa u diraysana u qiyaasaysa. Xaaladda ayay maammulkeeda la wareegtay, iyada oo aammusni, qosol ay marka ay iyadu doonto u qadhiidhayso, marka uu doonana ka qarinaysa, iyo ereyo kooban ku hagaysa haasaawaha. Bilaa awood ayay ka dhigtay. Wax la sito ayay ka dhigtay. Fig ayay kala baxday. Dad waxa uu yidhaahdaba "nacam" odhan jirey ayay ka mid noqon weyday. Iyada oo aan isagana didinayn ayay haddana marka ay doonto ku adkaysaa. Markii u horreysay ayay dareensiisay in laga awood badnaan karo.

Sahra ayaa u sheekaynaysa kooxda, Hoodo ayaa sheedda ka soo dhowraysa iyada oo kolba candhuuf culus liqaysa. In badan

ayay eegtaa, haddana way ka jeedsataa si aan looga shakiyin. Mar kasta oo ay labadoodu isa sii fahmaan, Hoodo laabta ayaa sii cuslaanaysa. Walow ay si niyad ah isugu keentay, haddana farxadda ay saaxiibaddeed u dareemayso, wax kale ayaa weheliya. Ishii aragtay in ay lambarrada kala qorteen ayaa degdeg u qoyday, dhibic illin ahna soo tuurtay. Qof ay rabtay ayay hibaysay caawa.

Labada Najax ruuxdooda ayaa ku midowday dhul ciiro ku fadhido, hareerahooduna qarsoon yihiin. Labadooda oo keli ah ayaa isu muuqda, isu qoslaya. Bartooda ka may dhaqaaqin, hawada sare haddii aad eegtana, kuwa gacmaha is haysta ee isla duulayaa waa iyaga. Fure ay la wareegi jirtay ayay heshay qufulkiisii. Daruur farxad ah ayaa keligeed u da'aysa, isna sida jeegaanta ayuu dusheeda hadheeyey. Cagaagni ayay doog dharab ku fadhiyo ku botorinaysaa. Xaalad ay si kedis ah u gashay ayay rabtaa in aanay ka bixin. Hadalka ayaan u baahnayn in la qasbo. Ereyada laxanku saaran yahay ayuu midba mar soo qubayaa. Debnaha ay sida xakamaysan u kala jiidayso ayay shidaal uga dhigaysaa haasaawe aan farogelin kale u baahnayn. Mawduucyada ay ka hadlayaan ayaa ka kooban wax kasta. Dhan kasta oo ay isu la kacaan – haddii ay ku midaysan yihiin iyo haddii kaleba – isku-soo-dhowaansho ayuu abuuraa. Weli hadal ay sidan u dhadhansato hore u may soo arkin. Sidaas oo ay tahay, waxay iska jiraysaa in ay u eekaato kumannaanka hablood ee isaga daba orda. Waxay hoos u leedahay "nasiib ayaad leedahay haddaad i hesho". Isaga ayaa u eeg qof maqlay codkeedaa hoose, oo rumaystay. Gabadh isaga hadal ku gujinaysa, mid aan isaga wax walba ku raacsanayn oo cod gaar ah leh iyo in ay wax badani ka qarsoon yihiin ayuu ogaaday. Inta uu ka bartay caawa, ayaa ah darkii koowaad ee ceel uu waadaanta kula noqon doono.

Habeenkii markii ay hoyatay ayay jiifka ku baandhaysan. Dareenno badan oo markii ay isaga la joogtay daah ka saarnaa ayaa imika soo xaadiray. Dhanka midig ayay u jiiftaa, jilbahana laabta ayay ku haysaa marka ay indho qoslaya hawada bannaan ku illowday. Afkeeda ayaa dhoollacaddayn ku turjumaya xusuusta ay maskaxdeedu hadba baal rogeyso. Hadalladiisii ayay dib ugu noqotay, maya, dhaqdhaqaaqiisii. Indhihiisii in ay hurdaan u

eekaa ayay midba mar eegaysaa. Libiqsigii caajisku ku jirey ayaa dareenkeeda xadaya. Debintii hoose ee uu kolba muudsanayey ayay la jidhidhicootay. Marka ay hadal damacdo, sidii uu u aamusayey ayaa garaaca wadneheeda kordhisay. Marka ay soo xasuusato sidii ay hadalka ugu adkaynaysay ayay qosol la jeedsataa. Dhankeeda marka uu u soo jeesto, sidii loo saaqayey ayaa haddana loogu duulayaa. Jidhkeeda ayaa xubinba gaarkeeda loo la hadlay, isaguna u qanciyey. Lambarkiisii ayay hoos u eegtay, waa sax. Qiyaastii in uu berri la soo xidhiidho ayay rajaynaysaa. Si kasta ha u dhacdee, iyaduna ma rabto in ay kaga horreyso. Sida ay noqoto, loo joogi doonee.

Dhanka kale ee magaalada, gabadh dhiggeeda ah oo Hoodo loogu yeedho ayaa sidaas si la mid ah u fikiraysa. Balse hal mid ayay ku kala duwan yihiin: afka Hoodo wuu xidhan yahay, indhaheeduna way qoyan yihiin. Calool-xanuun ay kala timid xafladdii ayaa hadda ku fiday. Dareen aanay rabin in la ogaado ayay la galgalanaysaa. Culays aanay ka caban karin ayaa ku raran. Wax aanay cidna la wadaagi karin ayaa cidlo ka helay. Habeenka oo ku dheeraaday, barkimada oo aan lahayn meel fayow iyo qalbi qayb maqan tahay ayay hurdo qadhiidh ah aakhirkii kabbatay.

Guri saddexaad oo magaalada badhtankeeda ah, Sahra ayaa xisaabbo la kadeedan. Waxa ay ahayd qofka keli ah ee aan dareenkeedu hagayn caawa. Qorshaha ayay Hoodo la wadday intii hore, markii Hoodo la daaray ayay keli ku noqotay hablihii ay sheekada beenta ah kaga jeedinaysay Najax. Indhaheeda oo ahaa kuwo aad u shaqaynayey ayay ku la socotay haasaawaha labada Najax, intii aanay dhanka Hoodo soo eegin kahor. Candhuufta ayaa isku taagtay markii ay indhaheedu qabteen Hoodo oo ilmada hoos u bi'inaysa. In ay farxad la ilmaynayso ayay iska hubisay, in aanay sidaas ayay ka garatay illinta dhaadheer ee ay qari is leedahay. Waxba way fahmi weyday. In ay sheekada Najax iyo dareenka Hoodo xidhiidh leeyihiin way garatay. Hawsha ay waddo awgeed, ayay waxba weydiin kari weyday. Waxay go'aansatay in ay iska dhigto qof aan u jeedin. Xisaabtaa xidhitaankeeda ayay hadda sariirta dusheeda ku laaqaysaa. Hal ay hal u geysay ayaa kow iyo toban ku noqonaya. Waagu inta uu dillaacayo ayay raagsatay.

Saddex dareen oo kala kaan ah, ayay habeenka ku sagootiyeen, qorraxduna ugu soo baxday.

Waaga oo ka qurux badan kuwii soo maray ayaa u hor baryey Najax. Iyada oo baalal leh ayay ka duushay jiifka. Hoodo weli qorraxdu dhankeeda ka ma soo bixin. Weji uu rinjigii xalay iyo qoyaankii kun midab u sameeyeen, timo geed maraa ah u eeg iyo cago mayd ah ayay la jiiftaa bartii xalay. Sahra oo qorraxda ka hor toostay ayaa dhanka Hoodo u soo xadhko-xidhatay. Dhexda ayay laba nafar oo kelyo ah ka sii qaadday. Si dhuummasho ah ayay qolka u soo gashay. Hoodo oo maqlaysa shanqadha ayaa ka wahsanaysa in ay kor u eegto qofka soo galay. Maryo sariirta dhinaceeda wadhnaa ayay sidaa isa ga riixday intii aanay salka si taxaddir leh u saarin furaashka. Hoodo oo isha bidix furtay ayaa aragtay qofka dul fadhiya, markaasay xidhay.

- Kelyahaad jeclayd ayaan kuu keenay.

Maalmaha qaar, sariirta ayay ka boodi lahayd farxad darteed. Baadka ishu xitaa muu dhaqaaqin. Sahra ayaa ka dhigatay in loo jawaabay oo sii wadatay hadalkeeda qabow.

- Basbaasna waan kuugu soo daray weliba, miyaanad urinayn?

Indhaha Hoodo ee xidhan ayaa midna hoos barkimada illin ugu mudday, midna sanka korkiisa dul cararsiisay. Sahra ayaa gacanteeda saartay garabka Hoodo, iyada oo aan hadal ayay u sii waddey dhanka wejigeeda iyada oo suulka si deggan ugu masaxaysa raadka qoyan ee ay illintu reebtay. Aamusni ayay timha ugu salaaxday saddex jeer. Hoodo ayaa labadeeda sacab degdeg ugu qallajisay dhabannadeeda, korna u fadhiisatay mar keli ah.

- Liin dhanaan maad soo raacisay?
- Waa tan, jeexaa dhan ayaa kuugu jira. Ma roodhida ayaad rabtaa mise laxooxda.

Intay cunaha sifaysay ayay raacisay ”roodhida”.

- Kee baad ka soo qaadday?
- Kii dhowaa. Ma macaana miyaa?
- Waxaasi ma shaah baa?

- Mayee waa bun, kii aad jeclayd.

Arrintii xalay, midhaheedu waa qaydhiin, in la goosto la ma rabo. Sheeko hudheellada magaalada iyo sida ay u kala quraac macaan yihiin ah, ayaa la galay. Bunka iyo noocyadiisa ayaa la qaadaa-dhigay. Codka ayaa si fiican uga soo baxay Hoodo, calooshana waa loo tiiriyey. Intaa kaddibna Sahra ayaa dhar u soo saartay. Bannaanka in ay u saarto, qolkan ilmaynayana ay ka kaxayso ayay rabtaa. Sidaa ayay yeeshay. Iyada oo jiidaysa ayay baabuurka saartay. Magaalada ayay dhinac uga saartay, baabuurka ayay ka dejisay, dhagax weyn oo ay ku fadhiisan jireen saddexdoodu, ayay laba sal saareen.

Wejiga Hoodo waxa si fudud ugu ciyaaraysa shalmadda ay laydhu ku dhirbaaxayso. Indhaha ayaa iyaguna ka gabbanaya indhaha Sahra. Way fahamtay waxa soo socda, inta aan su'aasha la weydiin ayay jawaabta sii bilowday.

- Sow ma garanaysid maalmihii dhoweyd ee aan idin ka maqnaa?
- Haa.
- Xafladdii aannu tagnay habeennimadii, maalintii ay Najax soo degtay, ayuu inankani yimid. Wax badan muu joogin, laakiin bahashii ayaa is kaaya bartay. Anigu markaa qorshihii aynu dejinnay ayaan fulintiisa u socday, oo Ilaahay igu og yahay.
- Haye.
- Inankii waannu is barannay. Ma garanayo wax igu dhacaye, malaha waa hadalkiisa, waan isku dardarsamay uun. In yar ayuu ila hadlay, wuxuun baan is arkay anigoo daldalmaya. Miiskayaga ayuu soo fadhiistay, hortayda weliba. Waannu iska soo hor jeednay. Waana qof aad is baranaysaan imika oo sheekada waad ka guraysaa.

Way aamustay, faraha ayay hoos u eegtay. Naqas culus ayay cantuugtay, intii in ka badanna way soo tuftay. Way sii wadatay.

- Waan is kala garan waayey. Waan ka jeedsan kari waayey. Si kasta oo aan isu qabto, si kasta oo aan isu xakameeyo, si

kasta oo aan Najax u soo xasuusto, wax ka weyn ayaa i watey. Muddo ayuu na la joogay, markii dambena wuu naga tegay.

- Ma intaas uun baa?
- Maalintii dambe ayuu haddana soo noqday. Anigu waxaan u haystaa in aan keligey sidan dareemayo, show isagana waa la sitaa. Af-dheeridayda anna hadalkaygii ayaa saameeyey malaha. Inankii markii uu soo noqday, dhankii aan joogay waa kan u soo cararay. Waa saddex cisho kahor uun. Maalintaas ayaan dareemay in isagana la sito. Waan u qaadan waayey. Dee qof la hadlaysa qof ay xiisaynayso ayaan ahaye, si caadi ah ayaannu habeenkaana u sheekeysanaynay. Habeenkii sidii markii aan ku kala tagnay ayuu maalintii dambe i soo wacay, waa dorraad.
- Haye.
- Kuye ”xalay oo dhan waan kaa fikiraayey oo maan seexan”.
- Maahee?
- Walliyo bille.
- Waynagaa ba’nay! Haye?
- Anna waan u soo gaabiyey hadalkoo, wuxuun baan ku idhi ”huuno ha iga fikirin, waan doonanahee”. Dee miyaanu in yar kaddib jarin khadka.
- Haye?
- Xalay ayaannu is aragnay markaa, salaanta ii muu dhaafin oo waa adigii arkayey. Markaa waa sidaas.
- Show bilaash u maad ooyeyn xalay!
- Xalay goorma?
- Dee xafladda. Ma inaanan ku arkayn ayaad moodeysay?
- Adna indho dheeridaa horto. Wallaahi ma rabo in aan Najax farxaddeeda lumiyo, ee anna sideen farxaddayda u soo ceshadaa haddaba?
- Miyaad rabtaa in aad u sheegto?

- Mooyi, ma garanayo wallaahi.
- Bal inna mari aan u tagnee.

Telefoonka oo ay caadi ahaan ku illoobi jirtay meel ay xasuusan kari weydo, maanta gacanta ayay ku haysaa. Marka ay ku dhididdo, gacanta midig ayay u dhiibaysaa. Musqusha way u qaadanaysaa, way la soo baxaysaa. Yeedhmadiisa ayay raajicinaysaa. Kolba hoos ayay u eegaysaa. Dhowr jeer ayay gujinaysaa – wuu shidan yahay. Daqiiqaddii dhaaftaaba wadno-gariir ayay ku reebaysaa. Feedhaha hoostooda iyo xuddunta korkeeda, maqaarka meel hoos looga dhaadhaco, ayaa dhaqdhaqaaqaysa. Caloosha dhan ayaa gariiraysa. Sambabbada ayaa shaqada kordhinaya. Wax aanay weligeed dareemin, balse macaan ayaan dhex mushaaxaysaa. Hawada ayaa si gaar ah dhadhamaysa, indhaha ayaa wax kasta u qurxinaya. Lugaha ayaa si dahsoon u dubaaxinaya. Meel in ay taagnaadaan ma rabaan, dhan ay u socdaanna ma garanayaan. Qolkeeda iyo daaradda inta u dhaxaysa ayay soddon jeer ku noqnoqotay, illaa awood kale ay iyada joojisay. Gacanta ayaa la gariirtay baaqa ka yeedhay teleefanka ay ku dheggan tahay. Hoos ayay u eegtay, magiciisa oo ay dhowr wadne raacaan ayaa muraayadda ku xardhan. Naqas qosol u badnaa ayaa debnaheeda soo dhaafay. Wadnaha ayaa amray in ay ka jawaabto, maskaxda ayaa tidhi ”afar jeer ha dhaco”. Saddex ilbidhiqsi ayay adkaysatay. ”Helow” ayay cod bilaa xanaf ah ugu heestay. Dhankiisa ayay ”Najax ii warran?” gariiraysaa ka soo yeedhay. ”Nabad walaal Najaxe ii warran?” ayay u celisay.

- Malaha wakhti xun ayaan ku soo wacay.
- Waa iska caadi walaal, hawl yar ayaan waday laakiin waan hadli karaa.
- Daalkii xalay ka warran?
- Daalkii la maan soo toosinba, saaka lixdiiba waan soo jeeday.
- Al, wallaahi qof adag ayaad tahay haddaa.
- Helow!
- Haa maad i maqlaysaa walaal?

- Wuu kaa yara googo'ayaa, haa, imikaan ku maqlayaa walaal. Maxaad tidhi?
- Qof adag ayaad tahay ayaan idhi.
- Iga daa Najaxoow waxna ma adkiye.
- Hee?
- Waxna ma adki, inkastoon yara adagahay malaha. Qosol kaddib ayuu weydiiyey "caawa maxaad qabanaysaa?"
- Caawa waan seexanayaa dee walaal.
- Maya intaanad seexan ka hor, ayuu weydiiyey isagoo qoslaya.
- Caawa waxa laga yaabaa inaan raaco hablo.
- Ma Hoodo iyo inanta kale?
- Haa, Hoodo iyo Sahra. Laakiin magaceeda yaa ku baray?
- Een.. waan maqlay uun wallaahi. Xalay ayaan maqlayey. Waa saaxiibaddaa maaha?
- Waa walaashay oo kale, haa.
- Dee caawa maad u jari?
- Waayo walaal?
- Anigaad i raaci lahayd?
- Xaggee?
- Xag aanan kuu sheegayn.
- Goorma?
- Fiidka.
- Fiidka? Bal walaal aan eego in aan iyaga ka soo fakan karo.
- Waad i soo wici, sow maaha?
- Haa, anaa kuu soo sheegi siday u dhacdo walaal.
- Waa war dhan, haye.
- Haye walaal.

- Haye. Baay.'

Badhanka khadka laga jaro ayay ugu yaraan shan jeer ku celcelisay si ay farxaddeeda keligeed u maqasho. Kor iyo hoos ayay u boodday. Diraca oo ay ku kufi gaadhay ayay labada kelyood gashatay. Bood-boodkii ayay sariirta la fuushay. Iyada oo hawada ku maqan ayaa albaabkeeda la soo riixay. Laba madax oo ay taqaanno ayaa soo eegaya.
Hoodo: naa bisinkee inanta maa la dardaray?
Sahra: waanigan arkaya, naa maad taajirtay?
Dhulka ayay u soo boodday, dhankooda ayay u soo carartay, Hoodo oo dhanka soke taagan ayay isku duubtay. ”Hoodooy wax aan kuugu abaal gudo wallaahi ma garanayo, waad ila dedaashay, anna waxaan kuu ballan qaadayaa in aan maalin uun kuu gudo intii aad ii gashay”. Hoodo way qallashay. Labadeeda gacmood ayaa naxdin la laallaada. Ta bidix ayay kor u soo qaaday si ay dhabarkeeda dhowr jeer u mariso. Sahra oo wejiga Hoodo ku soo beegan ayaa aragtay illinta dhabankeeda yaacaysa. Iyaduna way ku dartay. Waa Najax oo faraxsan, asxaabteeda oo farxadda dhabarkeeda ka ilmaynaya iyo iyada oo mooggan. Hoodo oo codka toosinaysa ayaa soo qasabtay ”naa waxaa saaxiibtinimadaa ka weyne iga fuq bal”.

Sariirta ayay si wareeg ah u fadhiisteen saddexdooduba, sidii beryaha qaar.

Sahra: haye, warran!

Hoodo: bal wax noo sheeg!

Najax: dee imikuu i soo wacay, ”caawa meel ayaan ku geynayaa” ayuu yidhi.

Sahra: haye, xaggee?

Najax: ii muu sheegin, laakiin caawa firaaqo in aan ahay ayuu i weydiiyey.

Sahra: haye?

Najax: ”aan kugu soo jawaab celiyo” ayaan ku idhi.

Sahra: oo waayo?

Najax: dee waan isu yara xariifinayey.

Hoodo: naa is xariifin lahaane walaal inanka la hadal, dirqi baannu ku soo qabannee!

Najax: dee waan ku celinayaa, imikaan wici.

Najax ayaa indhaha Hoodo isha la sii raacday. Sahra ayaa ka soo jeedisay.

Sahra: oo naa ma garanaysidba miyaa meesha uu ku geynayo?

Najax: may, ii muu sheegine, idinku xaaladdiinna ka warrama?

Sahra: annagu waxba ma hayno dee, adigaannu kaa soo war doonnay.

Najax ayaa u jeedsatay dhanka Hoodo.

- Naa hoodo maanta maxaa kaa si' ah?

Hoodo ayaa sii jeedsatay, cagaha dhulka dhigtay, korna u joogsatay.

- I sug suuligaan gelayaaye aan soo noqdee.

Markii ay baxday ayay Sahra weydiisay "naa maxaa helay maanta Hoodo?"

- Walaal mooyi, maanta dhan sidaasay ahayd. Waxba way ii sheegi weyday xitaa.
- Oo walaal maad inanta caadi u waraysatid? Wallaahi Sahraay ma naxayside ka warran?
- Dee waan waraystee waxba ii may sheegin, "waan fiicanahay" ayay igu tidhi.
- Sow tan la arkayo in aanay caadi ahayn.
- ...
- Hoogi waayey, anna halkanaan farxad boodboodayaa iyadana maan weydiinba xaaladdeeda.

Hoodo markii ay baxdayba naqas ay laabta ku haysay ayay soo fasaxday. Musqusha ayay baroor la dhex istaagtay. Beerka ayaa sabbeeyey. Culays laabta u fadhiyey ayay isa soo dhaafisay. Illin badan oo haaro u yeeshay illaa xalayna way soo farsamaysay. Iyaga oo hadalkii wada ayay calool-xanuun xidhan dharkii firfircoonida la soo gashay.

Najax: naa Hoodo walaal maxaa kaa qaldan maanta Ilaah baan kugu dhaariyee?

Hoodo: naa walaal hargab xun ayaa i soo haya dee, sanka iyo indhuhuba way i hoorayaan.

Najax: dee sidaa i dheh..

Hoodo: naa waxaa ka baxoo wax ma kuu sheegaa. inanka la hadal, waxba koodh ha iska dhigine ”waan ku raacayaa” dheh. Ma garatay? Imikana is diyaari oo wixii aad xidhan lahayd soo saar, meeye duruucdaadii horto? Kii xidho, kii akhtarka ahaa. Madhab iska dhig oo inanka raag. Kabihii afka dhuubnaana xidho. Markaa caawoo dhan soo sheekee dee, adigaaba haysta nin aad u sheekaysee. Naa Sahra miyaanay ahayn?

Sahra oo si hoose u qiiraysan ayaa ku naxday su’aasha. ”Dee mayee waa sidaa” ayay dirqi ku soo saartay.

Hoodo ayaa baalasha hoostooda ku qaadatay Najax markii ay Najax isu diyaarinaysay casuumaddii caawa. Dookha ayay ka kabtay, cabsi haysayna way isku dayday in ay hadal kaga maydho. Dhabarka waxa u soo jiifta Sahra oo isku daawanaysa labadan qof ee maankoodu kala daaqayo, jidhkooduna wada joogo. Laba hablood, da’ ahaan wax is dheerayn, damacu meel ka wada galay. Laba ay midi ku heshay rabitaankeedii ta kale waayiddeedii. Isle'eg teeda tabani tamar u tahay teeda togan. Inta mid ka maqan ay tahay in meel u buuxisay ta kale. Indhaha ayay ku rakibtay dhankooda. Fikirka ayay ku fogaatay marka ay indhuhu diiwaangelinayaan dhaqdhaqaaqooda. Mid ayaa dirac soo fidinaysa, ta kale ayaa dhinac u tuuraysa si ay mid kale u tusto. Ta kale ayaa markeeda laalaysa si ay mid kale u hor keento. Muddo kaddib ayaa kii u horreeyey dib loo raadinayaa iyaga oo wada qoslaya. Hoodo ayaa ka qaadaysa burushka ay Najax gacanta ku hayso. Dhanka muraayadda ayay ka soo jeedsanaysaa iyada oo iskaga gudbaysa muuqaalkeeda. Burushka ayay si taxaddir leh u dul cararsiinaysaa rinji ay gacanta bidix ku hayso iyada oo aamusan. Indhaha iyo gacanta ayay mar kor u soo wada qaadaysaa si ay dhabannada Najax u dul cararsiiso. Si taxaddir leh ayay u xardhaysaa iyada oo aan libiqsanayn. Walaasheed ka yar oo ay

arooskeedii u qurxinayso ayaa la moodaa. Najax way taqaannaa naxariista Hoodo, waanay og tahay sida ay ugu dhow dahay. Taas ayaa keenaysa in aanay ka shakiyin ficillada ay hadda samaynayso Hoodo. Sidii ay ka yeeli lahayd haddii ay iyada tahay, ayay dareemaysaa in ay imika Hoodo yeelayso. Balse ma oga. Way mooggan tahay. Inta ay og tahay ayaa ah waxba.

Qurux Alle siiyey, joog ay u dhalatay iyo ladh ay Hoodo ku kabtay ayay qolkii ku iftiimisay. Najax ma rabto in ay aad isu qurxiso caawa oo kale. Qofkii aan aqoon waxa uu moodayaa in ay aroos u socoto, waana dareen ay ka hesho qof kasta oo la kulma iyada oo lebbisan, balse iyada ayaa ah qof dheellitiran marka hore. Tan ayaa ah midda ay asxaabteedu uga hinaasaan mar kasta oo ay meel u wada baxayaan, walow ay kaftan ku dhammaystaan. Wakhtigii ballanta oo labaatan daqiiqo dhiman ayay guriga ka jarmaadeen. ”Nimco inaabtideed ayaa aroos leh oo aannu u tegaynaa habaryar” ayaa lagaga jawaabay su’aal ay Najax hooyadeed ka soo daba tuurtay intii aanay bixin kahor. Magaalada ayay sii dhex qaadeen iyaga oo la caweynaya Nimcaan Hilaac oo aad mooddo in uu raalli gelinayo Najax. Laammida daammurka la madow, iftiinka kala kaanka ah ee hareeraha ka haya, dadka inta kelida u socotaa ay yar tahay ee waddada dhinaceeda tallaabada aayar gundhinaya iyo guux iyo gurxan hoose oo dhegta u roon ayuu baabuurku dhex muquuranayaa. Laabta oo Najax in aan badnayn ruxmaysa ayay baabuurka dhigteen bar bannaan oo farta loogu fiiqay markii ay hudheelka soo galayeen. Wiil ka codsaday in uu u adeego ayay fasaxday iyada oo rabta in ay dhex fadhido gaadhiga. Markiiba telefoonka ayaa yeedhay. Waa isagii. ”Helow. Haa. Nabade ma fiican tahay? Alxamdu lillaah. Sow ma aragtid? Meel aannu istaagno ayaannu weyneyba. Haa. Xaggee? Hiihi. Mooyi wallaahi, weli baabuurka ka maan soo degin. Haye, haye.” Way dhigtay. Afar dhegood oo dhursugaya ayay u sheegtay in ay ka degayso. Cag rejo la ruxmaysa ayay sibidhka saartay qaybteeda hore ee dhulka uga dhow cidhibta. Meel ay garanayso ayay ku hagaagtay. Wax yar markii ay socotay ayay humaaggiisa garatay. Dhidid qabow ayaa soo dhaafay. Laydhaa martay. Si deggan ayay u salaantay. Cimilada oo qabow lagu sheegay kaddib ayaa isku dhinac loo dhaqaaqay. Laba is raba, haddana kala xishoonaya

sidoodii, ayaa dhulka loo eegayaa marka la sii socdo. Gacmihiisa wuxuu ku aasay labadiisa jeeb, madaxuna wuu fooraraa. Labadeeda way is dhaafsatay, cidhibta dhuuban ee kabtana dhulka ayay ku ilaalinaysaa. Hadalka ayuu midba mar qadhiidhanayaa, haasaawaha la handaafinayaa. Mugdigay ku libdheen. Dhabarkooda waxa ku soo maqan laba indhood oo ballay fatahay aad mooddo. Waxa ay ka soo tooganayaaan madaxa ku rakiban jidhka dubaaxinaya ee dhex fadhiya baabuurka jihada kale u socda. Baabuur isna magaaladu liqday markiiba.

Laab culus, indho burqanaya, naqas xakamaha soo goosanaya iyo dhafoor ololaya ayay la hoyatay. Keli markii ay ku noqotay qolkeedii, afka ayay barkimada ku hagaajisay. Indho gudhay ayuu waagu ugu baryey. Cadceedda soo baxday ayay karahday, jiif aan xal ahayn ayay door bidaysaa. Wax kasta dhadhankii ayaa ka tegay, wax kasta oo ay cuntadu u horreyso. Muhiim maaha gebigeeduba. Maskax foofaysa ayay la dhoofaysaa. Cashadii xalay ayay dul tagtaa. Hadba mid ayay dhowrtaa. Tinta ayay u hagaajisaa saaxiibaddeed. Indhaheeda farxadda la dhalaalaya ayay ka subkataa. Dhankiisa ayay eegtaa. Codkiisii degganaa ayay illaa cagaha ku dhegeysataa. ”Hee” ayay tidhaa iyada oo aan lala hadlayn. Indhahoodan is xadaya ayay u fiirsataa. Uummiga kalgacal ee cuntada ku weheliya miiska ayay dhaxanta iskaga duulisaa. Wixii ay is yidhaahdeen oo ay wax ugu dartay ayay kolba mid ka yeedhsiisaa. Hadal ay iyadu qurxisay ayay bilicdiisa la ilmaysaa.

Maalinta oo badh tagtay ayay jiifka ka kacday. Iyada oo qarsanaysa xanuunka haya ayay hawsha guriga ku fooftay. Dhar ay iyada hooyadeed u dirtay ayay bilowday in ay dhaqdo. Way is mashquulisay, maskaxda ayay u diidaysaa in ay firaaqo u hesho fikir guri ku yeeshay maankeeda.

Kaabadda bannaanka waxa soo fadhida hooyadeed. Iyaduna in ay ka durugto ayay kolba sabab u samaynaysaa. Qorraxdii dharka qallajinaysay ayaa daruuro madow dhabarkooda gashay. Dhibic dhulka u baratamaya ayaa dhirbaaxo la dhacay oogada ay ku taagan tahay. Hooyadeed ayaa ku dhawaaqday ”naa hooyo dharka ka gur xadhiga”. Hoodo way dhaqaaqi weyday. ”Naa hooyo

dee dhakhso, dharkii way qoyeene maxaa ku taagay?". Sida qoriga ayay dhaqaaqa joojisay. Dhanka hooyadeed ayay soo eegaysaa. Jidhka oo dhan ayaa qoyan. Dhibica roobka iyo illinta ayaa wiilka agtiisa ku kulmaya si ay uga daadegaan labada dhaban.

Dareenkooda ayaa haatan noqday mid dhan u wada jeeda. Haddii ay laba ahaayeen, maanta waa hal. Maalintii inta ay kala maqan yihiin ayaa ka yar inta ay wada joogaan. Haddii aanay is arkayna, cod ayay ku wadaagaan ereyada naxariista ah. Dabeecadihiisa ayay daristay, kuna qanacday. Cag iyo kabteed ayay noqdeen. Sidaas oo ay tahay, iyadu ma deggena. Been uu xidhiidhkoodu ku bilaabmay ayaa gubaysa. Haddii ay rabto way iska aamusi lahayd, Najax se ma aha qof noocaas ah. Waa in ay runta sheegto. Caawa ayayna qoondaysatay. "Maxaa dhici kara?" ayay is weydiisay. Wuu iga cadhoon karaa, iga niyadjabi karaa. Haddii ay xaaladdu faraha ka baxdana, wuu iga tegi karaa. Balse taa beddelkeedu maxay tahay? In uu ila joogo, wax aanan ahayna aamminsanaado. Qof aanan ahayn in uu i moodo, sidaasna muddo igu la joogo. Waxa se hubaal ah, in uu maalin uun xaqiiqada soo ogaan doono. Taasina ay noqon doonto dhacdo foolxun. Wixii dumayaaba ha dumaan, intii uu hadhow iga tegi lahaa imika ha iga tago. Wax kastaa ha dhacaan, yaanan se been ku haysan dareenkiisa. Waa in aan soo afjaraa caawa.

Wadne ruxmaya ayay la baal socotaa marka ay barxadda hudheelka ee ballaadhan wadiiqooyinkeeda dhirtu ku soo foorarto ay laydha la dheelayaan. Caawa gudaha ayaa miis gaar ah looga diyaariyey. Salka ayay la haleeshay buush midabkiisu ka gidaarka u eeg yahay. Isagu wuu soo qoslayaa, iyaduna hoos ayay u gariiraysaa. Ma garanayso goor ay bilawdo iyo si ay u bilawdo. Mar kasta oo ay ka fikirtana, way sii werweraysaa. Dhowr jeer ayuu weydiiyey waxa caawa ku dhacay ee ay la kala maqan tahay. In ay kala maqan tahay ayay ku dafirtay. Biyaha ayay isku mashquulisaa, durba caagad hor taallay way ka baxday. Salladh khudaar kala duwani ku jirto oo laba saxan oo yaryar dul taagtaagan ayaa hortooda la dhigay, cashadii weli way u maqan tahay. Caleen yar oo afka ku dhex wareegaysay ayay dirqi u dejisay. Way ka degi

weydey. Inta ay biyo kale isku qabatay, warqaddii ay gacanta kale ku haysayna miiska saartay, ayay si buuxda indhihiisa u eegtay.

- Najax, wax ayaan doonayaa in aan kuu sheego.

Markii uu magiciisa maqlayba si qumman ayuu u soo eegay, wixii uu wadayna wuu joojiyey.

- Hee, qaali!
- Een, berigii aynu is barannaynay..
- Hee, ayuu u yidhi si ay hadalka u sii waddo.
- Waan, een..
- Maxaa dhacay qaali?
- Ka ma shaqeeyo waxa aad moodayso in aan ka shaqeeyo.

Wuu aammusay, welina wuu soo eegayaa.

- Ma ihi guddoomiye, ka mana shaqeeyo ururka agoomaha.

Indhihiisa ayaa libiqsiga joojiyey.

- Waxaas oo dhan been ayay ahaayeen, ayay soo tuurtay iyada oo cidiyaha dhaadheer ee midabbada iyo kuulaha leh wadwadda.

Caagad sharaab ah ayuu afka ku qabtay. Markii uu ka qaaday ayuu soo eegay, isaga oo gacanta midig ku haya dhaladii. Si qabow ayuu u yidhi ”sharaabkan maad garanaysaa waxa laga sameeyey?” Wadnaha oo afka jooga ayay madaxa aayar ruxday. ”Cinab ayaa ku sawiran, laakiin waxa uu yahay maad garanaysaa?” Way yaabban tahay. ”Waa biyo soodhe leh, kaddibna dhadhan cinab loo sameeyey. Midabkan casna wuxuu ka yimid baytaraaf”. Indho madhan ayay ku eegaysaa. Inta uu afka si deggan isa ga masaxay ayuu gacantiisa bidix kor ugu soo qaaday teleefonka shaashadda ballaadhan ee agtiisa ku nasanaya. Korkiisa ayuu waxoogaa salaaxay. Dhankeeda ayuu u soo jeediyey, markaas ayuu raaciyey ”miyaad garanaysaa qofkaa?”. Gabadh madow oo si yar u dhoollacaddaynaysa ayaa kamaradda soo eegaysa. ”Maya” ayay u celisay. ”Waa Claudia, gabadh aannu aad isu naqaanno. Waxay u dhalatay dalka Tanzania, waddankana laba jeer ayay timid oo aan martiqaaday. Bal qiyaas shaqadeeda!”. Indhaha ayaa raxleeyey.

Jawaab ay ku daahday ayuu raagsaday, wuu sii watey. ”Waa guddoomiyaha ururka COA, ururka aad adigu sheegatay in aad guddoomiyihiisa tahay.” Wadnahaa ka siibtay, calooshana waa la dhex yaacay. Carrabkii hadli lahaa ayaa laf noqday.

- Laakiin Najaxeey caawa mid ayaa ii caddaatay.
- Hii, ayaa ka soo baxday.
- Waxa ii caaddaatay in aad tahay qof daacad ah.

Candhuufteeda ayay ku saxatay. Biyo ayuu u soo fidiyey. Mar dambe oo ay quficii joojisay ayay tidhi ”yaa?”

- Caawa waxaan ogaaday in aad tahay qof daacad ah, qof la isku hallayn karo. Wax kasta oo qof dumar ah lagu raaco waad leedahay, keliya tan aan caawa ogaaday ayaa iga maqnayd.
- U kaadi bal horto, oo intaas oo dhan miyaad ogeyd in aan been kuu sheegayo?
- Nacam.
- Oo markaana? Adigoo i fahansan ayaan meelahaa iska qoslayey miyaa?
- Quruxdaada ayaa i sakhraamisay xabiibi, intaasi waxba maaha.
- Waanigaa hoogay!
- Waxaan rabaa in aan ku guursado!
- Yaa?
- Si dhakhso ah weliba.
- Inaan hee?
- Reerka i soo bar horto.
- Waar reerku way ku yaqaannaan oo laguu sheegi maayee, miyaad i soo dooni?
- Hee, miyaan kula baxsan lahaa?
- Dee maya, waan yacnii, miyaanad i weydiinaynba in aan diyaar ahay? Billee aan ku diidaa.

- Indhahaagu wax kale ayay sheegayaan.

Caweyskii qosol iyo kalgacayl saa'id ah ayaa lagu dhammaystay, farxadna way la hoyatay. War weyn oo ay garan la' dahay cid ay la wadaagto ayay la seexatay. Subixii ayay hooyadeed ku salaantay, asxaabteediina ku xigsiisay. Waa la isla oogsaday. Dharaaro farxadeed ayaa la galay. Isagii ayay waalidkeeda hor keentay, waa la ansixiyey. Maaddaama oo uu safar u baxayo, maalmo gudahood ayaa ballantii meherka laga dhigay. Reerihii ayaa is bartay, diyaargarowgii kalena uu baal socdaa. Ayaamo mashquul ah ayay gashay. Hoodo iyo Sahra ayaa dhankooda ka hawl galay.

Maalintii meherka ayaa berri ah, maantana waxa loogu xinnaynayaa guriga Najax. Hoodo waa loo dhammeeyey oo bannaanka ayay u baxday, daaqadda qolka hoosteeda ayay sabab la'aan u taagan tahay. Sahra ayaa iyaduna imika ka kacday kursigii loogu shaqaynayey si ay Najax u fadhiisato markeeda. "Naa tii Hoodo meeday?" ayay tidhi intii aanay qolka bannaanka uga soo bixin. Dhanka bidix ayay u dhaqaaqday. Waxa ay aragtay Hoodo oo taagan keligeed hoosna u ooyaysa. Illinta ayay degdeg isa ga masaxday markii ay aragtay Sahra oo ku soo socota. Sahra ayaa garabka gacanta ka saartay, taabasho bannaanka u soo saartay baroor aanay filayn. Cod aan si fiican loo fahmayn ayay ku geeraartay. "Wallaahi in aanan ka xumayn saaxiibadday arooskeeda, wax aan ka jecelahay ma jirto in ay faraxsanaato, laakiin marmar uun baa la igu soo boodayaa. Bal maxaa murugadayda iyo farxaddeeda isku xidhay? Miyaannaan labadayaduba faraxsanaan karin? Maxaa dookha nin keliya noo wada geliyey? Midda kale ma rabo in aan u sheego in aan iyada darteed isaga u diiday. Waxaas oo dhan ayaa laabta iiga buuxa, waan cabbudhsanahay." Sahra oo dhabarka u salaaxaysa ayaa hadalka ku soo koobaysa "waa runtaa huuno". "Imikana waa arooskeedii, ma rabo in ay ogaato arrintan. Xitaa hadhow, sidaas in aynu ku illowno ayaan doonayaa. Iga ballanqaad Sahraay walaal in aanad arrinkan weligaa u sheegayn Najax." Sahra oo aan jawaabin ayaa dareentay dhaqaaqa dhabarkooda. Way jalleecday, waa wejigii Najax oo daaqadda soo taagan.

Sahra oo dhanka Najax sii eegaysa ayaa ku naxday ”naa Najax!”. Hoodo oo aan dhan kale eegin ayaa dhinac u dhaqaaqday. Najax oo hadal kale laga sugayey ayaa weji madhan halkan la soo taagan, si qabowna ugu celisay ”naa maxaa meesha idin taagay ba’naye? Sheeko boqolaan idiin hayaaye bal soo gala”. Way dhaqaaqday. Waa ficil naqas badan ka soo tuuray Sahra iyo Hoodo oo iyada hadalku meel durugsan ka soo gaadhayey. Iyaga oo debnaha been u sheegaya ayay soo hor fadhiisteen Najax oo kursigii xinnaha loogu marinayey si dhiibsan dhabarka u qotominaysa.

Najax: naa dee ta dhacday maad og tihiin? ”Hee?” ayay mar keliya la soo wada boodeen.

- Naa dee waa kii madaxweynuhu maqnaa ee aynu ogeyn. Wuu soo hadlay, wuxuu yidhi ”inankayga meherkiisa ka ma maqnaan karee ha la ila sugo intaan safarka ka soo noqonayo”.

Hoodo: maahee? Illaa goorma?

Najax: laba toddobaad kaddib ayuu imanayaa.

Sahra: oo dee ma meherka berri ah ayaa la baajinayaa.

Najax: ma amarka madaxweynaha ayaad diidi kartaa xabiibi, yaan lagu xidhin.

Qosol ayaa xigay. Aamusnaan degdeg ah sidoo kale. Qofba gaarkiisa ayuu u foofay qaddar ilbidhiqsiyo ah. Sahra oo aan rabin in la kala aamusnaado ayaa soo tuurtay ”oo dee haddaa maxaynu la xinnaysanaynaa?” Halkaas oo ay ”dee aniga weli la ii ma bilaabinbee idinku iska xarragooda” ka heshay Najax. Sababo ay ku fakato ayay markiiba soo bandhigtay, labadoodiina halkii ayay kaga dhaqaajisay. ”Weli cid u maan sheegine dadka ha iiga horraynina” ayay u dhaaftay. Dhankii uu qalbigeedu ka xigay ayay u dhaqaaqday. Weji-gabax, indho aan libiqsanayn iyo qoor aan dhaqaaq lahayn ayay waddooyinka magaalada la dhex qaadday. Kaabadda guriga isaga oo caday la soo fadhiya, gacanta bidixna jilibkiisa bidix dul dhigtay ayay ku soo hagaagtay. Weji anfariirsan ayuu ku qaabbilay. ”Xabiibi maxaa ku helay?” ayuu salaan uga dhigay. ”Hee qalbi, miyaan lagu soo booqan karin?” Alle hadalka

ku ma dhibin. Salka ayuu dhinac u hinjiyey, agtiisa ayay sidiisa oo kale u soo fadhiisatay. Hadalka ayay dusha ka xaadhay. Geedkan weyn ee ay caleemihiisu laydha la dheelayaan ayay noociisa ka waraysatay. Markii uu u sheegay ayay ka ubaxa leh haddana weydiisay. Muddo ayaa dhirta iyo noocyadeeda la qaadaa-dhigay. Marka uu sharraxayo, iyada wejigeedu waa bilaa nuuxsi. Sunniyaha ayaa dallacan, balse indhuhu may raacin. Dhabannada ayaa nasasho ku jira. Debnaha ayaa kala furan, midba gaarkeeda u qallashay. Ujeeddada booqashadeeda ayay haatan u dhaadhacday.

Isaga: ..deedna kaasi waa ka ubaxa cas bixiya, kani se waa huruud. Midda kale kan jirriddiisu..

Iyada: aabbo horto goormuu imanayaa?

- Huuno aabbo waxa u hadhsan shan dal oo kale, markaa beryahaa ma imanayo. Eeg, kan jirriddiisu way ka buuran..
- Illaa goorma qiyaastii?

Cadaygii ayuu dhinaciisa dhigay, gacantana afka mariyey. Hortiisa isaga oo sii eegaya ayuu weydiiyey ”maxaa soo kordhay xabiibi?” Iyada oo aad mooddo in ay isku dhagax eegayaan ayay u celisay ”waxba dee waan ku weydiinayaa”.

- Ugu yaraan saddex wiig ayuu sii maqnaanayaa, maanta ayuu Maleesiya ka dhoofayey.
- Qalbi haddaba i dhegeyso, haddaanu haween nahay, waxyaabbo aan weyneyn ayaa macno noo sameeya. Dee anna waxaan ahay inan la soo doonayo oo waxaan rabaa in ay noqoto maalin weyn. Markaa xabiibi haddii aynu aabbo sugno ka warran?
- Ma adigaa sidaa raba?
- Hiihi.
- Hadda waa bil ku dhowaad wakhtiga safarkiisa ka hadhay.
- ...
- Waa si wanaagsan, anna waan kugu raacay.
- Maxaad tidhi jirridda hee?

Way heshay sidii ay rabtay. Qorshe bilow ah ayay xadhigiisa soohiddiisa bilowday. ”Waxa aannu sugaynaa inta uu aabbihii dalka ku soo noqonayo, si uu uga qaybqaato. Sidaas ayaannu ku heshiinnay aniga iyo isaguba”. Waa sida ay waalidkeeda ugu dhigtay. In ay aqbalaan wax aan ahayni, meesha ma yaallo. ”Wakhti waxa aan haystaa inta aanu odaygu soo noqon, saddex toddobaad”, waa sida ay nafteeda ku tidhi. ”Waa wakhti kooban, balse waa suurtogal” ayay hoos u tidhi. Wada-hadalkooda khadka telefoonka ayay ka bilowday. Subixii marka ay toosto iyo habeenkii hurdada kahor, labadaa jeerba way joojisay in ay wacdo. ”Waan mashquulay saaka” iyo ”waan gam’ay anigoon filayn” ayay sababo uga dhigtay. Sidaas ayay maalmo ku wadday. In ay farriimihiisa kala daahdo jawaabaha ayay ku xigsiisay. Waxay siisay wakhti uu madadaalo kale ku raadsado. Asxaabtiisa ayay ku talogashay in uu ku bixiyo wakhtigii uu labadooda siin jirey. Isaga oo soo waca mooyaane, way joojisay in ay kaga horreyso. Kulankoodii joogtada ahaa ayay ku soo ururisay saddex habeen toddobaadkii. Saddex habeen oo si qotodheer u qorshaysan.

Habeenkii koowaadba way bilowday. ”Horto hablaha aannu asxaabta nahay weli maan is kiin baray?” Way og tahay in aanay weli is barin. ”May” ayuu si qabow u yidhi. ”Alla, oo weli maad aragba show?” ayay u raacisay iyada oo wax kale ka raadinaysa. ”Mayee dee waan arkay, waa Hoodo oo waa inanta inanka u doonan iyo inanta kale”. Way la heshay. Dabin ay u dhigtay ayaa gondaha jaray. Muu sharaysan su’aalaha, iyaduna way ka gudubtay. Habeenkii labaad ayay sheekadeeda dhextaal uga dhigtay asxaabteeda iyo sidii ay isku barteen, intay isku jiraan iyo sida ay isugu xidhan yihiin. Mar kasta waxa ay ku nasanaysay magaca Hoodo. Wax badan uga may sheegin Sahra, Hoodana wanaaggeeda ayay dhansiisay. Waxa ay u sheegtay in ay gashaanti tahay oo aanay cidna u doonnanayn. Intaa markii ay tidhi ayuu wejigiisu is beddelay, way ku raaxaysatay. Kun goor oo ay Hoodo iyada ka saxsanayd ayay uga sheekaysay. Kuwo kale oo dabeecaddeeda iyo furfurnaanshaha Hoodo ka warramaya ayay ku qulaamisay, si aan la dareemayn.

Inta ay hawshaas iyada ah waddo, waxa ay si gaar ah u dalbatay waxbarashada heerka sare ee jaamacadda caalamiga ah ee Kampala. Hooyadeedna si guudmar ah ayay ugu sheegtay in ay xiisaynayso waxbarasho meeshaas ah. Ayaamaha ayaa ku dhaafay sidii ay rabtay. Toddobaadkii hal mar ayay Hoodo iyo Sahra la kulantaa, markaana sheekadu meherka soo socda ma dhaafsiisna. Isaga ayay aragtaa, wax aan dantooda ahayn uga warrantaa. Qof aan la xiisayn karin ayay iska dhigtay. Hadalkoodii ayaa ku soo ururay maalintii hal mar. Iyada oo ka xun ayay haddana ku faraxday. Madaxweynihii ayaa dhankiisa isaguna baaqday, safarkii ayaa intii la sugayey ka dheeraaday. Way ku faraxday kaana. Taasi waxay ku sintay jawaab ay ku sugaysay oo dhankii jaamacadda uga timid.

Hoodo iyo Sahra oo aan u bogin xidhiidhin-la'aanteeda ayaa dhowr jeer su'aalo ku ganay. In aanay waxba jirin ayay qosol ugu dhex laaqdaa. Way rumaystaan. Sidii ay rabtay ayuu isaguna noqday qof dano kale yeeshay oo aan haleelin kulankoodii caadiga ahaa. Xakamaha ayay u haysaa xaaladda.

Waa Khamiis, berrina Jimce. Waa diyaargarow, berrina fulin. Bil ayaa ka soo wareegtay maalintii meherkoodu qabsoomi lahaa. Oori farxad ku nool, maalmaha la qaybsanaysa kii ay adduunka u jeclayd ayay maanta ahaan lahayd. Balse keligeed ayay ciil la yaraatay. Dareen ay muddadaas dabool saaraysay ayaa xadhkaha soo goostay. Waxay miisaanka saartay halka ay caawa jiifi lahayd iyo barta ay imika galgalanayso. Waxa ay is weydiisay sababta ay sidan u samaynayso, jawaab waafi ah ayay isa siisaa. Si kasta oo ay u xanuun kulushahay, runta ayay ku qanacdaa. Imika in aanay joogin meel laga soo noqdaa, ayay og tahay. Berrina in ay xidhiidhkan soo afjari doonto ayay nafta u sheegtay. Qalbi budo ah iyo indho bururay ayay hurdo aan badnayn ku kabbatay.

Sahra ayaa subaxnimadii la soo xidhiidhay.

- Naa xaggeed ka dhacday, miyaad na nacday?
- Naa haaye iska warran, Hoodona ka warran?
- Waannu wada joognaaye, xaggeed joogtaa aannu kuu nimaadnee.

- Anaa hadhow idiin imanayee iska jooga.

Hawsha sugaysa ayaa ka weyn kulanka ay doonayaan. Dhankiisa ayay u dhaqaaqday. Bartii ay ku la ballantay ayay timid isaga oo sii taagan. Candhuuf culus ayay liqday markii ay aragtay sida uu u sugayo. Baabuurka ayuu soo fuulay, dhinaceedana dhoolla-caddayn ballaadhan la soo fadhiistay.

- Warran xabiibi! ayuu ku bilaabay.
- Qalbi, arrin ayaan doonayey in aan kuu sheego.

Weji naxsan ayuu ku soo eegay.

- Een.. waad og tahay sidaan waxbarashada u jecelahay, welina waan yarahay.

Way margatay. ”Haye?” ayuu yidhi isaga oo raagsanaya waxa soo socda, haddana ka baqaya.

- Adigu guurdoon ayaad tahay sidaad ii sheegtay, anna in aan wax dhigto ayaan rabaa.
- Haye?
- Jaamacad Kampala ah ayaa ii soo baxday, in aad i fasaxdaan rabaa.
- Haye?
- Dee waa kaa.
- Haye?

Hadalka ayaa dhuuntiisa ku raagay. Haddana waxa ka soo baxday ”imika miyaad tegaysaa markaa?”. Su’aalo aanu rabin jawaabahooda, ayuu weydiiyey. ”Goormaad tegaysaa? Waa imisa sanno?”. Si aan faahfaahsanayn ayay ugu jawaabtay. Waxa ay moodaysay in ay sidaas dhibta yar kaga baxayso. Wax yar inta uu aammusnaa, ayuu ku yidhi ”walaal maxaad sidan u samaynaysaa?”. Way garatay in ay su’aashu meel fog ka soo go’day, waxay se isku dayday in ay fududaysato. ”Sidee walaal?” ayay si dabacsan u weydiisay iyada oo aan jawaabta xiisaynayn maqalkeeda. ”Dad is jecel ayaynu nahay, waynu is guursan rabnay, imikana waxaad i leedahay ’waan tegayaa’, maxaa inna helay? Maxaad igu nacday?”.

- Ku maan nicin dee walaal.
- Hee haddaa, maxaad iiga tegaysaa?
- Kaa ma tegayo ee..
- Adigaa maalintii hore ii yimid oo igu yidhi meherka dib inoogu dhig. Ma xasuusataa?
- Haa dee waxaan is lahaa..
- Haddana markii aan kaa yeelayna imika waxaad leedahay wax kale.
- Haaye maalintaa dee aabbaan sugayey walaal, waxaan is lahaa ha yimaaddo.
- Oo markaa maxaad dadkoo dhan ugu tidhi ”isagaa sidaa raba”. Waad og tahay in aad adigu ii la timide. Imika waxaas oo dhan iska dhaaf, aniga iyo adiguba waxaynu og nahay in ay jirto sabab kale oo aad iiga tegayso, maxaad igu nacday bal ii sheeg?
- Najax walaal ku maan nicin.
- Dee haddaba inna mari aynu is guursannee!
- Walaal i fahan biliis.
- Hee?
- In aan wax soo barto ayaan rabaa ee wax kale maaha.
- Way tahay oo anaa og Najaxeey, ha i odhannin sidaas. Magaalada oo dhan ayaa igu sheekaysanaysa xitaa, bal ii sheeg sababta aad igu diidday, si aan mustaqbalka uga taxaddiro.

Illinta ayay dib u celinaysaa inta uu hadlayo. Dirqi ayay intan ku soo saartay.

- Wallaahi in aanay waxba kaa qaldanayn walaal, inanta ku heshaana iyadaaba nasiib leh. Waan ogahay oo waan ka shallayn doonaa go’aankan, laakiin maanta in uu sax yahay ayaan u arkaa. Adiguna fadlan i fasax oo ha ii cadhoonnin. Adiguna cawil-naqa ayaad heli doontaayoo, qof ku jecel oo kaa farxisa ayaad heli doontaa.

Sacabka bidix inta uu ishiisa bidix korkeeda ku masaxay, naqas badanna qaatay, ayuu weydiiyey ”markaa imika goormaad baxaysaa?”.

- Weli tigidh maan goosan, laakiin adigu wax badan sii joogi maayo.

Daaqadda gaadhiga halka laga furo ayuu faraha la boobay. ”Aan ku sii qaadee..” ayay ka daba geysay. ”Sowkaa gaadhigaygii” ayuu hadal ku soo koobay.

Jidka dheer ee gurigooda taga ayay indho hooraya la soo qabsatay. Iyadoo aad gariirka mooddo ilmo qandho hayso ayay guriga soo gashay. Su’aalihiisa oo madaxeeda xuurto ku haysta ayay galgalimaysatay. Si walba in uu uga saxsan yahay ayay og tahay, laakiin aanu waxba ogeyn. Intii ay faraxday in ka badan in ay ilmayn doonto ayay og tahay. Sidaas oo ay tahay, diyaar ayay u tahay in ay dariiqaa marto. Go’aan aan ka-noqosho lahayn ayay fulintiisa bilowday. Way fool-dhaqatay, dhanka hooyadeedna u dhaqaaqday. ”Hooyo ma xasuusataa maalintii aan kuu sheegayey in aan jaamacad dalbaday” ayay hadal ay soo diyaarisay uga bilowday. Waa hooyadeed, sida loo la hadlana way taqaannaa. Waxoogaa qiiro ah, in ficil ah iyo in dhanka dumarnimada ah ayay isugu dartay. Waxay kursigii ka kacday iyada oo hooyadeedna faraqa ku sidata. ”Waa runtaaye orod wax soo baro hooyo, aabbahaana aniga igu daa, anigaa ka adage. Lacagta tigidhkana berri iigu kaalay, hooyo” ayay ka heshay. Farxad ay ku faraxday arrinta u meel-martay iyo naxdin ay arrinta lafteeda ka naxday ayay guriga kala baxday. Tilifoon ayay iska horreysiisay, in yar kaddibna way la kulantay asxaabteedii. Weji aan dhowr habeen hurdada ka bogan ayay la hor tagtay Sahra iyo Hoodo oo markiiba arkay is-beddelka ka muuqda.

Sahra: alla hoognay, naa ma ammaa kugu dhuusay?

Hoodo: naa bisinkee huuno maxaa ku helay?

Sahra: ma sidanuu aroosna ku sugayaa, bal soo fadhiiso.

Najax: naa baddaa ka baxa oo, bal ii warrama?

Sahra: ii warrama kuteh, naa adigu warran, adigaa war lagaa sugayaaye.

Najax: miyaan la iska soo war doonaynba?

Hoodo: oo huuno sownagii kugu soo xiiqnay.

Sahra: miyaad nagaga horreynaysaa?

Sheeko aan meel gaadhsiisnayn ayaa sharaabkii badankiisii lagu dhammeeyey. Waa laga gudbay su'aalihii bilowga ahaa, waana la is fahmay. Labadoodu se ma oga qaraxa hadhay. Kabbasho weyn oo mushakal ah ayay is dhaafisay, horena way u soo fadhiisatay.

- I dhegeysta, codsi ayaan wataa.

Laba qosol ku maqnaa ayaa afka degdeg isugu keenay.

- Arrin ayaan idiin sheegayaa, laakiin ta ugu muhiimsan ayaa ah, taageeradiina ayaan u baahanahay.

Hoodo: taasi waa qasab walaale noo sheeg, maxaa soo kordhay?
Sahra: igu dhur.

- Go'aan ayaan gaadhay. Guur ayaan iska dhaafay, wax-barasho ayaan u xadhko-xidhay.

Hoodo: maxaad tidhi?

Sahra: naa bal ku celi!

- Najaxna waan u sheegay, hooyana waan u sheegay. Jaamacad aan maalin dhoweyd si dhayal ah u dalbaday ayaa ii soo baxday.

Hoodo: oo Najaxna?

Sahra: naa bal naga aamus Hoodo – jaamacad xaggee ah?

- Kampala weeyaan. Dee Najax waan fasaxay, qof iga wanaagsan ayuu heli doonaa, ayay tidhi iyada oo Hoodo eegaysa.

Hoodo ayay indhuhu ka soo dhici gaadheen. Cagaha ayaa cuslaaday, cunaha ayaa xidhmay. "Ma ninkii ay i seejisay, ayay imikana cidlo kaga dhaqaaqday" ayay is tidhi. Illin ayaa ku soo joogsatay, way ka foorarsatay.

Sahra: waad iska ciyaaraysaa, maalintii beenta adduunkana maahee, wax noo sheeg. Ma ninkii aad sidii u rabtay, kunka beenoodna aynu u sheegnay, ayaad imika ka dhaqaajinaysaa?

- Naa walaal Ilaah baan idinku dhaarshee ha igu adkaynina, waa sababta aan sidan ugu ekaadaye. Beentiina waanigii u sheegaye. Wuu og yahay in aanan guddoomiyena ahayne.

Najax way la socotaa aammusnaanta Hoodo, ma na rabto in ay gujiso. Laakiin Hoodo ma oga in ay Najax fahmayso iyada.

Hoodo: yacnii haaye imika waad kala dhaqaajiseen isagii?

Sahra: haddaa ma Kampaluu u raaci lahaa?

Hoodo: bal na sug Sahra – naa Najax, imika ma saasaad ku kala dhaqaajiseen?

- Haa wallaahi, wuu i fasaxay isaguna.

Hoodo: oo miyaanu ka nixin, ma aayar uun buu ku fasaxay? Dee adigu mayee wuu ka xumaadee, laakiin muxuu samayn karaa? Hoodo: wallaahi Najaxeey ma naxaysid. Ma aayar uun baad sidaa kaga tegaysaa?

Sahra: naa waannu ku taageersannee ku soco.

Hoodo: oo Kampalana yaa kuu jooga? Goormaad se baxaysaa?

Sahra: naa Kampala Xasan baa joogee, taasi dhib ma lahee, laakiin goormaad baxaysaa?

- Wax badan ma joogayo, adigu maalmo gudahood.

Hoodo: waad iska ciyaaraysaa!

- Wallaahi waa iga dhab, dee kooraskaa bilaabmaya maalin dhow. Laakiin dee Hoodooy adna i fasax, calooshaad iga yara haysataaye saaxiib.

Hoodo: naa waad og tahay in aan kugu taageersanahay waxaad samaysabee, laakiin arooskaa aad kala ridayso ayuun baan yara diiday. Imikana Ilaahay ha ku nabad geliyo. Waanu kuu iman bee.

Sahra: naa haaye, oo yaad ku hagaagaysaa?

- Dee mooyi, Xasankii aad sheegaysayna muxuu ahaa?

Sahra: oo Xasan ma taqaannid? Inanka jaamacadda ka dhigta meesha, waa yarka lagu hagaagaba. Iska daa isagaan la xidhiidhayaaye. Waa wax yaroo subaga dee weliba.

Hoodo: waan arkay Xasane, wax walba isagaa kuu dhammaynayee.

- Subaggiisa maxaa iga galay. Naa bal naagahan eega!

Sahra: dee sowdiga Najax ka tegay, billee uu isagu kuu beddelaa. Waa wax yaroo wada akhlaaqoo waxaan ku idhi, haddaad aragto waad isku dhex yaaciye.

- Naa hadduu i dejinayo tunkaan ku qaadibee, lambarkiisana ii qora dee oo isku kaaya xidha.

Sahra: oo imika waad naga tegaysaa, waanigaa hoogay!

- Naa walaal Hoodooy mid ii samee, aniga wuu ii cadhoonayaaye, Najax la hadaloo biliis koombiyuutarkaygii ayaan gurigiisa ku illoobee iiga soo qaad.

Way helaysay siyaabbo kale oo ay kombiyuutarkeeda uga soo qaadato isaga. Ujeeddo ayaa se jirta. Habeenkaa waxa ay ku seexatay qorshe, qorshe isaga iyo Hoodo isku keenaya. Qorsheyaasha waxa dejin jirtey Hoodo, maanta se Najax ayaa hoggaanka u haysa. Balse waxaas oo dhan mid ayaa ka horreysa – in ay dalka ka baxdo.

Subixii ayay hooyadeed gacanta qabatay. Tigidh wakhtigiisu dhow yahayna gacanta ayay ku soo dhigtay. Weli waa subax, haddana aad ayay u kulushahay. Weli way yar tahay, haddana qalbigaa jaban. Sida ay u tallaabsanayso, laabta ay soo godayso, waxaad mooddaa qof gabowday. Geerka hoose ee indhaha iyo laammida ay ku dul socoto ayaa madowga ka siman. Hooyadeedna garabkeeda ayay socotaa, waxba se ma oga. ”Hooyo sowdigan xumaaday, miyaanad waxba cunin maalmahan?” oo ay weydiisay, waxay kaga jawaabtay ”waxba, hooyo”. Been ka weyn oo la sheego ayaan jirin. Wax ka weyn oo la qariyo ayaan jirin. Socodkay dhimaysaa, debintay wadhaysaa. Sheekada hooyadeed iyadu way maqlaysaa, waxaa se iska cad in aanay dhegeysanayn. ”Hii” iyo ”Haa”, marna ”maahee?” iyo ”wallee?” ayuu hadalkeedu

noqday. Hadal la weydiiyo ayay ”haye” iska tidhaa. Jismigeeda ayuun baa halkan soo qotoma, isna wuu jilcay haatan. Qalbi haaf maqan yahay ayaa laabta ugu jira. Markii ay timid gurigoodii ballaadhnaa, qolkii ay ku lahayd ayay is dhex taagtay. Dhinaceeda ayay kolba sii eegeysaa. Way dhoollacaddaysay iyadoo isla yaabban. Gidaarro aan wada muuqan ayay isha soo marisay. Iyadoo aan dhaqaaqin waa tan qiirootayba. Miyaan kaa tegayaa? Adigaa iigu dhowaa aqaloow dadka bee, ma yar aan shalay uun bartay baa iga kaa kaxaynaaya hadda? Xaal baad igu leedahay. Wax kastoo kugu weyn, wax ka weyn baa jira. Hooyo oo igu weyn, aabbo oo la mid ah, noloshan qabow ee haddeer aan ku jirey, dhammaantood wax ka weyn ayaa maanta i saaray. Isagaa iga tuuray wixii aan sitay oo dhan. Magaaladii aan ku dhashay isagaa iga i leh ”dhaaf”. Dadkii aan la rafiiqay isagaa i leh ”goo”. Sahradii degganayd, yartii noo ahayd deyrka. Haddii aan fakanno, qoftii ”jooga” lahayd. Maskaxdii naga weyneyd. Inantii kalee Hoodo.. ax, maxaan idhaa iyada. Inantaan ahayn laba aan kala maarmin. Midig haddii ay ahayd, bidixdeedaan ahaa. Wax kastoo ay jeceshay, anna waan la jeclaa. Intaa waan garanaayey, hadal waan ku hayey. Waxbaa se iiga dhinnaa: ficilku siduu noqon doono. Anigoo aan aqoon, nin ayaan iska jeclaaday. Sidii oo ay tahay dhagax, iyadaan u dirtay. Iyaday is barteen, anigaygan hortay. Qalbi aanay karayn ayaa dareen u bilaabay. Isagii aan rabayna, iyaduu iska jeclaaday. Doqonkaa hadda eega! Is muu odhan ”joogso, yar kalaa jirta oo qalbigaaga rabtee, Hoodo gaar ha u eegin”. Walaashay wacaneey, Hoododii noloshaay! Wixii aad ii samaysay waan kuu ogahay. Dharaartii aad hadlaysay anna waan ku maqlaayey. Weligey waan ogaa wanaaggaaga xabiibti. Balse maan filanayn qaddarkiisa dhammaan. Hadda se waan ogahay. Qof aad aad u jeclayd, isna aad kuu rabay, inaad iska dhaafto, aniga iiga tagto, waa wax aan la suuxay. Maxaad ii qososhay, adigoo murugaysan ii dhoollacaddaysay! Jidka aad ii wadhaysay, muxuu jabkaaga ahaa. Anigoon is ogeyn, illintaada arkayn, maxaan Dhoohan ahaa. Nabar aad dhayayso, anigoon wax ogeyn, maxaan diirka ka qaaday. Boogahaa kugu yaal, macaaneey ku tuntay. Adkaysigaagu badnaa! Hoogayeey wacnidaa.

Allaa mahad leh anigoon guri yeelan daaqaddaa i joojay. Isagaa mahad leh anigoon kaa afduuban yarkii ku rabay, aan ogaaday runta. Iyadoo ka qadhaadh ayaan kolleyba ogaan lahaa. Nasiib baan leeyahay. Wax aanan lahayn, in aan iska qaato anigaaban jeclayn. Wax aad leedahayna, hadalkeedaba daa. Danaystaan noqday. Way iga degi la' dahay, sideed iigu dhaaftay inankii ku rabay? Naftaydaad la jeclayd wanaag ay iska doontay. Adigaa is illoobay. Naftaadaad u dullaysay naf aan kuuba ogeyn. Farxaddeedaa kaa la weyneyd murugtaada oo dhan. Goormaad farxi lahayd? Ma maalintaan shan dhalo? Marka aan oori noqdo, maxaad qaban lahayd? Inankii aad jeclayd markuu "xabiibi" i yidhaa, sideed dareemi lahayd? Ciqaabta inaa le'eg maxaad u marin naftaada?

Waxa farxad ii ah, in aan kaaga dambeeyey. Adigoon is ogeyn in aan ku ogaaday, dabadeed shax degay. Mid kalaa jirta oo, anigoo ooyaya dib ii arki maysid. Dareen qaadani maysid. Qorshayaahshaadii wacnaa kuwaygaa ka wanaagsan. Adigoon is ogeyn hadduu ku guursan waayo, Najax la ima idhaa. Tunka intuu kugu qaado, dhulku kuu diidiba waayo, hooyaday i ma dhalin. Anigoo soo illoobay, adigoo wax dhalay, ilma Najax korinaaya hadday dhici weydo, anigaa doqon ah. Midna ha illoobin, inta aad ii gashay ayaa kun jeer ka badan, inta aan gudayo. Adigaa iga fiican, anigaa huba taas. Culays kasta oo i fuulaya, anigaa u diyaar ah. Walow uu ahaa ninkii keli ah ee aan jeclaado, haddana waan ka tegayaa. Adigaan kuu dhaafayaa. Qalbi qayb maqan tahay ayaan kaa la dhoofayaa. Garan maayo in uu weligii soo kaban doono. Meel aanan aqoon ayaan u socdaa. Dad aanan arag ayaan baran doonaa. Qol madow ayaan badhtankiisa tegaayaa. Diyaar ayaan se ahay. Waan dhaqaajiyey haatan.

Muddo aan yarayn ayay "nabadeey" is lahaayeen. In intaa ka badan way isku soo dhegganaayeen. Wakhtigii markay gaadhay, saaxiibaddood way fasaxeen. Dhankii hubinta baasaboorrada ayay u dhaqaaqday iyadoo dadkeeda gadaal u soo eegaysa. Boqollaal qof oo mid ba meel u socdo ayay dhex qaadday. Sahra oo ordaysaa ka soo daba carartay. Way soo gaadhay markiiba. "Su'aal ayaan ku weydiinayaa Najaxeey". Najax oo aan filayn ayaa soo joogsatay.

”Ilaah baan kugu dhaarshee, runta iigu jawaab”. Wax yar ayay aamustay, haddana way sii wadatay. ”Maalintii aad daaqadda taagnayd, miyaad na maqlaysay?”. Wejiga Najax ayay kor u eegtay. Dareen ayay ka weyday. Ishu may libiqsan, iska daa wax kaloo. Jawaab ayay soo celisay. ”Mid ii ballan qaad Sahraay, Hoodo ii ilaali”. Deedna way ka dhaqaaqday. Sahra oo aan dhaqaaqin ayay Najax libidhay.

Galab weeye nabdoon, cirku waa madow baahsan. Mahiigaan la yaqaan ayaa Kampala ku hooray. Qorraxdoo nasataa ilayskeedii dhulka diiday. Diyaaraddoo qoyan baa dhulka soo kala jeexday. Najaxoo naxsan baa dhismihii soo gashay. Dhulku waa mid cusub, afku waa af qalaad, dadku waa si kale. way ka soo dhammaatay, waxay raadinaysaa yarkii loo soo tilmaamay. Indhahay ku dhex baadhay dadkii meesha soo taagnaa. Midig ayay ka bilowday iyadoo socota. Bidix ayay ku dhammaysay, markaasay hakatay. Midabkiisa ka soocan Afrikaanka kale ayaa soo jiitay markiiba. ”Alla waa isagii” ayay hoos u tidhi. Dhankiisay u dhaqaaqday. Mar kastoo ay u dhowaato wuu sii ifayaa. Sankan soo qoran ayay aad u sii eegtay. Wejigiisa furan ayay soo hor istaagtay. Isagaa kaga horreeyey. ”Najax sow ma tihid?”. Inta ay indhaha uga jawaabtay ayay codna u raacisay ”Xasan sow maaha?”. Waa la is gartay. ”Barasho wanaagsan” ayuu ku yidhi. ”Mid qalbiga dhayda” ayay hoos u tidhi, korna waxay ugu qaadday ”mid aad u wanaagsan, walaal”. ”Bun ma rabtaa?” ayuu weydiiyey. ”Waxaad doonto i sii” ayay hoos u tidhi, korna waxay ugu qaadday ”shaah baan cabbi doonaa”. Way sii wada jeesteen. Hadal aan la maqlayn ayay sii rifayaan. Ciil baa kambadhuudha, gadaasheeda Najax. Waxa ay ku sii jeeddaa nolol aanay ogeyn, halka ay ku dambayn.

NAJAX II

ambaala, caasimad aan da' weyneyn, nabarradeedu badan yihiin – Najax sideeda oo kale. Baabuur yar oo cad ayuu Xasan ku qaaday. Rejo ay dalkeedii kaga timid ayay dib u qooraansanaysaa marka ay ka soo dhaqaaqeen gegida diyaaradaha ee Entebbe. Waa run, go'aan way ka gaadhay jacaylkii inanka madaxweynaha ee Najax. Waa run, noloshaa way ka timid. Waxa kale oo ay ka timid qayb iyada ka mid ah. Najax ma aha sidii ay ahaan jirtay. Ma aha qofkii safarka jeclayd. Ma aha qofkii dadka iyo barashadooda jeclayd. Xasan oo isku deyaya in uu uga faalloodo magaaladan ay timid, ayay "hii" ugu jawaabtaa. Hadalka ayay maqlaysaa, haddana way ka baxaysaa. Xarfihii uu odhanayey, guux ayay isu beddelayaan. Way soo dawaaftaa, maskaxdaa shaqaysa, qalbigaa ilmeeya. Mar dambe ayay ku toostaa Xasan oo leh "deedna sidaas ayaa Kambaala loogu bixiyey." "Haaa, wallaahi waa cajiib" ayay iska tidhaahdaa. Su'aal ayay "haye" kaga jawaabtaa. Qalbiga laabteeda hoosteeda ku jira ayaa ka culus baabuurka ay saaran tahay. Way qaadi kari la' dahay.

In ay madhan tahay ayay dareemaysaa. In ay wax weyni ka maqan yihiin ayay isu aragtaa. Inadhaha ayay u lalisaa mugdiga iyo dhulka madow ee muraayadda dhankeeda kale ka muuqda. Nolol cusub, dad cusub iyo meel cusub. Malaha jacayl cusub? Macquul u ma eeka. Saacad iyo labaatan daqiiqo kaddib ayay ku soo dhaceen jidka cammiran ee Malinga. Walow ay fiid tahay, haddana dadka ayaa sidii looga bartay jidka cidhiidhi ka dhigaya. Waa wada soomaali. Dadka lugaynaya, kuwa taagan iyo kuwa fadhiyaba. Meel kasta dhugdhugley ayaa taagan. Bakhaaro

magacyo soomaali ah leh ayay kolba mid dhaafaysaa. Meeshu ma Kambaalaa, mise waa Hargeysa? Xasan oo in muddo ah ka aamusnaa, ayaa sharraxaad u bilaabay. “Xaafaddan waxa la yidhaa Kisenyi, waa xaafaddii soomaalida. Waa xaafaddaadii.” Indhaha ayay la raacday dadka dhaafaya. Sahra iyo Hoodo ayay ka dhex baadhay. Labadeedii garab. Asxaabtii ay la noolayd. Xusuusta ayay dib u celisay. Makhaayaddii ay bunka ka cabbi jireen ayay ku noqotay. Codkii deggenaa ee Sahra ayay dhegeysatay. Hoodo oo qaylinaysa ayaa ka soo dhex gashay. Way iska qososhay. Hoodo. Waa saaxiibaddeed Hoodo. Gabadhii ay u hibaysay ninkii ay jeclayd. Tolow imika maxay qabanaysaa? Miyey is guursadeen? Haddana way isla yaabtay. Maalin uun bay ka soo maqnayd. Waddooyinkii ilayska lahayd ayay ka soo dhammaatay. Kisenyi qaybaheeda mugdi ah ayuu baabuurku ilays daciif ah waddada rafka ah ku iftiiminayaa. Baabuurkii ayaa waddada badhtankeeda istaagay. Hareeraha ayay eegtay, way weyday wax nal ah oo baxaya. ”Soo deg walaal” ayuu Xasan ku yidhi. Iyada oo aan garanayn meesha loo socdo cagaha dhulka tuuraha leh ku hubsatay. Shandad weyn oo ay lahayd ayuu Xasan la booday. Luuq ayuu daf yidhi, way daba kacday. Dhowr jid oo cidhiidhi ah ayuu ka laabay. Carruur da’doodu yar tahay, bannaankana taagtaagan ayay sii dhaaftay. ”Orda hoyda” ayay hoos u tidhi. Meel ay u haydaan miyey haystaan? Mooyi.

Gurigu dhanka bari ayuu u jeedaa. Albaabka laga galo midabkiisa cagaarka ah waxa kala gooya dillaac badhtanka ah oo laga arki arko cidda gudaha joogta. Marka aad gasho waxa aad dhex istaagaysaa daarad aan weyneyn oo dusha bannaan. Musqul ayaa garabka midig kaa qabanaysa. Qolka ku xiga waxa deggan Farduus iyo ninkeeda Cismaan oo isku cusub, welina wax carruur ah dhalin. Qolka soo jeeda waxa deggan gabadha guriga ka mas’uulka ah ee Ardo, ninkeeda Xaashi iyo saddexda carruur ah ee ay dhaleen. Qolka yar ee soo hadhay, dhanka bidixna ku yaalla, waxa deggan Nimco. Waa qolka ay Najax degi doonto. Dumarka oo daaradda ku caweynaya ayay Najax habeenkaa timid. Farduus waa gabadh iska qosol badan. Dhowaan ayay is guursadeen ninkeeda Cismaan. Cismaan waxa uu ka yimid Norway, waxaanu u joogaa in

uu iyada kexeeyo. Balse inta aanu noqon, iyada ayuu saddex bilood la joogayaa. Ardo waa gabadha guriga kireysa. Da' ahaan afartan ayay wax yar kor u dhaaftay. Gabadh aan aad u dheerayn, hilib xoog ahna leh. Waa qof deggan, balse gacan-bir ah ku haysa maammulka. Way salaameen dhammaan. Nimco oo kijinka ku maqnayd ayaa soo baxday. Si diirran ayay u salaantay. "Oo walaal in aad saaka imanayso ayaan moodaynee..." Najax way faraxday. Waxay dareentay in la sugayey. Wejigeeda oo aan in muddo ah wax farxad ah laga dareemin ayaa dhalaalay. "Kaalay walaal aan qolka ku tusee, waar dee Xasanow u soo qaad inanta alaabta." Waa la hor kacay. Way daba kacday. Markii uu Xasan alaabtii dhigay, ayuu Najax ku yidhi: "Anigu haddaba waan fasaxanahay ayaan filayaa, mar haddii aan Nimco kugu hubsaday waan nasan karaa. Haddii aad wax u baahatana Nimco ayaa lambarkayga haysa. Laakiin iyada haddii aad haysato, ii baahan maysid." Way u mahadcelisay, waanu dhaqaaqay. Nimco ayay isku soo hadheen. Dhankeeda ayay eegtay. Nimco da'deedu labaatan ayay wax yar kor u dhaaftay, sida Najax oo kale. Laba sanno ayay magaaladan ku noolayd. Waxa ay la dhalatay saddex wiil iyo saddex hablood. Laba wiil ayaa ka yar. Dhammaantood waxa ay joogaan Boorama. Magaaladii ay ku dhalatay ee ay ku kortay. Waa gabadh da'deed ka weyn, taqaanna sida dadka loo la dhaqmo. Waa qofkii ay Najax u baahnayd. Laakiin Najax dadkii way nacday. Cidna niyad u ma hayso. Maalmaha qaar hadal ayay ku wareerin lahayd, qosolkeedii dheeraana jaarka ayaa dhibsan lahaa. Balse imika qalbiga ayaa la la qaybsaday, waa lagu dhex maydhanayaa. Walow ay ku faraxsan tahay in ay nolol cusub bilaabayso, haddana waxa ay ka xun tahay in ay ka timid wax kasta oo iyada ka dhigayey iyada. Way kala maqan tahay, hadalku mar dambe ayuu gaadhayaa. "Walaal kolley waad soo daashee iska jiifso sariirta, casho ayaan kuu keeniye." Markii ay Nimco baxday ayay naqas badan dib u qaadatay, soona celisay. Hareeraha ayay eegtay. Qol yar oo hal qof loogu talogalay, balse laba sariirood lagu qasbay. Laba sariirood oo yaalla labada dhinac ee iska soo horjeeda. Gidaarka waxa ku dheggan sawir weyn oo ah qaaraddii Afrika. Bes. Wax kale ku ma yaallaan gidaarka qolka. Dhulka, barta waxa cagaha iyo sibidhka qabow u dhexeeya salli yar oo ay cagtu marba dhinac u kaxaynayso.

Gidaarka saddexaad waxa soo yaalla kabadhka dharka. Way ku yara dhowaatay. Qayb dhar ayaa ka buuxa, qaybna way madhan tahay. Shandaddeedii cuslayd ayay soo jiidday, waxa ay damacday in ay dharka khaanadaha ku gurto, haddana way ka wahsatay. Naf wax qabataa ku ma jirto. Casho loo keenay ayay badh ka cuntay, badhkii kalena kijinka iyada oo u sii wadda ayay Nimco ka qaadday. "Orod iska seexo walaal, kolley waad daalan tahaye. Waa innoo berri." Albaabka ayay soo ceshatay. Dhar ay saaka soo xidhatay ayay si deggan isa ga furtay. Midba mar qaadday. Kuwo dabacsanna way xidhatay. Sidii qokeedii ayay dareentay, qolkeedii ku dhex yaallay gurigoodii Hargeysa. Marka laga reebo in ay kun wax ku kala duwan yihiin labada qol. Culays ayay xusuusta qolkeeda ka sii qaadday. Sariirta ayay dul tagtay. Waxay isu diyaarisay in ay seexato, walow ay og tahay in aanay gam'i doonin afarta saacadood ee soo socda. Maro-kaneeco ayay isku sii daysay, dhanka gidaarka ayay u sii jeedsatay. Jilbaha ayay soo laabtay, gacmahana laabta ayay gashatay. Ilbidhiqsiyo kaddib, waxa ay dareentay sida ay illintu u dul ordayso sankeeda, barkimadana u qoynayso.

Sidii xaashi yar oo kale ayay u dul taallaa sariirta markii ay indhaha kala qaadday. Waa waagii kowaad ee ugu beryay dhul shisheeye. Gidaarka midabka cawlan ayaa markiiba xasuusiyey in aanay qolkeedii joogin, in aanay meeshu gurigii hooyadeed ahayn. Jidhka oo garaacaya ayay ku war heshay, maskaxda oo guuxaysa ayay la soo kacday. Intii ay hurudayba way riyoonaysay. Najax ayay dhowr jeer guursatay, haddana Hoodo ayay dhowr jeer u guurisay Najax. Madaxtooyada ayay dhowr subaxood ka soo toostay. Markii u dambeysayna, qol Kambaala ku yaalla ayay ka dhex toostay. Daal badan ayay dareemaysaa, sababtana ma garanayso. In ay iska jiifto ayay rabtaa, maalintu degdeg ku dhaafto, gabbalkuna dhaco. Ilayska maalinta ayay nacday. Cabsi ayaa haysa, wax ay ka cabsanaysana ma garanayso. Haddii aan la la yaabayn, way iska jiifi lahayd maalinta oo dhan. In ay keligeed ahaato ayay rabtaa. In ay is la sheekeysato ayay doonaysaa. Wakhti saa'id ah in ay u baahan tahay ayay dareemaysaa. Aniga oo

sidan ah, sideen waxbarasho u bilaabi karaa? Waa su'aal aan la hayn cid uga jawaabta.

Walow ay dad soomaali ah la joogto, haddana in ay ajnebi tahay ayay isu aragtaa. Wax kasta ayaa ku cusub. Dad cusub oo u baahan in la fahmo dabeecaddooda. Ma aha gurigii hooyaday. Dib ayay ugu noqotay qolkeedii ay keligeed lahayd. Waxa ay dareentay in aanu qol keli ah ahayn, balse uu saaxiibkeeda kowaad ahaa. Waxa ay soo xasuusatay maalintii u dambeysay ee ay dhex taagnayd, si ay nabadgelyo u tidhaahdana ay garan la'ayd. Sidii ay u dhex jiifi jirtay inta ay doonto, marka ay doontana uga bixi jirtay. Qolkii ay dhexdiisa siday doonto uga dhex qaylin jirtay, ugu dhex ciyaari jirtay, uga dhex qosli jirtay, uga dhex ooyi jirtay. Waxa ay barbardhigtay sida ay oohinta isugu celinaysay xalay, si aan loo maqlin naqaskeeda. Imika oo kale waxa ay u baahnayd in ay gurigii hooyadeed joogto, ugu yaraanna laba bilood ku xidhnaato gudihiisa. Dhabtii hooyadeed ee ay madaxa saari jirtay marka ay adduunyadu soo eegto, ayay tebtay. "Waan ku qasbanaa in aan soo dhaqaajiyo" ayay gar isku siisay. Waa runteed. Maxay odhan lahayd haddaa? "Hooyo inanka aannu isku magaca nahay ee madaxweynuhu dhalay ayaan jeclaaday, isna sidoo kale. Markii aan guur isku afgrannay ayaan ogaaday in ay saaxiibadday Hoodo isaga jeclayd. Markaa meherkii sidaas ayaan u joojiyey." May, sidaas in ay tidhaahdo, waxa ugu fududayd in ay ka soo baxsato magaaladeedii ay jeclayd. Cid kasta oo ay taqaanayna ay ka timaaddo.

Imika Kambaala ayay sariir yar oo bir ah dhinaceeda si kala dheer ugu fadhidaa. Noloshu sida ay sidan u noqotay ayay is weydiinaysaa. Waxaas oo dhan waxa ka daran, sidee ayay uga bixi doontaa? Waa su'aal ay ku dawakhday jawaabteeda, markii dambena ay isku qancisay in aanay jawaabba lahayn. Xaaladdan aan ku jiro, aayar uun laga ma baxo. Waxaas oo dhan wax ayaa ka horreeya. Waa in aan hooyo la hadlo. U sheego in aan nabad qabo. Nimco ayay weydiisay meel ay ka wacdo waalidkeedii. Telefoon ayay u dhiibtay, si naxariis lehna ugu sheegtay in ay wici karto cidda ay doonto.

Lambarkii oo ay dusha ka haysay ayay ka horreysiisay furihii, waanay dhegeysatay dhawaaqa baxaya. In yar kaddibna codkii qaboobaa ee hooyo ayaa la hadlay. Waa cod markii uu dhegaha Najax soo gaadhay, indhaheeda il biyo ah ka faruuray. Way isku daadatay, baroorna qabsatay. Way u sharrixi kari weyday sababta ay u ooyeyso. Hooyadeed waxa ay u qaadatay in ay qaloonayso inanteedu, in ay wax u dheer yihiin, Najax uun baa og.

”Hooyo Hoodo iyo Sahraa igu kaa wareeriyee maad la soo hadashid.”

”Anaa la hadli hooyo.” ayay ugu soo koobtay, wax yar kaddibna way dhigtay. Wax yar ayay ka fikirtay labadooda, markii ay indhuhu aragga isku yaaciyeen ayay ka boodday. Mar aan sidan dhaamo ayaan la hadli, ayay isku qancisay. Imika hawl kale ayaa i sugaysa. Waa in aan jaamacaddii tago. Waraaqaheedii oo dhan ayay isku hagaajisatay, iyada oo nafta qasbaysana waxa ay u baxday Kambaala mugweyn. Nimco oo u noqotay garab ay u baahnayd ayaa wadda. Carro cas oo adkaatay, tuuro kala waaweyna leh, ayaa cagaheeda soo cadaadinaysa. Dhanka sare, qorrax aad mooddo in ay cadhaysan tahay, ayaa soo dhalaalinaysa. Walow ay weli subax tahay, haddana kulaylku waa mid uu dukhsigu ka hadhgalay. Waxa ay dhex jiidheen badweyn dad ah, dad qof waliba meel u socdo. Cidhiidhiga iyo kulaylka ayaa ka yeedhsiiyey: ”Walaal jaamacaddu intee ayay innoo jirtaa?” Nimco oo labadii sanno ee ay magaalada joogtay la qabsatay deegaanka, ayaa si fudud ugu jawaabtay iyada oo sacabka midig indhaha dushooda koofiyad uga dhigaysa.

”Ma dheera walaal, waa illaa labaatan daqiiqo, haddii aynu helno Matatu dheereynaya.”

Iyada oo aan fahmin ayay ”haye” ku soo koobtay. Najax ayaa la yaabban sida ay Nimco dadka u wada garanayso, qiyaastii qof kasta oo ka soo hor baxa way salaamaysaa. Islaanta guriga hor fadhida, ka roodhida iibinaya, ciyaalka kubadda cagacaddaanta ku ciyaaraya – dhammaan. Luuq kasta oo ay ka laabaan, waxa ay

dareemaysaa in la soo eegayo. Dadkuba iyada ayay ku mashquulsan yihiin. Way yaabban tahay. Waa la eegaa, iyaduna way eegtaa. Marka laga jeedsan waayo, ayay iska jeedsataa. Haddana qof kale oo eegaya ayay aragtaa. Way shakiday. Maxaa si ah? Weli jawaab may helin, balse jidkii weynaa ayay ku soo baxeen.

Xaafadaha dhexdooda haddii ay dadku sida webiga u socdeen, halkan sida badda ayay u fadhiyaan. Waa isgoyska weyn ee xaafadda. Boqollaal qof ayaa is dhaafdhaafaya, in ka badan ayaa taagan – keli-keli iyo wadarba. Intaa waxa dheer xayawaanka dadka la dhaqmaya ee meesha ka muuqda. Gaadiidka oo dhowr nooc ah ayaa isna jidka dhan walba ka jooga. Baaskiil, walaalkeedii ka weynaa ee Dhugdhugley. Tagaasi yaryar iyo illaa kii waxaba dhalay ee xammuulka. Dhammaan ishu way qabanaysaa.

Najax waxa ay aad ugu dhowaatay Nimco, si aanay uga lumin. Ma aha meel lagu lumo.

Sidii ay u socotay ayay istaagtay Nimco. Najaxna sidoo kale.

”Maxaa dhacay walaal?”

”Halkan ayaynu ka raacaynaa Matatu?”

Balaayadu ma tareen baa haddaba? Daqiiqado kaddib ayuu meel fog ka soo baxay isaga oo ordaya. Midabkiisii caddaa ayay markiiba isha Nimco qabatay. Sidii looga bartay kirishboyga ayaa albaabka la laallaada. Isaga oo waxoogaa lacag ah gacanta midig ku xejinaya ayay Nimco indhaha ka wada hadleen, waanu istaagay hortooda.

”Soo fuul walaal waa kane.”

Najax ayaa aragtay in uu wuxu yahay bas caasi ah. Iyada oo aan fikir badan ka gaadhsiin ayay kursi cidhiidhi ah salka saartay. Waa xabaal yar oo socota – cidhiidhi, kulayl iyo diiqad. Indhaha ayay

bannaanka u lalisay, magaaladuba waa wada Matatu. Afarta jihaba basas cadcad ayaa u kala gooshaya. Inta taagan ayaa ka badan. Muddo markii ay socdeen ayay Najax tidhi: ”Walaal lacagta miyeynaan siinayn?” Nimco oo u dulqaadanaysaa aqoon-la’aanteeda ayaa si qabow ugu tidhi: ”Walaal marka la degayo ayaa la siiyaa.” Way iska aamustay.

Qiyaastii soddon jeer ayuu sii istaagay, illaa ay Nimco markii dambe ku qaylisay: ”Masow, masow, masow!” Waa loo joojiyey. Way ka degeen. Jidka Ggaba Road ayay wax yar hore u raaceen. Midig ayay uga dageen, markaas ayay Nimco joogsatay. Najax oo cagaheeda iyo jidka ku mashquulsanayd ayaa kor eegtay. Horteeda ayay soo taallaa, u eeg wax soo dhoweynaya, waa ”Kampala International University.”

Albaabka qaybtu furan tahay ayay ka galeen. Albaab ay is arki doonaan maalin kasta, dhowrka sanno ee soo socda. Dhismaha cawlan ee garabkooda bidix kaga aaddan ayay baashiisa socdaan, iyaga oo ku hagaagaya ka kale ee dhalada ah. Inta ay dhex socoto barxadda jaamacadda ayay isha ku xadaysaa qaybaha goob noqon doonta hoygeeda labaad. Meel ay subax kasta u soo kallahdo, asxaab cusubna ka dhex hesho. Asxaab cusub. Tolow miyaan diyaar u ahay asxaab cusub? Mustaqbalka dhan ayaa madow ah. Ma arkayso wax maanta dhaafsiisan. Runta marka la sheego, in ay sariirtii ku noqoto ayay rabtaa, dunidan fooshaxunna ay ka xarooto. Kolba naqas ayay soo tuuraysaa. Naqas culays badan oo laabta u fududaynaya. Qayb iyada ka mid ah ayaan rabin noloshan cusub. Qayb iyada ka mid ah ayaa rabta in ay magaaladeedii ku noqoto. Waa qaybta uu qalbigu hoggaamiyo. Dhexdeeda ayaa la isku haystaa. Halgan dheer oo aan dhammaan doonin ayaa ka socday markii ay albaabka quraaradda ah ka gashay dhismaha diiwaangelinta ardayda ajnebiga ah. Laba saacadood kaddibna waxa ay ka soo baxday iyada oo laba waraaqood gacanta ku sidata. Waraaqo ay geyn doonto xafiiska dowladda. Nimco oo la yaabban sida fudud ee loogu soo dhammeeyey hawsha inteedii badnayd ayaa faraxsan. ”Naa walaal nasiib ayaad leedahay wallaahi, waraaqahan si fudud dadka ku ma soo siiyaan.” Najax ma ay

xiisaynayninba natiijada kulanka. Qof la jiidayo ayay ahayd. Qof laabtii hooyadeed u baahan, balse silcaysa bacadka Kambaala. Bas Kisenyi tegaya ayay soo raaceen. Wax yar kaddibna sariirteedii ayay dhinaca kaga fadhidaa.

Dhul shisheeye xumaa, Ilaahayow dhul shisheeye ii daranaa. Ma sidan ayaa ii dambeysay? Bal maxaa i keenay meeshan, dhulkaygii iga soo kexeeyey? Dal iyo dad qalaad ayaan qalbi gudhay la dhex joogaa. Waxaas oo dhan waxa igaga daran, cidlo ayaan dareemayaa. Qof lunsan ayaan isu arkaa. Haddii aan hadli lahaana, cid aan u sheego ma haysto. Taas ayaa i gubaysa. Cid i dhegeysata ayaan rabaa. Balse ma haysto. Waa dhib aniga igu kooban. Sacabka ayay kolba dhabanka marinaysaa. Indhaha oo aan libiqsanayn ayaa soo burqanaya. Gacantu marka ay qoydo ayay shalmadda adeegsanaysaa. Noloshaba ma aniga ayaa arkay, waa maxay sidani? Qayrkay guryihii hooyadood ayay joogaan, werwer la'aan seexdaan. Dhowr usbuuc uun kahor nolol kale ayaan ku jirey. Farxad ayaan ku seexan jirey, aniga oo waaga raagsanaya. Magacayga meel laga yaqaanno ayaan joogay, aragtidayda la tixgeliyo. Qofkii aan dunida u jeclaa ayaan haystay. Isaguna wuu i jeclaa. Dhowaan ayaannu aqalgelaynay. Boggii aan nolosha ka joogay waa la rogey. Anigana waxba la i ma weydiin. Maantana waxa aan ahay ajnebi, jacaylkaygii waan ka soo tegay, dhulkaygii iyo waalidkaygii waan ka soo tegay. Igu culusaa waxan i haystaa. Rabbigayow iga dul qaad, ma qaadi karee. Illintii qaboobayd ayaa kulayl isu beddeshay, dhabankeedana gubaysa. Oohintii aamusnayd ayaa cod soo yeelanaysa. Cunaha ayaa xanuunaya. Way isku dhex daadatay. Si aan loo maqlin ayay naqaska isku celinaysaa. Meeshani waa meel baas. Xitaa si xor ah u ma ooyi karo. Way kacday, weyso degdeg ah soo qaadatay, qolka dhexdiisana istaagtay. Jiho qaldan ayay u jeedsatay, Ilaahayna waxa ay la hor istaagtay naf aan faraheeda ku jirin. Rakcaddii labaad, sujuuddii u dambeysay ayay madaxa dhulka ka qaadi kari weyday. Ilaahayow imtixaanka waan aqaannaa, waanan fahmay in aad i imtixaamayso, Ilaahayow intaa iigu jooji. Adiga ayaan kugu dhaartee naftaydu ma qaadi karto, feedhahaygu ma awoodaan intaa in ka badan. Adiga ayaa wax walba awoodee, Ilaahayow

sidan ii dhaan, waan ku baryayaaye. Ilaahayow... Toddoba iyo toban daqiiqo kaddib ayay soo fadhiisatay. Iyada oo dawakhsan ayay attaxiyaatka dhex carartay. Indho cascasna midig iyo bidix ula jeedsatay. Kitaab ay shandadda ku sidatay ayay dhabta saaratay. Aayado ay ka raagtay ayay indho aan caadi wax u arkayn ku akhriday.

Maalmihii xigey waxa ay ku mashquulsanayd hawlaha jaamacadda. Garabkeedana waxa joogtay Nimco. Nimco oo la yaabban qof hadalka soo gaabinaysa, wax badanna aan odhanayn. Waxa ay arkaysaa qof marka ay qoslayso debnaha xoog ku kala jiidaysa. Qof qosolka jilaysa, jilis aad u xun. Way arkaysaa in ay wax qaldan yihiin, mana saxayso waxa dhacay. Way isku cusub yihiin, ku ma dhiirranayso in ay weydiiso. Dhowr jeer way aragtay iyada oo si hoose illin isa ga masaxayso. Dhowr jeer way iska dhigtay wax aan arkayn. Wakhti ayay rabtaa in ay siiso. Wax ay u eeg tahay qof og xaaladda ay ku jirto, walow aanay ogeyn sababta ka dambaysa.

Ayaamuhu way is beddelayaan, walow ay luudayaan. Maalmaha ayaa isku wada eeg. Subaxa oo ay indho cas la kacdo, cuntada oo ay mar walba badh ka cunto, wixii xafiisyada dowladda kaga xidhan oo ay soo dhammayso, sariirta oo ay dhowr siyood u isticmaasho. Toban jeer oo ay tukato, intaa in ka badan oo ay beerka ka oydo. Hurdada oo ay u jiifsato siddeedda fiidnimo, saqda dhexena ay gama'do.

Saddex todobaad ayaa tegay, ugu yaraan toban kiiloona way ka dhaceen. Faraha ayaa qoryo u ekaaday, indhaha ayaa god ka soo jeedsaday. Waa maalintii labaad ee ay u kallahdo waxbarashadeedii oo si rasmi ah u bilaabantay. Sidii qof dhiman ayay gashaa fasalka, cidna la ma hadasho, iyada oo maqiiqan ayay guriga timaaddaa. Sidaas ayay ku waddey illaa ay maalin Sabti ah – toddoba cisho kaddib maalintii ay jaamacadda bilowday – ay go'aan gaadhay. Waa maalin ay fasax tahay. Guriga ayay ka baxday, mana garanayso meel ay u socoto. Waxay se u badan tahay in ay nafteeda la soo faqayso. Dhanka bari ayay u kacday.

Luuqyadii ayay ka dhammaatay, istaanka basaska ayay dhanka waqooyi ka martay. Indhaha ayay la raacaysaa dadka aad mooddo in uu midba jiho gaar ah u socdo. Qof kasta waayo gaar ah ayaa dul hoganaya. Qof kasta nolol gaar ah ayuu nool yahay, garoonkana waa la wadaagayaa. Cagta ayaa socodkeeda sii wadatay. Jidkii leexdaba way la leexataa, illaa ay ku soo baxday dhisme indhaheeda wiilashooda ballaadhiyey. Midabkiisa ciidda u eeg ayaa dhulka sare uga kaca, gidaarradiisa ayay awoodi ka muuqataa. Kaabado waaweyn ayaa dhulka ka bilaabma, qaybta sarena ku xidha dhulka. Minnaaradda dhinaca ku taalla ayaad mooddaa in ay daruuraha madaxa la gelayso. Weli dhisme sidaas u weyn ma ay arkin. Waa masjidka loogu magac daray Qaddaafi, madaxweynihii hore ee Liibiya. Hadyad ayuu u siiyey dalka iyo dadkiisa muslimka ah. Hortiisa marka ay taagan tahay ayay dareentay in ay qudhaanjo le'eg tahay. Kaabadaha waaweyn ayay kor u raacday. Barxadda weyn ee xagga sare ayay ka gudubtay. Dhismaha dedan markii ay cagta gelisay ayay dareentay qabow jidhka dhan saaqay. Laba rakcadood kaddib ayay dhankii bannaanayd u soo baxday. Kambaala ayay hoos u eegtay. Dhisme kasta dadka ku dhex jira ayay ka fikirtay, inta jidadka maraysa iyo inta meelahaa taagan. Qof kasta gaarkiisa ayay uga fikirtay. Walow aanay korkooda ka muuqan, haddana qof kasta culays gaar ah ayaa saaran. Qof kasta in dhibaysa ayaa garbihiisa saaran. Sidaas oo ay tahay noloshu ma joogsanayso. Cidna loo ma joojinayo. Maanta waa Sabti, berrina Axad. La ma odhanayo Najax ayuu dhib haystaaye, berrina Sabti ka dhiga. Laba arrimood, mid ayaa ila gudboon. In aan noqdo qof ay noloshu ka adkaatay, iyo in aan anigu ka adkaado. Midda dambe ayaan doortay. Murugada iyo culayskeeda waan arkay, mana aha meel la joogo. Bil dhan ayaan maalin kasta ooyayaa, waa qalad. Qalad maaha, laakiin waa iska mushkilad. Wax kasta oo i dhibaya waxa aan kaga tegayaa masjidkan. Noloshaydii hore waa in aan iska illoobo. Bog cusub waa in aan ku qoro xarfaha ay noloshani i barti doonto. Noloshaydana waa in aan jacayl dambe ka ilaaliyaa, naftaydana aan horumariyaa. Waxbarashadan cusub waa in aan ka soo dhalaalaa. Magacayga iyo jacaylna, hal weedh ma wada geli karaan. Xaaraan ayaannu kala nahay.

Labadii habeen ee u dambeeyey si dhakhso ah ayay u gama'day. Mar kasta oo uu qalbigeedu murugo bilaabana, way ku xanaaqaysay. Isna wuu is nabayey. Maalintii Isniintii ayay fasalka la soo gashay weji ka duwan kii ay hore u lahayd. Markii u horreysay ayay indhaheedu qabteen ardayda ay fasalka wada dhigtaan. Hal wiiil oo soomaali ah ayay indhaheedu ku dhaceen. Markiiba way ka jeedsatay. Balse isaga ayaan ka jeedsan. Dhankeeda ayuu u soo dhaqaaqay. "Salaamu calaykum walaal, Maxamed ayaa la i yidhaa, adna?"

Maxamed waa wiil firfircoon. Hadalkiisu joogsi ma laha, hakadna hadalkiisaba daa. "Walaal magacaaga ii sheeg? Aniga kaygu waa Maxamed? Goormaad timid Kampala? Ma reer Hargeysaad tahay?" Waa caksiga Najax. Su'aalaha oo dhan ayaa madaxeeda kor maraya, qaarkood ma maqlaysaba. Haddii ay dhegeysan lahayd, kii ay jeclayd ayay codkiisa ka dhex arkaysaa. Waa nin, ninna ma rabto. Barasho ayuu rabaa, iyaduna ma rabto. Hadal ay garanayso barta uu ku dhammaan doono, ayuu bilawgiisa wadaa, iyaduna ma rabto. Hadalkiisa way is dhaafisay, wax waalan ayay iska dhigtay. Ma aha mid qancaya. Maalmo dhowr ah ayay sidaas ku wadday, subax kasta salaan diirran ayuu kula soo kallahaa, si hurudda ayay ugu jawaabtaa. Ma daalo, ma daasho.

Najax wax kale ayaa gubaya. Mas'uuliyad ay ka gaabisay ayaa gaadhay wakhtigii la iska dul qaadayey. Tan iyo galabtii ay magaaladeedii ka soo duushay, asxaabteedii la ma ay xidhiidhin. Walow ay qiil haysatay, haddana taasi ma aha mid ay iyaga u sheegi karto. Nolol ay ka gudubtay ayay ka mid ahaayeen, si ay uga soo ceshatana ma garanayso. Hooyadeed oo dhowr jeer la soo qaadday arrintaas, si fudud ayay u dhaafisay. Maskaxdeeda oo maalin kasta soo hordhigtana, qalbigaa dhaafiya. Sahra iyo Hoodo ma aha dad sidaas lagu goyn karo, balse nolol ay ka gudubtay ayay ka mid noqdeen. Nolosheedii hore ayay ku milan yihiin, sidee looga saaraa? Waxa ay ahaayeen laba ay saddexayn jirtay, sidaana way ku dhammaystirnaayeen. Waayaha nolosha way ka tashan jireen, wax kastana si wadajir ah ayay uga qaybqaadan jireen. Nolosha indho dabacsan ayay ku eegi jireen, dhibaatooyinkeedana

isku ma ay dhibi jirin. Qosolka ayaa dhex u ahaa. Illaa uu Najax soo dhex galay, yarkii kala geeyey. Imika isaga go'aan wax u eg ayay ka gaadhay, sidaas darteed iyagana waa in ay meel uga hesho nolosheeda. Wax badan way ka wareegtay, balse galabta in ay la hadasho ayay go'aansatay.

Albaabkii kala jeexnaa ayay iska soo riixday goor casar laga baxay. Farduus oo daaradda dhar ku maydhaysa ayay sii dhaaftay. Qolkeedii ayay daf tidhi. Nimco ayaa sariirteeda soo fadhida, iyaduna shandaddii ayay dhulka ku tuurtay, hagoogtiina furatay. Laydh qabow ayaa markiiba qoorteeda jiidhay. Salaan kooban kaddib ayay Nimco hore u soo fadhiisatay. In badan way eegi jirtay, waxna may weydiin jirin. Maanta waxa ay aragtay in ay sidii hore ka weji furan tahay. Goor wax la weydiiyo Najax way tahay.

"Maanta waad faraxsan tahaye, maxaad soo aragtay Najaxeey?"

"Walaal sow aniga maalin walba faraxsan."

"Ilaahaaga ka yaab! Ma adaa faraxsan? Naa ha i qodqodin huunno."

Najax oo diidaysa in uu hadalku sii socdo ayaa tidhi: "Naa haaye walaal, mid baan iska kari la' ahay jaamacadda joogee. Adigu maanta maanad tegin meelna?"

Najax maalin keli ah may arkin Nimco oo jaamacad tegaysa, waxaanay u sheegtay in ay muddo dheer magaalada degganayd. In badan ayay rabtay in ay weydiiso, balse ay ku hagaagi la'ayd. Maanta iyada ayaa afka la soo gashay. Nimco way yara hakatay, haddana way hadashay.

"Naa imikaan ka imiye, i sug musqushaan gelayaaye."

Xuf ayay ku dhaaftay. Shakigeedii ayaa u sii xoogaystay. Telefoonkeeda ayay ku jeedsatay, waxa ay baadhay lambarradii. Kii Sahra ayay doorbidday. Hoodo oo ay aad isugu sii dhowaayeen ayay dib u dhigatay, sababo jira awgood. Way wacday, waxa loo sheegay in aanay lacag ku filani ugu jirin. Iyada oo telefoonka hiifaysa ayay Nimco soo baxday. Way u sheegtay in ay lacag u baahan tahay. Nimcana hawl ayay suuqa uga baahan tahay. Way is raaceen. Isgoyska weyn ayay tageen. Meheraddii kowaad ayay galeen. Khaalid oo ay wax ka iibsadaan ayaa soo qoslaya. Kaadh ayay ka qaateen. Wax aan toban tallaabo ka badnayn ayay galeen meheradda ”Masha Allah” ee ay Xaawi haysato. Nimco ayaa xijaab ka soo qaadatay. Najax oo weli kalabarasho ku jirta ayaa dhegeysanaysa sharraxaadda Nimco. Dhegaheedu maanta si fiican ayay u maqlayaan codkeeda. Ma xawilna sidii hore. Dukaan kasta iyo waxa uu ku fiican yahay ayay ogaatay. Mar keli ah ayay maqashay qof u yeedhaya. Way is taagtay. Dib ayay u eegtay. Nimco ayaa yaabtay.

”Maxaa ku helay?”

”Sug... Maad maqlayn?

”Maxay?”

”Iska dhaaf. Inna mari.”

Kabihii ayay midba meel ku sii tuurtay markii ay qolka gelaysay. Iyada oo yara naxsan ayay wacday lambarkii. Degdeg ayaa looga qabtay. ”Halow.” Cod aanay beryahaa maqlin. Cod meeshii maqli jirtay ay basaastay. Dareen noociisa aanay hore u arkin ayaa jidhkeeda dhex qaaday. Saaxiibaddeed Sahra ayay codkeedii maqashay.

”Naa Sahra, iska warran?”

U ma baahan in ay isu sheegto, naqaskeeda ayay garan kartaa. Qaylo ayay ku dhufatay.

”Naa Najax, Alla naa waa Najax. – Naa bal sug aannu la hadalnee. Naa Najax. Iska warran huunno? Maad na nacday?”

Hadal kasta oo ay kaga jawaabto, ma uu ahayn mid buuxiya barta ay weydiintu ka timid. In badan ayay isku dayday in ay ka dhaadhiciso culayska ka haysta deegaanka cusub iyo mashquulkiisa. In badan ayay ku tidhi: ”Sidaas darteed ayaan idiin soo wici kari waayey.” Balse waxa taas ku xigta: ”Sow adigii hooyaba la soo hadlayey, markaas uun maad na soo wacdid. Maxaad Faysbuugga xitaa nooga soo jawaabi weyday?”

Jawaabaha ayaa ku soo yaraaday. Kuwa qalbigeeda ku jira ayay dib u eegtay. Dalkaba idinka dartiin ayaan uga imid. Waxa aad ku maran tihiin wixii i soo qixiyey. Magacyadiinna ayaa iiga dhigan caloolxanuun. Silicaba idinka ayaa i baday. Dartiin ayaan dhul shisheeye keligey uga dhex ilmaynayaa. Intaas ayaa markiiba ka hor timid. In ka badanna way soo socotay. Balse ma ay odhan.

”Naa Najax” ayay ku war heshay.

Fikirka ayay ku dheeraatay. Waxa ay doorbidday in ay dhulka is dhigto. Khaladka ayay tunka ku qaadatay. Raalligelinna way dalbatay.

”Bal waa saxe hoo Hoodana la hadal.”

Waa loogu dhiibay.

”Naa huunno, Najax...”

Najax way isku dhex yaacday. Oohin ay qarinaysay ayaa bannaanka uga soo baxday. Waa qof aad ugu dheeraa qalbigeeda. Saaxiibad ay cid walba ka jeclayd. Codkeeda naxariista wata ayay ka dareentay in aanay weli waxba ogeyn. Iyaduna waa sida ay

rabto. Hoos ayay u weydiisay. Najaxaygii iiga warran? Ma is jeceshihiin weli? Habeenku ma ku soo wacaa? Sow kuu ma sheekeeyo? Muxuu ku yidhaa? Sidaydii si ka badan miyuu kuu jecel yahay? Miyuu i soo hadalqaadaa? Miyuu i xasuustaa? Afkeeda se bariido iyo raalligelin ayaa ka soo baxaya.

Nimco ayaa sheedda kala socota. Markii ay dhigtay telefoonka ayay fadhiga ku qallashay. Jidhkeeda dhan ayaa dhaqaaqa joojiyey. Waxa keli ah ee socday ayaa ahayd illinta dhabanka baratamaysa. Culays dusheeda saarnaa ayaa is muujiyey. Feedhaheeda yaryar ayaa qaadi kari la' waxan soo jiidhay. Halkii ayay nuuxsi la'aan sii fadhiday. Nimcana waxba may weydiin.

Saaka fudayd saa'id ah ayay la soo kacday. Xubnaha jidhka oo garaacaya, ayay kor u boodday. Quraac aanay dan ka geli jirin ayay xoog ku liqday. Iyada iyo nafteeda oo wada socda ayaa albaabka ka booday, kii fasalkana wada galay. Waa Maxamed, amma "Ilmihii yaraa", waa siday u taqaannee. Qosolkiisii oo aan maanta sidii u badnayn ayuu salaan u raaciyey. Maanta iyadu cid kasta way dhegeysanaysaa, isagana in ay la yara hadasho ayay damacday. Balse isaga ayaaba is yara dhuubaya. Si hufan ayay iyaduna u bariidisay. Mar keli ah ayuu weydiiyey: "Maxaad shalay salaanta iiga qaadi weyday?" Way yaabtay.

"Shalay goorma walaal?"

"Shalay markaad Khadra la socotay suuqa Kisenyi, sow anigii kuu yeedhayey."

"Alla ma aduu ahaa? Dee ku maan arkin walaal."

"Waa iska caadiye, iska dhaaf..."

"Laakiin Khadri waa ayo walaal, qof kale ayaan la socday. Khadra la ma yidhaa inanta."

"Khadraa la yidhaaye, maxay kuu sheegatay?"

”Dee walaal qof kalaad ku qaldaysaaye, inanta Nimcaa la yidhaa.”

”Haa, waa hagaag. Inantu miyaanay inanta reer Boorama ahayn?”

Way yaabtay.

”Haa...”

”Jaar ayaannu ahayn walaal inanta, Khadra Cumar Xasan ayaa la yidhaa. Hooyadeedna Yusur ayaa la yidhaa.”

Fajiciso ayay ku noqotay. Waxa ay damacday in ay wax ka ogaato xogta uu hayo. Balse wuu dhaqaaqay, xiisaddii ayaana bilaabantay. Maskaxda ayaa shuuqday. Ma qof kale ayuu ku qaldayaa? May. Maxay beenta iigu sheegaysaa? Dadkan baas ee aan cid la aammino lahayn. Meel baastani maxay ahayd? Kolley gurigii aan imika ka soo baxayna isagoo meeshii ka guuray ayaan ku noqon doonaa. Hal erey kaga muu soo duulin xiisaddii. Markii ay dhammaatay ayay dhankiisa u soo orodday. Way weydiisay. Wuu is adkeeyey. Si dabacsan ayay ugu dhigtay, dhowr jeerna qoorta ayay madaxa ku ciyaarsiisay. Isaga oo aan is ogeyn ayuu wixiiba bannaanka soo dhigay.

”Inanta walaal Khadra Cumar ayaa la yidhaa sidaan kuu sheegay. Laba sanno kahor ayuu aabbeheed oday siiyey, iyaduna way diidday. Reerka ayay isku kaceen, deedna way soo baxsatay. Illaa maanta waa la raadiyaa.”

Madaxeeda ayaa guri le’eg, dhexdiisa ayaa kubbad lagu ciyaarayaa. Afkii ay kala qaadday markii uu Maxamed warka u sheegay, ayay magaalada la soo dhex qaadday. War ay soo sidato ayay u qaadan la’ dahay. Nimco noqotay Khadra. Run been noqotay mise been wax kale noqotay. Maxaa kallifay inanta? Calool adakaa! Miyaanay ogeyn in maalin uun aan ogaan doono? Waan ogaa in ay wax qaldan yihiin. Inantan aan maalin kasta weydiiyo waxa iskuulkeedii ku dhacay, iyaduna kolba marmarsiiyo la imanaysa. Cajiib. Haddaba maanta waan ku soo qabtay dheh. Waan ku

hayaa Nimcoy, Khadray, Heblaayoy! Iyada oo isla hadlaysa ayay gurigii soo gashay. ”Nimco meeday?” ayay dadkii ka hor geysay. Mise Khadra ayaan idin idhaahdaa, waxba isku fali maysaane? Tolow miyay og yihiin. Iyada oo isla maqan ayaa loo sheegay in aanay Nimco joogin. Qolkii, sariirtii oo ay imika soo heshiinayaan ayay dharkii la jiifsatay.

Hooyadeed ayay u sheekaynaysay kolkii ay maqashay codka Nimco. Degdeg ayay u fasaxday. Awood aanay garanayn meesha ay ka timid ayaa soo fadhiisisay markiiba. Bariido ayay ku tuurtay durba. ”Naa Nimco, iska warran?” Nimco ayaa ku jawaabtay: ”Nabad huunnee ma fiican tahay?” Naayaa beennalay, Ilaahayow inantu waa noocma? Nabad huunno, kuye. Waan ba’nay. La ma naxayaba. Walaal maxaad beenta iigu sheegtay? Warkaaga waan soo helay. Nimco lagu ma yidhaa, jaamacadna ma dhigatid. Reerkiinnii ayaad ka soo baxsatay. Waa naagta Kambaala orod ku soo gashay, naa ma Cabdi Bilaa? Waxay is aragtay iyada oo fikirka ku fogaatay. Way ku dhiirran weyday. Hab kale waa in ay u weydiiso. Nimco diracii guriga ay ku joogeysay ayay ku dhex dhacday. Najaxna dhanka Nimco ayay u soo jeedsatay.

”Waad soo daahdee, waxaan is idhi maxaa helay tolow?”

Nimco oo sacab geerisaliin leh oo aan weli lugteeda bidix lagu duugin candhuuf ku sii tufaysa ayuu hadalku gaadhay.

”Tufuu, huunno maan soo daahay? Waan iska soo luudayey. Goormaad timid adigu?”

”Naa walaal maanta wiil baan arkay, anigu mar dhoweyd ayaan imide. Kow dheh.”

”Miyuu qurux badnaa waadigan faraxsane.”

”Naa ina rag way noo kala dhammaatee, waxaan ku idhi...”

”Bisinka, oo walaal maxaad sidaa u leedahay?”

”Naa nin Maxamed la yidhaa ma taqaannaa?”

”Kun Maxamed ayaan aqaannaa dee walaale, waa kee?”

Naagtu waa khubaro. Wallee tan in aanan gunteeda gaadhayn.

”Walaal Maxamed ayaa la yidhaa, jaamacadda ayuu ila dhigtaa.”

”Dee walaal maxaan ka garan.”

”Isagu in uu ku garanayo ayaa laga yaabaa.”

Shib. Waa la kala aamusay. Hadalkaa u dambeeyey ayaa hawada heehaabayey. Iyada oo lugaheeda isku mashquulinaysa ayay si hoose u tidhi:

”Ma aniguu i garanayaa?”

Najax ayaa u fiirsanaysa dhaqaaq kasta oo ay Nimco samaynayso. Codkeeda is beddelay ayay markiiba dareen ka qaadatay. Way ku sii adkaysay.

”Wiil Maxamed la yidhaa miyaydaan jaar ahayn Boorama, gurigii idin ka soo hor jeeday?”

”Adigu oohintii ma iska deysay?”

Yaa? Maxay tidhi inantu? Tacshiirad rasaas ah ayay ridaysay Najax, iyada madfac ayaa ku dhacay. Guux iyo gariirba waa laga waayey. Indhaha ayaa libiqsiga joojiyey. Ereyada dhegaheeda soo gaadhay ayaa fahankoodu ku adkaaday maskaxdeeda. Maxay tidhi? Waxay tidhi miyay tidhi? Marka laga tago su’aasha aanay filayn, waxa yaab ku noqotay sida qabow ee ay u tidhi.

Nimco diraca ayaa u soo laaban oo jilbaha u soo gaadha. Kubabka oo ay duugtay ayaa dhulka ku qotoma, gacmaheeda oo ay isku masaxayso ayay ku jeeddaa. Ka ma qasna.

Najax ayaa koomadii ka soo baxday.

”Walaal goormaad i aragtay anoo ooyaya?”

”Ninka magicii huunno?”

”Cajiib, dee wax kalaad u jeeddaa?”

”Markaad su’aashaa iiga jawaabto ayaan anna taada kaaga jawaabayaa?”

Najax oo ka xun sida ay Nimco u dhaqantay ayaa shalmadda la boodday, kabahana cagaha sii sudhay, albaabkana ka boodday. Cadho ayay karkaraysaa, wax ay tidhaahdana ma garanayso. Waxba ma odhan karto. Dalkeedii ma aha, gurigii hooyadeedna ma joogto. Wixii ku dhiba waa in aad liqdo, ayay beri hore isku qancisay. Maanta se illaa gacmaha ayaa gariiraya. Debinta hoose ayaa dhaqdhaqaaqaysa. In ay wax tidhaahdo ayay rabtaa, waxna ka ma soo baxayaan. Cay wixii ay taqaannayba hoos ayay u higgaadisay. Jidkii masjidka Qaddaafi ayay cagta saartay. Midabka maradeeda oo la falgalay ka carrada ay ku dul socoto ayay tallaabada dhufanaysaa. Dadkan baas ee aan la joogaa maxay ahaayeen. Waa qaar aan hadlin oo qolalka kale deggan iyo tan beenaleyda ah. Kambaalada la sheegaa ma sidanaa? Waa maxay dadkan kala wada jeedaa? Waa in aan Xasan la hadlo. Way wacday iyada oo aanu codkeedu degganayn.

”Walaal meeshan meel dhaanta maad haysaa Xasanow? Maya, wax dhibaato ahi ma jiraan walaale... Yaa? Haa yacnii way igu yara fog tahay walaal. Haye walaal, sida kale sow ma wacnid? Haye huunno.”

Wakhtigan la joogo galabta, waxa ay u cadhoonaysaa laba qof. Nimco iyo kii waxanba baday: Najax. May, Nimco iska illow, Najax ayay aad ugu cadhoonaysaa. Najaxow farxaddii jacaylkeennu i siiyey, waxa ka badan xanuunka uu i baday. Waa xanuun aan daawo lahayn. Kun go'aan ayaan kaa gaadhay, kunkaba waan buriyaa. Qof miyaad ka weyn tahay? Maxaad tahay? Yaa xaq kuu siiyey in aad qof kale noloshiisa sidan u saamayso? Naftaydu doqonsanaa! Miyaan kuu barooran uun illaa aakhrio? Miyay kolba naag yari igu wiirsan. Doqon waliba way i fahantay, adiga ayaa dadka ii jebiyey. Haddii wax ku dhibaya lagu weydiiyo, waad sheegi kartaa waxaasi waxa uu yahay. Imika maxaan idhaahdaa? "Een.. nin yaroo Najax la yidhaa ayaan u ooyayaa"? Akhas, ma sidanaa ii dambeysay? Taag darriyaa! Yaan nabsiga ka galay haddaba, ma Cumarkii nasakha ahaa? Intaas oo innamood ayaa i daba ordayey, markaasaan adiga kuu dhuubtay. Waa arrin toddobada mucjiso ee adduunka, siddeed ku noqonaysa.

Laba saacadood iyo saddex iyo toban ilbidhiqsi kaddib ayay guriga soo gashay. Iyada oo aan cidna la hadlin ayay barteedii yarayd is tuurtay. Cadhadii way ka yaraatay, dareen kale ayaa u beddelay. Way cidloonaysaa, Najaxna way tebaysaa. Si kasta oo ay ugu cadhooto, waxay og tahay in ay jeceshahay. Si kasta oo ay u fogeyso, inta ay soo dhoweyso ayaa ka badan. Qalbigeeda ayuu iska haystaa, in uu sii daayana ma rabo. Runta ayaa fiicane, iyada ayaa ku dheggan. Ma aha qof la sii daayo. Isagu waa intii iyada ka dhinnayd. Intiina waxa qaadatay saaxiibaddeed Hoodo. Tolow Hoodo ma wacaa? Maxaan ku idhaa? Iga daa. Ma rabo in aan ka qaso sheekada ay waddo. Kolley isaga ayay la hadlaysaa saacaddaa. Waa qof nasiib leh. Bes haddaba, maxaan uga fikirayaa Hoodo? Maxaan wakhti iyo tamar ugu bixinayaa. Ninkaygii ayay haysataa, naftaydana ma rabo in aan ugu daro. Laakiin tolow maxay imika ku leedahay isaga?

Way is rogtay, hurdo aan iman doonin ayay isku diyaarisay. Iftiinka waxa ay ka doorbidaysaa in ay indhaha isku hayso. Taasi waxa ay u fududaynaysaa in ay sii wadato riyadeeda. Hawada qolka dhex taagan ayay kolba qayb qaadanaysaa. Iyada iyo furaashka ayaan la kala garan. Jidhkeedu waa shayga keli ah ee jooga sariirta dusheeda. Halkaas ayay isaga uga baaqaysaa. Maskaxdeeda ayaa ku soo celcelinaysa ereyadii Saado Cali ay ku luuqayn jirtay:

Ruux ruux ka maqan yahay

Hurdaduu ku reemiyo

Riyo waalli badanaa

Saddex maalmood ayaa laga joogaa, weli se wax jawaab ah ka ma hayso Xasan. Markii ay guriga soo gashay galabtaas ayay maqashay codka Nimco. ”Haye walaal Sahra, Hoodana igu salaan.” Intaas ayaa dhegaheeda ku soo duushay. Way hakatay. Daaradda ayay istaagtay. Way u qaadan weyday. Ma Sahra iyo Hoodo ayay la hadlaysay? Mise waa kuwo kale? Goormay is barteen? Maxay ka wada hadlayeen tolow? Ma Xasan baa is baray? Weydiimo bilaa jawaabo ah ayay soo daadisay. Fikirka ayay ku dheeraatay. Nimco oo hadalkii dhammaysay ayaa qolka ka soo baxday, waa la isku naxay. Midba dhan aanu u socon ayuu u dhaqaaqay. Saddexdii maalmood ee u dambeeyey, xidhiidhkoodu wuu istaagay. Wax hadal ahi ma uu dhex marin, mid waliba dhankeeda ayay afka u buuraysay. Shandaddii ayay dhulka dhigatay. Iyada oo dhibsanaysa sidan ay nolosheedu tahay ayay wax yar taagnida ku qallashay. Nimco ayaa qolka ku soo noqotay. Sariirteeda ayay ku soo fadhiisatay, dhankanna way soo eegtay. Sidii qof hadal doonaya ayay dhaqaaqa badisay. Way bilowday. Su’aal gaaban ayay soo tuurtay.

”Maad cadhoonaysaa weli?”

Najax way u qaadan weyday su'aasha noocaas ah, ka may dhexayn. Dhankeeda ayay weji fajacsan ku eegtay, afka ayay qalloocisay, waxayna u raacisay: "Maxaan ka cadhoon lahaa?" Way ka jeedsatay oo shandaddeeda isku mashquulisay. Nimco sidaa ku ma joogeyso, dan gaar ah ayay leedahay.

"Inna mari maanta meel baan ku soo tusayaaye."

Muddo ayay ku qaadatay in uu hadalku u dhaadhaco. Markan iyada oo aan soo jeedsan ayay u jawaabtay.

"Waan daallanahay walaal."

"Anaa daalka kaa bi'inayee inna mari."

"May, walaal. Madaxaa i xanuunaya."

"Meel ku bogsiisa ayaan ku geynayaaye kaalay."

"..."

"Sidaa aad tahay uun soo bax, kaalay meel sariirtan dhaantaan ku soo tusayaaye."

Nimco oo sidii hore ka furfuran iyo Najax oo sida caagga ah ayaa is daba galay. Hadal badani ka ma dhexeeyo. Jidkii weynaa ayay ku hagaageen, bas ordaya ayaa u istaagay, 20 daqiiqo kaddibna waxa uu dhigey barxadda weyn ee basaska. Dhanka waqooyi/bari ayay u dhaqaaqeen. Nimco ayaa hagaysa, Najaxna way iska socotaa. Way wada socdaan, waanay kala socdaan. Jidka Naylka ayay kor u qaadeen iyaga oo garabka bidix ka maraya barxadda weyn ee Hotel Sheraton. Jidka ku dhereran beerta cagaaran ee Yuusuf Lule ayay midig uga baydheen iyaga oo ku dhacaya jidka Acacia Av. ee uu ku yaallo dhismaha ay u socdaan. Najax oo la yaabban meeshan loo wado, in ay aamustana doorbidday, ayaa la hor

joojiyey dhisme meel dhaadhac ah ku yaalla. Ganjeelka weyn ee furan ayaa ku hagaya dhismaha cad ee jiingadda cas. Waa hudheelka cuntada ee Mediterraneo. Sida magiciisa ka muuqata, waxa iska eh Talyaani. Gudihiisana waxa dhex jiifa cunnooyin talyaani ah oo kala duwan. Way ku dhaadhaceen.

Albaabka hore waxa taagan wiil ku lebbisan dhar cagaar ah oo iskujoog ah. Dhoollacaddayn ayuu kala hor yimid. Su'aal ayuu si qabow u weydiiyey, Nimco ayaa siisay warbixin uu u baahnaa. Wuu hor kacay, way daba galeen. Najax waxa ay go'aansatay in ay aragto uun waxa dhacaya. Caag la wato ayay sidiisa noqotay.

Waxa ay mareen luuq ileysku ku yar yahay. Hoos ayay u dhaadhaceen, dhexdeeda waxa ay istaageen barxad aad u ballaadhan, si bilicsanna loogu xardhay maryo kala midabbo ah. Kuraas iyo miisas ayaa madaxa isku la jira. Koonaha daaqadda xiga ayaa la geeyey, miis iyo laba kursi ayaa la dul istaajiyey, waxana loo sheegay in uu koodii yahay. Inankii ayaa ka dhaqaaqay, iyaguna way fadhiisteen. Nimco wejigeedu wuu furan yahay, Najaxna way is uruurinaysaa. Su'aalo badan ayaa ku taagan Najax, in ay wax weydiisana ma rabto. Saxan ballaadhan ayaa dhexdooda la soo dhigay, korkiisa waxa buuxa khudaar kala kaan ah. Laba saxan oo yaryar oo aanay waxba ku jirin ayaa baashiisa yaalla. Nimco ayaa mid qaadatay, aayar dul dhigtay qayb ka mid ah salladhkii meesha yaallay. Najax oo aammusan ayaa sidii si la mid ah yeeshay. Markaas ayay Nimco bilowday hadalka.

"Waxaan hubaa in aad u soo amban doonto meeshan."

Indhaheeda ayay eegtay, jawaabna way ka weyday. Way sii wadatay.

"Dadka is jecel ayaa yimaadda halkan, bal sidaa u eeg dadka meesha fadhiya."

Najax oo aan madaxa dhaqaajin ayaa hoos u tidhi: ”Imisa nin baa ku keenay halkan?”

”Cuntada waan innoo dalbay. Waa cunto-talyaani. Pizza iyo waxyaabo kale weeyaan. Waad ka heli doontaa.”

Way u juuqi weyday. Markii ay salladhkii laba jeer afka gelisay ayay Nimco beddeshay mawduucii.

”Eeg walaal, way jirtay in aynu maalintii dhoweyd si aan qummanayn u wada hadalnay. Waxaan dareemayaa in aan si kulul kuugu jawaabay. Runtii iga may ahayn xumaan, xaalad xun ayaan markaa ku jirey. Markaas uun baan maqlay in walaalkay dhakhtar loo qaaday, qalliin beerka ahna lagu samaynayo. Waan werwersanaa, adna su’aalo xasaasi ah ayaad i weydiisay.”

Koob biyo ah ayay afka saartay, haddana way sii wadatay.

”Markaa horto waan kaa raalligelinayaa dhacdadii maalintii dhoweyd. Maan jeclayn inaan sidaa kuu la hadlo. Sorry.”

Cunto ay afka ku haysay ayay degdeg u liqday. Sacabka ayay afka marisay, waxaanay markii u horreysay soo eegtay wejigeeda.

”Dhib ma leh walaal, raalli waan ahay. Aniguba wax aan afaarahayga ahayn iska galay, adna raalli ahow.”

Way is eegeen, isku dhoollacaddeeyeen. Markii u horreysay ayay si niyad furan u wada hadleen.

”Oo walaal, maxaa walaalkaa helay?”

Su’aasha iyo cuntada la sido ayaa hal mar soo wada gaadhay miiska. Way kala aamuseen. Saxni ay pizza ku wadhan tahay ayaa hortooda la dhigay, waxa la socday saxni kale oo ah baasto dhuudhuubani dul tuulan tahay, midab cagaar ah ayay lahayd. Dhowr saxni oo yaryar, waxyaabo kala midab ahina ku jiraan ayaa

miiska lagu dul daadiyey. Najax oo indhuhu ka soo dhici gaadheen ayaa su'aashii iska illowday.

"Walaal beryahaaba wuu xanuunsanayoo, waxa la ii sheegay in Hindiya la rabo in loo qaado."

Najax waxa ay ku mashquushay cantuugo ay afka dhex ciyaarsiinayso. Waxa shaki ka jiraa in ay jawaabta maqlaysay. Labaatan daqiiqo kaddib ayaa loo keenay cunto kale oo fudud. Iyada oo aan is weydiin meesha ay ku ridayso, ayay Najax markiiba is dhaafisay. Markii ay meesha soo gashay, imika ayay in badan ka culus tahay.

Kaftan iyo qosol badan kaddib, imika waxa ay dareemayaan in ay isku laab xaadhan yihiin, waxna is weydiin karaan. Najax ayaa bilowday.

"Wixii uu kii dhinnaa sheegayey ma dhab baa? Faduuliyad baan ahee, ha ila yaabine."

"Laba sanno kahor ayay ahayd. Markaas ayuun baan dhammeeyey jaamacadda Cammuud. Axmed inan la yidhaa ayaannu wada sheekaysan jirnay. Isku fasal ayaannu ahayn. Wallaahi qof aad u wanaagsan ayuu ahaa. Si fiican ayaannu isu fahannay. Sidaas annaga oo isku ah, jaamacaddiina dhammaynay, ayaannu guur soo hadal qaadnay. Shaqo uu meel ka raajicinayey, ayuu markaa sugayey. Waxa uu ii sheegay in uu rabo in aan xaaskiisa noqdo, balse aan wakhti yar siiyo. Qiyaastii hal sanno in aan sugo. Waan ogaa in uu i jecel yahay, markaa waan ka oggolaaday. Sannad wax weyn ma aha."

Way aammustay. Najax oo aan nuuxsanayn ayaa indhaha uun ku dhowraysa.

”Maalin Salaasa ah, galab ayay ahayd, markaas uun casar laga soo baxay. Sidii aabbo caadiga u ahayd, waxa uu ku fadhiyey kursigiisii caddaa ee bannaanka yaallay. Halkaas ayuu maalin kasta fadhiisan jirey, dadkuna way yaqaanneen. Maalintaas dad badan ayaa meesha joogey, waxa ka mid ahaa kan imika kula dhigta jaamacadda hooyadii. Markaas uun baan ka soo noqday jaamacadda. Cod dheer ayuu igu qaabbilay. Farxad ayaa ka muuqatay wejigiisa. Waxa uu sare ugu dhawaaqay in uu i siiyey saaxiibkii oo Ingiriiska ka imanaya. Berrina uu dalka imanayo weliba. Naxdin ayay laabtu i xanuuntay. Wax aan ku idhaana waan garan waayey. Gudaha ayaan galay, wuu iga soo daba galay. Hooyana way ka dambaysaa. Sababta aan u farxi waayey ayuu i weydiiyey. Aniga oo aan ka fiirsan ayaan u sheegay in aanan guur diyaar u ahayn. Bakoorad uu sitay ayuu shan jeer igu rogey. Hooyo ayaa iga qabatay. Aad ayuu u cadhaysnaa. Waxa uu ii sheegay in uu berri iman doono, anna aan isu diyaarin doono barashadiisa. Toddobaad kaddibna uu meherku dhici doono.”

”Deedna maxaad samaysay?”

”Maxaan samayn lahaa, dee waan soo baxsaday. Isla habeenkiiba. Sidaasaan halkan ku imid.”

”Oo cidi ku ma oga inaad halkan joogto?”

”Hooyo ayaa og, iyadaa i soo caawisay. Laakiin cid kale ma oga. Si tuugo ah ayaan ula hadlaa iyada.”

”Wallaahi hooyadaa waa khatar. Aabbana, miyaanu werwerayn?”

”Naa weli wuu cadhaysan yahaye, adigu ii warran.”

”Maxaan kuu warramaa walaal, isku wax baa inna haystee. Naa walaal nin ay saaxiibadday is jecel yihiin, ayaan iska jeclaaday. Markaasaan iyadii ku idhi ii soo qabo ninkaa. Markaasay ii soo qabatay. Anna markii aan ogaaday ayaan uga imid.”

”Waad iska ciyaaraysaaye! Oo ma iyadaa jeclayd markii hore? Hadday jeclaydna maxaa adiga kaa galay, maad iska haysatid?”

”Inanta saaxiib isku dheer ayaannu nahay...”

Halkaas ayay sheeko dheer uga gashay. Daqiiqado badan kaddibna way kala aamuseen. Midba dhankeeda ayay u dawakhday. Najax waa markii u horreysay ee ay ka sheekayso dhacdadan, codkeeda ayaa is beddelay. Maradii afka loogu talagalayna indhaha ayay dhowr jeer ku masaxday. Nimco oo aan calooljileec lagu aqoon ayaa illinta haysan kari weyday.

”Oo walaal wax baa ku halaye!”

”Waa markii u horreysay ee aan qof uga sheekeeyo arrintan, waan nefisayba.”

”Markaa imika maxaa talo ah?”

”Walaal sida caagga ayuun baan iska noolaan, waxbarasho aanan niyad u hayn ayaan iska dhigan doonaa, kan yaree maalin walba sheekada igu la soo kallahana waan iska xidhi hadalkiisa. Markaa sida ay ku dambeyso ayuun baynu eegi.”

”Nin kale ma laga yaabaa in aad hesho, mid ku illowsiiya dhibtii aad soo martay?”

”Walaal raggiiba waan nacay. Dhankooda ma eegi karaba. Najax nin aan ahayni ii ma cuntamayo. Isagana Hoodo ayaan u daayey. Markaa inta ay mucjiso dhacayso, sidan ayaan iska ahaan doonaa.”

”Alla hoognayeey walaal, adaaba iga calool adag. Arrintan waa in wax laga qabto. Sidani caddaalad maaha wallaahi.”

”Ilaahay uun baa wax ka qaban kara walaal, markaa waan iska quusane iska daa. Adigu maxaad samaynaysaa? Billee kan yari reerkiinnii u sheegaa in aad halkan joogto.”

”Taasaa iigu daran. Waan garanayaa kan yar, maalintii u horreysay ee aynu wada soconnay ayaan arkay. Isagu i ma uu arkin. Sidaas darteed ayaan jaamacadda uga joogey.”

”Iska daa anaa fikir hayee. Isaga ka werwer la’aw.”

”Hee, maxaad samayn?”

”Anaa aqaan waxaan samaynayee i sug. Maskaxda ayaan ka beddelayaa. Siduu rabo ayaan u yeelayaa. Waan u sheekaynayaa nasakha xun. Deedna waxaan ka saxeexayaa in aanu arrintaada cidna u sheegin. Anaa ciyaarsiinayee iska daa adigu.”

Najax hawl baa u taal, Nimcana mid kalaa u taal. Heshiis ayaa dhexdooda yaal. Najax waxa ay xidhiidh been ah la samayn doonta Maxamed, si ay uga ilaaliso in uu xogta Nimco geeyo Boorama. Intaas uun ma aha, waxa ay isku deyi doontaa in ay saamayn ku yeelato joogitaankiisa Kampala, si ay Nimco ugu soo noqoto jaamacaddeeda. Nimco waxa ay yarayn doontaa socodka, si aan cid kale u arkin. Way faraxsanaayeen markii ay guriga soo galeen, indhahoodana yididdiilo ayaa ka muuqatay.

Subixii kowaadba hawshii ayay Najax bilowday. Si kasta oo uu Maxamed uga niyadjabay haasaawaheeda, haddana la ma daaho salaanta. Salaantu waa inta ay u baahnayd. Sidiisii ayuu la soo kallahay. Iyada oo dhoollacaddaynaysa ayay dhankiisa u jeedsatay, si aanu filayna ay u bariidisay. Miskiinku qalin uu hayey ayuu sii daayey, hadallo aan is lahayna wuu is dhex dhigay. Dhankiisa ayay u dhaqaaqday, hadal aan badnayn balse isaga bad ku noqday ayay u cantoobisay. Su’aalo ay si laabfuran u weydiisay ayuu garan waayey wax uu kaga jawaabo. Ma uu sii diyaarsanba. Wax yar kaddib lambarrada ayay kala qorteen. Barxadda u dhaxaysa saddexda dhisme ayay tallaabada isu daysteen. Dhallinyar badan

oo koox-koox u taagnayd ayaa isha si hoose ula raacaysay. Waxa la ogaaday in ay inantii cusbayd heshay nin.

Galabtaas waxa ay guriga timid iyada oo madaxa qaadi kari la'. Sariirtii ayay madaxa ku horreysiisay. Nimco oo dareensan waxa haya ayaa qosol u dhacday.

"Naa miyuu ku soo dawikhiyey?"

Dirqi ayay su'aasha u dhammaystirtay. Deedna qosolkeedii ayay dhulka galgalasho ula dhacday. Cod aad mooddo in uu qof sii dhimanaya ka soo baxay ayaa ka soo yeedhay Najax.

"Naa iga aamus ma nooliye. Waxa yari ma baytariyuu ku shaqeeyaa?"

Nimco beerka ayay is haysaa, naqaskuna wuu ku yar yahay. Cagaha ayay dhulka la dhacaysaa. Codkeedii dheeraa ayaa si ay keligeed uun u qosli karto u dananaya. Galab ay isku soo dhowaadaan ayay noqotay. Jabkeeda ayay ka sheekeysay, Nimcana is ma hayn karto. Si kasta oo ay Najax u qososho, haddana waxa ay og tahay in aanay hawshani maanta ku ekayn. Waxa uu werwerkeedu dhibayaa ayaamaha soo socda, bilaha aan weli iman. Ma rabto in ay ka sii fikirto xanuun aan weli soo gaadhin. Qushi, ayay hoos u leedahay, kolleyba saaxiibaddaa ayaad caawinaysaa. Haddii ay dabeecad leedahay Najax, waa kaalmaynta dadka ay taqaanno. Naxariis aan maydhmin, si kasta oo ay u raddo. Waa inta ay dadka dheer tahay.

Najax iyo Maxamed way isku soo fakadeen. Qof aanay ka cadhaysiin karin ayaa lagu raray. Way ku qasban tahay in ay xammaasho inta uu Ilaahay kala furanayo. Isagu ma aha qof maalinna laga nasanayo. Ma xanuunsado, ma soo habsaamo. Subax kasta albaabka hortiisa ayuu ilko uu banneeyey la sii taagan yahay. Waxa ay ka yaabtay niyadda uu hayo. Mar way dhibsataa, marna way ka naxdaa. Ka warran miskiinkan aad beenta u sheegayso! Wakhti ayuu igu luminayaa, in aan sidiisa oo kale

dareemayo ayuu ii haystaa. Wakhtiga in aan ka luminayo ma oga. Waa fikir ay caloolxumo ka qaaddo. Ujeeddada falkeeda ka dambaysa ayay eegtaa, markaas ayay degtaa. In ay gabadh walaasheed ah badbaadinayso ayay is xasuusisaa, gabadh haddii la ogaado halka ay joogto qasab loogu guurin doono nin aanay rabin. Subaxba dareen nooc ah ayay ku soo toostaa, balse mid isku mid ah ayay isaga ku qaabbishaa.

Inta ay jaamacadda joogto, garabkeeda ayuu joogaa. Inta ay ka maqan tahayna, dhegta ayuu ugu jiraa. Habeen oo dhan in ay la hadasho ayuu rabaa, ma diiddo iyaduna. Wax laga wada hadlo ayaa soo dhammaada. Sariirteeda iyo shanqadha ka yeedha marka lagu jiifsado ayay is aragtaa iyada oo uga sheekeynaysa. Inta badan isaga ayaa hadla, iyada oo aan dhegeysanayn ayay ”hiihi” ugu halcelisaa. Dhowr jeer ayay ku jartay khadka, qosolka Nimco awgii. Subaxana ay ku tidhi ”dabkaa iga dhacay.” Ma sii weydiiyo su’aalo badan. Waxa uu u arkaa qof uu dirqi ku helay. Ma rabo in uu ka xanaajiyo. Ma oga in ay iyaduna isaga ilaalinayso. Balse ay sababuhu kala duwan yihiin.

Isaga wax badan ka ma taqaanno, runtiina ma xiisaynayso in ay ogaato. Dhowr jeer oo ay isku dayday in ay wax ka ogaato noloshiisa, waxa uu ugu celceliyaa in yar oo isku mid ah. In uu reer Boorama yahay, weligiina aanu meel u dhaafin. Imikana ay tahay markii u horreysay ee uu gurigooda ka yimaaddo. Intaas wax aan ahayn u ma sheego, qoyskooda ku ma halqabsado, cid kale oo reerkooda ah ka ma sheekeeyo. Maaddaama oo ay marka horeba hadalkiisa badan khaati ka taagnayd, ma sii weydiiso wax intaas dheer. Balse dhowr jeer oo ay Nimco la wadaagtay arrintan, Nimco ayaa ugu jawaabtay: ”Naa anaa kuu garanayoo waa nasakhe iska daa waxba ha weydiine.”

Xidhiidhka labada qof ma aha mid meel uun taagnaada. Kooduna sidaas oo kale waxa uu qaadayey tallaabooyin wadajooggooda badinaya. Waxa uu dhowr jeer ka codsaday in ay jaamacadda kaddib kulmaan. In badan ayay ka diidday, si dadban. Heer waxa ay gaadhay aanay marmarsiiyaha sii wadi karin. Magaalada ayuu

meelo badan soo tusay. Inta taaggiisa ah ayuu soo wareejiyaa, meelo kala duwan ayuu cunto ka soo siiyaa, iyada oo faraxsan ayuu soo celiyaa. Ma oga in ay ku faraxsan tahay soonoqodka ay guriga ku soo laabatay. Walow aanay isku ujeeddo ahayn, haddana mid waliba wuu ku qanacsan yahay sidan ay wax u socdaan. Haatan way la qabsatay codkiisa, waxaanu noqday qof saaxiib dhow u ah.

4 BILOOD KA DIB

Subax ay qorraxdu kulayl la soo kallahday, dhulkuna cadho la soo toosay. Waa maalintii u dambeysay ee jaamacadda, fasaxa xagaaga awgii. Markii ay baskii ka degtay ayay weji furan ku soo eegtay dhankii albaabka. Sidii qof ay wax ka lumeen ayay hareeraha daymootay. Miskiinkii mee maanta? Maxamed halkii ma taagna. Malaha gudaha ayuu galay. Way socotay, weli se ma aragto dhakadiisii dhuubnayd. Qolkii ayay ku hagaagtay, ma dhex fadhiyo. Waa maalintii u horreysay ee uu soo xaadiri waayo. Wax weyn ayaa ku dhacay. Way werwertay. Lambarkiisii ayay wacday. Ma dhacayo. Maxaa heli kara? Wax kasta.

Maanta waxba la ma dhiganayo, kulan gaaban ayay la soo qaadatay maammulihii waxbarashadeeda, ardaydiina way soo salaantay. Laba saacadood kaddib ayay damacday in ay iska tagto. Intii aanay ka soo dhammaan dhismaha ayuu telefoonkeedu yeedhay. ”Hello!” Waxba way ka fahmi weyday, sammada ayay ka qaylisay. ”Maxaa dhacay?” Jawaabta ayay sugtay. Waa Nimco oo ooyeysa. ”Naa Nimco maxaa dhacay bisinkee? Yaa dhintay?” Waxba way ka fahmi weyday hadalkeeda isku qasan. Markiiba waxa ay ku warheshay Maxamed oo soo ordaya. Xaggiisa ayay u orodday. Weli telefoonkii ayay dhegta ku haysaa, Nimcana way ooyaysaa. Horto Maxamed wuu nool yahay. Isaga laftiisa ayaa xiiqsan, qof dhiillo sida sidiisa ayuu u soo ordayaa. Markiiba warkii ayuu ku taabtay. ”Nimco walaalkeed oo aad u xanuunsanaya ayaa magaalada la keenay, gurigii aad degganayd ayaa imika la geeyey. Inna mari tagsi ayaan innoo hayaaye, soo carar.”

Wuu hor kacay, way daba orodday. Baabuur u taagnaa ayay kursiga dambe isku tuurtay. Cagaha ayaa garaacaya, in ay socdaan ayay rabaan. In ay oroddo ayay rabtaa. Xawaaraha baabuurka ayay saluugaysaa. Jid ay dadka iyo xawayaanku wadaagayaan ayay xoog ku dhaafayaan. Kun sawir oo kala nooc ah ayay maskaxdeedu is tusaysaa. Midba midka uu ka xun yahay faallaynaysaa. Tolow siduu yahay? Miskiinka yari miyuu dhiman rabaa? Nimco aan waco. Way ku dhufatay, way la weyday. Teleefankeedu wuu dansan yahay. Mar kasta oo ay Kisenyi u soo dhowaato, garaaca wadnaha ayaa sii kordhaya. Maxamed ayay hadal kala quban ku bilowday. ”Jidka, jidka maad garanaysaa? Halkan ka leexo.” Inta aanay u tilmaaminba, wuu sii garanayaa. Goormuu arkay guriga? Way yaabtay. Maaha su’aal muhiim ah maanta, way ka gudubtay. Isaga ayaa ku hagaajiyey gurigii.

Baabuurkii ayaa ku soo laabay guriga hortiisa. Naxdin ayuu jidhka inta hoose uu qallalay. Way ku hagaagi kari weyday guriga. Maxamed ayaa soo booday, daaqadda ka furay, deedna degdeg guriga u galay. Cagta midig ayay dhulka ku horreysiisay, walow ay jeclaan lahayd in ay iska dhex fadhido baabuurka. Wixii ay alaab sidatay ayay ka kacday, shalmadda oo dhinaca ka saaranna albaabka daaradda ayay ka soo gudubtay. Qof keli ahi ma dhex joogo. Daaraddii weyneyd ee dadku ku kulmi jireen, maanta cidi ma dhex taagna. Mee Maxamedkii ila socday?

Qolkeedii ayay ku soo dhowaatay, isaga oo aan wax shanqadh ahi ka socon. Way istaagtay, haddana aayar dhaqaaqday. Dadkii ooyayey meeye? Nimco meeday? Way soo dhowaatay, aayar soo tallaabsatay. Qoorka iyo cagta midig ayay mar keli ah soo wada gelisay. Qolka mugdiga ah ayay dhex istaagtay. In yar kaddibna ilayska qorraxda ayaa qolka ku baahay. Markaas ayay aragtay. Baroorna qabsatay. Waa hooyadeed iyo saaxiibadaheed Sahra iyo Hoodo.

Markii ay soo gashayba, sacab iyo cod dheer ayaa lagu soo dhoweeyey. Dareenkeeda oo marka hore aad u laaqnaa, ayaa imikana sammada tegay. Hooyadeed ayay isku duubtay, duuf iyo dhareerna ku duugtay. Qalbi aad u qallalay lixdii bilood ee u dambeeyey, ayay naxariista hooyadeed hoos dhigatay. Nafteeda oo ka luntay ayay hooyadeed ka dhex heshay. Way sii dayn kari weyday. Cod la fahmayo ka ma soo baxayo, naqaskuna waa ku qaliil. Way isla fadhiisteen, intii ag taagnaydna qosolgariir ayay qaadeen. ”Hooyo sow adigan dhuubtay, miyaanad waxba cunin?” ”Imikaan naaxi doonaa hooyo?” Kor ayay soo eegtay, waa wejiyo ay u xiistay. Midba mar ayay isku martay. ”Idinka ma kala dhergaynee i suga” ayay hoos ugu tidhi. Qosol iyo wax oohin u eg ayay kaga jawaabeen. Way soo jeedsatay, Nimco ayay aragtay. Iyada oo ilmada shalmadda ku duugaysa ayay ku tidhi: ”Naayaahe, waad iga gashatay maanta wallaahi. Walaal aan jirin ayaad ii sheegtay.” Nimco ayaa madaxa ruxday, waxayna u raacisay: ”Been kuu maan sheegin, waa mide horto walaalkay ma xanuunsanayo, balse wuu yimid. Sariirta eeg!” Najax ayaa sariirta eegtay, mise qof ayaa jiifa. Maryo badan ayaa dushiisa saaran. Hooyadeed ayaa markiiba tidhi ”waan soo weyseysanayaa.” Way baxday. Najax way fahmi weyday waxa socda. Sahra, Hoodo iyo Maxamed ayaa isku daawanaya labadooda. Najax waxa ay soo eegtay dhanka Nimco, wejigeeda ayay ka weyday wax ishaaro ah. Saddexda kale ayay marba mid eegtay. Way asqowday. ”Haddii aanu xanuunsanayn, muxuu la jiifaa walaal?” ayay si hoose ugu tidhi Nimco. Jawaabtii isaga ayaa siiyey. Wuu soo istaagay. ”Maxaa yeelay adiga ayaan kuu imid.” Way eegtay. Waa Najax. Ninkii ay jeclayd. Kii ay u silicday. Waabu sii qurux badnaaday. Afka ayaa kala tegay. Sidii ilmo yar ayay khajilaad yaraatay. Way fahmi weyday waxan dhacaya. Hadallo isdhaaf ah ayay tidhi. ”Iska warran Najax? Naa Hoodo... Najax, ma fiican tahay?” Mar keli ah ayaa lagu qoslay. Afka ayay gacanta saartay, markaas ayuu hadalkii Nimco ku soo noqday. ”Walaalkay” aa? Nimco ayay ku soo jeedsatay haddana. ”Naa mee walaalkaa?” Isaga ayaa u jawaabay. ”Waa aniga.”

Intii ay maskaxdeedu qaadi karaysay ayay dhaaftay. Sahra ayaa u soo gurmatay. ”Ma xasuusataa berigii aad naga soo baxaysay? Waannu ogeyn in aanad waxbarasho darteed u soo baxayn.” Hoodo ayaa kala boodday. ”Qofna meherkiisa waxbarasho u ma baajiyo.” Sahra ayaa ku soo noqotay. ”Waxan oo dhan waannu kuu sii qorshaynay. Xasan iyo Maxamed waa walaalo, waxaanay ilmaabti yihiin Najax iyo Nimco. Xasan markiiba waxa uu kuu keenay Nimco.” Nimco ayaa soo gashay hadalka. ”Waan xasuustaa sidaad ahayd berigii, dhowr jeer ayaan isu kaa sheegi gaadhay.” Sahra ayaa sii wadatay. ”Qorshuhu waxa uu ahaa in lagu dejiyo oo aad hesho meel aad ku nasato, hadhow marka Hoodo la guursadana, lagu soo celiyo.” Hoodo ayaa qososhay, hadalna ku tuurtay saaxiibaddeed Najax. ”Ma waxaad moodaysay in aad ninkaaga aniga iiga tegi karto, waan kaa daba fikiray. Odaygayga Xasan ayaa la yidhaa. Xasan kalena ma aha, waa Xasankeennan.” Fajiciso! ”Oo Najax is maydaan guursan?” ”Ma ninkaaga ayaan kaa qaadan lahaa? Isaguna adiga ayuu ku sugayey. Maanta labadiinnuba doob iyo gashaanti ayaad tihiin. Cid aad isaga uga tanaasushaana ma jirto.” ”Oo maa lagu guursaday adiga?” ”May, khamiista dambe ayuu i soo doonayaa. La’aantaa ma aroos baan dhigan lahaa?” Najax ayaa eegtay dhanka Najax, haddana ka soo jeedsatay, deedna su’aal weydiisay dhammaantood. ”Oo ka warrama haddii aan nin kale halkan ka heli lahaa? Qorshihiinnu wuu kala daadan lahaa.” Waa lagu qoslay. Maxamed ayaa markii u horreysay hadlay. ”Oo aniga shaqadaydu maxay ahayd?” Yaabkii adduunka! ”Anigu adiga in aan ragga kaa mashquuliyo ayay ahayd shaqadaydu.” Iyada oo aan is ogeyn ayay qosol ku dhufatay. ”Oo naayaahe Nimco, reer aad ka soo baxsatayna ma jirtee, ma anigaad riwaayad ii jilaysay?” Nimco ayaa ku qososhay Najax. ”Wallaahi daacad baad tahay, wax kasta waad iga rumaysatay. Naa jaamacadda waan dhammeeyey oo meeshaba adaan kuu joogay.” Halkaa marka ay marayso ayay Najax hooyadeed ku soo noqotay qolka. ”Naa hooyo diyaargarow, berri ayaynu noqonaynaaye.” Way yaabtay, se faraxday. ”Aabbahaana wuu ku sugayaaye.” Hareeraheeda ayay eegtay. ”Idinkuna?” Hooyadeed ayaa u jawaabtay. ”Waa la is wada raacayaa dhammaan. Tigidhadii waa la

gooyey mar hore. Hoodo arooskeeda waa in aan shaqadiisa bilowno. Sijaayad ii dhiiba hooyo."

Lix toddobaad kaddib iyo magaalada Hargeysa. Afar toddobaad kahor ayay is guursadeen Hoodo iyo Xasan. Sahra iyo Maxamed meherkoodu waa bisha dambe 27-keeda. Najax iyo Najaxna caawa ayay aroos yihiin. Laba weji oo dhalaal ka muuqdo, indho iskood u dhoollacaddaynaya. Ehel iyo xigaal ayaa hoolka buuxiyey, farxaddooduna dadka ayay wada gaadhay. Waa Najax oo garab taagan Najax. Gacmaha is haysta, duniduna hortooda wadhan tahay.